IIB MA GALO

FAAFINTA RASMIGA AH

الجريدة الرسمية

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

لجمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 8aad Muqdisho 1 Jannaayo 1980 L. 1

FAAFINTA BIL SOO BAXA

جريدة شهرية

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J.D.S.

QIIMAHA : waa 5 shilin lnmbar walba **RUKUNKA** : Sanalkii waa Sh. 100 Soomaaliya gudaheeda — dibedana waa Sh. So, 300, Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo Qiimaha qorotaanka F. R, halkii sadar iyo wàxii ka yàr wàà 2 laba Sh. — Rukunka iyo qorjtaanku waxaa la weeydiistaa Laanta Maamulkà Fàafintà Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuurahà ee Wàsàaràddà Làcagta.

KOOBNIIN

QAYBTA KOOWAAD

SHARCI

SHARCI L. 1 ee 1 Jannaayo 1979, dib u samaynta Baabuurta Dawladda. Bogga 2

S *H A* R C I

SHARCI L. 2 ee 17 Diseember 1979, Habaynta Sharciga «Somali Airlines» » 6

LAW No. 2 on 17th Disember 1979 Organization of the Somali Airlines » 16

QAYBTA LABAAD

X E E R

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 1 ee 10 Abriil 1979, Abuurid Xafiiska ku qaybsamaha Arrimaha Xajka iyo Diinta ee Jedda. » 26

Wakaaladda M. Qaranka

XEER WASAARADDA GAR. iyo Arrimaha Diinta L. 2 ee 22 Diseember 1979, Magacaabid Guddoomiyaha Iskaashatada Qareennada. » 27

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 1..1.1980 Lumid Buug Kayd L. yahay 12616 ku qoran Sh So 11068/= ay leedahay Caasha Aw Aadan Diiriye L. 2 » 28

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 1.1.1980 Lumid, Buug Kayd L. 2594; ku qoran Shs 3.057,15/= uu leeyahay Cali Nuur Socdaal L.3 » 29

ISKAASHATADA SHAYBAARKA TAWAKAL 2. 1. 1979, Shir Caadi Dhaaf ah L. 4 » 30

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 1.1.1980 Lumid Buug Kayd L. 14768 ku qoran Sh So 47,202 uu leeyahay Ibraahim Xaaji Diiriye L. 5 » 31

QAYBTA KOWAAD

SHARCI L. 1 ee 1 Jannaayo 1979 dib u samaynta Baabuurta Dawladda MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO ARKAY : Xaashida 1aad, 2aad iyo 3aad ee Kacaankii 21. 10. 1969;

ISAGOO ARKAY : Sharciga tirsigiisu yahay 1, 17, 18, iyo 19 ee soo baxay 1dii Juulay, 1976;

ISAGOO OGAADAY : inay Hay'ado badan ee Dawladda marka gaadiidkoodu jabo ama kharribmo ay ku hagaajiyaan hoosooyin ay leeyihiin dad gaar ahaaneed ayadoo ku baxdo lacag aad u fara badan;

ISAGOO TIXGELIYEY : lagama maarmaannimada ah in shaqaalaha qabta hawsha dheeraadka ah ee dib u samaynta baabuurta loo aqoonsado abaalgud dhiirri gelin ah;

ISAGOO TIXGELIYEY : Go'aanka Guddiga Siyaasadda iyo Golaha Wasiirrada ee taariikhdiisu ahayd 12. 9. 1979;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga *soo soc***da** *:*

QODOBKA *1AAD*

Marka laga bilaabo 1. 1. 1979, waxaa si buuxda looga hirgeliyey Hoosada Dhexe ee Xarunta Wasaaradda Gaadiidka Dhulka iyo Cirka, hoosooyinka Wasaaradda Gaadiidka Dhulka iyo Cirka ee Gobollada iyo Degmooyinka hawlaha dib u samaynta baabuurta Wasaaradaha ee maamulka baabuurtooda u madax bannaan, kuwa Wakaaladaha, Shirkadaha Dawladdu dhinac ka tahay iyo Bankiyada, marka laga reebo Hay'adaha Dawladda ee iska leh hoosooyinka gaar ahaaneed.

QO*D*OBKA *2AAD*

1. Waxaa dhammaan Gaadiidka ay iska leeyihiin Hay'adaha ku tilmaaman qodobka 1aad loo ogol yahay in ay ku samaystaan hoosooyinka aan soo sheegnay oo keliya. Isla markaana waxaa sharcigan lagu xaaraantimeeyey in gaadiidka aan soo sheegnay lagu hagaajiyo hooso ay leedahay dad ama shirkad gaar ahaaneed.

Cirka, marka uu dhegeysto talada Farsama Yaqaanka Sare ee Wasaaradda (Injineerka), una sugnaato in gaadiidka qaarkood ee ku tilmaaman Qodobka 1aad ee sharcigan aan dib loogu samayn karin hoosooyinka gaadiidka, dhanka farsamada ama qalabka dayactirka awgeed, wuxuu amar ku bixin karaa in dib loogu sameeyo hoosooyin gaar ahaaneed.

3. Sidoo kale, Wasiirka Wasaaradda Gaadiidka dhulka iyo cirka, gobollada iyo degmooyinka wuxuu u wakiilan karaa Guddoomiyaha Guddiga maamulka gobolka ama degmada.

Guddoomiyaha Guddiga maamulka ee gobolka ama degmada waxaa awood loo siiyey amar bixinta ku tilmaaman xubinta 2aad ee qodobkan, ka dib marka uu dhegeysto talada Wakiilka Wasaaradda Gaadiidka dhulka iyo cirka ee jooga gobolka ama degmada.

Qod. 3aad

Hay'adaha ku tilmaaman Qod. 1aad marka loo sameynayo ama loo dayactirayo waxay la baxayaan kharashka alaabta, tan dayactirka la geliyey baabuurka iyo kharash hawl gacmeed ah oo saacadiiba dhan Shs. 30/= (Soddon Shillin).

Qod. 4aad

1. Kharashka hawl gacmeedka (diritto di mano de'opera) waxay u kala baxaan laba qaybood oo kala ah:

b. 10/= oo lagu shubayo khasnadda Dawladda iyo
t. 20/= oo lagu dhiirri gelinaayo Shaqaalaha kala ah: Xirfadlayaasha,

Farsama yaqaanada baabuurta ee Wasaaradda Gaadiidka Dhulka iyo Cirka.

2. Shaqaalaha la siinayo lacagta dhiirri gelinta ah, waa in ay ahaadaan:

b. Kuwo shaqadoodii caadiga ahayd si habsami ah u gutey
t. Kuwo saacado dheeraadka ah shaqeeyey iyo
j. Kuwo tayada wax soo saarkoodu loo begey.

3. Shaqaalaha aan kor ku soo sheegnay waxaa abaalmarintoodu loogu kala badin karaa hadba sida wax soo saarkoodu u kala badan yahay.

4. Shaqaalaha la siinayo dhiirri gelinta waa kuwa ku tilmaaman xubinta koowaad ee xarafka (t) ee qodobkan.

QODOBKA 5AAD

Madaxweynaha J.D.S. isagoo tixgelinaaya isbedelka ka dhasha ascaarta suuqa wuxuu awood u leeyahay in uu soo saaro Xeer uu ku kordhinaayo lacagta hawl gacmeedka aan soo sheegnay.

Qod. 6aad

Hay'adaha Dawladda waxaa loo ogol yahay in gaadiidkoodu ay ku sameystaan hoosooyinkooda.

Qod. 7aad

Waxaa hab xisaabeed laga furay Xarunta iyo Gobollada Curaar)Deposit accounts) dakhli kastana wuxuu gelayaa Curaartaas.

Qod. 8aad

Kharashyada Xarunta looga baahdo waxaa awood kharash si toos ah loo weydiisanayaa Xisaabiyaha Guud. Sidoo kalena maamulayaasha Wasaaradda Gaadiidka Dhulka iyo Cirka ee jooga gobollada iyo degmooyinka waxay weydiisanayaan Xisaabiyaha gobolka ama degmada.

Qod. 9aad

Awoodda ogolaanshaha qeybinta lacagta hawl gacmeedka la siinayo Shaqaalaha Wasaaradda Gaadiidka Dhulka iyo Cirka ku xusan Qod. 4aad, waxaa la siiyey Wasiirka Wasaaradda Gaadiidka Dhulka iyo Cirka. Gobolladuna wuxuu u Wakiilan karaa Isuduwayaasha iyo Guddiga Shaqaalaha ee Wasaa-

Qod. 10aad

Cod allaale ciddii ku xad gudubta arrimaha ku tilmaaman Qod. 2aad ee Sharcigan, waxaa lagu xukumayaa Xabsi gaaraya ilaa laba sano ee xarig ah ama ganaax ilaa Shs. 10.000/= Toban kun Shillin) ama labada oo la isugu daro.

Qod. 11aad

Sharciga wuxuu dhaqan gelayaa 1. 1. 1979. Sharcigan waxaa lagu soo saari doonaa faafinta rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho 1 Jenaayo 1979

Madaxweynaha J.D. Soomaaliya
(Jaalle S/Gaas Maxamed Siyaad Barre

SHARCI L. 2 ee 17 Diseember 1979, Habaynta Sharciga «Somali Arlines»

MADAXWEYNAHA J. D. S.

ISAGOO ARKAY: Dastuurka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya;

ISAGOO ARKAY: Dastuurka iyo Xeer Nidaamiyaha oo lagu dhisay Sharikadda sahmiyada leh ee «**SOMALI AIRLINES**» iyo heshiiskii ka dhexeeyey Dawladda Soomaaliyeed iyo Sharikadda Dayuuradaha ee «ALITALIA» ee lagu meel mariyey Sharciga L. 19 ee 9.2.1975;

ISAGOO AQOONSADAY: Inay tahay lagama maarmaan in Maamulka Sharikadda «**SO*M*ALI AIR*LI*NES**» lagu habeeyo sharci kaddib markii sharikadda «SOMALI AIRLINES» loo aqoonsaday in ay tahay sharikad dan qarameed leh iyo iyadoo Sharikadda «ALITALIA» ay ka baxday Sharikadda «SOMALI AIRLINES» oo ay sahmiile wadaag kala ahayd Dawladda Soomaaliyeed;

ISAGOO TIXGELIYEY: Go'aankii Guddiga Siyaasadda iyo Golaha Dhexe ee Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed;

WUXUU SOO SAARAYAA: Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

Sahmiga Sharikadda

Laga bilaabo 1da Jannaayo 1978 Dawladda Soomaaliyeed, keli ahaan, waxay yeelatay dhammaan sahmiyada Sharikadda «SOMALI AIRLINES», kaddib markii Sharikadda «ALITALIA» oo sahmiile wadaag la ahayd Dawladda Soomaaliyeed, ay ka baxday Sharikadda «SOMALI AIRLINES», oo sahmiyadeedii ay la wareegtay Dawladda Soomaaliyeed.

Qod. 2aad

Heshiis Dhaqan Beelay

Isbeddelka ka dhashay lahaanshada sahmiyada Sharikadda «SOMALI AIRLINES», ee ku xusan Qod. 1aad ee sharcigan, wuxuu keenay in heshiiskii ka dhexeeyey Dawladda Soomaaliyeed iyo Sharikadda «ALITALIA», taariikhdiisuna ahayd 24.1.1974,

laguna meel mariyey sharciga L. 19 ee 9.2.1975, uu noqday mid dhaqan beelay.

Qod. 3aad

Madax-bannaanida Sharikadda

1. Laga bilaabo taariikhda ku xusan Qod. 1aad ee sharcigan, Sharikadda «SOMALI AIRLINES», oo ah Sharikad Madax bannaan oo shaqsiyad qaynuuna leh, oo sharcigan loogu aqoonsaday in ay tahay Sharikadda «Dan Qarameed», waxay ku habaysan tahay sharcigan iyo Xeerka Madaniga, Qaybta Ganacsiga.
2. Hantida (Patrimonio) Sharikaddu waa Shiling So. 62.000.000,-.
3. Sahmiyada Sharikadda «SOMALI AIRLINES», waxay u furan yihiin cid kasta oo doonaysa in ay sahmi ku yeelato, sida uu dhigaayo Qod. 2346 iyo Qodobbada la xiriira ee Xeerka Madaniga, Qaybta Ganacsiga, hase yeeshee sahmiga Dawladdu kama yaraan karo 51%.
4. Habka ka qayb galka sahmiga Somali Airlines iyo awoodda maamulka sharikadda oo ay yeelan doonaan sahmiilayaasha ka duwan Dawladda, waxaa lagu caddayn doonaa Xeer Madaxweyne, iyadoo ay mar waliba la raacayo Xeerka Madaniga

Qod. 4aad

Xarunta Sharikadda

Xarunta Sharikaddu waxay ahaan doontaa Magaalada Muqdisho, waxayna, haddii loo baahdo, ku yeelan doontaa Laamo Gobbollada iyo Degmooyinka Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaalia, iyo dalalka dibedda.

Qod. 5aad

Ujeeddada iyo Awoodda Sharikadda

1. Ujeeddada Sharikadda «SOMALI AIRLINES» waxay tahay:

   1) Maamulka duulimaadka gudaha, la xiriira qaadista rakaabka, alaabta iyo boostada;

   2) Duulimaadka dibedda oo ah Soomaaliya iyo waddammada dibedda dhexdooda iyo Maamulka hawlaha la xiriira oo dhan;

3) Gargaarka farsamada iyo ganacsiga, iyo hawlaha la xiriira «Handling» oo ay u fidiso Sharikaad Dayuuradaha kale, sida sahay siinta (Catering) oo ay u fidiso Sharikaadka Dayuuradaha aan soo sheegnay;

4) Dhismaha, qandaraaska, maamulka; qalabka iyo hawlaha guud oo leh ujeeddo gargaareed iyo raaxada rakaabka iyo shaqaalaha Sharikadda.

2. Sharikaddu waxay awood u leedahay waxyaabaha soo socda:

1) Inay qaban karto hawlaha dayuuraduhu uga baahan yihiin Gegooyinka iyo sahay siinta dayuuradaha ee Gegooyinka «Catering», ha ahaadeen kuwo ayadu u baahan tahay ama la xiriira Sharikado kale oo dayuuradeed;

2) Inay soo gadan karto, dhisan karto ijaaran karto hangarro, hoosooyin, guryo iyo qalab kasta oo loogu talagalay hawlaha duulimaadka;

3) Inay abaabuli karto, qaban karto hawl kasta oo si toos ah ama si dadban ugu xiran ujeeddada Sharikadda;

4) Inay dhisi kasto, maamuli kartana dugsiyo farsamo iyo duuliyeyaal dayuuradeed;

5) Inay qabato hawl kasta, abuurtana ilo dhaqaale, warshadeed, ganacsi, maaliyadeed, bankiyeed guurto iyo ma guurto oo si toos ah ama si dadban loogu horumarin karo hawlaha Sharikadda.

Qod. 6aad

Xuquuq gaar ah Sharikadda

1. Sharikaddu, waxay keli ahaan, xaq u leedahay inay maamusho isu-duulimaadka gudaha iyo dibedda, ha ahaadeen duulimaad caadi ah ama kuwo weydiisasho ah.

2. Sharikaddu waxay ka qaadan kartaa dayuudaraha shisheeyaha xaquuqda «royalties».

Qod. 7aad

Canshuur dhaafid iyo tas-hiilaat

1. Sharikadda waxaa laga dhaafay canshuuraha soo socda.

1) Bixinta canshuuraha Furdadda, xuquuqda iyo canshuur kasta oo ku saabsan keenidda dayuuradaha, alaabta dayactirka iyo wixii qalab farsamo ah oo ku saabsan duulimaadka iyo hawlaha dhulka «di volo o di terra» iyo shidaalka dayuuradaha.

2) Waxyaalaha kale ee canshuurta laga dhaafay Sharikadda waxaa ka mid ah: cuntada, cabbitanka iyo alaabta in laga iibiyo rakaabka looga baahan yahay duulimaadka caalamiga ah.

1. Sharikaddu waxay yeelanaysaa tas-hiilaatka (Privileges) soo socda:

b) Isticmaalid lacag la'aaneed raadiyaasha xiriiriyaha ah, raadiyaha ah kaaliye duulimaad iyo hawsha hawada, ha ahaadeen kuwo hadda jira ama kuwo mustaqbalka la dhisi doono;

t) Isticmaalid lacag la'aaneed Gegooyinka Dayuuradaha iyo saldhigyadooda ee dalka;

[illegible] Isticmaalid lacag la'naaneed hoosooyinka dayuurada-

Qod. 8aad

Xubnaha iyo dhismaha Sharikadda

1. Sharikaddu waxay yeelanaysaa xubnaha iyo dhismaha hoos ku tilmaaman:

1) Guddi Maamul
2) Guddoomiye
3) Guddoomiye ku xigeen
4) Guddi Baaris Xisaabeed

Xubnaha uu ka kooban yahay Guddiga Maamulka, xilkiisa iyo awoodiisu waa kan ku tilmaaman qodobada soo socda, waxayna ku habaysan yihiin sharcigan iyo Xeerka Madaniga.

Qod. 9aad

Gddiga Maamulka

1. Guddiga Maamulka ee ku sheegan qod. 8aad ee sharcigan, wuxuu ka kooban yahay xubanha hoos ku qoran:

1) Guddoomiyaha Sharikadda — Guddoomiye
2) Guddoomiye ku xigeenka Sharikadda — Xubin
3) Wakiil ka socda Wasaaradda Gaadiidka — Xubin
4) Wakiil ka socda Wasaaradda Maaliyadda — Xubin
5) Wakiil ka socda Guddiga Qorsheynta Qaran — Xubin
6) Wakiil ka socda Bankiga Dhexe — Xubin

2. Wakiilada Hay'adaha ee xubnaha ka ah Guddiga Maamulka waxaa lagu soo magacaabayaa go'aan uu soo saaro Wasiirka Wasaaradda Gaadiidka Dhulka iyo Cirka, isagoo dhegeystey talada Madaxda Hay'adaha ay ka tirsan yihiin xubnahaasu.

3. Xubnaha Guddiga Maamulka ee kor ku tilmaamani waxay yeelanayaan, ugu yaraan, laba fadhi sannad kasta.

4. Fadhiga Guddigu wuxuu ku ansaxayaa marka ay ka soo qayb galaan xubnaha intooda badan.

5. Guddigu wuxuu go'aankiisa ku gaarayaa cod hal dhee-raad ah. Haddii cododku is le'ekaadaan, codka Guddoomiyaha ayaa go'aan ku raacaya.

QODOBKA 10AAD

Xilka Guddiga Maamulka

1. Guddiga Maamulka, marka laga reebo awoodda xeerka madaniga ama sharcigan u xilsaaray xubno gaar ah ee Sharikadda, waxaa xilkiisu yahay inuu qabto hawlaha la xiriira maamulka caadiga ah iyo mid aan caadi ahayn, ee la xiriira fulinta ujeeddada Sharikadda. Gaar ahaan, Guddiga Maamulku wuxuu, sharci ahaan, xilkiisa u Wakiilan karaa Guddoomiyaha, isagoo caddaynaaya xuduudda awoodad.

2. Guddiga Maamulka waxaa xilkiisa iyo awooddiisa ka mid ah inuu :

1) Dejiyo qorshaha iyo barnaamijyada la xiriira hawlaha Sharikadda, iyadoo lala socodsiinaayo Wasiirka Wasaaradda Gaadiidka, Dhulka iyo Cirka;
2) Hubiyo fulinta qorshaha iyo ujeeddooyinka loo dhisay Sharikadda;

3) Go'aan ka gaaridda xirtaanka Miisaaniyadda ee sannadka, iyadoo la raacayo sharcigan iyo Xeerka Madaniga.

QODOBKA 11AAD

Magacaabidda Madaxda Sharikadda

1. Guddoomiyaha, Guddoomiye ku xigeenka Sharikadda iyo Maareeyeyaasha Waaxyaha ee Sharikadda, waxaa lagu magacaabayaa xeer uu soo saaro Madaxweynaha, isagoo tixgelinaaya talada uu soo jeediyo Wasiirka Wasaaradda Gaadiidka Dhulka iyo Cirka.

2. Madaxda Qaybaha waxaa magacaabaya Wasiirka Gaadiidka Dhulka iyo Cirka, isagoo tixgelinaya talada Guddoomiyaha Sharikadda.

QODOBKA *12*AAD

Xilka Guddoomiyaha Sharikadda

Guddoomiyaha Sharikadda, wuxuu matilayaa Sharikadda, ha noqoto Maxkamada horteeda, ta maamulka iyo cid kasta, wuxuuna leeyahay, isagoo raacaya sharcigan Xeer Nidaamiyaha la xiriira iyo Xeerka Madaniga Qaybta Ganacsiga, inuu :

1) Guddoomiyo Shirka Guddiga Maamulka;
2) Fuliyo go'aannada Guddiga Maamulka iyo wixii hawl ah oo ay u' xilsaaraan;
3) Mas'uul ka yahay maamulka lacagta ee Sharikadda;
4. In uu saxiixo heshiisyada ay Sharikaddu dhinac ka tahay isagoo oggolaansho ka haysta Guddiga Maamulka, haddii heshiisku aanu galaynin Maamulka caadiga ah, qorshaha iyo barnaamijkana aanu ku jirin.
5) Saxiixo heshiisyada degdegga ah ee ay dhinac ka tahay Sharikaddu soona hordhigo Guddiga Maamulka.

QODOBKA *13*AAD

Xilka Guddoomiye ku-*xigeenka Sharikadda*

Xilka Guddoomiye ku-xigeenka Sharikaddu waa sida hoos ku tilmaaman :

1) Sii wado hawlaha caadiga ah ee Guddoomiyaha marka ay jiraan waxyaabo joogto ah oo ka reebay gudashada xilkiisa;
2) Inuu gacan buuxda ku siiyo Guddoomiyaha, hawlaha loo xilsaaray;
3) Inuu fuliyo hawlaha Guddoomiyuhu u xilsaaro.

QODOBKA *14*AAD

Guddiga Baarista Xisaabaadka

1) Guddiga Baarista Xisaabaadka ee Sharikadda oo ka kooban saddex xubnood oo joogto ah iyo laba aan joogto ahayn, waxa magacabaya Wasiirka Wasaaradda Gaadiidka Dhulka iyo Cirka, isagoo dhegeystey Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda.
2) Xilka iyo awoodda Guddiga Baarista Xisaabaadka, waxay ku habaysan yihiin Xeerka Madaniga, Qaybta Ganacsiga.

QODOBKA *15*AAD

Muddada ay xilka haynayaan Guddiga Maamulka iyo Guddiga Baarista Xisaabaadka ee Sharikadda

1) Xubnaha Guddiga Maamulka iyo Guddiga Baarista Xisaabaadka muddada ay xilka haynayaan waa saddex sannadood oo laga bilaabo Taariikhda la magacaabo Guddiga. Hase yeeshee magacaabiddaas waa la cusboonaysiin karaa.

2) Xubnaha Guddiyada Maamulka iyo Baarista Xisaabaadka magacaabiddooda waa lagala noqon karaa, iyadoo la raacayo habka magacaabidda.

QODOBKA *16*AAD

Matilaha Sahmiga Dawladda ee Sharikadda

Sahmiga Dawladda Soomaaliyeed ay ku leedahay Sharikadda «SOMALI AIRLINES», waxaa matilaaya Wasiirka Wasaaradda Gaadiidka Dhulka iyo Cirka oo ay Sharikaddu hoos timaado, sida u tilmaamayo Xeerka Madaniga, Qaybta Ganacsiga.

QODOBKA *17*AAD

Awoodda Wasiirka Wasaaradda Gaadiidka Dhulka iyo Cirka

1) Wasiirka Wasaaradda Gaadiidka Dhulka iyo Cirka, waxaa awooddiisa saldhiga u ah sharcigan.

2) Wasiirku, waxaa uu ku leeyahay Sharikadda awood iyo mas'uuliyad buuxda dhanka kormeerka iyo ilaalinta, fulinta dan qarameedka loo dhisay Sharikadda.

QODOBKA *18*AAD

Habka Maamulka shaqada iyo shaqaalaha Sharikadda

Sharikadda «SOMALI AIRLINES» waxay yeelanaysaa qaab habaynaaya habka maamulka shaqada iyo shaqaalaha Sharikadda, oo caddaynaaya xuquuqda iyo waajibaadka shaqada iyo shaqaalaha, gaar ahaan, mushahaaradooda, gunnooyinkooda, liiltirkooda iyo hawlgabkooda.

QODOBKA *19*AAD

Miisaaniyadda

1) Sannadka Lacagta ee Sharikaddu wuxuu bilaabanayaa 1da Jannaayo, wuxuuna dhammaanayaa 31da Diisambar ee sannad walba.

2) Guddiga Maamulku, ugu dambayn, 31ka Maarso ama inta ka horraysa Sannad kasta, waa in uu isku dubbaridaa xiritaanka miisaaniyadda ee sannadka la soo dhaafay, isagoo isku hagaajiyey xisaabihii sannadkaa iyo bandhiggii macaashka iyo khasaaraha, wuxuuna u gudbinayaa Wasiirka Wasaaradda Gaadiidka Dhulka iyo Cirka si uu u oggolaado una gudbiyo Wasiirka W. Maaliyadda.

3) Faa'iidada ka soo baxda hawlaha ay qabato Sharikadda, kuna cad miisaaniyadda sannadka ee Sharikadda, ka dib markaa laga gooyo xisaabta kaydka ah (Fondo di Riserva), waxaa loo qaybinayaa sahmiilayaasha, iyadoo ay qaybta Dawladdu noqonayso mid lagu kordhinaayo sahmiga Dawladdu ku leedahay Sharikad-

4) Haddii khasaare miisaaniyadeed ku timaaddo Sharikadda, waxaa khasaarahaas qaybsanaya sahmiilayaasha, hadba inta uu le'egyahay sahmiga cidda ku leh Sharikadda, iyadoo ay qaybta Dawladda bixinayso Wasaaradda Maaliyadda lana raacaayo oggolaanshaha miisaaniyadda, Wasiirka Wasaaradda Gaadiidka Dhulka iyo Cirkuna qaadaayo xilka doonista iyo kabidda khasaarahaas Qaybta Dawladda.

QODOBKA *20*AAD

X*eer*ka N*idaamiye*

Madaxweynaha J. D. S. wuxuu awood u leeyahay, isagoo tixgelinayaa talada uu soo jeediyo Wasiirka Wasaaradda Gaadiidka Dhulka iyo Cirka, inuu soo saaro Xeer Nidaamiye Guud ee Sharikadda.

QODOBKA *21*AAD

B*urin* S*harci*

Sharci kasta ama Xeer kasta oo ka soo horjeeda ama aan la socon karin sharcigan, waa la buriyey.

QODOBKA *22*AAD

D*haqan gel*id

Sharcigani wuxuu dhaqangelayaa isla maalinta uu saxiixo Madaxweynuhu, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho. 17 Diseember 1979

JAALLE MAXA*M*ED SIYAAD BARRE

***M*ADAXWEYNAHA J. D. S.**

TRANSLATED FROM SOMALI

Law No. 2 on 17th December 1979 Organisation of the Somali Airlines

THE PRESIDENT OF THE SOMALI DEMOCRATIC REPUBLIC

HAVING SEEN : The Constitution of the Somali Demacratic Republic;

HAVING SEEN : The Constitution and the Decree in which the shareholding company known as Somali Airlines was established and the Agreement between the Somali Government and the company known as ALITALIA ratified by Law no. 19 of 9. 2. 1975;

HAVING REALIZED : The necessity for a low to reconstitute the SOMALI AIRLINES having been recognized as a Company of National Interest, and as a result of the withdrawal of M/S ALITALIA the Co-Shareholders in the company from its participation therein;

TAKIN NOTE : of the approval of the Political Council and the Central Committee of the Somali Socialist Revolutionary Party;

HEREBY PROMULGATES

THE FOLLOWING LAW :

ARTICLE *1*

COMPANY SHARES

With egfect from 1st January 1978, the Somali Govornment has become the sole owner of all the shares of the Somali Airlines Company, after Alitalia Company which was the Co-Shareholder in the Company with the Somali Government withdrew from the Somali Airlines Company, and its shares were taken over by the Somali Government.

ARTICLE 2

ANNULLED AGREEMENT

As a result of the ownership of the shares of the Somali Airlines Company referred to in Article 1 of this Law, the Agreement between the Somali Government and ALITALIA Company dated 24. 1. 1974 which was ratified by Law no. 19 of 9. 2. 1975 became null and void.

ARTICLE 3

AUTONOMY OF THE COMPANY

1) With effect from the date referred to in Article 1 of this Law, the Somali Airlines Company, which is an autonomous Company possessing juridical personality and recognized as a company of national interest, is constituted in conformity with this Law and the Commercial Section of the Civil Code.

2) The capital of the Company is So Sh. 62.000.000

3) The shares of the Somali Airlines Company shall be available to all those who wish to subscribe to it as shareholders, in accordance with Article 2346 and other relevant provisions of the Commercial Section of the Civil Code, provided that the shares of the Government shall not be less than 51%

4) The manner of acquiring the shares of the Somali Airlines Company and the status of the various shareholders, other than the Government, in the administration of Company, shall be determined by Presidential Decree, in compliance with the Civil Code.

ARTICLE 4

COMPANY'S HEAD OFFICE

The Company shall have its head office in Mogadishu, and may, whenever necessary, establish branches and secondary offices in the Regions and Districts of the Somali Democratic Republic, as well as abroad.

ARTICLE 5

OBJECTIVES AND POWERS OF THE COMPANY

1) The objectives of the Somali Airlines Company are as follows :

a) Operation of the internal flights, in respect of carriage of passengers, cargo and mail;

b) Operation of international flights between Somalia and the foreign countries, and the execution of all the activities relevant thereto;

c) Rendering auxiliary technical assistance and sales facilities, and handling services to other airlines, such as catering;

d) Undertaking constructions, tenders, mangement, equipment anad general activities for the purpose of assistance to and the comfort of the passengers and the company personnel.

2) The Company shall have the following powers :

a) To render the services required by the Airlines in the airdrome and catering services whether required by it or by other airlines.

b) To purchase, build, or rent hangars, workshops, buildings and any equipment considered necessary for the conduct of the air service.

c) To irganize, undertake any activity directly or indirectly connected with the objectives of the company;

d) To establish and run technical and pilot training centres;

e) To perform any task, anad create sources of economic, industrial, commercial, financial, banking, movable and immovable properties which could be directly or indirectly used to promote the objectives of the Company.

ARTICLE 6

EXCLUSIVE RIGHTS OF THE COMPANY

1) The Company shall have the exclusive right to operate both domestic and international flights.
2) The Company may collect royalties from foreign Airlines.

ARTICLE 7

TAX EXEMPTION AND PRIVILEGES

1) The Company shall be exempt from the following taxes and duties :

a) Customs duties, charges, and any tariffs and import taxes on aircrafts, spareparts aand all technical materials related to the air services at flight or on ground, as well as aircraft fuel;

b) Other items which are within the tax exemption of the Company shall include food and beverages as well asitems required for the free duty shop on board international flights.

2) The Company shall also have the following privileges :
a) The use, free of charge, of radio communication facilities, as well as aircraft auxiliary radio and navigation aids whether existing or to be installed in the future;

b) The use of airdromes and airfields in the Country, free of charge;

c) The use of hangars free of charge.

ARTICLE *8*

ORGANS AND STRUCTURE OF THE COMPANY

1) The Company shall have the structure and organs set out below :

a) Board of Directors;

b) President of the Company;

c) Vice President;

d) Board of auditors.

2) The membership of the Board of Directors, its functions and powers are prescribed in the subsequent articles, and are in accordance with this Law and the Civil Code.

ARTICLE *9*

BOARD OF DIRECTORS

1) The Board of Directors refferred to in Article 8 of this Law, shall consist of the following members :

a) The President of the Company — Chairman;

b) The Vice President of the Company — Member;

c) A representative of the Ministry of Air & Land Transport — Member;

d) A representative of the Ministry of Finance — Member;

e) A representative of the State Planning Co mmission Member;

f) A representative of the Central Bank — Member.

2. Members of the Board of Directors who are representatives of the various organizations shall be appointed by Decree of the Minister of Air & Land Transport, having heard the Heads of the Organizations these Members represent.

3. The Members of the Board of Directors referred to above shall meet at least twice a year.

4. The meeting of the Board shall be valid only when the majority of the Board Members are present at the meeting.
5. The decision of the Board shall be taken by majority vote. In the case of split decision, the Chairman shall have the casting vote.

ARTICLE 10

RESPONSIBILITIES OF THE BOARD OF DIRECTORS

1. With the exception of matters falling within the exclusive competence of particular organs of the Company in accordance with this Law and the Civil Code, the Board of Directors shall be responsible for the routine administration of the Company as well as other activities related to the execution of the objectives of the Company. The Board of Directors may delegate its functions to the President, setting out the limits there of.
4. The functions and powers of the Board of Directors shall include;
a) Laying down the plan and programme related to the activities of the Company, in keeping the Minister of Air & Land Transport informed.
b) Ensuring the proper implementation of the programme and objectives for which the Company was constituted;
c) Determining the annual budget, in accordance with the provisions of this Law and the Civil Code.

ARTICLE 11

APPOINTEMENT OFOFFICERS OF THE COMPANY

1) The President, Vice President and Heads of Departments of the Company shall be appointed by Decree of the President of the Republic, having taken note of the advice of the Minister of Air & Land Transport.
2) The Heads of Service shall be appointed by Decree of the Minister of Air & Land Transport, having taken due note of the advice of the President of the Company.

ARTICLE 12

THE RESPONSIBILITY OF THE PRESIDENT OF THE COMPANY

The President of the Company shall be the legal representative of the Company before the Courts, the Adminstration and before every one else, and shall have the following powers and obligations in accordance with the provisions of this Law, the Regulations related thereto, and the Commercial Section of the Civil Code :

1) To preside over the meeting of the Board of Directors;

2) To implement the decisions of the Board of Directors and to perform any duties as may be delegated to him by the Board;

3) Be responsible for the financial matters of the Company;

4) To sign the Agreements to which the Company shall be a party; having received prior authorization of the Board of Directors, if the same do not fall within the scope of the routine administration or within the plans and work programmes;

5) To sign urgent Agreements to which the Company shall become party, submitting them to the Board of Directors for approval.

ARTICLE 13

THE RESPONSIBILITY OF THE VICE PRESIDENT OF THE COMPANY

The responsibility of the Vice President of the Company shall be as follows :

a) To perform temporarily the routine functions of the President in cases of permanent disability barring the latter from carrying out his duties.

b) To give the President maximum assistance in the execution of his responsibilities.

c) To carry out the duties which may be assigned to him by the President.

ARTICLE 14

THE BOARD OF AUDITORS

1) The Board of Auditors of the Company, conisting of three regular members and two ad hoc members, shall be appointed by the Minister of Air & Land Transport, having heard the Minister of Finance.
2) The responsibility and powers of the Board of Auditors shall be governedby the provisions of the Commercial Section of the Civil Code.

ARTICLE 15

TENURE OF OFFICE OF THE BOARD OF DIRECTORS AND THE BOARD OF AUDITORSw

1) The tenure of office of the members of the Board of Directors and the Board of Auditors shall be three years commencing from the date of their appointment, subject to renewal.
2) The members of the Board of Directors and the Board of Auditors may have their appointment withdrawn following the procedure of their appointment.

ARTICLE 16

THE REPRESENTIVE OF THE GOVERNMENT SHARES

The shares of the Somali Government in the Somali Airlines Company shall be represented by the Minister of Land and Air Transport to whose Ministry the Company is attached, in accordance with the provisions of the Commercial Section of the Civil Code.

ARTICLE 17

THE POWERS OF THE MINISTER OF AIR & LAND TRANSPORT

1) The powers of the Minister of Air & Land Transport shall be based on this Law.
2) The Minister shall have full powers and responsibili-

ty over the Company in respect of the supervision, control in carrying out its objectives as a Company of National Interest.

ARTICLE 18

ORGANISATIONAL ESTABLISHMENT OF THE COMPANY

1) The Somali Airlines Company shall have a system of organisations of the work and the personnel of the company setting out their rights and obligations in respect of their work, and in particular their salaries, allowances; gratuity and pension.

ARTICLE 19

FINANCIAL PROVISIONS

1) The Financial Year of the company shall commence on 1st January, and shall end on 31st December each year.

2) The Board of Directors shall review, not later than 31st March of each year, arranging them in a Balance Sheet indicating the Profit and Loss Accounts, and shall submit the same to the Minister of Air & Land Transport for approval and transmission to the Minister of Finance.

3) The profits realized from the Company's activities, as shown in the annual accounts of the Company, after setting aside the reserve funds, shall be distributed among the shareholders, provided that the profit accruing to the Government from its holding shall be reinvested in the Company to augment its shares and enhance its development.

4) If the budgetary loss is sustained by the Company, the loss shall be borne by the shareholders, according to their shareholdings in the Company. The amount of the loss payable by the Government shall be paid by the Minister of Finance., in compliance with the approval of the budget. The Minister of Air and land transport shall be responsible for the recovery of and the making up for the loss of the Government Portion.

ARTICLE 20

REGULATIONS

The President of the Somali Democratic Republic shall have the power to issue Regulations for the Company, having taken note of the advice of the Minister of Air & Land Transport.

ARTICLE 21

ABROGATION

Any provision contrary to or inconsistent with this Law is hereby abrogated.

ARTICLE 22

ENTRY INTO FORCE

This Law shall come into force on the day of signature and it shall be published in the Official Bulletin.

Mogadishu, 17 December 1979

The President of the
Somali Democratic Republic
(MOHAMED SIYAD BARRE)

QAYBTA LABAAD

XEER-MADAXWEYNAHA JDS L. 1 ee 10 Abriil 1979 Abuurid Xafiiska ku qeybsanaha Arrimaha xajka iyo Diinta ee Jedda.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY Xaashida 1aad, 2aad iyo tan Saddexaad ee Kacaanka:

ISAGOO ARKAY: Sharciyada lamb. 17,18,19 ee 1da Luulyo 76
ISAGOO ARKAY: Dekreetada lam. PV88/10/78 ee 23.10.1978;
ISAGOO TIXGELIYEY: Baahida loo qabo in Jedda laga abuuro Xafiiska ku qeybsanaha Arrimaha Diinta iyo Xajka.
Wuxuu soo saaray Xeerka soo socda:

QODOBKA 1AAD

Waxaa halkan lagu sharciyeynayaa Abuuridda Xafiiska ku qeybsanaha Arrimaha Xajka iya Diinta oo laga dhisay Jedda ee Dalka Sacuudi Carabiya.

QODOBKA 2AAD

Xafiiska isaga ah ee kor lagu soo sheegay wuxuu ka mid noqonayaa Qaabka Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta.

QODOBKA 3AAD

Xafiisk ku qeybsanaha Arrimaha Diinta iyo Xajka waxey howshiisa ka mid noqon doontaa.

1) Xoojinta Xiriirka ka dheeeya Jamhuuriyadda Dimoqoraadiga Soomaaliya iyo Boqortooyada Sacuudi Carabiya.
2) Ilaalinta iyo tixgelinta xuquuqda Dalka Soomaaliyeed ee gudanaya Waajibaadka Xajka.
3) La tainta Safaaradda Soomaaliyeed ee Jedda iyo Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta xagga Arrimaha Diinta.

QODOBKA 4AAD

Kharajka Xafiiska ee lagu sheegay Xeerkan Waxa laga bixinayaa Miisaaniyadda Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta.

ISAGOO TIXGELINAYA : Baahida loo qabo in guddoomiye Jaallaha magaciisu hoos ku imaan doono waxaa loo magadib markii Guddoomiyihii hore ee Iskaashatada Jaalle Dr. Issi firfircooni ah u guto hawsha ka saaran xilkaas loo magacaa-

Muqdisho 1. 1. 1980

QODOBKA 5AAD

Xeerka wuxuu dhaqan gelaya marka laga bilaabo 23. 10. 78 waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda

Muqdisho 10 Abriil 1978

MADAXWEYNAHA J.D.S.
Jaalle Maxamed Siyaad Barre,

Waan aragnay ee Diiwaangelinnay
Diiwaanka lamb. 1 bog. 93,
Muqdisho 14 Abr. 1979,
Hantidhowrka Guud KMG,
Yuusuf Cali Nuur.

XEER WASAARADDA GAR. IYO ARR. DIINTA L. 2 ee 22 Dis. 79 , Magacaabid Guddoomiyaha Iskaashatada Qareenada

WASAARADDA GARSOORKA IY OARR. DIINTA

WASIIRKA GARSOORKA

ISAGOO ARKAY: Dastuurka J.D.S.

ISAGOO ARKAY: Xeerka Iskaashatada Qareenada ee lamb. 85 Taariikh 21.10.75;

ISAGOO TIXGELINAYA: Baahid a l qabo in guddoomiye loo magacaabo Iskaashatada Qareenada, iyada oo isla markaas la daryeelayo danta guud ee Caddaaladda, lana tixgelinayo in ayan weli Iskaashatadu diyaar u aheyn in ay is doorato.

WUXUU SOO SAARAY

Qod. 1aad

Jaallaha magaciisu hoos ku imaan doono waxaa l magacaabay inuu noqdo Guddoomiyha Iskaashatada Qareenada, ka dib markii Guddoomiyihii hore ee Iskaashatada Jaalle Dr. Ismaacii Jimcaale uu istiqaalo ka geeyey Guddoominimadii.

Jaalle Dr. Axmed Yuusuf (Canjeex), waxaa loo magacaabay in uu noqdo Guddoomiyaha Iskaashatada Qareenada. ku meel gaar haan.

Qod. 2aad

Dekreetadani waxey dhaqan gelaysaa marka la saxiixo, waxaana Jaallaha Dekreetadani khuseyso laga rajeynayaa in uu si firfircooni ah u guto hawsha ka saaran xilkaas loo magacaabay

Muqdisho 22 Disembar 1979

Jaalle Dr. Axmed Shire Maxamuud
Wasiirka Garsoorka iyo Arrimaha Diinta

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
GUDDOOMIYAHA

HADDUU AKHRIYEY : dacwadda kor ku qoran;

HADDUU HUBSADAY : in Buug Keyd dhumay oo lambarkiisu ahaa 2594, lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Dhexe kuna qorneyd lacag dhan Sh. So. 3.057.15 uu iska lahaa Cali Nuur Socdaal sida ku cad warqadda lambarkeedu 104321 Taariikh 25. 9. 79 oo bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Dhexe.

HADDUU ARKAY : qodobka Sharciga lambar. 2 ee 9. 9. 1965

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Buuga Keydka) lamb. 2594 ku qoran Magaca Cali Nuur Socdaal ayna ku jirto Sh. So. 3.057.15

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka laanta Dhexe u beddelo Cali Nuur Socdaal buuga Keydka ee kor tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dèmoqraadiga ee Soomaaliyeed, haddii inta ka horeysa aan is hortaag laga keenin.
Muqdisho, 1. 1. 1980

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOL. BENAADIR
Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax.

L. 2

MAXKAMADDA GOBOLKA BENAADIR
GUDOOMIYAHA

HADDUU AHKRIYEY : dacwadda kor ku qoran;

HADUU HUBSADAY : In Buug Keyd dhumay oo lambarkiisu ahaa 12616 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed laanta Xarunta kuna qornayd lacag dhan Sh. So. 11.068 iska lahaa Gaasha Aw Aadan Diiriye sida ku cad warqadda lamb. 42307, taariikh 29. 12. 1979 oo bankiga Ganacsig iyo keydka S maaliyeed laanta 5aad.

HADDUU ARKAY : qodobka Sharciga lambar. 2 ee 9. 9. 1965

WUXUU XEERIYEY

In la baabiyo (Buuga Keydka) lambarkiisu 12616 oo ku qoran magaca Caasha Aw Aadn Diiriye ayna ku jirto Sh. So. 11.068

WUXUU FASAXAY

In bankiga Ganacsiga iyo Keydka laanta Xarunta u beddelo Caasha Aw Aadan Diiriye buuga Keydka ee ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto mudo aan ka yarayn 30 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliyeed haddii inta ka horeysa aan is hortaag laga keenin.

Muqdisho 10 Abriil 1979

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOL. BENAADIR
Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 3

SHIR CAADI DHAAF AH.

Waxaa shir caadi dhaaf ah Isugu iman doona saamileyda Iskaashatada Saybaarka TAWAKAL, ee horey loogu qoray Qoraalka lam. 12019 ee 6.10.1979, laguna diiwaangeliyey Xamar taariikhdu markey aheyd 7.10.1979 lam. 693, Vol,23, ee laguna qoray buugga Maxkamadda Gobolka Banaadir ee Iskaashatooyinka, taariikh. 13.10.79 Saamileyda waxey shirkaas yeelan doonaan taariikhdu maryay tahay 12.1.1980 saacaddu markay tahay 5ta galabnimo. waxaana lagu qaban doonaa Xafiiska Notaayda Xamar, Dr. Maxamuud Xuseen Diirshe.
Qodobada looga doodi doono shirkaas waxey yihiin:

1) Kordhinta Maaliyadda Iskaashatada.

2) Iyo Arrimaha kale oo quseeya iskaashtada.

Muqdisho 2 1 19780

Guddoomiyaha Iskaashatada
Cabdulqaadir Sheekh Xasan Cali

MAXKAMADDA GOBOLKA BENAADIR
GUDOOMIYAHA

HADDUU AHKRIYEY : dacwadda kor ku qoran;

HADDUU HUBSADAY in Buuga Keydka dhumay oo lambarkiisu ahaa 14768, lagana soosaaray Bangiga Ganacsiga iyo Keydka S maaliyeed Laanta 1aad kuna qorneyd lacag dhan Sh. So. 47.202 uu iska lahaa Ibraahim Xaaji Diiriye oo bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta 1aad.

HADDUU ARKAY : qodobka Sharciga lambar. 2 ee 9. 9. 1965

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Buuga Keydka lamb. 14768, oo ku qoran Magaca Ibraahim Xaaji Diiriye ayna ku jirto Sh. So. 47. 202

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka laanta 1aad u beddelo Ibraahim Xaaji Diiriye buuga Keydka, ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalm d laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafint rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Demoqraadiga ee Soomaaliyeed haddii inta ka horeysa aan is hortaag laga keenin.

Muqdisho, 1. 1. 1980

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOL. BENAADIR
Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 5

IIB MA GALO

FAAFINTA RASMIGA AH

الجريدة الرسمية

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

الجمهورية الصومال الديمقراطية

SANNADKA *8*AAD MUQDISHO *6* JENAAYO *1980* L. *1*. R. *1*

FAAFINTA BIL SOO BAXA

جريدة شهرية

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J.D.S.

QIIMUHU : waa 5 shilin lambar waliba RUKUNKA : Sanadkii waa Sh. 100 Soomaaliya gudaheeda — dibadana waa Sh so. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo Qiimaha qoritaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa laba Sh — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weeydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta wxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta

QAYBTA KOOWAAD

S H A R C I

W. M.

QAYBTA LABAAD

X E E R

W. M.

QAYBTA SEDDEXAAD

TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH

Natiijada Doorashada iyo magacyada Xildhibaannada iyo xubnaha loo doortay Goalha Shacbiga iyo Golayaasha Shacbi

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

GUDDIGA DHEXE EE DOORASHADA

GUDOOMIYAHA

MARKUU ARKAY: Qod. 16, 62 iyo 95aad ee Dastuurka J.D.S oo la xiriira doorashada xildhibaannada Golaha Shacbiga iyo xubnaha Golayaasha Shacbiga ee Degaannada,

MARKUU ARKAY : Sharciga L. 43 ee 1 Diseember 1979 oo ku saabsan Doorashada Golaha Shacbiga iyo Golayaasha Shacbiga ee Degaannada gaar ahaanna qodobadda 11, 14, 15, 16. 46, 47, 48, 49 iyo 64aad;

MARKUU ARKAY : Go'aanka L. DGSH/01/1—70 ee 20. 12. 79 oo uu soo saaray Guddoomiyaha Guddiga Qaranka ee Doorashada lana xiriira Magacaabidda Guddiga Dhexe ee Doorashada;

MARKUU ARKAY : Diiwaanka Hawlaha Guddiga Dhexe ee Doorashada oo ay ku faahfaarsan tahay :

1) Natiijada ku meel gaarka ah ee doorashada oo ay soo gudbiyeen Guddiyada Doorashada ee Degmooyinka sida uu tilmaamaayo qod. 44aad ee sharciga Doorashada kor ku xusan;

2) Go'aanka la xiriira natiijada doorashada,

MARKUU ARKAY : Qod. 47 iyo 49aad ee sharciga Doorashada ee kor ku xusan;

WUXUU CADDEYNAYAA

In natiijada kama dambaysta ah ee doorashada Golaha Shacbiga iyo Golayaasha shacbiga ee Deooaannada tahay sida soo socota :

— WADARTA DOORTAYAASHA : 3.979.651

— Tirada cododka oggolaaday musharaxiinta Golaha Shacbiga iyo Golayaasha Shacbiga ee degaannada :— 3.976.331 oo la mid ah 99.91% tirada cod bixiyayaasha.

— Tirada diiday musharaxiinta Golaha Shacbiga iyo Go-

0.05% tirada cod bixiyayaasha;

— Tirada codadka aan ansax ahayn 1.492 oo la mid ah 0.04%

SIDAAS DARTEED

1) Guddiga Dhexe ee Doorashadu wuxuu ku dhawaaqayaa in loo doortay xildhibaannada Golaha Shacbiga iyo xubnaha Golayaasha Shacbiga ee Degaannada Jaallayaasha ku kala qoran lifaaqyada A iyo B ee diiwaanka hawlaha Guddiga Dhexe ee Doorashada iyadoo la jiraan kuwo Kaydka ah.

Musharraxiinta la soo doortay waxay noqonayaan rasmi ahaan xildhibaanno Golaha Shacbiga Qaranka iyo kuwa Golayaasha Shacbiga ee Deegaannada laga bilaabo taariikhda go'aankan oo ah 5ta Jannaayo 1980, sida ay qabaan qodobada 62aad ee Dastuurka iyo 2aad ee Sharciga Doorashada ee kor lagu soo xusay.

Muqdisho, 6da Jannaayo 1980

GUDDOMIYAHA

GUDDIGA DHEXE EE DOORASHADA

JAALLE DR. XASAN YUUSUF NUUR

LIFAAQ A

MAGACYADA XILDHIBANNADA GOLAHA SHACBIGA EE HEER QARAN

1. Jaalle Maxamed Siyaad Barre,
2. Jaalle Maxamed Cali Samatar,
3. Jaalle Xuseen Kulmiye Afrax,
4. Jaalle Ismaaciil Cali Abokor,
5. Jaalle Axmed Saleebaan Cabdalla
6. Jaalle Cabdalla Maxamed Faadil,
7. Jaalle Maxamed Sheekh Cusmaan,
8. Jaalle Maxamuud Geelle Yuusuf,
9. Jaalle Jaamac Maxamed Qaalib,
10. Jaalle Cabdi Warsame Isaaq,
11. Jaalle Muuse Rabiile Good,
12. Jaalle Cabdulqaadir Xaaji Maxamed,
13. Jaalle Aadan Cabdullaahi Nuur
14. Jaalle Aadan Cabdi Ducaale,
15. Jaalle Maxamed Jibriil Muuse,
16. Jaalle Bile Rafle Guuleed,
17. Jaalle Axmed Xasan Muuse,
18. Jaalle Maxamed Ibraahim Axmed,
19. Jaalle Cismaan Jaamac Cali,
29. Jaalle Maxamed Cali Nuur,
21. Jaalle Maxamed Xawaadle Madar,
22. Jaalle Xuseen Cabdulqaadir Qaasim,
23. Jaalle Cabdullaahi Cosoble Siyaad,
24. Jaalle Yuusuf Cali Cismaan
25. Jaalle Cabdiraxmaan Jaamac Barre,
26. Jaalle Maxamed Yuusuf Weyrax,
27. Jaalle Aadan Maxamed Cali,
28. Jaalle Yuusuf Ibraahim Cali (Abuuraas
29. Jaalle Maxamed Buraale Ismaaciil,
30. Jaalle Cabdisalaam Sheekh Xuseen,
31. Jaalle Cabdiqaasim Salaad Xasan,
32. Jaalle Axmed Shire Maxamuud,
33. Jaalle Cumar Carte Qaalib,
34. Jaalle Axmed Ashkir Bootaan,
35. Jaalle Keenidiid Axmed Yuusuf,
36. Jaalle Maxamuud Cali Axmed,
37. Jaalle Faaduma Cumar Xaashi,
38. Jaalle Axmed Xabiib Axmed,
39. Jaalle Maxamed Maxamuud Warsame,
40. Jaalle Warsame Cabdullaahi Cali,
41. Jaalle Maxamuud Jaamac Axmed,
42. Jaalle Ibraahim Meygaag Samatar

44. Jaalle Axmed Maxamed Maxamuud,
45. Jaalle Maxamed Nuur Galaal,
46. Jaalle Axmed Maxamuud Faarax,
47. Jaalle Cabdiraxmaan Cabdi Xuseen,
48. Jaalle Cabdullaahi Maxamed Xasan,
49. Jaalle Cabdiraxmaan Caydiid Axmed,
50. Jaalle Cumar Xaaji Maxamed,
51. Jaalle Yuusuf Axmed Salxaan,
52. Jaalle Axmed Sahal Cali,
53. Jaalle Maxamuud Cabdi Dhuunkaal,
54. Jaalle Cusmaan Maxamed Jeellee,
55. Jaalle Maxamed Cumar Jees,
56. Jaalle Xamsa Maxamed Gaaddaweyne,
57 Jaalle Maxamed Jaamac Maxamed,
58. Jaalle Warsame Cali Faarax,
59. Jaalle Cumar Salaad Cilmi,
60. Jaalle Cali Xuseen Cabdullaahi,
61. Jaalle Axmed Maxamed Ducaale,
62. Jaalle Maxamed Cali Shire,
63. Jaalle Faarax Wacays Dhuule,
64. Jaalle Cabdullaahi Warsame Nuur,
65. Jaalle Ismaaciil Axmed Ismaaciil,
66. Jaalle Cabdirisaaq Maxamuud Abuubakar,
67. Jaalle Maxamed Cali Warsame,
68. Jaalle Maxamed Cumar Cusmaan,
69. Jaalle Abuukar Xasan Weheliye,
70. Jaalle Rashiid Sheekh Cabdullaahi Axmed Guuleed
72. Jaalle Abuukar Sheekh Yuusuf,
71. Jaalle Daahir Warsame Yuusuf Ducaale
72. Jaalle Abuukar Sheekh Yuusuf Maxamuud
73. Jaalle Jaamac Gaas Macaawiye Aw Yuusuf
74. Jaalle Maxamuud Saciid Maxamuud Cali Gacamey
75. Jaalle Cabdi Maxamad Tarrax Maxamuud
76. Jaalle Maxamed Cabdi Yuusuf,
77. Jaalle Abuukar Xaaji Nuur (Kolombo),
78. Jaalle Maxamuud Cabdi Cali (Beyr)
79. Jaalle Maxamuud Maxamed Rooble.
80. Jaalle Cabdisalaam Xaaji Maxamad Cabdi Xuseen
81. Jaalle Maxamad Xarakow Maxamad Muuse
82. Jaalle Cabdulqaadir Macow Cumar Cabdi
83. Jaalle Maxamad Cabdullaahi Cabdi «Dooday»
84. Jaalle Axmed Sugulle Xersi,
85. Jaalle Cabdi Afrax Yuusuf Wardheere (Jaqaf)
86. Jaalle Axmed Cabdi Saciid,

87. **Jaalle Muuse Nuur Amiin,**
88. Jaalle Axmed Maxamuud Faarax (Fadhixume)
89. **Jaalle Axmed Maxamed Isaaq (Karakuus),**
90. Jaalle Cabdullaahi Maxamad Mire Jaamac
91. Jaalle Maxamed Faarax Ciise Cabdulle (Gaashaan)
92. Jaalle Siid-Cali Cabdulle Barre Sabriye
93. **Jaalle Khaliif Muuse Samatar Warsame**
94. Jaalle Maxamuud Shire Ismaaciil Maxamed
95. Jaalle Maxamad Yalaxow Maalin Jimcaale
96. Jaalle Cumar Maxamed Xandulle Maxamed
97. **Jaalle Salaad Cusmaan Rooble,**
98. Jaalle Saleebaan Axmed Max'uud Guuleed Hagoog
99. Jaalle Maka Macallin Maxamad Abuukar
100. Jaalle Xaliima Sheekh Max'uud Maxamed Kaaraan
101. Jaalle Aamina Max'ed Ax'ed Maxamed Afarindhood
102. **Jaalle Faaduma Axmed Caalin,**
103. Jaalle Maxamad Muuse Maxamad Maxaad
104. Jaalle Abroone Yuusuf Xaaji Xuseen
105. Jaalle Xaaji Cumar Cali Cumar
106. Jaalle Sheekh Xasan Cabdullaahi Faarax Bullaale
107. Cabdi Mire Nuur Termuus
108. Jaalle Saleebaan Maxamuud Aadan «Gaal»
109. Jaalle Axmad Jaamac Cabdulle Kooshin «Jengeli»
110. Yuusuf Xasan Cilmi Shucayb
111. Jaalle Maxamad Xasan Muudey Afrax
112. Jaalle Cali Aadan Bootaan Geedi «Cali Karraan»
113. Jaalle Maxamuud Cabdi Nuur Maxamed
114. Jaalle Cali Saalax Cabdikariim Xaaji Muuse
115. Jaalle Maxamed Cali Xasan Colow «Kaneeco»
116. **Jaalle Xasan Maxamed Cusmaan (Jumbur),**
117. Jaalle Axmad Cali Saalax Cali
118. Jaalle Cabdisalaam Xasan Maxamad (Indhabuur»
119. Jaalle Cabdullaahi Jaamac Muxumed Cilmi
120. **Jaalle Yuusuf Sheekh Cali Samatar,**
121. Jaalle Maxamad Nuur Caliyow Cusmaan
122. Jaalle Maxamed Xuseen Guure «Afyare Garaad»
123. Jaalle Maxamad Yuusuf Axmad Jaamac
124. Jaalle Shire Suudi Maxamuud Faarax
125. Jaalle Maxamuud Nuur Caalin Cabdulle
126. **Jaalle Aadan Cabdi Xuseen,**
127. Jaalle Inj. Cabdicasiis Siidow Cumar Cismaan
128. **Jaalle Maxamed Maxamuud N. (shood),**

129. Jaalle Cabdirashiid Sheekh Axmed Maxamed
130. Jaalle Cabdiraxmaan Maxamad Cumar Cusmaan
131. Jaalle Cabdullaahi Salaad Warsame Xasan Aljabra
132. Jaalle Inj. Cabdulqaadir Faarax Max'ed Max'uud «Dawiil»
133. Jaalle Shariif Maxamad Cali Isaaq Aadan
134. Jaalle Daahir Macallin Cabdulle,
135. Jaalle Xuseen Aw Maxamuud Maxamed Ciise Kooficad
136. Jaalle Saciid Maxamuud Indhayare Takar
137. Jaalle Cabdiraxmaan Maxamuud Caraale
138. Jaalle Dr. Maxamed Sheekh Cali Munasar,
139. Jaalle Maxamed Cali Xaamid Cabdi
140. Jaalle Cabdullaahi Maxamed Diirshe Shiil
141. Jaalle Cabdiraxmaan Jaamac Maxamed Bullaale
142. Jaalle Nuur Fiqi Cusmaan Idaw
143. Jaalle Cabdi Muxumed Amiin Cige
144. Jaalle Max'uud Sheekh Mursal Max'ed (Gacamey)
145. Jaalle Cabdulaahi Sh. Xuseen Xasan Hantiwadaag
146. Jaalle Cali Xaaji Cilmi Cabdi «Suun Dhurwa»
147. Jaalle Cali Maxamed Axmed Warsame «Ilkacase»
148. Jaalle Xasan Abshir Faarax,
149. Jaalle Cabdullaahi Maxamed Sheegow,
150. Jaalle Cabdiraxmaan Xuseen Cabdi Samaale (Beedaani)
151. Jaalle Aadan Xuseen Xeyle Warfaa
152. Jaalle Mahad Dirir Guuleed Yuusuf
153. Jaalle Cabdi Maxamed Saxardiid,
154. Jaalle Cabdi Cusmaan Maxamed,
155. Jaalle Saciid Faarax Warsame,
165. Jaalle Cumar Cusmaan Diiriye,
157. Jaalle Maxamed Cali Abokor,
158. Jaalle Aadan Xersi Warsame
159. Jaalle Cabdiraxmaan Gaabow Maxamuud Max'ed
160. Jaalle Xasan Xaaji Max'uud Warsame Gaadweyne
161. Jaalle Yuusuf Cabdi Ibraahim (Kolombaas)
162. Jaalle Maxamed Muuse Cawaale,
163 Jaalle Cabdiraxmaan Cabdulle Cusmaan (Shuuke)
164. Jaalle Culumo Cabdiraxmaan Macallin
165. Jaalle Cabdiraxmaan Cusmaan Cumar
166. Jaalle Cali Khaliif Galeydh Warsame

167. Jaalle Xasan-Weli Sheekh Xuseen Cismaan Cilmi
168. Jaalle Cabdullaahi Axmed Caddow,
169. Jaalle Maxamed Saciid Samatar «Gacaliye»
170. Jaalle Maxamed Cumar Jaamac «Dhigic - Dhigic
171. Jaalle Maxamed Xaaji Axmed Weheliye

KEYDKA

1. Jaalle Axmed Saciid Naaleeye,
2. Jaalle Maxamed Xaashi Cigaal
3. Jaalle Axmed Sheekh Jaamac
4. Jaalle Xaawa Afarx Hiraabe,
5. Jaalle Maxamed Cali Cabdi,
6. Jaalle Yaasiin Xaaji Ismaaciil,
7. Jaalle Xasan Suudi Xersi,
8. Jaalle Cali Aadan Saalax,
9. Jaalle Cabdi Xaashi Cabdillaahi,
10. Jaalle Maryan Yuusuf Maxamuud,
11. Jaalle Xuseen Cabdulle Calasow,
12. Jaalle Xasan Cali Sooraal,
13. Jaalle Xasan Xaashi Fiqi,
14. Jaalle Yuusuf Cabdi Shirdoc
15. Jaalle Yuusuf Cilmi Rooble,
16. Jaalle Maxamed Dhaqane Dhoorre,
17. Jaalle Maxamed Maxamuud Nuur (MM Nuur)
18. Jaalle Caasha Faarax Shuuriye,
19. Jaalle Khaliif Xaaji Cabdillaahi,
20. Jaalle Xuseen Cabdulle Cali.

LIFAAQ B

XUBNAHA GOLAYAASHA SHACBIGA EE DEGAANNADA

GOLAHA SHACBIGA DEEGAANKA EE XAMAR

1) Jaalle Dr. Xasan Jilicow Maslax,
2) Jaalle Iikar Amiin Iikar,
3) Jaalle Dr. Axmed Xaaji Macow,
4) Jaalle Muraayad Garaad Axmed,
5) Jaalle Faadumo Shariif Abuukar,
6) Jaalle Dr. Cali Jumcaale Axmed,
7) Jaalle Maxamed Bin Yuusuf Ca
8) Jaalle Cabdullaahi Cali Hilowle,
9) Jaalle Cabdi Saahid Maxamed
10) Dr. CABDULLAAHI MAXAMUUD SIYAAD «Food»
11) Jaalle Faarax Weheliye Caddow (Sindaco),
12) Jaalle Xamsa Cabdulwahaab,
13) Jaalle Dr. Maxamed Nuur Xaaji Cumar,
14) Jaalle Faarax Maxamed Faarax,
15) Jaalle Xasan Cilmi Hiraabe (Dhicis),
16) Jaalle Cabduraxmaan M. Maxamuud (Adeer),
ISAGOO TIXGELIYEY: Kaalinta aqoonsiga mudan ee Jaalle Aadan Cabdi Axmed (Gabayaa Sare) uu ka qaatay dhismaha iyo horumarinta dalka, isagoo guubaabo badan ka sameeyey dagaalkii Kacaanku u soo galay difaaca Qarannka horukaca iyo cadaalada bulshada cusub ee Soomaalya:

ISAGOO ARKAY: lagama maarmaan inay tahay in Jaalahaas la gudoonsiiyo aqoonsiga iyo qaddarinta uu Kacaankiisa iyo unmaddiisa ka mudan yahay; loogana recbo raad dhaxal gala ah, taariikhi ah;

ISAGOO TIXGELIYEY: talada Gudiga Abaalmarinta 10 Guurada Kacaanka;

WUXUU KU MAAMUUSAY

Billad maar ah oo Kacaanimo Jaalle Aadan Cabdi Axmed

Muqdisho, 10 Febaraayo 1980

(S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)
Madaxweynaha J.D.S.

XEER WASAARADDA H GUUD L. 21 ee 11 Diseemarb 79 Sijsmo dhul Dowladeed loo isticmaali doono dan caam (masjid) kana wakiil ah: Cabdi Maxamed Xayd iyo Sheekh Maxamed Xiis Ismaaciil kuna yaal Muqdisho deg Hodon kuna fadhiya Mq. 4.600

ISAGOO ARKAY: Xaashida 1aad 2aad iyo tan 3aad ee Kacaanka 21kii Oktoobar 1969kii

ISAGOO ARKAY: Sharciga lamb. 14 oo 3 Juunyo 1962 iyo bedelaadii ka dambaysayey kuna saabsanaa nidaamka maamulka Guud ee Dowladda (Ordinamento del Governo)

ISAGOO ARKAY: Sharciga lamb 17 18 19 ee 10 Luuliyo 1976 kuna saabsan habka maamulka guud ee Dowladda oo la wareegtay Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed;

ISAGOO ARKAY: Sharciga lamb 41 soona baxday 10 Nofembre 1973 Sharciga dhulka dhismaha;

ISAGOO ARKAY: Xeer lamb 6 soona baxday Janaayo 1967

ISAGOO ARKAY Arjigii uu keenaadeen Jaallayaasha Cabdi Maxamed Xayd iyo Sheekh Maxamed Xiis Ismaaciil taariikhdu markay ahayd 13.9.1976 kuna weydiisteen dhismo dhul loo isticmaali doono dan caam ah oo diineed, ku yaal Muqdisho deg. Hodon kuna fadhiya Mq 4.800:

ISAGOO ARKAY: Warqadda lamb. yahay DH/MG/294 taareekhdeeduna aheyd 16 Jeen. 1977 ee ay qortay Wasaaradda Dawladda Hoose ee Muqdisho oo ku weydiisaneyso in la siiyo dhul Jaallayaashi Cabdi Maxamed Xayd iyo Sheekh Maxamed Xiis Ismaaciil oo ay u doonayaan deganaasho wadaado iyo Masaajid

ISAGOO ARKAY: Warqadda lamb yahay din/III/22/1442 taariikhdeeduna ahayd 30.5.1978 ee ay soo qortay Wasaaradda Garsoorka iyo Arimaha Diinta oo ay ku weydiisanay so in la siiyo dhul laga dhiso Masaajid

ISAGOO ARKAY: Naadada dhulka kuna, saabsan cad dhul ah, la weydiistay, ogeysiis ahaan loogu dhajiyey looxa Dowladda hoose ee Xamar laguna qoray faafinta Rasmiga ah ee dowladda, iyadoo aan cidna hor istaagin.

ISAGOO ARKAY: Naqshada lamb 949 kuna saabsan dhismo dhagaxeed oo ay u aqoosadeen Guddiga waaxda sahanka iyo degaanka mag. ee Wasaaradda Hawlaha Guud ee Muq disho fadhigoodii 14aad taariikhduna ahayd 5.7.1978, kuna saabsan dhismo masjid iyo Guri;

ISAGOO ARKAY: Warqadda Hubsimada dhulka soo sameeyeen Sahamiyo Cali Axmed Maxamed iyo ARK. Xaashi Axmed Ceydiid ka tirsan Qeybta Farsamada dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud taariikhdeeduna aheyd 2 Febaraayo 1977;

X E E R

Waxaa la caddeynayaa in la siiyey Hoggaanka Aydilooji-yada XHKS dhul Dawladeed ee cabbirkiisuna yahay mt.

kuna fadhiya mq. 112.073 kuna yaal Muqdisho Degmada Hodan;

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORON

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddada Kartogaraafiyada.

Koonfur waxaa ka xiga: Dhul Dawladeed.

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul Dawladeed

B a r i waxaa ka xiga: Dhul Dawladeed

Waan aragnay ee Diiwaangelinay
Diiwaanka lamb 1 bogga lamb. 1
Muqdsho 9 Jennaayo 1980
Hantidhawraha Guud KMG.
Yuusuf Cali Nuur.

Muqdisho 16 Jennaayo 1980

Wasiirka Wasaaradda Hawlaha Guud
INJ. Maxamed Xawaadle Madar

XEER WASARADDA H. GUUD L. 22 ee 9 Jennaayo 1979 Siismo dhul Dawldaeed la siiyey Hoggaanka Aydiloojiyada XHKS kuna yaal Muqdisho Degmada Hodan kuna fadhiya mq. 122.073

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAG.

ISAGOO ARKAY: Xaashida 1aad, 2aad iyo tan 3aad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY: Sharciga lamb. 14 ee 3 Juunyo 1962 iyo Beddelaaddii ka dambeeyey kuna saabsan Nidaamka Maamulka Guud ee Dawladda (Ordinamento del Governo);

ISAGOO ARKAY: Sharciga lamb. 17,18,19 ee 1 Luulyo 1976 kuna saabsan Habka Maamulka Guud ee Dawladda oo la wareegtay Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed;

ISAGOO ARKAY: Sharciga labm. 41 soona baxday 1 Nofembar 1973 Sharciga dhulka dhismaha;

ISAGOO ARKAY: Xeer lam. 6 soona baxay 9 Jen. 1967;

ISAGOO ARKAY: Warqadda L. yahay XHKS/B-16/2996/79 iikhdeeduna aheyd 15 Nofembar 79 ee ay soo qortay Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed; Hogaanka Aydilocjiyada oo ay ku weydiisaneyso in la siiyo dhul laga dhiso Machadka Culuunta Siyaasadda ee Golaha Dhexe XHKS.;

ISAGOO ARKAY: Warqadda Hubsimada dhulka oo soo sameeyeen Inj. Cabdikariin Cige Guuleed iyo Sah. Abuukar Maxamed Sheekh ka tirsan Waaxda Sahanka iyo Degaanka Magaaleynta ee Wasaaradda Hawlaha Guud dhul ku fadhiya mq. 122.073 kuna yaal Muqdisho Degmada Hodan;

XEER

Waxaa la caddeynayaa in la siiyey loona aqoonsaday Cabdi Maxamed Xayd iyo Sheekh Maxamed Xjis Ismaaciil, dhul Dowladeed, lagana dhisi doono Masjid iyo Guri dhul cabirkiisu yahay mt. 80X60 kuna fadhiya Mq.4.800 kuna kuna yaal Muqdisho deg. Hodon wadada hawl--wadaag.

Soohdimihiisuna yihiin sida hoos ku tilmaaman

Waqooyi waxaa ka xiga: Jid

Koonfur waxaa ka xiga: Jid

Galbeed waxaa ka xiga: Jid

Bari waxaa ka xiga: dhul Dowladeed.

Waan Aragnay ee Diiwaangeliney
Diiwaanka lamb; 1 Bogga lamb. 48.
Muqdisho, 16 Diseembar 1979.
Hantidhawraha Guud KMG
Yuusuf Cali Nuur

Muqdisho 11 Disembar 1979

Wasiirka Wasaaradda Hawlaha Guud
INJ. Maaxmed Xawaadle Madar

XEER WASAARADDA H. GUUD L. 23 ee 21 Jennaayo 80 Siismo dhul Dawladeed, la siiyey Wakaaladda Daaqa Qaranka kuna yaal Muqdisho Degmada Wadajir kuna fadhiya mq. 40.400

WASAARADDA H. GUUD
WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAG.

ISAGOO ARKAY: Dastuurka Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliya;

ISAGOO ARKAY: Sharciyada lamb yihiin 17,18,19 ee 1da Luulyo 1976, kuna saabsanaayeen Xukunka Dalka oo la wareegayXHK Soomaaliyeed;

ISAGOO ARKAY: Sharciga 41 soona baxay 13kii Sebtembar 1973 oo ku saabsan oggolaanshaha dhulka dhismaha;

ISAGOO ARKAY: Xeer lamb. 6 soona baxay 9 Jennaayo 67 oo la xiriira qiimaha dhul bixinta;

ISAGOO ARKAY: Warqadda lamb. yahay WDQ/3/16/129/80 taariikhdeeduna aheyd 17 Jannaayo 80 ee ay soo qortay Wakaaladda Daaqa Qaranka oo ay ku weydiineyso in la siiyo dhul;

ISAGOO ARKAY: Warqadda Hubsimada dhulka soo sameeyeen Sah. Abuukar Maxamed Sheekh iyo Maxamed Maye Xaaji kana tirsan Waaxda Sah. iyo Degaanka Magaaleynta ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhul ku fadhiya mq. 40.400 kuna yaal Muqdisho Degmada Wadajir

WUXUU XEERAYAA

Waxaa la caddeynayaa in la siiyey Wakaaladda Daaqa Qaranka dhul dawladeed ee cabirkiisu yahay mt. (350X100) + (90X60) kuna fadhiya mq. 40.400 kuna yaal Muqdisho Degma-Wadajir

SOCHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa k xigaa: Waddo

Koofur waxaa ka xiga : Wadada Xalane

Galbeed waxaa ka xiga: Waddada Jaalle Siyaad

B a r i waxaa ka xiga: Dhul Dawladeed

Waan aragnay ee diiwaangelinnay
Diiwaanka lamb.1 bogga lamb.2.
Muqdisho,23 Jan. 1980
Hantidhowrka guud KMG
Yuusuf Cali Nuur

Muqdisho 21 Jen. 1980
Wasiirka Wasaaradda Hawlaha Guud
INJ. Maxaded Xaxaadle Madar

XEER WASAARADDA H GUUD L. 24 ee 28 Jan. 1980 waaxyaha dhismaha Jidadka,

WASIIRKA

ISAGOO ARKAY: Dastuurka Jamhuuriyada Dimoqraadiga Soomaaliya:

ISAGOO ARKAY: Sharciyada L. yihiin 17,18,19 ee 1da Luulyo 1976 kuna saabsanaayeen Xukunka dalka oo la wareegay Xisbiga Hantiwadaaga Kacaanka Soomaaliyeed:;

ISAGOO ARKAY: Sharci lamb, 74 ee 3.6.1962 kuna saabsan dhismaha qaabka Dowladda oo lagu bedelay Xeerka Madaxweynaha JDS. lamb yahay 198 ee 20.6.1961;

ISAGOO ARKAY: Qodobka 55aad ee sharciga shaqaalaha dowladda lamb yahay 29 soona baxay 1.4.1970;

ISAGOO ARKAY: Xeerka Madaxweynaha JDS lam 23 ee 26.9. 1972 kuan saabsan dhismah qaabka wasaaradda h guud

ISAGOO ARKAY: Xeerka Madaxweynnaha JDS lr 23 ee 25.1 1978 dhismaha qaabkka wasaaradda hawlaha guud;

ISAGOO OGAADAY: Isku xidhnaanshaha labada Waaxood ee isku ahaan jiray Waaxda Jidadka;

ISAGOO DHAGAYSTAY: Doodihii labadii Shir ee lagu qabtay Wasaaradda Hawlaha Guud 22.1.1980 iyo 23.1.1980

ISAGOO TIXGELIYEY: Taladii lataliyaayaasha Bankiga Aduuna ku kaalmeeyey kor u qaadidda waaxda Jidadka;

WUXUU SOO SAARAYAA

XEER NIDAAMIYAHAN

Qod. 1aad

Waxda dhismaha Jidadka waxaa loo qaa[illegible]

Qod 2aad

Waaxda Hoosooyinka iyo qalabka waxaa loo aqoonsan doonaa waaxda 2aad ee Jidadaka.

Inta Madaxwenaha JDS go,aan ka gaadhayo dhameystirka qaabka la xidhiidha Jidadka, Agaasimaha waaxda Jidadka ayaa hoggaamiye u ah labada waaxood. Agaasimaha waaxda hoosooyinka iyo qalabka wuxuu ka tilmaan qaadanayaa una warbixn doonaa Agaasimaha waaxda Jidadka.

Waan Aragnay ee Diiwaan geliney
Dii waanka lamb 1 Bogga lamb 11.
Muqdisho 4 Febaraayo 1980
Ku xigeenka hantidhawraha Guud W S

Dr. Xuseen Cabdulle

Muqdisho 28 Jen. 1980

WASAARADDA H. GUUD
WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAG.

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALEYNTA
NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Xasan Cilmi Barkhadle uu u soo qortay arji waaxda sahanka iyo deegaanka magaaleynta ee W.H. G. Xamar maalintii taariikhdu ahaad 20.12.76 oo ku yaal Muqdisho Degmada Yaaq shiid Qaabkiisuna yahay Rettangolare Adimihiisuna yihiin 20x30 kuna fadhiya600 Mdh

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: dhul Lamb.0225 Y
Koonfur waxaa ka xiga: Waddo
Galbeed waxaa ka xga: Waddo
B a r i waxaa ka xiga: dhul Lamb. 0322 Y

Qofkii danaynaayaa dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal waaxda sah. iyo deg. Magaalaynta ee W.H.G. waxaana lagu doodi k araa muddo(30) soddon beri laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buuga faafinta rasmiga ah.

Muqdisho 27.NOV.1979

AGAASIMAHA WAAXDA SAHAN. IYO DEG. MAGAALAYNTA
INJ. CABDIKARIIM CIGE GUULEED

L. 37

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALEYNTA
NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J/le Maxamed Ibraahim Xoore uu u soo qortay arji waaxda Sahanka iyo Deg. Magaaleynta ee W.H.Guud Xamar maalintii taariikhdu aheyd 3.3.79 uu ku weydiistay gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Yaaqshiid Qaabkiisu yahay Regtangolaare Addimihiisuna ynhiin 20X30 kuna fadhiya 600 mdh.

SOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORON:

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo
Koonfur waxaa ka xiga: Dhul lam. 0234 Y
Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lam. 0237 Y
B a r i waxaa ka xiga:Waddo

Qofkii danaynaaya dhulkaas wuxuu si fiican ugu arki karaa Naqshadda dhulka oo taal waaxda dhismaha iyo dhulka ee W.H G. waxaana laga doodi karaa mudo (30) soddon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoroy Buugga Faafinta Rasmiga ah:

Muqdisho 27 Nofembar 1979

Agaasimaha Waaxda Sah. & Deg. Magaaleynta
INJ.Cabdikadiin Cige Guuleed

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALEYNTA
NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Barni Cabdi Axmed uu u soo qortay arji waaxda Sahanka iyo Deg. Magaaleynta ee W.H.Guud Xamar maalintii taariikhdu aheyd 30.1.1979 uu ku weydiistay gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho D mada Yaaqshiid Qaabkiisu yahay Regtangolaare Addimihiisuna ynhiin 20X30 kuna fadhiya 600 mdh.

SOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORON:

Waqocyi waxaa ka xiga: **Waddo**
Koonfur waxaa ka xiga: Dhuul lam. 0242 Y
Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lam. 0245 Y
B a r i waxaa ka xiga: Dhul lam. 0241 Y

Qofkii danaynaayaa dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal waaxda sah. iyo deg. Magaalaynta ee W.H.G. waxaana lagu doodi k araa muddo(30) soddon ber laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buuga faafinta rasmiga ah.

Muqdisho 27 Nofembar 1979

Agaasimaha Waaxda Sah. & Deg. Magaaleynta
INJ. Cabdikariin Cige Guuleed

L. 39

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALEYNTA
NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Madar Xasan Xaaji uu u soo qortay arji waaxda Sahanka iyo Deg. Magaaleynta ee W.H Guud Xamar maalintii taariikhdu aheyd 12.3.79 uu ku weydiistay gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Yaaqshiid Qaabkiisu yahay Regtangolaare Addimihiisuna ynhiin 20X30 kuna fadhiya 600 mdh.

SOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORON:

Waqocyi waxaa ka xiga: **Waddo**
Koonfur waxaa ka xiga: Dhul lam. 363
Galbeed waxaa k axiga: Dhul lam. 362 Y
B a r i waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii danaynaayaa dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal waaxda sah. iyo deg. Magaalaynta ee W.H G. waxaana lagu doodi k araa muddo(30) soddon ber laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buuga faafinta rasmiga ah.

Muqdisho 27 Nofembar 1979

Agaasimaha Waaxda Sah. & Deg. Magaaleynta
INJ. Cabdikariin Cige Guuleed

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALEYN...
NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cumar Xaaji Maxamed uu u soo qortay arji waaxda Sahanka iyo Deg. Magaaleynta ee W.H.Guud Xamar maalintii taariikhdu aheyd 1.1.79 uu ku weydiistay gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Yaaqshiid Qaabkiisu yahay Regtangolaare Addimihiisuna ynhiin 20X30 kuna fadhiya 600 mdh.

SOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORON:
Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo
Koonfur waxaa ka xiga: Dhul lam. 0252 Y
Galbeed waxaa ka xiga: Dhuul lam. 0255 Y
B a r i waxaa ka xiga: Dhul lam. 0251 Y

Qofkii danaynaayaa dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal waaxda sah. iyo deg. Magaalaynta ee W.H.G. waxaana lagu doodi k araa muddo(30) soddon beri ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buuga faafinta rasmiga ah.

Muqdisho 27 Nofembar 1979

Agaasimaha Waaxda Sah. & Deg. Magaaleynta
INJ. Cabdikariin Cige Guuleed

L. 42

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALEYNTA
NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Maryan Reydal Warsame uu u soo qortay arji waaxda Sahanka iyo Deg. Magaaleynta ee W.H.Guud Xamar maalintii taariikhdu aheyd 3.2.1979 uu ku mada Yaaqshiid Qaabkiisu yahay Regtangolaare Addimihiisuna ynhiin 20X30 kuna fadhiya 600 mdh.

SOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORON:
Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo
Koonfur waxaa ka xiga: Dhul lam. 029 Y
Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lam. 028 Y
B a r i waxaa ka xiga: Dhul lam. 032 Y

Qofkii danaynaayaa dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal waaxda sah. iyo
W.H.G. waxaana lagu doodi k araa muddo(30) soddon beri ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buuga faafinta rasmiga ah.

Muqdisho 27 Nofembar 1979

AGAASIMAHA WAAXDA SAH. IYO DEG. MAGAALAYNTA
INJ. CABDIKARIIM CIGE GUULEED

L. 43

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALEYNTA
NAADO DHUL

Waxaa la in caddeynayaa Jaalle Axmed Maxamed Samantar uu u soo qortay arji waaxda sahanka iyo degaanka Magaaleynta ee W.H.Guud Xamar maalintii taariikhdu ahayd 4.7.79 uu ku weydiistay gabal dhul dowlodeed ah oo ku yaal Muqdisho deg. Yaaq-shiid qiibkiisu yahay Rettangolore Addimihiisuna yihiin 20X30 kuna fadhiya 600 Mdh.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN:

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo
Koonfur waxaa ka xiga: Dhul lamb 0278 Y
Galbeed waxaa ka xiga: Waddo
B a r i waxaa ka xiga: Dhul lamb O277 Y

Qofkii danaynaayaa dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal waaxda sah. iyo deg. Magaalaynta ee W.H.G. waxaana lagu doodi k araa muddo(30) soddon beri ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buuga faafinta rasmiga.

Muqdisho 27 Nombeebar 1979

Agaasimaha Waaxda Sah. & Deg. Magaaleynta
INJ. Cabdikariin Cige Guuleed

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAHANKA & DEGAANKA MAGAALAYNTA
NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Gaanle Sare Ibraahim Maxamd Sacmal uu u soo qortay arji waaxda sahanka iyo deg. Magaaleynta ee W.H.Guud Xamar maalintii taariikhdu ahayd 9.6.79 uu ku weydiistay gabal dhul dowladeed ah oo ku yaal Muqdisho deg. Yaaq-shiid qaabkiisu yahay Rettangolre Addimihiisuna yihiin 20X30 kuna fadhiya 600 Mdh.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA SOO SOCOTA

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul lamb 0231 Y
Koonfur waxaa ka xiga: Waddo
Koonfur waxaa ka xiga: Waddo
Koonfur waxaa ka xiga: Waddo
Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lamb 0232 Y
B a r i waxaa ka xiga: Dhul lamb 0228

Qofkii danaynaayaa dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal waaxda sah. iyo deg. Magaalaynta ee W.H.G. waxaana lagu doodi k araa muddo(30) soddon beri ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buuga faafinta rasmiga ah.

Muqdisho 27 Nombeebar 1979

Agaasimaha Waaxda Sah. & Deg. Magaaleynta
INJ. Cabdikariin Cige Guuleed

WASAARADDA *HAWLAHA GUUD*
WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYNTA
NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Maxamed Cabdi Maxamud (Qamariye) uu u soo qorty arji waaxda sahanka iyo deg. Magaaleynta Xamar maalintii taariikhdu ahayd 1.1.79 uu ku weydiiysat gabal dhul dowladeed ah oo ku yaal Muqdisho deg.Yaaq shiid qaabkiisu yahay Rettangolre Addimihiisuna yihiin 20X30 kuna fadhiya 600 Mdh.

SOOHIDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN:

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo
Koonfur waxaa ka xiga: Dhul lamb 083 Y
Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lamb 082 Y
B a r i waxaa ka xiga: Dhul lamb 086 Y

Qofkii danaynaaya Dhulkaas wuxuu si fiican uga arkikaraa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Degaanka Magaalaynta ee W.H.G. waxaana laga doodi karaa muddo (30) Soddon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Rasmiga ah.-

Muqdisho 27 Nombeebar 1979
Agaasimaha Waaxda Sah. & Deg. Magaaleynta
INJ.Cabdikadiin Cige Guuleed

L.45

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALEYNTA
NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Khadra Yuusuf Jaamac uu u soo qortay arji waaxda sahanka deg. Magaalaynta Xamar ee W.H.Guud Xamar maalintii taariikhdu ahayd 12.9.79 uu ku weydiistay gabal dhul dowladeed ah oo ku yaal Muqdisho deg. Yaaqshiid qaabkiisu yahay Rettangolre Addimihiisuna yihiin 20X30 kuna 600 Mdh.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo
Galbeed waxaa ka xiga: Waddo
Koonfur waxaa ka xiga: Dhul lamb 0103 Y
B a r i waxaa ka xiga: Dhul lamb 0106

Qofkii danaynaaya Dhulkaas wuxuu si fiican uga arkiraa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee W.H.G. waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood laga bilaabo maalinaa lagu soo qoray Buugga Faafinta Rasmiga ah:

Muqdisho 27 Nombeebar 1979
Agaasimaha Waaxda Sah. & Deg. Magaaleynta
INJ.Cabdikadiin Cige Guuleed

L.46

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYTA
NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cibaada Cabdi Yuusuf uu u soo qortay arji waaxda sahanka iyo deg. Magaalenta ee W.H. Guud Xamar maalintii taayriikhdu ahayd 12.1178 uu ku weydiistay gabal dhul dowladeed ah oo ku yaal Muqdisho deg. Yaaqshiid qaabkiisu yahay Rettangolre Addimihiisuna yihiin 20X30 kuna fadhiya 600 Mdh.

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo
Koonfur waxaa kka xiga: Dhhul lamb 0294 Y
Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lamb 0297 Y
B a r i waxaa ka xiga: Dhul lamb 0293 Y

Qofkii danaynaayaa dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal waaxda sah. iyo deg. Magaalaynta ee W.H.G. waxaana lagu doodi k araa muddo(30) soddon beri ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buuga faafinta rasmiga ah.

Agaasimaha Waaxda Sah. & Deg. Magaaleynta
INJ.Cabdikadiin Cige Guuleed

L. 47

WASAARADDA *HAWLAHA* GUUD
WAAXDA SAHANKA & *DEGAANKA* MAGAALAYNTA
NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Siraad Cumar Bubbad uu u soo qorty arji waaxda sahanka iyo de Magaalaynta ee W.H.G Xamar maalintii taariikhdu ahayd 12.9.79 uu ku weydiistay gabal dhul dowladeed ah oo ku yaal Muqdisho deg Yaaq-shiid qaabkiisu yahay Rettangolere Addimihiisuna yhiin 20X30 kuna fadhiya 600 Mdh.

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul lamb 036 Y
Koonruf waxaa ka xiga: Waddo
Galbeed waxaa ka xiga: Waddo
B a r i waxaa ka xiga: Dhul lamb 037 Y

Qofkii danaynaaya Dhulkaas wuxuu si fiican uga arkikaraa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Degaanka Magaalaynta ee W.H.G. waxaana laga doodi karaa muddo (30) Soddon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Rasmiga ah.-

Muqdisho 27 Nofeembar 1979

Agaasimaha Waaxda Sah. iyo Deg. Magaaleynt.
INJ Cabdikariin Cige Guuleed

L.48

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYNTA
NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cali Nuur Aadan Cali uu u soo qortay arji waaxda sahanka iyo Magaaleynta ee W.H.G. Xamar maalintii taariikhdu ahayd 16.2.79 uu ku weydiistay gabal dhul dowladeed ah oo ku yaal Muqdisho deg. Yaaq-shiid qaabkiisu yahay 20X30 kuna fadhiya 600 Mdh.

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul lamb 0315 Y
Koonfur waxaa ka xiga: Waddo
Galbeed waxaa ka xiga: Waddo
B a r i waxaa ka xiga: Dhul lamb 0312 Y

Qofkii danaynaaya Dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee W.H.G. waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Rasmiga ah:

Muqdisho 27 Nofeembar 1979

AGAASIMAHA WAAXDA SAH. IYO MAGAALAYNTA
INJ. CABDIKARIIM CIGE GUULEED

L. 49

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYNTA
NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Axmed Cabdiraxmaan Axmed uu u soo qortay arji waaxda sahanka iyo deg Magaaleynta ee W.H.Guud Xamar maalintii taariikhdu ahayd 18.5.77 uu ku weydiistay gabal dhul dowladeed ah oo ku yaal Muqdisho deg Yaaq-shiid qaabkiisu yahay Rettangolore Addimihiisuna yihiin 20X30 kuna fadhia 600 Mdh.

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul lamb 090 Y
Koonfur waxaa ka xiga: Waddo
Galbeed waxaa ka xiga:ee Dhul lamb 087 Y
B a r i waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii danaynaaya Dhulkaas wuxuu si fiican uga arkikaraa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Degaanka Magaalaynta ee W.H.G. waxaana laga doodi karaa muddo (30) Soddon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Rasmiga ah.-

AGAASIMAHA WAAXDA SAH. & DEG. MAGAALAYNTA
INJ. CABDIKARIIM CIGE GUULEED

L. 50

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYNTA
NAADO DHUL

Waxaa la cadeynayaain Jaalle Saciid Sheekh Xasan Nurley uu soogortay arji Waaxda Sahanka iyo Deegaanka Magaaleynta ee W.H.Guud Xamar Maalintii Taariikhdu ahayd 13.6.79, uu ku weydiistay Gabal Dhul Dawladeed ah oo ku yaal Mudishho Degmad Yaaqshiid Qaabkiisu yahay Rettangolare Addimihiisuna yihiin 20x30 kuna fadhya 600 Mdh.

SOOHDHIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN
Koonfur waxa ka xiga Dhul Lamb. 0107 Y
Galbeed waxa ka xiga Dhul Lamb. 0106 Y
Bari waxa ka xiga Dhul Lamb. 0110 Y

Qofkii danaynaaya Dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Sah. iyo Deg. Magaaleynta ee W.H.G. waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Rasmiga ah:

Muqdisho 27 Nofeembar 1979

Agaasimaha Waaxda Sah. iyo Deg. Magaaleynta
INJ Cabdikariin Cige Guuleed

L. 51

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYNTA
NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Ayaan axmed maxamd uu usoo qortay arji waaxda sahanka Iyo degaanka Magaaleynta ee W.H.GUUD Xamar maalintii taariikhdu ahayd 23.11.76 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ahoo ku yaal Mupdisho Degmada YAAQ SHIID Qaabilkiisu yahay RETTAN GOLAR Addimihiisuna yihiin 20x30 kuna fadhiya 600 Mdh.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDAN HOOS KU QORAN:
Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul lam. 668 Y
Koonfur waxaa ka xiga: Waddo
Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lam. 669 Y
B a r i waxaa ka xiga: Dhul lam. 665 Y

Qofkii danaynaaya Dhulkaas wuxuu si fiican uga arkikaraa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Degaanka Magaalaynta ee W.H.G. waxaana laga doodi karaa muddo (30) Soddon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Rasmiga ah.-

AGAASIMAHA WAAXDA SAH. & DEG. MAGAALAYNTA
INJ. CABDIKARIIM CIGE GUULEED

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALEYNTA
NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J/lee Dh/me Xasan Maxamuud Khaliif uu u soo gortay arji waaxda Sah. iyo deg. Magaaleeynta ee W.H Guud Xamar maalintii taariikhdu aheyd 17.10.78 uu ku weeydiistay gabal dhul dowladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Yaaqshiid qaabkiisu yahay Regtangolaaree Addimihiisuna yihiin 20X30 kuna fadhiya 600 mdh.

SOOHIDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN:
Waqooyi waxaa ka xiga: xiga: Dhul lam. 350 Y
Koonfur waxaa ka xiga: Waddo
Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lam. 351 Y
B a r i waxaa ka xiga: Dhul lam. 347 Y

Qofkii danaynaayaa dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal waaxda sah. iyo deg. Magaalaynta ee W H G waxaana lagu doodi k araa muddo(30) soddon ho laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buuga faafinta rasmiga ah

Muqdisho 19 Nofembar 1979

AGAASIMAHA WAAXDA SAH. IYO MAGAALAYNTA
INJ. CABDIKARIIM CIGE GUULEED

L. 53

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYNTA
NAADO DHUL

Waxaa la caddeeynayaa in Jaalle Faawuma Cabdulqaadir Xasan uu usoo qortay arji waaxda Sah. iyo degaanka Magaaleynta ee W.H.Guud maalintii taariikhdu aheyd 19.7.77 uu ku weydiistay gabal dhul dowladeed ah oo ku yaal Muqdisho degmada Wadajir qaabkiisu yahay Trebesiyo Addimihiisuna yihiin (40+30) 20 kuna fadhiya 700 mdh.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA SOO SOCOTA
Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul dad leeyahay
Koonfur waxaa ka xiga: Waddo
Galbeed waxaa ka xiga: Waddo
B a r i waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii danaynaayaa dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal waaxda sah. iyo deg. Magaalaynta ee W H G waxaana lagu doodi k araa muddo(30) soddon ho laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buuga faafinta rasmiga ah.

Muqdisho 19 Nofembar 1979

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYTA
NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Ducaale Jaamac Axmed uu u soo qortay arji waaxda Sah. iyo degaanka Magaaleynta ee W.H.Guud maalintii taariikhdu aheyd 24.3.79 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho degmada Yaaq-shiid qaabkiisu yahay Regtangolaare Addimihiisuna yihiin 20X30 kuna fadhiya 600 mdh.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA SOO SOCOTA

Waqooyi waxaa ka xiag: Waddo
Koonfur waxaa ka xiga: Dhuul lam. 043 Y
Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lam. 042 Y
B a r i Waxaa ka xiga: Dhul lam. 046 Y

Qofkii danaynaaya Dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee W.H.G. waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Rasmiga ah:

Muqdisho 19 **Nofembar 1979**

AGAASIMAHA WAAXDA SAH. IYO MAGAALAYNTA
INJ. CABDIKARIIN CIGE GUULEED

L. 55

WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA
WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALEYNTA
NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J/le Biixi Xuseen Warsame uu u soo qortay arji waaxda Sah. iyo degaanka Magaaleynta ee W.H.Guud maalintii taariikhdu aheyd 12.2.79 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho degmada Yaaq-shiid qaabkiisu yahay Regtangolaare Addimihiisuna yihiin 20X30 kuna fadhiya 600 mdh.

SOOHDIMIHIISUNA WAA SIDA HOOS KU QORNA:

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul lam. 0199 Y
Koonfur waxaa ka xiga: Waddo
Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lam. 0200 Y
B a r i waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii danaynaaya dhulkaas wuxuu si fiican ugu arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal **Waaxda Sah. iyo Degaanka** Maaylaynta, ee W.H.G. waxaana laga doodi karaa muddo (30) Soddon bari ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Faafinta Rasmiga ah

Muqdisho 19 Nofembar 1979

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYNTA
NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J/le Maxamed Xuseen Qaraama uu u soo qortay arji waaxda sah. iyo degaanka Magaaleynta ee W.H.Guud maalintii taariikhdu aheyd 27.10.79 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho degmada Xamar weyne qaabkiisuna yahay Regtangolaare Addimihiisuna yihiin 6.10.X25 kuna fadhiya 152.50 mdh.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN
Waqooyi waxaa ka xiga: Waddada Ejito
Koonfur waxaa ka xiga: Degmada Xamar weyne
Galbeed waxaa ka xiga: Dhul dad leeyahay
B a r i waxaa ka xiga: Dhulkiisii hore

Qofkii danaynaaya Dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee W.H.G. waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Rasmiga ah:

Muqdisho 19 Nofembar 1979
Agaasimaha waaxda sah. iyo deg. Magaalaynta
Inj Cabdikariin Cige Guuleed

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYNTA
NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle aMaxamuud Amiin Maxamed Cali iyo Safiya Sh. Amiin Maxameed Cali uu u soo qortay arji waaxda sah. iyo degaanka Magaaleynta ee W.H.Guud maalintii taariikhdu aheyd 3 7.79 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho degmada Wadajir Qaabkiisu yahay Regtangolaare Addimhiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 mdh.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN
Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul lam. 226 W
Koonfur waxaa ka xiga: Waddo
Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lam. 218 W
B a r i waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii danaynaaya Dhulkaas wuxuu si fiican uga arkikaraa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Degaanka Magaalaynta ee W.H.G. waxaana laga doodi karaa muddo (30) Soddon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Rasmiga ah.-

Muqdisho 19 Nofembar 1979

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA
NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Faaduma Cali Ciid uu u soo qortay arji waaxda sah. iyo degaanka Magaaleynta ee W.H.Guud Xamar maalintii taariikhdu aheyd uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho degmada Yaaq-shiid qaabkiisu yahay Regtangolaare Addmihiisuna yihiin 20X30 kuna fadhiya 600 mdh.

SOOHDIMIHIISUNA WAA SIDA HOOS KU TILMAAMAN
Waqooyi waxaa ka xiag: Waddo
Koonfur waxaa ka xiga: Dhul lam. 015 Y
Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lam. 012 Y
B a r i waxaa ka xiga: Dhul lam. 061 Y

Qofkii danaynaaya dhulkaas wuxuu si fiican ugu arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Sah. iyo Degaanka Magaalaynta, ee W.H.G. waxaana laga doodi karaa muddo (30) Soddon bari ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Faafinta Rasmiga ah

Muqdisho 19 Nofembar 1979
Agaasimaha waaxda sah. iyo deg. Magaalaynta
Inj Cabdikariin Cige Guuleed

L. 59

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYNTA
NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J/le Caasha Maxamuuud Culusow uu u soo qortay arji waaxda sah. iyo deggaanka Magaaleynta ee W.H.Guud maalintii taariikhdu aheyd 2.2.79 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho degmad Yaaq-shiid qaabkiisu yahay Regtangolaare Addmihiisuna yihiin 20X30 kuna fadhiya 600 mdh.

SOOHDIMIHIISUNA WAA SIDA HOOS KU QORNA:
Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul lam. 058 Y
Koonfur waxaa ka xiga: Waddo
Galbeed waxaa ka xiga: Waddo
B a r i waxaa ka xiga: Dhul lam. 059 Y

Qofkii danaynaaya dhulkaas wuxuu si fiican ugu arki karaa Naqshadda dhulka oo taal waaxda Sahanka iyo Degaanka ee W.H.G. waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood laga bilaabo maalinaa lagu soo qoray Buugga Faafinta Rasmiga ah:

Muqdisho 19 Nofembar 1979
Agaasimaha waaxda sah. iyo deg. Magaalaynta
Inj Cabdikariin Cige Guuleed

L. 60

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYNTA
NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaallee Muxiba Jaamac Barre uu u socqortay Waaxda Sahanka iyo Deegaanka Magaaleynta Xamar maalintii taariikhdu ahaayd 10.2.79 uu kuweediistay gabal dhul dowladeed ah oo ku yaal Muqdisho Deg. Yaaq shiid Qaabkiisuna yahay Reettangolare Aaddimihiisuna yihiin 20X30 kuna fadhiya 600 Mdh.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDAN
Waqooyi waxaa kaxiga: Waddo
Galbeed waxaa ka xiga: Waddo
Kofur waxaa kaxiga: Dhul L.021 Y
B a r i waxaa ka xiga: Dhul L. 024 Y.

Qofkii danaynaaya Dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee W.H.G. waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Rasmiga ah:

Muqdisho 27 Nofeembar 1979
Agaasimaha waaxda sah. iyo deg. Magaalaynta
Inj Cabdikariin Cige Guuleed

L. 61

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYNTA
NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J/lee Bashiir Cabdulle Maxamed uu u soo qortay arji waaxda sahanka iyo degaanka Magaaleeynta Xamar maalintii taariikhdu aheyd 14.5.79 uu ku weeydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho degmada Yaaqshiid qaabkiisu yahay Regtangolaare Addimihiisuna yihiin 20X30 kuna fadhiya 600 mdh.

SOOHDIMIHIISUNA WAA SIDA HOOS KU QORNA:
Waqooyi waxaa ka xiag: Waddo
Koonfur waxaa ka xiga: Dhul lam. 073 Y
Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lam. 072 Y
B a r i waxaa ka xiga: Dhul lam. 076 Y

Qofkii danaynaaya Dhulkaas wuxuu si fiican uga arkikaraa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Degaanka Magaalaynta ee W.H.G. waxaana laga doodi karaa muddo (30) Soddon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Rasmiga ah.-

Muqdisho 19 Nofembar 1979
Agaasimaha waaxda sah. iyo deg. Magaalaynta
Inj Cabdikariin Cige Guuleed

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYNTA
NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J/le Axmeed Maxamed Wehliye uu u soo qortay arji waaxda sahanka iyo degaanka Magaaleeynta Xamar maalintii taariikhdu aheyd 29.8.79 uu ku weeydiistay gabal dhul dowladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Yaaqshiid qaabkiisu yahay Regtangolaare Addimihiisuna yihiin 20X30 kuna fadhiya 600 mdh.

SOOHDIMIHIISUNA WAA SIDA HOOS KU QORNA:
Waqooyi waxaa ka xiag: Waddo
Koonfur waxaa ka xiga: 027 Y
Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lam. 026 Y
B a r i waxaa ka xiga: Dhul lam. 030 Y

Qofkii danaynaaya Dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshada Dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee W.H.G. waxaana laga doodi karaa mudo (30) soddon maalmood laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Rasmiga ah:

Muqdisho 19 Nofembar 1979
Agaasimaha waaxda sah. iyo deg. Magaalaynta
Inj Cabdikariin Cige Guuleed

L. 63

WASAAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYNTA
NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaallee Maxamed Saalim uu u soo qortay arji waaxda sahanka iyo degaanka Magaaleeynta Xamar maalintii taariikhdu aheyd 14.2.79 uu ku weeydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho degmada Yaaqshiid qaabkiisu yahay Regtangolaare Addimihiisuna yihiin 20X30 kuna fadhiya 600 mdh.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN
Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul lam. 013 Y
Koonfur waxaa ka xiga: Waddo
Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lam. 0140 Y
B a r i waxaa ka xiga: Dhul lam. 0144

Qofkii danaynaaya Dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee W.H.G. waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Rasmiga ah:

Muqdisho 19 Nofembar 1979
AGAASIMAHA WAAXDA SAHAN. IYO DEG. MAGAALAYNTA
INJ. CABDIKARIIN CIGE GUULEED

L. 64

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYNTA
NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cali Jumcaale Cumar uu u soo qortay arji waaxda sahanka iyo degaanka Magaaleeynta Xamar maalintii taariikhdu aheyd 30.7.79 uu ku weeydiistay gabal dhul dowladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Yaaqshiid qaabkiiuna yahay Regtangolaare Addimihiisuna yihiin 20X30 kuna fadhiya 600 mdh.

SOOHDIMIHIISUNA WAA SIDA HOOS KU QORNA:

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo
Koonfur waxaa ka xiga: Dhul lam. 2140 Y
Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lam. 2143 Y
B a r i waxaa ka xiga: Dhul lam. 2139 Y

Qofkii danaynaaya dhulkaas wuxuu si fiican uga arkikaraa gaalaynta ee W.H.G. waxaana laga doodi karaa muddo (30) Sod. Naqshadda dhulkaas oo taal Waaxda Sahanka iyo Degaanka Madon beri ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta rasmiga ah..

Muqdisho 19 Nofembar 1979

Agaasimaha waaxda sah. iyo deg. Magaalaynta
Inj Cabdikariin Cige Guuleed

L. 65

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYNTA
NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J/le Khadiija Axmed Xasan uu u soo qortay arji waaxda sahanka iyo degaanka Magaaleeynta Xamar maalintii taariikhdu aheyd 28.1.79 uu ku weeydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho degmada Yaaqshiid qaabkiisu yahay Regtangolaare Addimihiisuna yihiin 20X30 kuna fadhiya 600 mdh.
gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Mudisho degmadaaalT9p

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul lam. 0311 Y
Koonfur waxaa ka xiga: Waddo
Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lam. 0312 Y
B a r i waxaa ka xiga: Dhul lam. 0308 Y

Qofkii danaynaaya Dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee W.H.G. waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood laga bilaabo maalinaa lagu soo qoray Buugga Faafinta Rasmiga ah:

Muqdisho 19 Nofembar 1979

WASAARADDA HAWLAHA GUUD WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYNTA NAADO DHUL

Waxaa la caddeeynayaa in J/le Xabiiba Maxamed Xersi uu u soo qortay arji waaxda sahanka iyo degaanka Magaaleeynta Xamar maalintii taariikhdu aheyd 2.11.79 uu ku weeydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho degmada Yaaqshiid qaabkiisu yahay Regtangolaare Addimihiisuna yihiin 20X30 kuna fadhiya 600 mdh.

SOOHDIMIHIISUNA WAA SIDA HOOS KU TILMAAMAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo

Koonfur waxaa ka xiga: Dhuul lam. 681 Y

Galbeed waxaa ka xiga: 680 Y

B a r i waxaa ka xiga: Waddo

Muqdisho 19 Nofembar 1979

AGAASIMAHA WAAXDA SAHAN. IYO DEG. MAGAALAYNTA

BEDELAAD NAADO DHUL

L. 67

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU AKHRIYEY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU HUBSADAY: in Buug Keydka dhumay oo lambarkiisu ahaa 5840 lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Keeydka Soomaaliyeed Laanta 3aad kuna qorneyd lacag dhan Sh.So. 2.097 uu iska lahaa Raxma Maxamed Kheyre sida ku cad warqadda la. 197 Taariikh 9.2.80 oo bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta 3aad

HADDUU ARKAY: qod. 69 sharciga lam. 2 9.9.65

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (ammortameento) Buug Keyd lam. 5840 oo ku qoran Magaca Raxma Maxamed Kheeyre ayna ku jirto Sh.So. 2.097

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka laanta 3aad u beeddelo Raxma Maxamed Kheyre buugga Keydka ee kor ku tilmaaman una sameyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegato mudo aan ka yareyn 30 maalmood maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliyeed haddii inta ka horeeysa aan is hortaag laga keenin

Muqdisho 9.2.80

W.S. Guddoomiyaha M. Gobolka Banaadir

Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

Lam. 68

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HAUU AKHRIYEY: dacwadda kor ku qoran;

HADDUU HUBSADAY: in Buug Keydka dhumay oo lambarkiisu ahaa 198 lagan soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta 3aad kuna qorneyd lacag dhan Sh.So. 7.140 uu iska lahaa Xaaliimo Ciise Cali sida ku cad warqadda lam. taariikh 9.2.80 oo bangiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Laanta 3aad.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (ammortamento) Buug keydka Lam. 3742, oo ku qoran Magaca Xaliimo Ciise Cali ayna ku jirto Sh.So. 7.140/-

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka laanta 3aad u beeddelo una sameyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegato mudo aan ka yareyn 30 maalmood maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliyeed haddii inta ka horeeysa aan is hortaag laga keenin

Muqdisho, 9.2.80

W.S. Guddoomiyaha M. Gobolka Banaadir

Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 69

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU AKHRIYEY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU HUBSADAY: in Jeegga dhumay oo lambarkiisu ahaa 207541 lagana soo saaray Bangiga Ganacsig iyo keydka Soomaaliyeed Laanta kuna qorneyd lacag dhan Sh.So. 32,500 uu iska lahaa Maxameed Nuur Xuseen sida ku cad warqadda lam. 001893 taariikh 19.2.80 oo bangiga ganacsigao iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Dhexe

HADUU ARKAY: qod 69 sharciga Lam. 2 ee 9.9.65.

WUXUU XEERIYAY

In la baabi'iyo (ammortamento) Jeegga lam. 207541 oo ku qoran magaca Maxameed Nuur Xuseen ayna ku jirto Sh. So. 32,500

WUXUU FASAXAY

In Bangig aGanacsiga iyo Keydka Laanta Dhexe u bedde lo Maxamed Nuur Xuseen Jeeg wareega ee kor ku tilmaaman una sameyo mid la mid ah ka dib markay soo wareegato mudo aan yareyn 15 maalmood maalinta go'aanka lagu daabaco faafinta rasmiga ahee Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliyeed haddii inta ka horreysa aan is hortaag laga keenin.

Muqdisho 20.2.80

W.S. Guddoomiyaha M. Gobolka Banaadir

Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 70

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU HUBSADAY: In Buug Keyd dhumay oo lambarkiisu ahaa 1126 lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Socmaaliyeed Laanta 5aad kuna qoraneyd lacag dhan Sh. So. 8.500 uu iska lahaa Cabdullaahi Wehliye Ma. sida ku cad awarqadda lam. 000170 Taariikh 17.2.80 oo bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta 5aad.

HADDUU ARKAY: qod. 69 sharciga lam. 2 ee 9.9.65

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (ammortamento) Buug Keyd lam. 1126 oo ku qoran magaca Cabdullaahi Wehliye M. ayna ku jirto Sh.So. 8.500

WUXUU FASAXAY

In bangiga Ganacsiga iyo Keydka laanta 5aad u beddelo Cabdullaahi Wehliye Maxamed buugga keydka ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib marka ay ka soo mudo aan ka yareyn 30 maalmood maalinta go'aanka lagu daabaco faafinta rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomliyeed haddii inta ka horeysa aan is hortaag laga keenin.

Muqdisho 31 Jenayo, 1980

Guddoomiyaha M. Gobolka Banaadir

Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

Lam. 71

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU AHKRIYEY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU HUBSADAY: In Jeegag dhumay oo lambarkiisu ahaa 121451 iyo 256844 lagan soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Burco kuna qorneyd lacag dhan Sh.So. 20.000 iyo 3.274 uu iska lahaa Micallin Axmed Diiriye sida ku cad warqadda L. 001222 Taariikh. 3.2.80 oo bangiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Laanta Burco.

HADDUU ARKAY: qod. 69 sharciga lam. 2 ee 9.9.65
In la baabi'iyo (ammortamento) Jeegig lam. 121451 256844 oo ku qoran magaca Macallin Axmed Diiriye ayna ku jirto Sh.So. 20.000 iyo 3.274

WUXUU FASAXAY

In Bangiga ganacsiga iyo Keydka Laanta Burco u beddelo Macallin Axmed Diiriye Jeegagga war. ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegato muddo aan ka yareyn 15 maalmood maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliyeed haddii inta ka horeysa aan is hortaag laga keenin

Guddoomiyaha M. Gobolka Banaadir
Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

Muqdisho 3.2.80

L. 72

MAXAKMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU AKHRIYEY: Dacwadda kor ku qoron;

HADDUU HUBSADAY: In Jeeg Wareega dhumay oo lambarkiisu ahaa 226639 lagana soo saaray Bingiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Xogheynta kuna qorneyd lacag dhan Sh.So. 5.000 uu iska lahaa Xareed Cilmi Yuusuf sidi ku cad warqadda lam. 001163 taariikh 2.2.80 oo bangiga ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Xogheynta

HADDUU ARKAY: qod. 69 sharciga lam. 2 ee 9.9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (ammortamento) Jeeg Wareega lim. 226639 oo ku qoran magaca Xareed Cilmi Yuusuf ayna ku jirto Sh.So. 5.000

WUXUU FASAXAY

In Bangiga Ganicsigaa iyo Keydka laanta Xogheynta u beddelo Xareed Cilmi Yuusuf Jeegga war. ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib makay ka soo wareegato muddo aan ka yareyn 15 maalmood maalinta gelaanka lagu daabaco faafinta rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliyeed haddii inta ka horeysa aan is hortaag laga keenin

Muqdisho 18.2.80

Guddoomiyaha M. Gobolka Banaadir
Cali Axmed Faqi

L. 73

WARSHADDA MARMARKA IWM

OGEYSIIS SHIR CAADI AH

Waxaa la ogeysiinayaa dadka ka mid ah saamilayaasha Warshadda Marmarka IWM. (ISMA — S.P.A.) in ay ka soo qeybgalaan shirka caadiga ah ee lagu qaban doono Saldhigga Warshadda Marmarka IWM. ee Muqdisho, maalinta bishu tahay 15.4.80 saacadduna tahay 4.30 galabnimo, hadduu shirku ku dhamaan waayana mar labaadka bisha Abriile maalinta ay tahay 24.4.1980 isku saacadda kor ku qoran.

Shirkaa asaga ah waxaa looga hadli doonaa arrimaha hoos ku taalla.

1. Miisaaniyadda Sannadka 1979
2. Wax ka beddelid xubnaha Guddiga Maamulka iyo Guddiga Baarista
3. Arrimo la xiriira Raasimaalka shirkadda.

MAAMULKA IDMAN
Dr. Cabdullaahi M. Cabdulle

L. 74

IIB MA GALO

FAAFINTA RASMIGA AH

الرسمية الجريدة

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

لجمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 8aad Muqdisho 24 Febraayo 1980 — Lr 3 R 2

FAAFINTA BIL SOO BAXA جريدة شهرية

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J.D.S.

QIIMAHA : waa 5 shilin lnmbar walba **RUKUNKA** : Sanalkii waa Sh. 100 Soomaaliya gudaheeda — dibedana waa Sh. So, 300, Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo Qiimaha qorotaanka F. R, halkii sadar iyo wàxii ka yàr wàà 2 laba Sh. — Rukunka iyo qorjtaanku waxaa la weeydiistaa Laanta Maamulkà Fàafintà Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuurahà ee Wàsàaràddà Làcagta.

KOOBNIIN

QAYBTA KOOWAAD

SHARCI

SHARCI L. 5 ee 2 Febraayo 1980, Sharciga Shaqaalaha Dawlada.

Bogga 216

QAYBTA LABAAD

XEER

W. M.

QAYBTA SEDDEXAAD

SAXID QALAD (Eeg Bogga 274)

SHARCI L. 5 ee 2. 2. 1980 Sharciga Shaqaalaha Dawladda

MADAXWEYNAHA J.D. S.

ISAGOO ARKAY : Qod 82aad 111aad iyo 113 ee Dastuurka Jamhuuriyadda Dimooqraadiga Soomaaliya;

ISAGOO AQOONSADAY : Inay tahay lagama maarmaan in Shaqaalaha Dawladda loo sameeyo sharci mideysan waxna laga beddelo qaar kalana lagu daro;

ISAGOO DHEGEYSTAY : Taladii Wasiirka Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshadda;

ISAGOO TIXGELIYAY : Go'aankii Golaha Dhexe ee XHKS taariikhdiisuna ahayd 11. 10. 1979.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda :

QAYBTA 1AAD

QODOBBO GUUD

QODOBKA 1AAD

CADAYN

Ereyada soo socda, haddaan sharciga gudahiisa si kale loogu fasirin, waxaa loola jeedaa sida erey kasta ku dhinac qoran

— Golaha Wasiirada wuxuu ka kooban yahay : Madaxweynaha JDS iyo Wasiiradda oo dhan.

— «HEER» waxaa loola jeedaa darajooyin is leh oo is raacsan sida lagu tilmaamay qod 4aad ee sharcigan;

— «Qoys» wuxuu ka kooban yahay qofka Shaqaalaha ah iyo afadiisa/ninkeeda iyo caruurtiisa/carruurteeda aan qaan-gaar ahayn.

— «Darajo» waxa loola jeedaa qaybaha heerarka loo kala saarayo.

— «Madaxda Hayadda» waxaa loola jeedaa :

b) Madaxweynaha J. D. S. marka laga hadlayo Madax-

j) Sarkaalka u madax ah hay'ad aan wasaarad hoos imaan.

k) «Mushahar» waxa loola jeedaa lacagta uu shaqaaluhu bil walba xaq u leeyahay in la siiyo, sida ku cad lifaaqa 1aad ee Sharcigaan.

«Hay'ad dawladeed» waxaa loola jeedaa Madaxtooyada J. D. S. Wasaarad, Wakaalad, Warshad, Dawladda Hoose, Bankiga ama Mashruuc Dawladdu leedahay ama qayb ku leedahay.

«Hawl qaran» waxaa loola jeedaa Hawl kasta oo qaraanku iska leeyahay kana tarjumaysa danta guud ee dalka. Hawsha iskaa wax u qabso waxa loo aqoonsan yahay hawl qaran.

QODOBKA 2AAD

SAAMAYN

1) Sharcigani wuxuu saamaynayaa shaqaalaha joogtada ah ee Dawladda.

2) Sharcigani ma saamaynayo :

b) Shaqaalaha aan joogtada ahayn ama kuwa heshiis leyda ah.

t) Shaqaalaha ka tirsan hay'adaha lacagta iyo shirkadaha.

j) Dadka ka tirsan Ciidamada Qalabka sida iyo kuwa ciidan ahaanta u habaysan.

QAYBTA *II*

QAABKA

QODOBKA 3AAD

(1 Jago kasta waxay yeelan doontaa darajo, waajibaad iyo mas'uuliyad lagu aqoonsanayo magac koobn.

2) Tirada guud ee jagooyinka hayadda ee loogu tala galay miisaaniyadda Dawladda iyo jagooyinka aan lacag loogu tala gelini waxay isku wada noqonayaan qaabka hayaddaas.

QODOBKA 4AAD

HEERARKA

1) Waxa jiri doona heerarka soo socda :
— Heerka «A» iyo «AY» maamule iyo aqoon yahan.
— Heerka «B» Fuliye.
— Heerka «F» Farsamayaqaan oo ah qofka haysta shahaado Dugsi Sare iyo mid ka sareysa ee farsamo ama shahaado u dhiganta.
— Heerka «C» karaani.
— Heerka «X» xirfadle ama shahaado qiimayn xirfadeed
— Heerka «D» Adeege, Ilaaliye iwm.
2) Heer kastaaba wuxuu yeelaan doonaa mushaarada iyo darajooyinka ku tilmaaman lifaaqa 1aad ee sharcigan.

QAYBTA III

SHAQO SIINTA

QODOBKA 5AAD

U shaqaynta Dawladda, marka laga saaro Ciidamada Qalabka sida iyo kuwa Ciidan ahaan u habaysan, waxa lagula dhaqmayaa sida uu dhigayo sharcigan; hase yeeshee, Madaxweynaha J. D. S. wuxuu awood u leeyahay marka :

b) baahi weyni jirto ama

t) maslaxadda qaranka ay ku jirto.

j) iyo marka ay jiraan waxyaalo kale oo gaar ah inuu amro qorniin shaqaale iyadoo aan la marin habka uu dhigayo sharcigani.

QODOBKA 6AAD

SHURUUDAHA LAGA DOONAYO QOFKA LA QORAYO

Qof kastoo shaqo Dawladeed la siinayoo waa :
1) Inuu ahaado Soomaali

2) In da'diisu' ayan ka yarayn 15 sano.

3) Inuu Caafimaad taam ah qabo.

4) Inuu asluub wanaagsan lahaado

5) Inuusan aheyn qof xafiisyada Dawladda looga reebay xukun ku dhacay awgii «Interdetto».

6) Inuu lahaado shahaadooyinka looga baahan yahay jagada loo qaadanayo, kuwaasoo kala ah :

i) Shahaado Jaamacadeed ama mid u dhiganta, marka jagada, tahay Heerka «A» iyo «AY».

ii) Shahaado dugsiga sare oo caadiga ah ama mid u dhiganta marka jagadu tahay heerka «B 10»

ii) Shahaado dugsiga sare uu la jiro tababar farsamo iyo shaqo aqoon gaar ahaaneed ugu yaraan labo sano waxa lagu qori doonaa darajada «B 9».

iv) Shahaadada Dugsiga dhexe uu la jiro tababar farsamo iyo aqoon gaar ahaaneed ugu yaraan laba sano, waxa lagu qori doonaa darajada «C 10»

v) Shahaadada dugsiga dhexe ama shahaado la mid ah, waxa lagu' qori doonaa darajada «C 11».

vi) Inuu heysto caddeyn ah inuu qori karo aqriyina karo af Soomaaliga.

QODOBKA 7AAD

GUDDIGA QIIMEYNTA SHAHAADOOYINKA

Si loo ogaado heerka ama qiimaha ay shahaadooyinku leeyihiin, waxa qiimaynaya Guddiga Qiimaynta Shahaadooyinka ee hoos yimaada Wasaaradda Hiddaha iyo Tacliinta Sare oo loo xil-saaray hubinta shahaadooyinka la aqoonsan karo.

Guddigu wuxuu ka kooban yahay :

1) Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Hiddaha iyo Tacliinta sare Guddoomiye

2) Guddoomiye ku xigeenka Jaamacadda Ummadda Xubin.

3) Agaasimaha waaxda Shaqaalaha ee WASHAB Xubin
4) Agaasimaha Waaxda Qorshaha ee W. Waxbarashada iyo Barbaarinta Xubin.
5) Wakiil ka socda Xiriirka Guud ee Uruurada Shaqaalaha Soomaaliyeed Xubin.

QODOBKA 8AAD

WEYDIIN QORIS SHAQAALE

1) Hayadaha Dawladda iyo Hayadaha Gaarka ahiba marka ay u baahdaan shaqaale waxay weydiisanayaan Wasaaradda shaqada iyo Arrimaha Bulshada.
2) Wasaaraddu Haddii aanay hayn Shaqaale loo beddeli karo hayadda shaqaalaha soo warsatay waxay weyddiinta ku faafinaysaa Wargeysyada. Qorista Shaqaalaha waxa loo raacayaa habka shaqo qorista shaqaalaha ee Sharcigani tilmaamayo.

QODOBKA 9AAD

SHAQAALAHA AAN AQOON GAAR AH LOOGA BAAHNAYN

MARKUU ARKAY : In ay lagama maarmaan tahay in la xaddido gunnooyinka Xubnaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga ee Magaalada Xamar;

MARKUU DHEGEYSTAY talada Wasiiradda Maaliyadda;

WUXUU SOO **SAARAYAA**

Xeerka soo socda :

QODOBKA 1AAD

Xubnaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga ee Magaalada Muqdisho waxay yeelanayaan, bil walaba, gunnada magacyadooda ku hor qoran :

— DUQA MAGAALADA XAMAR : Gunno Wasiir iyo guri qalabeysan;

— KU XIGAHA DUQA MAGAALADA XAMAR Gunno Wasiir ku xigeen

— KU - XIGEENKA XOGHAYAHA GOLAHA SHACBIGA EE MAGAALADA XAMAR IYO GUDDOMIYE GUDDI HOOSAAD Sh. So. 2.200

— GUDDOOMIYE KU XIGEEN GUDDI HOOSAAD IYO XUBIN GUDDIGA JOOGTADA AH : Sh. So. 1.500

QODOBKA **2AAD**

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa laga bilaabo 24. 2. 1980, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

Muqdisho, 26. Febraayo 1980

MADAXWEYNAHA J. D. S.

S/GAAS *MAXAMED SIYAAD BARRE*

XEER HOOSAADKA GOLAHA SHACBIGA ee 27 Jenaayo 1980

HORDHAC

Iyadoo la wada ogsoon yahay in Gole Shacbiga kasta uu iska leeyahay Xeer-Hoosaad nidaamiya, loona cuskado fulinta iyo horumarinta hawlihiisa kala duwan, ayaa Xeer Hoosaadkan oo magacsiisu yahay «XEER-HOOSAADKA GOLAHA SHACBIGA» kadib markii aad loo lafaguray, loogana baaraandegay, lana hibiyey inuu waafaqsan yahay Dastuurka, ayaa Golaha Shacbigu si wadajir ah ugu oggolaaday shirkiisii 26. 1. 1980.

Xeer Hoosaadkan oo ka kooban 47 qodob, wuxuu si rasmi ah u dhaqan galay taariikhda kor ku xusan ee Goluhu oggolaaday.

Muqdisho, 27. 1. 1980

JAALLE ISMAACIIL CALI ABOKOR
GUDDOOMIYAHA GOLAHA SHACBIGA

XEER HOOSAADKA GOLAHA SHACBIGA

XUBINTA 1

BILLAABIDDA XILKA XILDHIBAANNIMADA

QODOBKA 1AAD

(DHAARTA XILDHIBAANNIMADA)

1) Xildhibaanku inta uusan bilaabin hawshiisa wuxuu Shirguddoomiyaha hortiisa ku marayaa dhaarta soo socota :

«*WAXAAN MAGACA ILAAHAY IYO KAN WADDANKA KU MARAYAA INAAN AMMAANO, KALSOONI IYO HAGAR LA'AAN UGU ADEEGO SHACBIGA SOOMAALIYEED, INAAN FULIYO MABAADI'DA KACAANKA 21KA OkTOOBAR 1969,* INAAN DHAWRO DASTUURKA & SHURUUCDA DALKA INAN *HIRGELIYO MABAADI'DA HANTIWADAAGGA, INAAN ILAALIYO DANTA GUUD EE SHACBIGA IYO DANAHA QARANKA SOOMAALIYEED, INAAN KARTIDAYDA OO DHAN KU DAAFACO XORRIYADA, MADAXBANAANIDA IYO MIDNIMADA DALKA, INAAN DANTA GUUD KA HORMARIYO DANTEYDA GAAR, AHAANEED, INAAN DADKA SOOMAALIYEED KU DHAQO SINNAAN IYO CADDAALAD*».

2) Xildhibaankii diida inuu maro dhaarta kor ku xusan, wuxuu ka dhacayaa xilka Xildhibaannimada Golaha Shacbiga.

XUBINTA II

GUDDIGA JOOGTADA AH

QODOBKA 2AAD

(DOORASHADA GUDDIGA JOOGTADA AH)

1) Golaha Shacbigu wuxuu fadhigiisa ugu horreeya ka dhex dooranayaa Xubnihiisa Guddoomiyaha Golaha iyo laba Guddoomiye.

2) Wuxuu kaloo dooranayaa Xoghayaha iyo tobanka yub-

3) Guddoomiyaha iyo Guddoomiye ku-xigeennada Golaha Shacbigu waxa ay noqonayaan Guddoomiyaha iyo Guddoomiye ku-xigeennada Guddiga Joogtada ah?

4) Xoghayaha Guddiga Joogtada ah waxaa uu noqonayaa Xoghayaha Golaha Shacbiga.

5) Guddoomiyaha Golaha Shacbiga, Guddoomiye ku-xigeennada iyo Xubnaha kale ee Guddiga Joogtada ah waxaa soo sharraxaya Golaha Dhexe ee Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed.

6) Guddoomiyaha Golaha, Guddoomiye ku-Xigeennada iyo xubnaha kale ee Guddiga Joogtada ah waxaa lagu dooranayaa hab gacan taag ah oo ku ansaxaya cod hal dheeri ah.

7) Haddii xubin ka mid ah Guddiga Joogtada ah uu xilka ka fariisto, beddelaadiisa waxaa loo marayaa habka ku xusan lambarada 5 iyo 6 ee qodobkan.

QODOBKA 3AAD

XILKA, AWOODDA IYO FADHIYADA GUDDIGA JOOGTADA AH

1) Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbigu wuxuu qabanayaa xillalka iyo awoodaha ku xusan qoddobbada 76 iyo 78 ee Dastuurka.

2) Guddiga Joogtada ah fadhigiisu wuxuu ku ansaxayaa marka ay ka soo qayb galaan seddex meelood laba xubnihiisa.

3) Inta uusan Guddiga Joogtada ah Go'aan ka gaarin arrin ansaxinta Golaha Shacbiga u baahan yahay, waxaa loo gudbinayaa Guddiga awoodda u leh.

4) Go'aanada uu gaaro Guddiga joogtada ah inta u dhexeysa Kalfadhiyada, una aahan in Golaha laga ansaxiyo, waxaa loo bandhigayaa Golaha, iyadoo uu jeedinayo xubinta Guddiga ee loo xilsaaro.

5) Ka doodidda iyo cod u qaadidda go'aannada ku xusan lambarka 4aad ee qodobka, Golaha Shacbiga wuxuu u marayaa habka ku tilmaaman qodobbada 37 — 43 ee Xeerkan.

QODOBKA 4AAD

XIKA GUDDOOMIYAHA GOLAHA SHACBIGA)

1) Guddoomiyaha Golaha Shacbiga waa Hoggaamiyaha Golaha, wuxuu hubanti geliyaa dhowrista Xeer-hoosaadka Golaha iyo habsami u socodshada hawlaha Golaha. Wuxuu qeybiyaa hadalka, dhexdhexaadiya doodaha, bandhigaa su'aalaha, dejiyaa nidaamka cod-bixinta, ku dhawaaqaa natiijada codadka, kormeeraa hawlaha Xoghayaha, kormeeraha iyo ku-xigeennada kormeeraha. Wuxuu isugu yeeraa mar kasta oo loo baahdo xubnaha Guddiga Joogtada ah, Guddoomiyayaasha Guddiyada Golaha, sbi looga baaraandego nidaamka iyo kala hormarinta hawlaha Golaha, isagoo ogeysiinaya Dawladda, haddii ay la habboonaato, si ay u soo magacawdo qof uga wakiil ah shirarkaas.

2) Guddoomiyuhu wuxuu qabanayaa, muddada Goluhu kala maqan yahay, mashruucyada sharciyada, warbixinnada iyo codsi kasta oo ka yimaada Xildhibaannada, isagoo wargelinaya Golaha maalinta ugu horreysa ee uu isu yimaado.

QODOBKA 5AAD

(GUDOOMIYE KU-XIGEENNADA)

1) Gudoomiyuhu marka uu maqan yahay ama ay ku timaaddo sabab ka reebaysa gudashada xilkiisa, waxaa hawlihiisa qabanaya Goddoomiye ku-xigeenka 1aad.

2) Guddoomiye ku-xigeennada waxay kaloo qabanayaa hawlihii kale ee Guddoomiyaha ama Guddiga Joogtada ahi u xilsaaraan?

QODOBKA 6AAD

(XILKA XOGHAYAHA)

1) Xoghayuhu, isagoo hawlgelinaya hawlwadeennada Golaha, wuxuu qabanayaa xilalka soo socda :

a) Ogeysiinta Xildhibaanada, waqti ku haboon, taariikhda fadhiyada Golaha iyadoo la raacinayo ajendaha shirarka,

b) Qoridda magacyada Xildhibaanada hadalka weydiista;

t) Akhrista soo jeedinta iyo qoraallada kale;

j) Qoridda go'aannada Golaha;

x) Ku sugidda diiwaanka Xildhibaannada jooga iyo kuwa maqnaada;

Kh Hubinta mashruucyada sharci iyo go'aannada kale ee Goluhu guddoomiyo isagoo saxiixaya.

2) Xoghayaha Golaha shacbiga waa madaxa Maamulka iyo Shaqaalaha Golaha.

3) Xoghayaha waxaa fulinta xilkaas gacan ku siinaya laba kaaliye Xoghaye oo uu Guddiga Joogtada ahi xubnihiisa ka dhex dooranayo.

QODOBKA 7AAD

1) Golaha Shacbigu wuxuu yeelanayaa hal kormeere iyo laba kormeere ku-xigeen oo xilkoodu yahay hab maamuska, ilaalinta nabadgalyada iyo habsami u socoshada hawlaha Golaha.

2) Kormeeraha iyo kormeere ku-xigeennada ku xusan lambarka 1aad ee qodobkan waxaa dooranaya guddiga Joogtada ah, wuxuuna ka dhex dooranayaa xubnihiisa.

XUBINTA III

(GUDDIYADA GOLAHA SHACBIGA)

QODOBKA 8AAD

(DHISMAHA GUDDIYADA GOLAHA)

1) Golaha Shacbigu wuxuu yeelanayaa Guddiyo ka kooban Xildhibaanno ka tirsan Golaha oo ay Guddoomiyeyaal ka noqonayaan Xubno Guddiga Joogtada ah.

2) Guddiyadu waxay xilka haynayaan muddada Golaha oo dhan, waana kuwa hoos ku qoran :-

1) Guddiga Siyaasadda;

2) Guddiga Dhaqaalaha iyo Maaliyada;

3) Guddiga Arrimaha Bulshada;

4) Guddiga Shuruucda;

5) Guddiga Difaaca iyo Nabadgalyada

3) Golaha Shacbiga wuxuu xubnihiisa ka dhex magacaabi karaa, haddii loo baahdo, Guddiyo aan joogta ahayn oo qabanaya xilal gaar ah, muddo xaddidan gudaheed.

QODOBKA 9AAD

KA BAARAANDEGIDDA HORDHACA AH

1) Mashruuc sharci kasta waxaa loo gudbinayaa ka baaraandegidda Guddiga awoodda u leh.

2) Mashruucyada sharci ee dhan ka sameeya dakhli ama kharaj waxaa isla markaa loo gudbinayaa Guddiga Dhaqaalaha iyo Maaliyadda.

3) Codsiyada la xiriira xil ka fariisad, xil ka qaadid ama denbi ku qaadid Xildhibaan, waxaa ka baaraandegaya Guddiga Shuruucda oo taladiisa u gudbinaya Guddiga Joogtada ah.

4) Ka baaraandegidda miisaaniyadda sannadka iyo xisaabxirka waxay ka mid yihiin awoodda gaarka ah ee Guddiga Dhaqaalaha iyo Maaliyada oo ay kaabayaan min hal xubin oo ka wakiil ah Guddiyada kale.

QODOBKA 10AAD

(SHIRDUMIDDA GUDDIYADA GOLAHA)

1) Guddiyada waxaa isugu yeeraya Guddoomiyaashooda, iyagoo u maraya guddoonka Golaha Shacbiga.

2) Guddoomiyaasha Guddiyada waxay kulan kasta kaddib gaarsiinayaan Guddoomiyaha Golaha Shacbiga Magacyada Xubnaha Maqnaada.

QODOBKA 11AAD

(CADDEYN BIXINTA SARAAKIISHA MAAMULKA

Guddiyadu waxay awood u leeyihiin iney u yeertaan Saraakiisha Maamulka si ay u weydiiyaan caddayn la xiriirta arrinta laga hadlayo.

QODOBKA 12AAD

MAGACAABID WARBIXIYE

Gudoomiye Guddi kasta marka la soo gaarsiiyo mashruuc sharci, wuxuu xubnaha Guddiga ka dhex magacaabaya qof warbixin ka soo sameeyo.

Haddii mashruuc sharci uu dhan ka saameeyo arrimo la lagu kordhiyaa wakiil ka socda Guddiga Dhaqaalaha iyo Maalixiriira maaliyada, waa in guddiga ka baaraandegaya arrinta yadda.

QODOBKA 13AAD

(BANDHIGIDDA MASHRUUCA SHARCI)

1) Guddi kasta wuxuu gudigga joogtada ah u gudbinayaa Mashruuca sharci ee uu ka soo baaraandegay.

2) Guddiga Joogtada ah wuxuu mashruuca sharci ee ku tilmaaman lambarka 1aad ee qodobkan u bandhigayaa Golaha Shacbiga, iyadoo warbixinta uu jeedinayo xubin ka mid ah Guddigi ka soo baaraandegay.

XUBINTA IV

(GUDDIYADA BAARISTA)

QODOBKA 14AAD

(MAGACAABIDDA GUDDI BAARIS)

1) Golaha Shacbigu wuxuu magacaabi karaa Guddi Baaris oo ka kooban xubno ka mid ah Xildhibaannada Golaha.

2) Magacaabidda Guddiga ku qoran lambarka 1aad ee qodobkan waxaa soo jeedin kara Guddiga Joogtada ah, waxaana Goluhu ka doodi karaa haddii ay isku raacaan saddex meelood meel Xildhibaannadiisa.

3) Dhismaha Guddi Baaris, Goluhu wuxuu ku doonayaa cod hal dheeri ah.

4) Goluhu wuxuu magaabidda Xubnaha Guddiga Baarista u wakiilan karaa Guddiga Joogtada ah.

QODOBKA 15AAD

(AWOODDA GUDDIGA BAARISTA)

Guddiga Baaristu, marka uu xilkiisa gudanayo, wuxuu leeyahay awood la mid ah tan Hay'adaha Garsoorka, wuxuuna natiijada baaristiisa u soo gudbinayaa Guddiga Joogtada ah.

QODOBKA 16AAD

(HAWL FULINTA XARUNTA KA BAXSAN)

Marka Guddiga Baarista ay la noqoto inuu hawshiisa ka fuliyo ama u diro xubno ka mid ah Guddiga meel ka baxsan Xarunta Golaha Shacbiga, waa inuu ogeysiiyaa Guddoomiyaha Golaha, isla markaana ka helaa oggolaansho.

XUBINTA V

(XIL KA FARIISIN)

QODOBKA 17AAD

(XIL KA FARIISASHO)

1) Xil ka fadhiisashada Xildhibaanka waxaa cod hal dheeri ah ku guddoominaya Golaha Shacbiga.

2) Codsiga xil ka fariishada xildhibaanku wuxuu ku soo gudbinayaa qoraal sababaysan.

QODOBKA *18*AAD

XIL KA QAAD*IDDA* XILDH*I*BAAN*KA*

1) Xildhibaan kasta ee oofin waaya shuruudaha xildhibaanimada ama ka soo bixi waaya waajibaadka xilkiisa la ririira, waxaa laga qaadayaa xilka.

2) Codsiga xil ka qaadidda waxaa soo jeedin kara, Doortayaasha ka sokow, siduu qabo qod. 74/2 ee Dastuurka, afar meelood meel Xildhibaannada, waxaana cod hal dheeri ah ku guddoominaya Golaha Shacbiga.

XUBINTA VI

F*ADHI*YADA, *DOODAHA*, NABADGELYADA QOLKA SH*I*RKA

I*YO TIRI*BUUNK*A*

QQ*O*BKA 19AAD

(MUD*DADA* KALFADHIYADA)

Kalfadhiyada caadiga ah iyo kuwa aan caadiga ahayn ee

QODOBKA 20AAD

(SHIRARKA GOLAHA)

Shirarka Golaha Shacbiga waxaa fura,xirana Shirguddoomiyaha, isaga ayaana ku dhawaaqayaa waqtiga iyo ajandaha shirka dambe.

QODOBKA *21*AAD

(HADALQORKA FADHIYADA)

1) Xoghayaha Goluhu wuxuu fadhi kasta ka diyaarinayaa hadalqor lagu muujinayo magacyada Xildhibaannada ka soo qeyb galay fadhiga, arrimaha laga dooday iyo go'aannada laga gaaray.
2- Hadalqorka fadhi kasta waa inuu saxiixaa Guddoomiyaha iyo Xoghayaha Golaha.

QODOBK*A 22AAD*

OGGOLAANSHAHA HADALQORKA*)*

1) Fadhi kasta wuxuu ku bilaabmayaa akhrinta hadalqorka fadhigii ka horreeyey, haddii uu si ka duwan Goluhu isku raacin.

2) Hadalqorka marka la akhriyo, haddaan cidna wax ka oran, waxaa loo qaadanayaa in la oggolaaday.

3) Shirgudoomiyuhu wuxuu hadalka u oggolaan karaa Xildhibaanka doonaya inuu saxo ama caddeeyo hadal ama ra'yi uu hory u soo jeediyey kuna yaal hadlqorka la akhriyey.

QODOBKA *23*AAD

(*AKHR*I*NTA QORA*A*LADA*)

1) Shirgudoomiyuhu, ama haddii uu foro, Xoghayuhu wuxuu Golaha u Akhrinayaa dhambaallada iyo qoraallada soo gaara ee khuseeya Golaha.

2) Looma akhrinayo Golaha, qoraallada aan la aqoon cidda soo dirtay ama aan habbooneyn.

QODOBKA 24AAD

(TIRADA SHARCIGA)

1) Hubinta tirada sharciga ah ee fadhiga Golaha, waxaa leh Shir Guddoomiyaha.

2) Xisaabta tirada sharciga ah ee fadhiga Golaha, waxa leh :

3) Xildhibaannada ka soo qeyb galay fadhiga haddii ay tiradoodu ka yar tahay kala bar iyo hal Xildhibaannada Golaha, marka laga reebo kuwa ku xusan lambarka 2aad ee qodobkan, waxaa fadhiga dib loo dhigayaa hal saac, haddii halkaas saac kaddib aan la helin tirada sharciga ah, waxaa fadhigaas loo ridayaa maalinta ku xigta ee aan fasax ahayn, isla saacadii maalintii hore, haddii Shirguddoomiyuhu si ka duwan uusan go'aamin.

4) Haddii inta fadhigu socdo loo baahdo in la hubiyo tirada sharciga ah ee Xildhibaannada si cod loo qaado, Xildhibaanka maqnaada fasax la'aan wuxuu la mid yahay qof fadhigaas oo dhan aan ka soo qeyb galin.

QODOBKA 25AAD

(HADAL QADASHO)

Xildhibaanku wuxuu hadalka qaadan karaa marka shirguddoomiyuhu u idmo codsi kaddib.

QODOBKA 26AAD

(HABSAMI U SOCOSHADA DOODAHA)

1) Haddii Xildhibaan uu ku hadlo erayo qadaf ah ama ku kaco fal uu ku carqaladeynayo habsami u socoshada doodaha, Shirguddoomiyuhu wuxuu ku baraarujinayaa inuu nidaamka dhowro, hase yeeshee, Shirgudoomiyuhu wuxuu isla markaas u oggolaan karaa ama dib ugu dhigi karaa, haddii uu codsado, in Xildhibaanku sheego sababta ku kalliftay falka ama erayada kor ku xusan.

2) Haddii Xildhibaanku carqalaadayn dambe u laabto ama ku kaco falal ka qallafsan kuwii hore looga digay, Shirgudoomiyuhu wuxuu ku amri karaa in uu qolka shirka ka baxo.

3) Shirguddoomiyuhu wuxuu talo ku soo jeedin karaa in Xildhibaanka laga joojiyo ka qeyb gelidda fadhiga maalintaas inta ka horeysa ama fadhiyada Golaha muddo u dhexaysa 2 ilaa 10 maalmood, haddii falalka Xildhibaanku ku kacay ay noqdaan kuwo qalalaase geliya doodaha fadhiga ama uu isticmaalo xoog ama haddadaa.

4) Soo Jeedinta talooyinka ku xusan lambarka 3aar ee qodobkan, cod ayaa loo qaadayaa.

5) Haddii Goluhu oggolaado talooyinka Shirgudoomiyuhu soo jeediyay ee ku xusan lambarka 3aad ee qodobkan, hase yeeshee, Xildhibaanka arrintu khuseyso uu diido inuu fadhiga ka baxo, ama u hoggaansami waayo amarka Shirguddoomiyaha ee ku xusan lambarka 2aad ee qodobkan, Shirguddoomiyuhu wuxuu laalayaa fadhigaas, wuxuuna ku dhaqaaqayaa tallooyinka loo baahan yahay si go'aanka Goluhu u fulo.

6) Xildhibaanka ku kaca, isagoo jooga qolka shirka Golaha dibaddiisa, hase yeeshee ku sugan xarunta Golaha gudaheeda, fal dhibaato gaar ah keeni kara, Guddoomiyuhu wuxuu talo ku soo jeedin karaa in laga qaado tillaabooyinka ku xusan lambarka 3aad ee qodobkan.

QODOBKA *27AAD*

*(*NABADGELYA*DA* GOLAHA *S*HACBIGA*)*

1) Nabadgelyada Golaha Shacbiga waxaa ka mas'uul ah Golaha Shacbiga oo idil, waxaana hawlaha la xiriira hoggaaminaya Guddoomiyaha, isagoo kaashanaya kormeeraha, ku-xigeennadiisa iyo ciddii kale ee hawlahaas gacan ku siin karta.

2) Waxaa qof kasta ka reeban in uu hub la soo galo shirka.

QODOBKA *28AAD*

***(GELITAANKA* QOLKA SHIRKA)**

1) Inta Shirku socdo, qolka shirka Golaha Sahcbiga sinnaba kuma soo geli karo qof aan ka tirsanayn Golaha.

2) Ciidammada Nabadgelyadu waxay qolka shirka ku soo geli karaan amarka shirguddoomiyaha oo keli ah.

QODOBKA *29AAD*

(FADHIGA TRIBUUNKA)

1) Dadweynaha loo idmo in ay fariistaan tiribuunka qolka shirka Golaha, inta doodu socodaan waa in ay ka reebtoonaadaan hadal, calaamado ah u riyaaqid ama ama diiddo doodaha socda.

2) Qofkii qadaf u geysta Golaha Shacbiga ama Xubin ka mid ah Xildhibaannada, Shirguddoomiyuhu wuxuu amrayaa in si degdeg ah loo horgeeyo Hay'adda Garsoorka ee awoodda u leh.

QODO*BKA 30AAD*

AFKA GOLAHA SHACBIGA

Doodaha iyo qoraallada Golaha waxaa lagu isticmaali karaa afafka Soomaaliga iyo Carabiga.

QO*DO*BKA *31AAD*

(KA QAYB QAADASHADA DOODAHA)

1) Xildhibaannada doonaya in ay hadalka qaataan waxay magacyadooda u gudbinayaan Shirguddoonka, waxayna hadalka u kala qaadanayaan sida qorridda magacyadooda u kala horreeyaan.

2) Xildhibaankii Shirgudoomiyuhu u yeero, sugnaantana in uu maqan yahay, waxaa ka lumaya xaqa ka hadalka mwduucaas.

QODOBKA 32AAD

QODOBKA *32*AAD

(HABKA HADAL JEEDINTA)

1) Xildhibaanku wuxuu hdalkiisa ka jeedinayaa meesha u fadhiyo, isagoo taagan, una jeeda xagga Shirgudoomiyaha.

2) Qofka looma oggola in uu hadalka qaato hal mar ka badaan, doodiiba, haddii uusan Shirguddoomiyuhu u oggolaan, ama uusan jeedinneyn tusaale la xirriirta dhowrista Xeer-hoosaadka Golaha ama sabab shakhsi ah.

3) Sabab shakhsi ah waxaa loola jeedaa wixii dhaliil ah ee loo jeediyo Xildhibaanka ama ra'yi isaga lagu lammaanay oo ka duwan kii uu dhiibtay.

4) Xildhibaanku waa in uu tilmaamaa sababta shakhsiga ah ee ku kallifaysa in uu hadalka qaato, Shirguddoomiyaha ayaa go'aan ka gaaraya.

QO*DOBK*A *33*AAD

***(IS BERI* YEERID)**

Haddii qof ka mid ah Xildhibaannada lagu eedeeyo arrimo sharaftiisa dhaawacaya, wuxuu Guddoomiyaha Golaha Shacbiga ka codsan kraa in la magacaabo Guddi ka sal gaara dhabta eedeyntaas.

QODOB*KA 34*AAD

(*KU *EKAANTA* MAWDUUCA*)

Shirguddoomiyuhu wuxuu hadalka ka goyn karaa Xildhibaanka ka weecda arrinta doodu ka furan tahay; kaddib marka uu laba jeer oo is xigta xusuusiyo in uu mawduuca ku ekaa-

QODOBKA 35AAD

KHUDBADDA QORAALKA AH)

1) Xildhibaanku wuxuu jeedin karaa khudbad qoran.

2) Akhrinta khudbadda lama kala goyn karo, kamana badana karto 20 daqiiqadood, haddii aysan Shirgudoomiyuhu ugu muuqan si ka duwan.

QODOBKA 36AAD

(KALA MUDNAANTA HADALKA)

Waxaa mudnaasho leh hadallada ku saabsan baraarujinta dhowrista mawduuca dooddu ka furan tahay iyo Xeer-hoosaadka Golaha Shacbiga.

QODOBKA 37AAD

(KA DOODIDDA MASHRUUC SHARCI)

1) Mashruuc sharci waxaa dood laga furi karaa marka ay ka soo wareegto ugu yaraan 24 saacadood u qeybinta mashruuca Xildhibaanada, hadii Goluhu uusan go'aansan wax ka duwan.

2) Goluhu kama doodi karo, go'aanna kama gaari karo arrin aan ku jirin ajendaha fadhiga, marka laga reebo xaaladaha degdegga ah ee Guddiga Joogtadaha ah ku taliyo.

QODOBKA 38AAD

(HABKA DOODA)

1) Ka baaraandegidda mashruuc sharci waxaa lagu bilaabayaa dood guud oo la xiriirta mabaadi'da mashruuca.

2) Wasiirka ama Xildhibaanka mashruuca soo jeediyey, ama haddii ayan labadaasu codsanin, labaatan Xildhibaan, waxay weydiisan karaan in mashruuca looga

3) Goluhu, marka u dhageysto laba qof oo midkood uu taageerayo soo jeedinta lagu soo jeediyey waxaa loo qaadayaa cod gaar ah.

5) Mashruuca sharci ee ka kooban hal qodob keli ah, doodda gaar ahaaneed waxaa ay ku dhafmaysaa tan guud.

QODOBKA 39AAD

(HABEYNTA SIIQADA KAMA DAMBEYSTADA AH

Ka doodidda mabdi'da guud ee mashruuca sharci kaddib, Goluhu wuxuu u xilsaari karaa Guddiga awoodda u leh in uu habeeyo siiqada kama dambeysta ah ee qodobbadda mashruuca sharci, iyadoo lagu soo celinayo Golaha si uu go'aan uga gaaro.

QODOBKA 40AAD

(TOOSINTA MASHRUUCA SHARCI)

1) Shirguddoomiyuhu wuxuu diiwaaniayaa qodobgada soo kordhay iyo toosinnada laga soo jeediyey mashruuc sharci inta ay dooddu socotay.

2 Ka doodidda qodobbada dheeraadka ah iyo toosinnadda waxaa loo dhigi karaa fadhi danbe, haddii ay codsadaan labaatan Xildhibaan oo ka baxsan Xildhibaannanada talada wax ka beddelka mashruuca sharci lahaa.

3) Sidoo kale waxaa dib u dhigid weydiisan kara Guddiga Maaliyadda marka qodobka dheeraadka ah ama toosintu ay keenayaan kharaj dheeraar ah ama ay dhimayaan dakhliga, si toos ah ama si dadbana.

QODOBKA 41AAD

1) Qofka talada soo jeediyey waa uu ka noqon karaa haddii ayan is hortaagin ugu yaraan shan Xildhibaan.

2) Xildhibaanka la noqda soo jeedinta wuxuu Golaha u bandhigi karaa sababta ku kalliftay ka noqoshada

XUBINTA VII

COD - BIXINTA

QODOBKA 42AAD

(HABKA COD-BIXINTA)

Codbixinta waxaa loo dhiibanayaa habka gacanta taagidda.

QODOBKA 43AAD

KU DHAWAAQIDDA NATIIJADA

Natiijada codbixinta waxaa ku dhawaaqaya Guddoomiyaha, isagoo isticmaalaya habka ah «GOLUHU WAA OGGOLAADAY» ama «GOLUHU WAA DIIDAY».

XUBINTA VIII

SU'AALAHA IYO AFTIDA

QODOBKA 44AAD

SU'AASHA IYO AFTIDA)

1) Xildhibaanka doonaya in uu soo jeediyo su'aal ama afti wuxuu keenayaa weydiin qoraal ah, isagoo aan soo sabeeyn, Guddoomiyaha ayaan u akhrinaya Golaha saddex maalmood gudahooda laga bilaabo maalinta weydiinta la keenay, haddii Goluhu kalfadhi ku jirrinna maalinta labaad eeuu isu yimaado.

2) Su'aashu waa weydiin ku saabsan in arrin jirto iyo in kale, in wararka qaarkood ay soo gaareen Dawladda iyo wixii ka jira, iyo in ay Dawladdu ka gaartay ama ay ku talo jirto in ay ka gaarto go'aan arrin gaar ah.

3) Aftidu waa weydiin qoraal ah oo ku saabsan sabaha ku kalifay ama ujeeddooyinka Dawladdu ka leedahay tallaabooyinka ay qaaday oo ku leh barnaamijkeeda.

QODOBKA 45AAD

(JAWAABTA SU'AASHA IYO AFTIDA)

1) Shirguddoomiyuhu kaddib marka uu su'aasha ama aftida u akhriyo Golaha, wuxuu u gudbinayaa Wasiirka ay khuseeyso oo jawaab qoraal ah ka dhiibaya muddo Shirgudoomiyaha xadido gudaheeda, hase yeeshee aan badnaa karin labaatan maalmood, taasoo laga akhriyo Golaha hortiisa.

2) Haddii weydiiyaha ama aftiiluhu ku qanci waayo jawaabta qoraalka ah, wuxuu weydiisan karaa Wasiirka ay khuseeyso in uu arrinta ka caddeeyo Golaha hortiisa.

XUBINTA IX

ERGOOYINKA

QODOBKA 46AAD

(MAGACAABIDDA ERGOOYINKA)

Ergooyinka Golaha Shacbiga waxaa magacaaba Guddiga Joogtada ah.

XUBINTA X

HAWLAHA

QODOBKA 47AAD

SHAQAALAHA GOLAHA

1) Magacaabidda, dallacaadda iyo hawlgelinta Shaqaalaha Golaha Shacbiga waxaa awood u leh Guddiga Joogtada ah.

2) Goluhu wuxuu leeyahay QAAB u gaar ah ee u oggolaado Guddiga joogtada ah. Qaabku wuxuu muujinayaa tirada, nooca Mushahaarka iyo gunooyinka Shaqaalaha, iyadoo la raacaya nidaamka u degsan Shaqaalaha Joogtada ah ee Qaranaka.

TUSMO

XUBINTA KOOWAAD

Bilaabidda Xilka Xildhibaanada

Qod. 1aad — Dhaarta Xildhibaannimada

XUBINTA LABAAD

GUDDIGA JOOGTADA AH

Qod. 2aad — Doorashada Guddiga Joogtada ah 1

Qod. 3aad—Xilka, Awoodda iyo Fadhiyada Gudiga Joogtada 2

Qod. 4aad — Xilka Guddoomiyaha Golaha Shacbiga 2

Qod. 5aad — Guddoomiya Ku Xigeennadda 3

Qod. 6aad — Xilka Xoghayaha 3

Qod. 7aad — Kormeerayaasha Golaha 4

XUBINTA SADDEXAAD

GUDDIYADA GOLAHA SHACBIGA

Qod. 8aad — Dhismaha Gudiyadda Golaha 4

Qod. 9aad — Ka baaraandegidda hordhaca ah 5

Qod. 10aad — Shirgudoomiyaha Guddiyadda Golaha 5

Qod. 11aad — Caddeyn Bixinta Saraakiisha Maamulka 5

Qod. 12aad — Magaabid War bixiye 5

Qod. 13aad — Bandhigidda Mashruuc Sharci 6

XUBINTA AFRAAD

Qod. 14aad — Magacaabidda Guddi Baaris 6

Qod. 15aad — Awoodda Guddiga Baarista 6

Qod. 16aad — Hawl Fulinta Xaruunta ka Baxsan 6

XUBINTA SHANAAD

Qod. 17aad — Xil ka fadhiisasho 7

XUBINTA LIXAAD

FADHIYADA, DOODAHA, NABADGELYADA

QOLKA SHIRARKA IYO TIRIBUUNKA

Qod. 19aad — Muddada kalfadhiyadda 7

Qod. 20aad — Shirarka Golaha 7

Qod. 21aad — Hadal-qorka fadhiyada 7

Qod. 22aad — Oggolaanshaha Hadalqorka 8

Qod. 23aad — Akhrinta Qoraallada 8

Qod. 24aad — Tirada Sharciga 8

Qod. 25aad — Hadal qaadashada 8

Qod. 26aad — Habsami u socoshada doodaha 9

Qod. 27aad — Nabadgalyada Golaha Shacbiga 10

Qod. 28aad — Gelitaanka Qolka Shirka 10

Qod. 29aad — Fadhiga Terebuunka 10

Qod. 30aad — Afka Golaha 10

Qod. 31aad — ka qeyb qaadashada doodaha 10

Qod. 32aad — Habka hadal jeedinta 11

Qod. 33aad — Is beri yeelid 11

Qod. 34aad — ku ekaanta Muwdaaca 11

Qod. 35aad — Khudbadda qoraalka ah 11

Qod. 36aad — kala mudnaanta hadalka 11

Qod. 37aad — ka doodidda Mashruuca Sharci 12

Qod. 38aad — Habka Dooda 12

Qod. 39aad — Habaynta siiqadda kama dambeysta ah 12

Qod. 40aad — Toosinta Mashruuca Sharci 12

Qod. 41aad — Ka noqoshada Talada 13

XUBINTA TODDOBAAD

COD-BIXINTA

Qod. 42aad — Habka Codbixinta 13

Qod. 43aad — Ku dhawaaqidda natiijada 13

XUBINTA SIDEDAAD

SU'AASHA IYO AFTIDA

Qod. 44aad — Su'aasha iyo Aftida 13

Qod. 45aad — Jawaabta Su'aasha iyo Aftida 14

XUBINTA SAGAALAAD

ERGOOYINKA

Qod. 46aad — Magacaabida ergooyinka 14

XUBINTA TOBNAAD

HAWLAHA

Qod. 47aad — Shaqaalaha Golaha 14

٢٤ النصاب القانونى
٢٥ التناوب في الكلام
٢٦ حسن سير المناقشات
٢٧ أمن مجلس الشعب
٢٨ الدخول الى قاعة الاجتماعات
٢٩ الجلوس فى الشرفة
٣٠ لغة المجلس
٣١ المشاركة في المناقشات
٣٢ كيفية توجيه الكلام
٣٣ البراءة
٣٤ التقيد في الموضع
٣٥ الكلمة المكتوبة
٣٦ الاسبقية فى الكلام
٣٧ مناقشة مشروع قانون
٣٨ كيفية المناقشة
٣٩ وضع الصيغة النهائية
٤٠ التعديل على مشروع قانون
٤١ سحب الاقتراح

القسم السابع

التصويت

٤٢ كيفية التصويت
٤٣ اعلان النتيجة

القسم الثامن

الاسئلة والاستجواب (استفسارات)

٤٤ الاسئلة والاستجواب (استفسارات)
٤٥ الرد على الاسئلة والاستجوابات (استفسارات)

القسم التاسع

الوفود

٤٦ تسمية الوفود

القسم الثامن

الخدمات

٤٧ موظفو المجلس.

٧ مراتـــب المجلـــس

القسم الثالث

لجـــان مجلـــس الشـــعب

٨ انشاء لجـــان المجلـــس
٩ الاجـراءات الاوليـة المرعيـة
١٠ رئاســـة لجان المجلـــس
١١ افـــادات مـــوظفى الادارة
١٢ تسميـــة المقـــرر
١٣ تقديـــم مشـــروع قانـــون

القسم الرابع

لجـــان التحقيـــق

١٤ تعـــين لجنـــة تحقيـــق
١٥ صلاحيـــات لجنـــة التحقيـــق
١٦ القيام بالوظائف خارج مقر المجلس

القسم الخامس

الاستقالـــــة

١٧ الاستقـــالة عـــن العضـــوية
١٨ التجـــريد من العضـــوية

القسم السادس

الاجتماعات والمناقشات والمحافظة على الامن في قاعـــة الاجتماعـــات والشـــرفـــة

١٩ مـــدة الـــدورات
٢٠ اجتمـــاع المجلـــس
٢١ تسجيـــل وقائع الاجتمـــاع
٢٢ الموافقـــة عـــلى الكـــلام
٢٣ تـــلاوة المحـــاضر

القسـم (٩)

الـوفـود

تسميـة الوفـود

اللجنة الدائمة هى التى تتولى تسمية وفود مجلس الشعب .

القسـم (١٠)

الخـدمات

العاملـون فى المجلـس

١ ــ تعيين وترفيع وتوجيه العاملين في مجلس الشعب من اختصـاص اللجنة الدائمة.

٢ ــ يكون للمجلس نظام خاص توافق عليه اللجنة الدائمة . يحدد النظام عدد ونوعية ومرتبات وعلاوات العاملين وذلك وفقا لقانون موظفى الدولة الدائمين.

الفهـرس

المـادة ابتداء مهـام العضـوية

١ يميـين العضـوية

القسـم الثانى

اللجنـة الدائمـة

٢ انتخـاب اللجنـة ادائمـة

٣ مهام وصلاحيات واجتماعات اللجنة الدائمة

٤ مهـام رئيـس مجلـس الشـعب

٥ نائبـا الرئيـس

٦ مهـام الامـين

القسم (٧)

التصويت

مادة (٤٢)

كيفية التصويت

يكون التصويت بطريقة رفع الايادى.

مادة (٤٣)

اعلان النتيجة

مهمة اعلان النتيجة منوطة برئيس المجلس وتكون بهذه الصيغة (وافق المجلس) او (رفض المجلس).

القسم (٨)

الاسئلة والاستجوابات

مادة (٤٤)

١ — اذا قام النائب بتوجيه سؤال او استجواب فعليه أن يتقدم بطلب خطى دون بيان الاسباب التى حدث به الى ذلك ويقوم الرئيس بتلاوة على المجلس فى بحر ثلاثة أيام تبدأ من اليوم الذى قدم فيه الطلب اذا لم يكن المجلس فى حالة انعقاد فانه يفعل ذلك خلال الجلسة التى تلى جلسة انعقاد.

٢ — السؤال عبارة عن استفهام من حصول واقعة وفيما اذا كانت بعض المعلومات قد وصلت الى الحكومة او فيما اذا كانت صحيحة ام لا وما اذا كانت الحكومة قد اتخذت او أنها بصدد اتخاذ القرارت ام لا حول مواضيع

٣ — الاستجوابات عباة عن طلب خطى يتعلق بالاسباب التى دعت الحكومة او نواياها ازاء تصرفات قامت بها ولها صلة ببرنامجها.

(مادة ٤٥)

الرد على الاسئلة والاستجوابات

١ — يقوم الرئيس بعد تلاوة السؤال او الاستجواب على المجلس باحالته على الوزير المختص والذى يقوم خلال المدة التى يحددها له الرئيس ولا تتجاوز عشرين يوما بالرد خطيا وتقرأ على المجلس.

٢ — اذا رأى السائل او المستجوب ان الاجابة الخطية غير مقنعة ، يجوز ،

٤ — اذا تمت مناقشة المشروع مادة فمادة فان التصويت يكون عن كل مادة على حدة وعن كل تعديل مقترح.

٥ — مشروع القانون المكون من مادة واحدة فان المناقشة العامة تكون مقرونة بالمناقشة الخاصة.

مادة (٣٩)

صياغة التصديق النهائى

١ — بعد اجراء مناقشة عامة يجوز للمجلس ان يكلف لجنة تكون لها صلاحية وضع صيغة نهائية لمواد مشروع القانون والذى يعاد الى المجلس لاقراره.

مادة (٤٠)

التعديل على مشروع القانون

١ — يقوم رئيس الجلسة بتسجيل المواد الاضافية والتعديلات التى تم ادخالها على مشروع القانون اثناء المناقشات.

٢ — يجوز تأجيل مناقشة المواد الاضافية والتعديلات الى جلسة أخرى بناء على اقتراح عشرين نائبا ليس من بينهم النواب المقترح والتعديل على مشروع القانون.

٣ — كذلك يجوز للجنة الاقتصادية والمالية ان تطلب التأجيل عندما يترتب عل المادة الاضافية او التعديل زيادة فى المصروفات او تخفيضا في الايرادات بصورة مباشرة او غير مباشرة.

مادة (٤١)

سحب التعديل

١ — يجوز للشخص الذى يقوم بالتعديل ان يسحب ذلك الا في حالة اعتراض خمسة من النواب على ذلك.

٢ — يجوز لمن يسحب الاقتراح الاضافي او التعديل ان يبين الاسباب التى دعته ذلك.

مـــادة (٣٤)

التقيـــــد في الموضـــوع

١ — يجوز لرئيس المجلس أن يسحب الكلمة عن النائب الذى يخرج عـــن الموضوع المطروح على بساط البحث بعد أن يلفت انتباه الى ذلك مرتـــين متتاليتـــين.

مـــادة (٣٥)

الكلمـــــة المكتـــوبة

١ — يجوز للنائب أن يدلى برأيه مكتوبا.

٢ — لا يجوز مقاطعة تلاوة الكلمة المكتوبة والتى لا يجوز ان تتعـــدى العشرين دقيقة ما لم ير رئيس الجلسة خلاف ذلك .

مـــادة (٣٦)

الاولـــــوية فى الكـــــلام

الاولوية فى الكلام للمسائل الخاصة بلفت النظر الى مراعاة الموضوع الذى تجرى مناقشته والى التنبيه الى اللائحة الداخلية لمجلس الشعب.

مـــادة (٣٧)

مناقشـــــة مشـــــروع قـــــانون

١ — لا يجوز اجراء مناقشة اى مشروع قانون الا بعد مضى ٢٤ ساعـــة على الاقل وبعد توزيعه على النواب ما لم يقرر المجلس خلاف ذلك.

٢ — لا يجوز اجراء مناقشة او اقرار أى موضوع ليس مدرجا في جـــدول الاعمال الا في الحالات المستعجلة والتى ترتأيها للجنة الدائمة.

مـــادة (٣٨)

كيفيـــــة المناقشـــــات

١ — تبدأ المداولة حول مشروع قانون باجراء مناقشـــة عامـــة لمـــبادىء المشروع.

٢ — الوزير أو النائب صاحب المشروع فى حالة عدم تقدمهما بطلب ذلك، يجوز لعشرين نائبا ان يطلبوا اجراء المناقشة حول كل مادة.

٣ — بعد أن يستمع المجلس الى عضوين احدهما مؤيد وآخر معارض فانه

مـــادة (٣٠)

لغـــة مجلـــس الشعب

يجوز استعمال كل من اللغتين الصومالية والعربية فى المناقشـــات وكتابة المحاضر.

مـــادة (٣١)

التنـــــاوب في الكـــلام

١ — على النواب الراغبين فى الكلام ان يسجلوا اسماؤهم لدى رئيـــس المجلس ويأخذ كل منهم الكلام وفق الاسبقية في تسجيل اسمائهم.

٢ — اذا دعا رئيس المجلس النائب للكلام وتبين انه غير موجود فانه يفقد حقه في الكلام عن ذلك الموضوع.

مـــادة (٣١)

كيفيـــة الكـــلام

١ — يتكلم النائب في مكانه وهو واقف موجها كلامه الى الرئيس.

٢ — لا يجوز لاحد ان يتكلم أكثر من مرة فى المناقشة الواحدة الا اذا سمح له رئيس الجلسة بذلك او من اجل التنميه الى مراعاة احكام اللائحـــة الداخلية للمجلس او سبب شخصى.

٣ — يقصد بالسبب الشخصى كل ما يوجه من نقد الى سلوك النائب او ما ينسب اليه من آراء تختلف عن تلك التى عبر عنها.

٤ — يتعين على النائب ان يشرح الاسباب الشخصية التى حدث به الى طلب الكلام وللرئيس ان يقرر بخصوص ذلك.

مـــادة (٣٣)

فى البـــــراءة

١ — اذا اتهم احد النواب بأمور تمس كرامته فانه يجوز له أن يطلب من رئيس المجلس تعيين لجنة للنظر فى مدى صحة تلك التهمة.

٤ — يتعين التصويت على الاقتراحات المنصوص عليها فى الكفرة (٣) من هذه المادة.

٥ — اذا وافق المجلس على اقتراحات رئيس المجلس المذكورة فى الفقـــرة (٣) من هذه المادة ورفض النائب الذى يخصه الامر مغادرة الاجتـــماع او رفض الامتثال لاوامر رئيس المجلس المذكورة في الفقرة (٢) من هذه المادة فان الرئيس الجلسة يقوم برفع تلك الجلسة ويتخذ الاجراءات اللازمة حتى يمكن تنفيذ قرار المجلس.

٦ — اذا تسبب النائب فى حدوث امور ذات خطورة وهو خارج قاعـــة الاجتماعات ولكنه موجود داخل مقر المجلس يجوز للرئيس ان يقترح علـــى المجلس اتخاذ الخطوات المذكورة فى الفقرة (٣) من هذه المادة.

مـــادة (٢٧)

١ — المحافظة على أمن المجلس مسؤولية جماعية لكل مجلس الشـــعب ويتولى رئيس مجلس الشعب تنسيق الوظائف المتعلقة بذلك بالتعاون مع المراقب ونائبيه وكل شخص آخر يمكنه أن يمد لمديد العون.

٢ — يحذر حمل السلاح على كل شخص يدخل قاعة الاجتماعات.

مـــادة (٢٨)

الدخـــول الى قاعة الاجتماعات

١ — لا يجوز لغير اعضاء المجلس اثناء الاجتماعات الدخول الى قاعـــة الاجتماعات.

٢ — لا يجوز لقوات الامن الدخول الى قاعة الاجتماعات الا بأمر شخصى من رئيس المجلس.

مـــادة (٢٩)

الجلوس في الشـــرفات

١ — على افراد الجمهور المسموح لهم بالجلوس في الشـــرفات المجلـــس اثناء المناقشات الامتناع عن الكلام والا يضهروا اى علامات تنبؤ عن الرضا او عدم الرضا بصدد المناقشات الجارية.

٢ — كل شخص يهين المجلس او نائبا عضوا فيه يأمر رئيس المجلـــس بتسليمه فورا الى الجهة القضائية المختصة.

مـــادة ٢٤(٢٤)

النصـــاب القانـــونى

١ — مهمة التاكد من تكامل النصاب القانونى هى من اختصاص رئيـــس الجلسة

٢ — عند تعداد النصاب القانونى فان النواب الذين هم فى اجازة او المتغيبين بمهمة كلفهم بها رئيس المجلس لا يحسبون لتكميل النصاب القانونى.

٣ — اذا لم يبلغ عدد النواب الحاضرين الى النصيب بزيادة واحد باستثناء الاعضاء المذكورين في الفقرة الثانية من هذه المادة تؤجل الجلسة لمدة ساعة واحدة واذا انقضت الساعة دون ان يكتمل النصاب الشرعى يؤجل ذلـك الاجتماع الى اليوم التالى ان لم يكن يوم عطلة وفي نفس الساعة المحاددة بالنسبة لليوم السابقة ما لم يقرر رئيس الجلسة خلاف ذلك.

٤ — اذا دعت الحاجة الى التحقيق عن تكامل النصاب القانونى للنـــواب اثناء انعقاد الجلسة من أجل اجراء التصويت فان النائب المتغيب بدون اذن يعتبر بمثابة من لم يشترك في كل ذلك الاجتماع.

مـــادة (٢٥)

التكلـــــم

يأخذ النائب الكلام بعد أن يأذن له الرئيس بذلك بناء على طلبه.

مـــادة (٢٦)

حســـن ســـير المناقشـــات

١ — اذا نطق احد النواب بعبارة غير لائقة او اساء بتصرفه الى حريـــة المناقشات او الى حسن سير اعمال الجلسات فالرئيس ان يلفت انتباهه الى مراعاة النظام.

٢ — اذا عاد النائب وقام بعرقلة اخرى او اقام بتصرفات ذات خطورة اكثر والتى سبق ان حذر منها يحق للرئيس ان يأمره بمغادرة قاعة الاجتماعات.

٣ — يحق لرئيس المجلسة أن يقترح منع النائب من حضـــور الجلســـات المتبقية من ذلك اليوم وكذلك من اجتماعات المجلس خلال مدة تتراوح مـــا بين يومين الى عشرة أيام اذا كانت التصرفات التى قام بها النائب تثـــير اثناء المناقشات في الجلسة او استخدام القوة او التهديد.

القسم (٦)

الاجتماعات والمناقشات والمحافظة على الامن في قاعة الاجتماعات والشرفة

مادة (١٩)
مدة الدورات

تستمر الدورات العادية الى أن يفرغ المجلس من البت بالمواضيع المدرجة فى جدول الاعمال.

مادة (٢٠)
اجتماعات المجلس

رئيس المجلس هو الذى يفتح الجلسة ويرفعها ويعلن موعد الاجتماع القادم وجدول اعماله.

مادة (٢١)

وقائع الاجتماعات

١ — يقوم امين المجلس بتسجيل وقائع كل اجتماع وتتضمن أسماء النواب الذين اشتركوا في الاجتماع والمواضيع التى تم بحثها والقرارات التى تم اتخاذها.

٢ — يقوم رئيس وامين المجلس بالتوقيع على كل محضر.

مادة (٢٢)
الموافقة على المحضر

١ — يبدأ كل اجتماع بتلاوة محضر الجلسة السابقة ما لم يقرر المجلس خلاف ذلك.

٢ — بعد الانتهاء من تلاوة المحضر واذا لم يعقب احد عليه فان ذلك يعتبر بمثابة الموافقة عليه.

٣ — يمكن للرئيس ان يأذن فى الكلام للنائب الذى يرغب في تصحيح او توضيح رأى كان قد اعرب عنه سابقا ومدون في المحضر المقروء.

مادة (٢٣)

تلاوة البيانات

١ — يقوم الرئيس عند افتتاح الجلسة بنفسه أو أمين المجلس بتلاوة الخطابات والرسائل التى وردت اليه وتخص المجلس.

٢ — لا تقرأ على المجلس الرسائل المجهولة او غير اللائقة.

٢ — تتولى اللجنة الدائمة اقتراح تعيين اعضاء لجنة التحقيق المذكورة من هذه المادة ويخضع لموافقة ثلثى اعضاء المجلس.

٣ — يشوت مجلس الشعب على انشاء لجنة تحقيق بأغلبية صوت واحد.

٤ — يحق للمجلس أن يفوض اللجنة الدائمة بهمة تعيين لجنة تحقيق.

مـــادة (١٥)

صلاحيـــات لجنـــة التحقـــيق

للجنة التحقيق أثناء تأديتها لوظيفتها صلاحيات مساوية لصلاحيـــات الهيئة القضائية وتقوم بابلاغ اللجنة الدائمة نتائج تحقيقاتها.

مـــادة (١٦)

القيـــام بوظائف خارج مقر المجلس

اذا رأت لجنة التحقيق بأنه مـــن الانسب حتى يتســـنى لها تأديـــة وظيفتها أن تنتقل او توفد بعض اعضائها خارج مقر مجلس الشعب ، يتعين عليها أن تحيط رئيس مجلس الشعب علما بذلك وأن تحصل على موافقته.

القســـم (٥)

مـــادة (١٧)

الاستقالـــــة

١ — يتم اقرار استقالة النائب بالتصويت عليها من قبل مجلس الشعب وباغلبية صوت واحد.

٢ — تكون الاستقالة بموجب طلب خطى معلل من النائب.

مـــادة (١٨)

سحب عضـــويـــة الـــنائب

١ — كل نائب يخل بشرط العضوية او يؤدى واجباته المتعلقـــة بمهامـــه تسحب عنه العضوية.

٢ — يتم اقرار تجريد العضوية الى جانب المنتخبين كما هو منصوص عليه فى المادة ٢/٧٤ من الدستور ربع النواب ويتم اقراره باغلبية صوت واحد من قبل مجلس الشعب.

مـــادة (١٠)

اجتمـــاعات لجـــان المجـــلس

١ ـــ يقوم رؤساء اللجان بتوجيه الدعوة اليها عن طريق رئيس المجلـــس الشعب.

٢ ـــ يقوم رؤساء اللجان بابلاغ رئيس مجلس الشعب عقب كل اجتمـــاع أسماء النواب المتغيبين.

مـــادة (١١)

افـــادات موظفى الادارة

يحق للجان أن تستدعى موظفى الادارة لكى تسألهم افادات بخصوص الموضوع الذى يجرى بحثه.

مـــادة (١٢)

تعيين المقـــــرر

يقوم رئيس كل لجنة عند استلامه لمشروع قانون بتعيين مقرر مـــن اعضاء اللجنة . اذا كان في مشروع القانون ما يسمى نواحى مالية فـــان اللجنة التى تقوم بدراسته يتعين ان يضاف اليها ممثل عن اللجنة الماليـــة والاقتصادية.

مـــادة (١٣)

تقديم مشروعات القوانين

١ ـــ تقوم كل لجنة بتقديم مشروعات القوانين التى قامت بدراستها الـــى اللجنة الدائمة.

٢ ـــ تقوم اللجنة ادائمة بتقديم مشروعات القوانين المنصوص عليها فى الفقرة (١) من هذه المادة الى المجلس الشعب ويتولى شرحها احد اعضاء اللجنة التى قامت بدراستها.

القسم (٤)

لجـــان التحقيـــق

مـــادة (١٤)

تعيـــــين لجنـــة تحقيـــــق

١ ـــ يحق لمجلس الشعب تعيين لجنة تحقيق تتكون من النواب الاعضاء فى

القسم (٣)

لجان مجلس الشعب

مادة (٨)

انشاء لجان مجلس الشعب

١ — تكون للمجلس لجان تتألف من نوب فى المجلس ويرأس كلا منها عضو في اللجنة الدائمة.

٢ — تمارس اللجان مهامها طيلة مدة المجلس وهى اللجان التالية : —

١ — اللجنة السياسية.

٢ — اللجنة الاقتصادية والمالية.

٣ — اللجنة الاجتماعية.

٤ — اللجنة القانونية.

٥ — لجنة الدفاع والامن.

يمكن لمجلس الشعب اذا اقتضت الحاجة أن يشكل من بين اعضائه لجانا غير دائمة تتولى مهام خاصة فترة محدودة.

مادة (٩)

اجراءات أولية

١ — يحال كل مشروع قانون على اللجنة المختصة لتقوم بدراسته.

٢ — يعرض على اللجنة الاقتصادية والمالية كل مشروع قانون يمس ايرادات او نفقات .

٣ — كل طلب يتعلق بفصل او استقالة او تجريم النائب يحال على اللجنة القانونية لتقوم بدراسته وترفع رأيها الى اللجنة الدائمة.

٤ — دراسة الميزانية السنوية والحسابات الختامية تدخل في عداد اختصاصات اللجنة الاقتصادية والمالية باشتراك عضو يمثل عن كل لجنة من اللجان الاخرى.

مـــدة (٥)

نائبـــا الرئيس

١ ـــ ينوب عن الرئيس عند غيابه او حدث ما يمنعه من تأدية مهام عملـــه نائبه الاول٩

٢ ـــ يتولى نائب الرئيس المهام التى يكلفه بها الرئيس أو اللجنة الدائمة.

مـــادة (٦)

مهـــام الامـــين

١ ـــ فيما يتولى الامين توجيه العاملين فى المجلس فان الوظائف التالية تدخل فى عداد مهامه : ـــ

أ ـــ ابلاغ النواب وخلال مدة مناسبة مواعيد اجتماعات المجلس مرفقـــا بذلك جدول الاعمال.

ب ـــ تسجيل اسماء النواب الذين يرغبون في الكلام.

ج ـــ تلاوة الاقتراحات والبيانات الاخرى.

د ـــ تدوين قرارات المجلس .

هـ ـــ اثبات حضور وغياب النواب.

و ـــ التأكد من مشروعات القوانين وما تم اقراره من قبل مجلس الشعب والتوقيع عليه.

٢ ـــ أمين مجلس الشعب هو رئيس الجهاز الادارى والعاملين فىالمجلس.

٣ ـــ يساعد الامين في تنفيذ مهامه مساعدان يتم انتخابهم من قبل اللجنة الدائمة من بين اعضائها.

مـــادة (٧)

مراقبـــو المجـــلس

١ ـــ يكون للمجلس مراقب ونائبا مراقب مهمتهم الاشراف على شـــؤون المراسم (تشريفات) والمحافظة على أمين وحسن سير اعمال المجلس.
٢ ـــ المراقب ونائباه المذكورون في الفقرة (١) من هذه المادة يتم انتخابهـــم من قبل اللجنة الدائمة من بين اعضائها.

يتم ترشيحهم من قبل اللجنة المركزية للحزب الاشتراكى الثورى الصومالى.

٦ — رئيس مجلس الشعب ونائباه والاعضاء الآخرون في اللجنة الدائمة يتم انتخابهم بطريقة رفع الايادى وتكون قانونية بأغلبية صوت واحد.

٧ — اذا امتنع أحد اعضاء اللجنة الدائمة عن اداء مهام عمله فان استبداله يتم وفق الفقرة (٥) و (٦) من هذه المادة .

مادة (٣)

مهام وصلاحيات واجتماعات اللجنة الدائمة

١ — تمارس اللجنة الدائمة لمجلس الشعب المهام والصلاحيات المنصوص عليها في المادتين (٧٦) و (٧٨) من الدستور.

٢ — تكون اجتماعات اللجنة الدائمة قانونية باشتراك ثلثى اعضائها.

٣ — يتعين على اللجنة الدائمة قبل أن تقرر أى موضوع يحتاج الى اقرار مجلس الشعب أن تعرضه على اللجنة المختصة.

٤ — القرارات التى تتخذها اللجنة الدائمة خلال فترة ما بين دورتى المجلس والتى تحتاج الى اقراره يتولى عرضها عليه عضو اللجنة المكلفة.

٥ — عند المناقشة والتصويت على القرارات المذكورة في الفقرة (٤) من هذه المادة يتبع مجلس الشعب الاجراءات المنصوص عليها فى المواد ما بين ٣٧ — ٤٣ من هذا النظام.

مادة (٤)

مهام رئيس مجلس الشعب

١ — يرعى رئيس مجلس الشعب ويضمن تطبيق أحكام النظام الداخلى وحسن سير أعمال المجلس.

يأذن فى الكلام ويدير المناقشات ويعرض الاسئلة ويرتب عمليات التصويت ويعلن نتائجها ويشرف على اعمال الامين والمراقب ونائبيه كلما دعت الحاجة بدعوة اعضاء اللجنة الدائمة ورؤساء لجان المجلس لبحث جدول الاعمال وترتيب اسبقيتها ويقوم بابلاغ الحكومة اذا رأى ذلك مناسبا لكى تقوم بتعيين مندوب عنها فى تلك الاجتماعات.

٢ — يستلم رئيس مجلس الشعب خلال عطلة المجلس عن العمل مشروعات القوانين والتقارير وكل طلب يأتى من انواب ويحيط المجلس علما بذلك في أول جلسة تالية يعقدها.

اللاحـــــة الـــداخلـــيـــــة لمجـلـــس الشعـــب

القسم (١)

ابتداء مهام العضـــوية

مـــادة (١)

يمـــين العضوية

١ ــ قبل تولى النائب مهامه يقسم امام رئيس مجلس الشعـب القسـم التالى : ــ

(أقسم بالله وبالوطن أن أخدم بأمانة وثقة واخلاص الشعب الصومالى وأن أنفذ مبادى ثورة الحادى والعشرين من أكتوبر ١٩٦٩ وأن احترم الدستور وقوانين البلاد وأن أقوم بتطبيق مبادىء الاشتراكية وأن ارعى المصالح العامة للشعب ومصالح الدولة الصومالية وأن ادافع بكل ما فى وسعى عن حرية وسيادة ووحدة الوطن وان اقدم المصلحة العامة على مصلحتى الشخصية وأن أعامل المواطنين الصوماليين على قدم المساواة وبالعدل).

٢ ــ كل نائب يستنكف عن اداة القسم المذكورة أعـلاه تسقـط عنـه العضوية.

٣ ــ يراس أول جلسة لمجلس الشعب النائب الاكبر سنا.

القســـم (٢)

اللجنة الدائمـــة

مـــادة (٢)

انتخاب اللجنة الدائمـــة

١ ــ ينتخب مجلس الشعب في جلسته اولى من بين اعضائه رئيس المجلس ونائبين للرئيس.

٢ ــ ينتخب كذلك أمين المجلس والاعضاء العشرة في اللجنة الدائمة.

٣ ــ يعتبر رئيس مجلس الشعب ونائباه رئيسا ونائبى رئيس للجنـــة الدائمة.

٤ ــ يعتبر أمين اللجنة ادائمة امين مجلس الشعب.

IIB MA GALO

FAAFINTA RASMIGA AH

الجريدة الرسمية

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

الجمهورية الصومالية الديمقراطية

Sannadkii 8aad Muqdisho 25 Abriil 1980 L 2 R 4

FAAFINTA BIL SOO BAXA جريدة شهرية

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxbooyada J.D.S.

QIIMAHA : waa 5 shilin Inmbar walba **RUKUNKA** : Sanalkii waa Sh. 100 Soomaaliya gudaheeda — dibedana waa Sh. So, 300, Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo Qiimaha qoroṭaanka F. R, halkii sadar iyo wàxii ka yar wàà 2 laba Sh. — Rukunka iyo qorṭaankù waxaa la weeydiistaa Laanta Maamulkà Fààfintà Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuurahà ee Wàsàaràddà Làcagta.

KOOBNIIN

Q A Y B T A **K O O W A A D**

S H A R C I

W. M.

Q A Y B T A **L A B A A D**

QAYBTA SADDEXAAD

TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH

WASAARADDA H. GUUD, 10. 12. 1979 Naado Dhul Jaalle Xasan Nuur Sh. Cusmaan L. 142 » 524

WASAARADDA H. GUUD, 10. 12. 1979 Naado Dhul Jaalle Warsame Barre Axmed L. 143

WASAARADDA H. GUUD, 10. 12. 1979 Naado Dhul Jaalle Cali Axmed Maxamed Weheliye L. 144 » 525

WASAARADDA H. GUUD, 10. 12. 1979 Naado Dhul Jaalle Maxamed Xuseen Xasan L. 146

WASAARADDA H. GUUD, 10. 12. 1979 Naado Dhul Jaalle Cali Maxamed Ibraahim L. 146 » 526

WASAARADDA H. GUUD, 10. 12. 1979 Naado Dhul

WASAARADDA H. GUDD, 10.12.1979 Naado Dhul Jaalle Maxamed Khayre Sheekh Max, L. 148 « 52

WASAARADDA H. GUDD, 10.12.1979 Naado Dhul Jaalle Cabdiraxmaan Maxamed Xeersii L. 149

WASAARADDA H. GUUD 29.9.1979 Naado Dhul Jaalle Maxamed Cilmi Maxamed L. 150 « 52

WASAARADDA H. GUUD 29.9.1979 Naado Dhul Jaalle Batuullo Maxamed Axmed L. 151

WASAARADDA H. GUUD 29.9.1979 Naado Dhul Jaalle Buraale Faarax Maxamed iyo Cabdulaahi Aadan L. 152 « 52

WASAARADDA H. GUUD 29.9.1979 Naado Dhul Jaalle Xabiiba Maxamuud Maxamed L. 153

WASAARADDA H. GUUD 29.9.1979 Naado Dhul Jaalle Cali Cabdi Saayaq L. 154 « 53

WASAARADDA H. GUUD 29.9.1979 Naado Dhul Jaalle Cali Maxamed Nuur L. 155

WASAARADDA H. GUUD 29.9.1979 Naado Dhul Jaalle Bintow Cumar Cali L. 156 « 5

WASAARADDA H. GUUD 29.9.1979 Naado Dhul Jaalle Caasho Goodle Maxamed L. 157

WASAARADDA H. GUUD 29.9.1979 Naado Dhul Jaalle Cabdulaahi Maxamed Xirsi L. 158 « 5

WASAARADDA H. GUUD 12.12.79 Bed. Naado Dhul Jaalle Cabdullaahi Cumar Cabdi L. 191

WASAARADDA H. GUUD 20.12.1979 Naado Dhul Jaalle Caasha Yuusuf Xasan L. 160 « 53

WASAARADDA H. GUUD 20.12.1979 Naado Dhul Jaalle Cilmi Maxamed Barre L.161

WASAARADDA H. GUUD 20.12.1979 Naado Dhul Jaalle Sahro Cali Mire L. 162 « 534

WASAARADDA H. GUUD 20.12.1979 Naado Dhul Jaalle Maxamuud Maxamed Xasan L. 163

WASAARADDA H. GUUD 20.12.1979 Naado Dhul Jaalle Cali Caade Axmed L. 164 « 53

WASAARADDA H. GUUD 20.12.1979 Naado Dhul Jaalle Cabduqaadir Abuukar Max L. 165

WASAARADDA H. GUUD 20.12.1979 Naado Dhul

WASAARADDA H. GUUD 20.12.1979 Naado Dhul Jaalle Xaawo Guuleed Jaamac L. 167

WASAARADDA H. GUUD 20.12.1979 Naado Dhul Jaalle Shuceyb Sheekh Xuseen L. 168 « 53

WASAARADDA H. GUUD 20.12.1979 Naado Dhul Jaalle Cumar Geele Maxamed L. 169

WASAARADDA H. GUUD 20.12.1979 Naado Dhul Jaalle Maxamed Ducaale Muuse L. 170 « 53

WASAARADDA H. GUUD 20.12.1979 Naado Dhul Jaalle Dh/me Ismaaciil Max Cumar L. 171

WASAARADDA H. GUUD 20.12.1979 Naado Dhul Jaalle Saciid Cige Aadan L. 172 « 539

WASAARADDA H. GUUD 2.1.1980. Naado Dhul Jaalle Caasha Maxamed Cabdi L. 174

WASAARADDA H. GUUD 2.1.1980. Naado Dhul Jaalle Faaduma Xaaji Buraale L. 175 « 540

WASAARADDA H. GUUD 2.1.1980. Naado Dhul Jaalle Yuusuf Cabdulaahi Maxamed L. 176

WASAARADDA H. GUUD 2.1.1980. Naado Dhul Jaalle Xasan Cali Dijriye L. 177 « 541

WASAARADDA H. GUUD 2.1.1980. Naado Dhul Jaalle Sheekh Axmed Xaaji Max L. 178

WASAARADDA H. GUUD 2.1.1980. Naado Dhul Jaalle Xasan Faarax Mire L. 179 « 542

WASAARADDA H. GUUD 2.1.1980. Naado Dhul Jaalle Abuukar Macalin Yuusuf L. 180

WASAARADDA H. GUUD 2.1.1980. Naado Dhul Jaalle Xaaji Axmed Xuseen L. 181 « 543

WASAARADDA H. GUUD 2.1.1980. Naado Dhul Jaalle Faarax Ciise Cabdi L.182

WASAARADDA H. GUUD 2.1.1980. Naado Dhul Jaalle Xasan Ismaaciil Warsame L.183 « 544

WASAARADDA H. GUUD 2.1.1980. Naado Dhul Jaalle Ibraahim Rashiid Cige L. 184

WASAARADDA H. GUUD 2 1 1980 Naado Dhul Jaalle Xaaji Max'ud Cusmaan iyo Cabdullaahi Maxamuud Cali L. 185 « 545

WASAARADDA H. GUUD 9.12.79 Bed. Naado Dhul
Jaalle Nadiifa Cilmi Mataan L. 187 « 54(

WASAARADDA H. GUUD 9.12.79 Bed. Naado Dhul
Jaalle Shamsa Maxamed Xuseen L. 188

WASAARADDA H. GUUD 9.12.79 Bed. Naado Dhul
Jaalle Dr. Cumar Hilowle Maxamed L. 189 « 55

WASAARADDA H. GUUD 12.12.79 Bed. Naado Dhul
Jaalle Maymuuna Xaaji Cumar L. 190

CONCERIA & CALZATURIFICIO SOMALA S.P.A.
A; Ogeysiis shir caadi ah L. 192 « 551

SOCIETA' INCREMENTO PRODUZIONE AGRICOLA
S.I.P.A; Ogeysiis shir caadi ah L.193 « 552

Maxkamadda G. Banaadir.
30. 3. 80, lumid Buug Keyd. » 553
L. 11141 ———— L. 193/bis

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALEYNTA
NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Maxamed Axmed Yuusuf uu u soo qortay arji Waaxda Sah. iyo Degaanka Magaaleynta ee W.H.Guud Xamar maalintii taariikdu aheyd 1.7.79 uu ku weydiistay gabal dhul dowladeed oo ku yaal Muqdisho Deg. Kaaraan Qaabkiisuna yahay Regtangolaare Addimihiisuna yihiin 60X50 kuna fadhiya 3000 Mdh.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIN SIDA HOOS KU QORAN
Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo
Koonfur waxaa ka xiga: Waddo
Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lam. 1
B a r i waxaa ka xiga: Dhul lam. 3

Qofkii danaynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki ka-Naqshadda dhulka oo taal waaxda Sah. iyo Deg. Magaaleynta ee W.H. Guud Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta shaciga Rasmiga ah.

Muqdisho 10 Dic. 1979

Agaasimaha Waaxda Sah. iyo Deg.Magaalaynta. ee WHG
Inj. Cabdikariin Cige Guuleed

L. 135

WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALEYNTA
WASAARADDA HAWLAHA GUUD
NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cabdulqaadir Daahir Cali uu u soo qortay arji Waaxda sah. iyo Deg. Magaaleynta ee W.H.Guud Xamar maalintii taarjikhdhu aheyd 113.78 uu ku weydiistay gabal dhul dowlaeed ah oo ku yaal Muqdisho Deg. Yaaq-shiid Qaabkiisuna yahay Regtangolaare Addimihiisuna yihiin 20X30 kuna fadhiya 600 Mdh.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIN SIDA HOOS KU QORAN
Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul lam. 1027 Y
Koonfur waxaa ka xiga: Waddo
Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lam. 1082 Y
B a r i waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii danaynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki ka-Naqshadda dhulka oo taal waaxda Sah. iyo Deg. Magaaleynta ee W.H. Guud Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta shaciga Rasmiga ah.

Muqdisho 10 Dic. 1979

Agaasimaha Waaxda Sah. iyo Deg.Magaalaynta. ee WHG.
Inj. Cabdikariin Cige Guuleed

L. 136

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALEYNTA
NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Xuseen Maxamed Yuusuf uu u soo qortay arji Waaxda sah. iyo Deg. Magaaleynta ee W.H.Guud Xamar maalintii taariikhdu aheyd 14.10.79 uu ku weydiistay gabal dhul dowladeed ah oo ku yaal Muqdisho Deg. Kaaraan Qaabkiisuna yahay Regtangolaare Addimihiisuna yihiin 40X30 kuna fadhiya 1200 Mdh.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIN SIDA HOOS KU QORAN
Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo
Koonfur waxaa ka xiga: Dhul lam. 11 - 12 B
Galbeed waxaa ka xiga: Waddada Balcad
B a r i waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii danaynaaya dhulka waxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka$ Deg. Magaalaynta ee W.H.Guud Xamar waxaana laga doodi karaa Muddo(30) Soddon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta sharciga Rasmiga ah.

Muqdisho 10 Dic. 1979
Agaasimaha Waaxda Sah. iyo Deg.Magaalaynta. ee WHG.
Inj. Cabdikariin Cige Guuleed

L. 137

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYNTA
NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J/le Sheekh Cali Cismaan Ismaaciil uu u soo qortay arji Waaxda sah. iyo Deg. Magaaleynta ee W.H.Guud Xamar maalintii taariikhdu ahayd 17.9.77 uu ku weydiistay gabal dhul dowlaeed ah oo ku yaal Muqdisho Deg. Yaaq-shiid Qaabkiisuna yahay Regtangolaare Addimihiisuna yihiin 20X30 kuna fadhiya 600 Mdh.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIN SIDA HOOS KU QORAN
Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul lam. 0223 Y
Koonfur waxaa ka xiga: Waddo
Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lam. 0224 Y
B a r i waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii danaynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki ka-Naqshadda dhulka oo taal waaxda Sah. iyo Deg. Magaaleynta ee W.H. Guud Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta shaciga Rasmiga ah.

Muqdisho 10 Dic. 1979
Agaasimaha Waaxda Sah. iyo Deg.Magaalaynta. ee WHG.
Inj. Cabdikariin Cige Guuleed

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALEYNTA
NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Shaamow Xasan Cali uu u soo qortay arji Waaxda sah. iyo Deg. Magaaleynta ee W.H.Guud Xamar maalintii taariikhdu aheyd 29.9.79 uu ku weydiistay gabal dhul dowlaeed ah oo ku yaal Muqdisho Deg. Yaaq-shiid Qaabkiisuna yahay Regtangolaare Addimihiisuna yihiin 20X30 kuna fadhiya 600 Mdh.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIN SIDA HOOS KU QORAN
Waqooyi waxaa ka xiiga: Waddo
Koonfur waxaa ka xiga: Dhul lam. 0156 Y
Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lam. 0155 Y
B a r i waxaa ka xiga: Dhul lam. 0159 Y

Qofkii danaynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal waaxda Sah. iyo Deg. Magaaleynta ee W.H. Guud Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta shaciga Rasmiga ah.

Muqdisho 10 Dic. 1979
Agaasimaha Waaxda Sah. iyo Deg.Magaalaynta. ee WHG.
Inj. Cabdikariin Cige Guuleed

L. 139

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALEYNTA
NAADO DHUL

I Signori Azionisti della Societa' Incromento produzioni Agricole—S.I.P.A.—S.P.A., sono convocati in Assemblea Ordinaria, in Lugano (Svizzera), via Nossa, 32, per il giorno 9 Giugno 1980, alle ore 10 in prima convocazione ed, occorrendo, in seconda convocazione per il giorno 16 Giugno 1980 alla stessa ora e nello stesso luogo, per discutore e deliberare sul seguento:

ORDINI DEL GIORNO

1. Relozione del Consiglio di Amministrazione Rapporto del Collegio Sindacale;

2 Presentazione Bilancio e Conto perdite profitti chiusi al 31 dicembre 1979 e deliberazioni relative:

3. Nomina del Consiglio di Amministrazione e del Collegio Sidacale.

Avranno diritto di intervenire all'Assemblea gli Azionisti inscr-tti nel Libro Soci almeno cinque giorni prima di quello fissato per l'Assemblea.

IL CONSIGLIO DI AMMINISTRAZIONE

L. 193

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU: Arkayey dacwada kor ku qoran:

HADDUU: Hubsaday in Buug Keyd ka dhumay oo lambarkii-su ahaa 11141. Lagana soo saaray Bangiga Gana-siga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta laad kuna qornayd lacag dhan Sh. So. 445. uu iska lahaa Yaasiin Cumar Xasan sida ku cad warqadda lam. 1710. Taariikh 30.3.80 oo bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta laad.

HADDUU: Arkay qod 69 sharciga lam. 2 ee 9.9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (ammortamento) Buug Keydka Lam. 11141. oo ku qoran Magaca Yaasiin Cumar Xasan ayna ku jirto Sh. So. 445.

WUXUU XERIYEY

In Bangiga Ganacsiga iyo Keydka laanta laad u beddelo Yaasiin Cumar Xasan buugga Keydka), ee kor ku tilmaaman una sameyn mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 3c. maalmood maalinta go'aanka lagu daabaco faafinta rasmiga ah ee Jamhuuriyadda De. Soomaali-yeed, haddii inta ka horeysa aan is hortaag laga keenin.

Muqdisho, 30.3.80.

GUDDOM. MAXKAMADDA GOBOL. BANAADIR

W. S. Dr.Cabdullaahi Maxamed Maax.

L. 193/bis

FAAFINTA RASMIGA AH

الرسمية الجريدة

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

لجمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 8aad MUQDISHO 2 MAAJO 1980 L. —5

FAAFINTA BIL SOO BAXA جريدة شهرية

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J.D.S.

QIIMAHA : waa 5 shilin lnmbar walba **RUKUNKA** : Sanalkii waa Sh. 100 Soomaaliya gudaheeda — dibedana waa Sh. So, 300, Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo Qiimaha qorotaanka F. R, halkii sadar iyo wàxii ka yàr wàà 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weeydiistaa Laanta Maamulkà Fààfintà Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuurahà ee **Wàsààràddà Làcagta.**

KOOBNIIN

Q A Y B T A **K O O W A A D**

S H A R C I

SHARCI L. 14 ee 17 Feberaayo 1980, Warshadda Hargaha Hargeysa. BOGGA 558

SHARCI L. 15 ee 25 Febraayo 1980, Hargaha iyo Saamaha » 565

SHARCI L. 16 ee 5 Abriil 1980, Meel marin heshiis » 572

LAW N. 16 5th Apr. 80, Instrument of Ratification » 573

SHARCI L. 17 ee 5 Abriil 1980, Meel marin heshiis » 574

LAW N. 17 5th Apr. 80, Instrument of Ratification » 575

SHARCI L. 18 ee 5 Abriil 1980, Meel marin heshiis » 576

LAW N. 18 5th Apr. 80, Instrument of Ratification » 577

SHARCI L. 19 ee 15 Abriil 1980 Meel marin Heshiis » 578

LAW N. 19 15th Apr. 80, Instrument of Ratification » 579

Wakaaladda Madbacadda Qaranka

SHARCI L. 20 ee 15 Abriil 1980, Meel marin heshiis » 580

LAW N. 20 15th Apr 80, Instrument of Ratification » 581

X E E R

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 56 ee 9 Jenaayo. 1980, Xubnaha Guddiga. » 582

MAXKAMADDA GOBOLA J. HOOSE 27. 4. 1980, Lumid Buug Kayd L. 5373 oo ku qoraan Sh. So. 1.319 ay leedahay Ruqiyo Cali Ciise L. 194 » 586

MAXKAMADDA GOBOLKA J. HOOSE, 27.4.1980, Lumid Buug Kayd L. 5705 ku qoran Sh. So. 4.020 uu leeyahay Caynab Muuse L. 195 » 587

MAXKAMADDA GOBOLKA J. HOOSE, 1. 5. 1980, Lumid Buug Kayd L. 5805 ku qoran Sh So. 808 uu leeyahay Cawad Aadan Maxamed L. 196 » 588

MAXKAMADDA GOBOLKA G. Dh. **MAREEB**
25.10.1979 Lumid Jeeg Wareega L. 283112 L. 263

QAYBTA *KOOWAAD*

SHARCI L. 14 ee 17 Febraayo 1980 Wasaaradda

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY : Qodobbada 111 iyo 113 ee dastuurka J D.S.
ISAGOO ARKAY; Sharciga Wakaaladaha Iskood u Madax bannaan lam. 36 ee 22 Abriile 1972.

ISAGOO AQOONSADAY: Iay tahay lagama maarmaan in Warshadda Hargaha Hargeysa ee dhowaan dhismaheedu dhammaaday loo sameeyo sharci:-

ISAGOO ARKAY: Go'aanka Guddiga Siyaasadda iyo Golaha Wasaaradda.-

WUXUU SOO SAARAY

Sharciga s oosocda:

QAYBTA 1AAD

HABKA GUUD EE DHISMAHA WARSHADDA

Qod.1aad

1) Warshadda Hargaha Hargeysa ayaa halkn lagu dhisay oo hdda ka dib la orandoono Warshadda Hargaha Hargeysa si loo gaaro horukac xagga farsamada Hargaha.-

2) Warshaddu waxay tahay mid madax bannaan ee jirid iyo shaqsiyad qaynnuuniya leh.-

3) Warshaddu waxay u hoggaansami doontaa Xeerkan iyo Xeerarka soo socda:-

a) Xeerka lam. 16 ee soo baxay 1dii Abriil 1970 iyo toosintii ka dambaysay ee Wakaaladaha madax bannaan faaqidaadda xisaabaha shirkadaha, sancada iyo ganacsiga iyo kuwa ku saabsan Mu'asaasaha Amaahda ee ay qayb ku leedahay Dawladdu.

b) Xeerka lam. 36 ee 22 Abriil 1972 ee Shaqaalaha Wakaaladaha Madax bannaan.

t) Xeerka lam. 58 ee 31 Lulyo 1972 ee lacagta wakaaladahamadax bannaan.

4) WARSHADDU WAXAY KA MID TAHAY KUWA DA-

QODOBKA 2AAD

XARUNTA IYO LAAMAHA WARSHADDA

Xarunta Warshaddu waxay ahaan doontaa Magaalada Hargeysa waxayna haddii loo baahdo, ku yeelan doontaa laamo Goballada iyo Degmooyinka J.D.S.-

Qod. 3aad

UJEEDDOOYINKA

UJEEDDOOYINKA WAA:

1) In Hargaha Dalka la gaarsiiyo Farsamada cusub si noocooda iyo qiimahadooba kor loog qaado:-

2) In suuqa dalka gudihiisa iyo kan dibadaba loo helo noocyada iyo midabyada hargo megdisan oo ku habboon lana tartami kara hargaha dalalka kale.

3) In Wrshaddu soo saarto hargaha megdisan ee loo yaqaan Pickled iwm.

4) In Warshaddu ayada oo la tixgelinayo qodobada kor ku qoran ay u madx bannaan tahay in ay hargaha iyo alaabta ka samaysan Hargaha ay ka ganacsan karto:

QO*D*OBKA *4A*AD

AW*OOD*A

Warshaddu waxay leedahay, iyadoon ku xad gudbin Xeerkan, awood ay ku fulin karto ujeeddooyinka ku xusan qodobka saddexaad ee Sharcigan :

QOD*OBK*A *5*AAD

***K*ORM*EE*RKA GUUD**

1) Kormeerka Guud ee Warshada waxaa yeelan doona Wasiirka Wasaaradda Warshadaha :-

2) Isagoo tixgelinaya qodobka 1aad (1) beddelaadda

Sharciga lambarkiisu yahay 36 ee 22 Abriil 1972, Wasiirku wuxuu ku leeyahay Warshadda awood iyo mas'uuliyad buuxda xagga jaangooyada (Qorshaha) dhaqaalaha horumarinta iyo heshiisyada ganacsiga ee ay Warshaddu gelayso :-

QAYBTA 2AAD

QODOBKA 6AAD

HABKA DHISMAHA WARSHADDA

1. Warshaddu waxay yeelan doontaa Maareeye Guud oo lagu magacaabo Dekreetada Madaxweynaha J.D.S. Isagoo tixgelinaya ra'yiga Wasiirka Wasaaradda Warshadaha iyo talada Guddiga Siyaasadda iyo Golaha Wasaaradda —

2. Warshaddu waxay ka koobnaan doontaa waaxyo, xubno, iyo laamo, waxaana awood u leedahay, hadday noqoto lagama maarmaan, inay laama ka furto Gobollada iyo Degmooyinka si ay hawsha loo xilsaaray u gudato;

QODOBKA 7AAD

XILKA MAAREEYAHA GUUD

1) Maareeyaha Guud waxaa loo xilsaaray, isagoo masilaya Warshadda fulinta ujeeddooyinka ku cad qodobka seddaxaad ee sharcigan, hawshiisuna waxay tahay :-

a) Inuu fuliyo Siyaasadda Dowladda Kacaanka Soomaaliyeed, Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed.

b) Inuu saxiixo heshiisyada ay Warshaddu dhinac ka tahay isagoo oggolaansho ka haysay Warshadda :

t) Inuu masuul ka yahay habka maamulka shaqada Warshadda, wuxuuna awood u leeyahay inuu sameeyo wixii qaraar ah ee ku saabsan maamulka iyo cannaanta shaqaalaha Warshada

j) Inuu mas'uul ka yahay maamulka lacagta Warshadda.

x) Inuu kudhaqaaqo wixii qaraar ah ee deg deg ah isagoo isla markaas ogeysiinaya Wasiirka Wasaarada War shadaha.

Kh) Inuu bixiyo wixii mar lagama maarmaan ah si hawsha maamulka guud iyo xisaabuhu ay hab fiican ugu socdaan.

d) Inuu fuliyo wixii hawl maamulka shaqada Warshadda ee caadi ah.

r) Inuu fuliyo wixii hawl maamulka shaqada ee aan caadi ahayn isagoo ka haysta oggolaansho qoraal ah Wasiirka Wasaaradda Warshadaha.

2) Marka uu ka maqan yahay Maareeyaha Guud shaqaalaha ama ay jiraan asbaabo ka reebaya shaqada, waxaa hawsha sii fulin doona sarkaal ka tirsan waaxyaha Wasaaradda isagoo ka haysta oggolaansho Wasiirka Wasaaradda Warshadaha.

Qod. 8aad

Xaquuqda qaynuuniga iyo dhaqaalaha ee shaqaalaha Warshadda.

Xaquuqda qaynuuniga iyo tan dhaqaalaha ee Maareeyaha Guud Agaasimayaasha, waax yaha iyo shaqaalaha kale ee Warshadda, waxaa xukumi doona xeerka lambarkiisu yahay 36 ee 22 Abriil 1972 kuna saabsan shaqaalaha Warshadaha iyo Wakaaladaha Madaxa bannaan.

Qod. 9aad

Magacaabidda Agaasimayaasha

1) Warshaddu waxay lahaan doontaa Agaasimayaal waaxyood oo lagu magacaabi doono xeerka Madaxweynaha JDS isagoo tixgelinaya ra'yiga Wasiirka Wasaaradda Warshadaha.

2) Maamulayaasha xubnaha iyo laamaha waxaa lagu magacaabi doonaa Xeer uu sasiixo Wasiirka Wasaaradda Warshadaha.

QAYBTA 3AAD

QODOBKA 10AAD

HANTIDA WARSHADDU WAXAY KA KOOBAN TAHAY

1) Lacag dhan Sh. So 12.000.000 oo ah hanti gelinta qalabka iyo Dhismaha Dowladda Soomaalida iyo Dowladda Jarmalka Bari geliyeen Warshadda.

2) Wixii Warshadda ka soo gala faa'iido ay leesho ama wixii shaqo ah ee ay u qabato hay'adaha kale.

3) Wax alaale wixii dambe ee Dawladda ama Hay'adaha Caalamiga si sharci ah ugu soo wareejiyaan Warshadda.

QODOBKA 11AAD

MIISAANIYADDA WARSHADDA

1) Maareeyaha Guud, marka ay tahay 30ka Oktoobar ama inta ka horeysa sannad kasta waa inuu isku dubaridaa miisaaniyadda caadiga ah iyo tan hormarinta ee ku saabsan sannadka soo socda isagoo faahfaahinaya kuna muujinaya lacagta soo geli doonta ama ka bixi doonta Warshadda sannadka soo socda, waxaanu hor dhigi doonaa si loo ogolaado Wasiirka Wasaaradda Warshadaha iyo kan Maaliyadda.

2) Sannadka lacagta ee Warshaddu wuxuu bilaabanayaa 1da Jannaayo wuxuuna dhammaanayaa 31 Disember ee sannad walba.

QODOBKA 12AAD

XIRITAANKA MIISAANIYADDA

1) Maareeyaha Guud marka ay tahay 3, Maarso ama inta ka horeysa sannad kasta waa inuu isku dubaridaa xiritaanka miisaaniyadda ee sannadka la soo dhaafay

isagoc isku hagaajinaya xisaabtii sanadkaas iyo bandhiggii macaashka iyo khasaaraha Warshadda taana u gudbiyaa Wasaaradda Maaliyadda iyo tan Warshadaha.

2) Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda wuxuu awood uleeyahay isagoo la tashnay Wasiirka Wasaaradda Warshadaha inuu oggolaado xiritaanka miisaaniyadda, wuxuuna amar ku bixin karaa in lagu qoro faafinta Rasmiga ah ee Dowladda iyadoo kharajka ay bixineyso Warshaddu :-

QODOBKA 13AAD

AMAAH

Warshaddu, iyadoo haysata oggolaansha Wasiirka wax waa ka amaahan kartaa hay'adaha Caalamga ah iyo Bangiyadda gudaha ee Dalka si ay u hirgeliso xilka la saaray ama ujeedooyinka Warshadda :

QODOBKA 14AAD

FAA'IIDO WARSHADDA IYO KORDHINTA TACAB SOO SAARKA

Warshadda haddii ay soo saarto faa'iido weyn ee ka badaan tii loogu tala galay, iyadoo la raacayo qorshaha tacabka kordhay, waxay xaq u yeelanayaan abaalgud lacageed, sida uu qorayo qodobka 8aad ee toosintii sharciga lambarkiisu yahay 96 ee soo baxay 22 Abriil 1972.

QODOBKA 15AAD

XISAABAADKA

Xisaabaadka Warshaddu waxaa loo raacayaa habka loo de**jiyey xisaab**aha Wakaaladaha iyo Warshadaha :

QODOBKA 16AAD

MAAMULKA LACAGTA

Maamulka lacagta eeWarshadda waxaa xukumaya xeerka lambarkiisu yahay 58 ee soo baxay 31 Luuliyo 1972 Wakaaladaha Madaxbannaan.

QODOBKA *17AAD*

S H A Q A A L E

1) Sida uu dhigayo qodobka 17aad ee xeerka shaqaalaha Dowladda maareeyaha Guud, Agaasimaha Waaxyaha iyo shaqaalaha kale ee Warshadda ma geli karaan ganacsi amase farsamo lid ku ah danaha iyo ujeedooyinka Warshadda.

2) Warshaddu way qoran kartaa shaqaalaha ay u baahan tahay iyadoo raacaysa sharci shaqo qorista ee Wakaaladaha.

QO*DOBKA 18AAD*

XEER GUUD

Madaxweynaha J. D. S. wuxuu awood u leeyahay, isagoo tixgelnaayo talada Wasiirka Wasaaradda Warshadaha, inuu soo saaro xeer nidaamiya Warshadda xukuma si looga hortago dhibaatooyinka ka imaan karta wixii aan ku sheegnayn sharcigan.

QODOBKA 19AAD

Sharcigaani wuxuu shaqan gelayaa markuu saxiixo Madaxweynaha J. D. S., waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda.

Muqdish 17 FEB 1980.

MA*DAXWEYNAHA* JDS
Jaalle Maxamed Siyaad Barre

SHARCI L. 15 ee 27 Febraayo 1980 Hargaha iyo Saamaha :

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY : Qodobka 82aad xubintiisa 14aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

ISAGOO ARKAY : Sharciga Lr. 2 ee 16kii Maajo 1973, Sharciga dhismaha Wakaaladda Hargaha iyo Saamaha.

ISAGOO ARKAY : Sharciga Lr. 20 ee 27.6.1967 (Veterinary Code).

ISAGOO AQOONSADAY : Inay tahay lagama maarmaan in loo dejiyo Xeer Hagaajinta tayada hargaha iyo saamaha, ilaalinta heliddooda, ganacsigooda iyo habeynta warshadeyntooda si loo tixgeliyo ujeeddooyinka Wakaaladda Hargaha iyo Saamaha loo dhisay.

ISAGOO ARKAY : Tale-soo-jeedin W. H. S. lana tashaday Wasiirka Wasaaradda Ganacsiga.

WUXUU XEERAYAA

QODOBKA 1AAD

Hargaha iyo Saamuhu waxay ka mid yihiin khayraadka dalka (National Resource), sidaas awgeed, waa in la hagaajiyaa tiro iyo tayoba.

QODOBKA 2AAD

Waa in Ololaha Joogteynta Horumarinta Reer Miyiga lagu daro ka hortagga summadda hargaha waxyeelaynaysa, lagu hannuuniyo inay xoolaha ka suntan: Surka Dnka, Addimada hoose, Dhegaha iyo Tuurta.

Wakaaladdda Hargaha iyo Saamaha iyo Wasaaradda Xannaanada Xoolaha Dhirta iyo Daaqa wax aalafarayaa inay u gudbiyaan talooyin lagaga reebayo dadweynaha dabka wax u dhimaya qiimaha hargaha.

Qodobka *3aad*

CUDURRADA MAQAARKA

(Skin diseases)

Wakaaladda Hargaha iyo Saamaha waxaa la farayaa inay u gudbiso Wasaaradda Xannaanada Xoolaha Dhirta iyo Daaqa wixii Cudurra ah ee maqaarka qiima dilaya, Wasaaradduna ka ciribtirtaa Xoolaha nool iyadoo ku kusameyneysa Cilmi Baaris Cudurrada maqaarka sida uu qorayo Qod. 4aad ee Sharciga lagu dhisay Wakaaladda Hargaha yio Saamaha.

Qodobka *4aad*

BAAHINTA FARSAMADA DARYEELKA HARGAHA

Wakaaladda Hargaha yio Saamaha waa inay sameysaa shaqo dibadeed kuna baahisaa waddanka oo dhan farsamada daryeelka hargaha iyo saamaha iyadoo lasiinayo tababarro kala duwan, kawaanleyda, Ganacsatada iyo cid allaale ciddii ku lugle hargaha iyosaamaha, waana in la ciribtiraa wixii farsamexumi ah ee qiimahooda hoos u dhigaya.

QODOBKA 5AAD

B. Waa in xoolaha oo dhan lagu qalaa xeryaha gawraca (Kawaannada) ee loogu talagaley, ciddii meel kale ku qasha xoolaha ee sharcigu u ogol yahay waa inay keenaan maqaarka meelaha loogu talagaley iibkooda iyo daryeelkooda.

T. Wasaaradda Dawladaha Hoose iyo Hormarinta Reer Miyiga waxaa la farayaa inay magaalooyinka iyo tuulooyinka ka dhisaan kawaanno qalliin oo u qalma gawrac xoolaha. Kawaanndu waxay suurto gelinayaan daryeelka xaabka xoolaha (Animal By-product), daryeelka Caafimaadka dadweynaha, nadaafadda guud iyo ururinta canshuuraha.

J) Waa in kawaannadu ka baxsanaadaan magaalada waana inay yeeshaan biyo ku filan.

X) Waa in xoolaha la qalaa waqti iftin ah. Way reeban tahay in xoolaha lagu qalo meel mugdi ah ama lagu qalo waqti mugdi ah. Waa in xoolaha dhakhtar eegaa intaan la dilin iyo markii la dilo hilibkoodaba.

Kh. Way reeban tahay in la qalo neef caato ah oo aan lahayn hilib iyo harag.

D. Neefka lagu soo gawraco meel ka baxsan kawaanka waa reeban tahay in la keeno kawaannada qalliinka iyo kuwa hilibka haddii aanu dhakhtar fasixin. ciddii lagu helaa waxay muteysatay ciqaab.

R. Xoola-qalayaashu waa inay noqdaan qaangaadh haystana ruqsad u gaar ah qallnka oo ay kaqaateen Dawladda Hoose.

Qod. 6aad

HARAG BIXINTA (Flaying)

B. Waa in haragga loo jeexaa sarmo toosan (Ripping ling) waa in haragga lagu saraa mindi caarad dhuuban laguna qalaa mindi jirdacsan oo aan wax yeelin, laguna hugaa gacanta si aanay haragga marnaba wax u gaarin.

T. Waa in haragga laga dhawraa dhiigga, uuska, wasakhda, daloolka, jeerarka iyo dhammaan wixii waxyeelaynaaya si uu san qiimihsu hoos u dhicin.

J. Qofka ku xadgudbaa wuxuu muteysanayaa ciqaab ama shaqadoo laga joojiyo.

X. Waa in haragga ariga iyo saamaha lo'da loo bixiyaa ballaar (open), waana reeban tahay in loo bixiyo Cokad. Ciddii si kale u bixisa ee aan ku dhaqmin habka xubinta ku xusan waxay muteysatay ciqaa bah ganaax iyo wixii la mid ah.

Kh. Saamaha Geela waa in loo bixiyaa laba gog iyo luqunta laguna bixiyaa ilaa jilbaha.

Qod. 7aad

B. Waa inay Wakaaladdu ka caawintaa Dawladaha hoose qalabka qalliinka iyo dhismaha xiryaha gawraca

Qod. 8aad

QALLAJINTA HARGAHA IYO SAAMAHA

B. Hargaha iyo saamaha waa in lagu qallajiyaa hawo furan oo hadh leh ama cusbo iyadoo lagu cusbeynaayo ama lagu qallajinaayo meel ku habboon ee u qalanta. waa reeban tahay in lagu dhiso haragga dhulka dushsiisa (Ground drying) ama meel qorrax ah. Ciddii ku dhaqmi weyda sidaas waxa uu mutaysanayaa ganaax.

T. Waa in laga dhisaa guryaha qallajinta magaalooyinka iyo tuulooyinka meeshii ay gaadhaan xoolaha lagu qalaa 10 (Toban) neef maalintiiba.

J. Meelaha leh guryaha qallajinta hargaha wixii xoolo ah ee lagu qalo waa in hrgahooda lagu qallajiyaa. Waa reeban tahay in meel kale lagu dhiso hargaha. Ciddii ka hortimaada waxa ay mutaystay ganaax.

x. Hargaha iyo saamaha intaan la dhisin waa in la mayraa hilbaha laga dhammeeyaa.

kh. Hargaha iyo saamaha marka neefka laga bixiyo waa in Qalabka Qalliinka iyo dhismaha xeryaha Gawraca.

T) waa in aan dhulka la dhigin ee loo sameeyaa Shillaal dhulka ganacsiga iyo daryeelka hargaha iyo saamaha ka soo baxa degla dhisaa ama la cusbeeyaa oo aanay oolin muddo 4 saacadood ka badan si ayaan ugu dhalan Baktiiriyo. Ciddii ku dhaqmi weydana waxay muteysatay ciqaab ganaax ah iyo wixii la mid ah.

D. Habka loo dhisayo hargaha waa inuu ahaadaa ballac furan (Suspensios air dried), waana inaanu haraggu ka la dheeraan ee ay u muuqdaan si qeexan madaxa, afarta adin iyo dabaduba.

R. waa in ay wakaaladd uu gudbisaa habka cusub ee casriga ah dadweynaha ku lg leh hargaha iyo saamaha.

Qodobka 9aad

***KAYDINTA* HARGAHA IYO SAAMAHA**

B. waa in lagu keydiyaa hargaha iyo saamaha bakharro qabow ee ku habboon.

waa in aan dhulka la dhigin ee loo sameeyaa Shillaal dhulka

J. Hargaha kayd ka ah waa in la laga ilaashaa cayayaanka reebka iyo qiiqa iyo wixii wax u dhimaaya oo dhan.

X. Waa in ay Wakaaladdu gaadhsiisaa sunta lagula dagaalamo cayayaanka meelaha lagu kaydiyo hargaha.

Kh. Ciddii dayacda hargaha ee ku kaydisa meel aan ku habboonеyn waxay muteysatey ciqaab.

D. Ganacsatada hargaha iyo kawaanleyda ka soo bixi weyda shuruudaha hargaha iyo saamaha waa laga qaadayaa shatiga gncsiga.

Qod. *10aad*

GAADIIDKA HARGUHU SAARAN YIHIIN

B. Gaadiidka sida hargaha waa reeban tahay inay qaadaa alaab kale iyo dad rakaab ah, gaar ahaan biyaha, caanaha, naaftada, dhuxusha IWM.

QAYBTA LABAAD

MAAMULKA GANACSIGA

HARGAHA IYO SAAMAHA IYO ILAALINTOODA

QODOBKA 11AAD

B. Dhammaan hargaha iyo saamaha ka soo baxa dalka guhiisa waa inay soo galaan gacanta Wakaaladda Hargaha iyo Saamaha. Ciddii ka hortimaada ee meel kale u wada ama geysa waxay mutaysatay ciqaabah ganaax, xarig iyoo hargaha oo lagal wreego.

T. Cidda ka ganacsanaysa hargaha ha ahaadeen : Iskaashato, Shirkad ama Ganacsade gaar ahaaneed waa inay yihiin dad lagu aamini karo daryeelka hargaha soona gaadhsiinaya Wakaaladda ee aan meel kale geyneyn.

J. Dadka hargaha ka ganacsada waa inay leeyihiin Shati u gaar ah ganacsiga hargaha iyo saamaha oo ay ka qaateen Dawladaha Hoose ee Degmooyinka.

X. Cid aan ogolaansho ka haysan Wakaaladda Hargaha iyo Saamaha ama cid ay wakiilatay looma siin karo Ruqsad Ganacsiga Hargaha iyo Saamaha

Kh. Waa reeban tahay inay ka ganacsadaan hargaha cid aan Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya dhexdeeda ku jirin oo u lahayn Shati.

QODOBKA *12AAD*

B. Waxa la farayaa Dawladaha Hoose inay xil iska saaraan ogaalka xaaladda hargaha ka soo baxa degmooyinkooda tiro iyo tayoba iyaga oo diiwaan gelinaya. Wakaaladda Hargaha iyo saamuhuna waa inay og tahay lana socotaa hargaha soo baxa Gobollada, Degmooyinka iyo Tuulooyinka tiro iyo tayoba iyo waxay ku sugan yihiin.

QODOBKA 13AAD

B. Hargo iyo saamo kasta oo gaadiid saaran oo u kala socda dalka gudihiisa waa inay la socotaa warqad caddeyn ah oo muujinaysa : Tirada, Nooca, meesha ay ka keeneen iyo meeshaay ku socdaan. Warqaddaas oo ay bixiso Dawladda Hoose ay ka yimaadeen ama Wakaaladda Hargaha iyo Saamaha.

T. Haddii harguhu wataan warqad caddeynaysa in laga soo cashuuray degmadii ay ka yimaadeen lagama qaadi karo cashuuur labaad intay ka keenayaan Xarunta Wakaaladda.

J. Waa reeban tahay in loo qaado hargaha meel ka dadban Saldhigyada Wakaaladda. Wixii hargo iyo saamo ah ee loo wado meel ka dadban Saldhigyada Wakaaladda ciddii ku kacda arrintaas oo ay ku caddaato inay u wadeen hargahaas meel kale oon Saldhigyada Wakaaladda ahayn waxay mutaysadoontaa ciqaab culus iyo hargaha oo lala wareego.

X. Ciddii lagu ogaado ama lagu helo iyaga oo qarinaya hargo ay damacsanaayeen in qarsoodi ay dibedda uga saaraan dalka waxay mutaysanayaan ciqaabta ku xusan Qod. 13aad Xubintiisa J.

Qodobka 14aad

B. Hargaha iyo Saamaha nooc kasta ha ahaadeene sida kuwa Ariga, Lo'da, Geela, Ugaarta, Yaxaaska, Libaaxbadeedka iwm weey roobaan tahay in ay waddanka ka saarto cid aan ahayn Wakaaladda Hargaha iyo Saamaha ama aan ahayn cid ka

T) Cid allaale ciddii lagu soo caddeeyo inay hargo ama saamo ka saarayeen Waddanka iyo ciddii gacan ku siisay waxay mutaysanayaan ciqaab ah ganaax iyo Xarig.

J) Qofka lagu helo in uu hargaha iyo saamaha ku iibsanayo ama ku iibsaday qiimo ka sareeya kan Wakaaladdu ku iibsato wuxuu mutaysanayaa ganaax ama xarig iyadoo loo qaadanayo inuu qofkaasi u wado hargaha meel aan ahayn Wakaaladda.

Qodobka 15aad

Qofkasta oo ku xadgudubta Xeerkan waxaa lagu qaadayaa Qod. 505 ee Sharciga Ciqaabta (Penal Cede) .

Qodobka *16aad*

Sharcigaani wuxuu dhaqan gelayaa markuu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho 27 Feberaayo 1980

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA

DIMUQRAADIGA SOOMAALIYA

JAALLE MAXAMED SIYAAD BARRE

SHARCI L. 16 ee 5 Abriil 1980, Meel marin Heshiis

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY : Cod. 67aad xubintiisa 5aad iyo Qod. 82aad xubintiisa 4aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Dimoqradiga Soomaaliya.

ISAGOO ARKAY : Oggolaanshaha Golaha Shacbiga ee Heshiiska dhexmaray Dawladda Jamhuuriyadda Dimoqradiga Soomaaliya iyo Hey'adda Caalamiga ah ee Horumarinta (IDA) oo sammeynayo Amaah lacageed ee loo fidinayo Mashruuca Ballaarinta Beeraha ee J.D.S.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:-

Qod. 1aad.

Heshiiska dhexmaray Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Hay'adda Caalamiga ah ee Horumarinta (IDA) oo lagu kala saxiixdey Degmada Colombia (USA) taariikh 24.10.79 oo ku saabsan Amaah lacageed oo loogu talo galey in loo fidiyo Mashruuca Ballaarinta Beeraha ee Wasaaradda Beeraha J.D.S. heshiiskani wuxuu ka mid yahay kuna lifaaqan yahay sharcigan isagoo la socda «Schedule» waa la meel mariyey.

Qodobka 2aad

Shuruudaha iyo Xaaladaha ay qorayaan qodobada heshiiska iyo seddexda «Schedule» waxay ku yeelan doonaan J.D.S. qiimo iyo astaan sharci la heer ah sharciyada iyo Xeerka Dalka, wuxuuna dhaqan gelayaa markuu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho Abriille 1980

(JAALLE MAXAMED SIYAAD BARRE)

Madaxweynaha J.D.S.

LAW N. 16 5th Apr, 1980, Instrument of Ratification.

SOMALI DEMOCRATIC REPUBLIC

THE PRESIDENT

Instrument of Ratification :

HAVING SEEN : Article 67 paragraph 5 and Article 82 paragraph 4 of the Constitution of the Somali Democratic Rewublic.

TAKIN NOTE : The ayproval of the People's Assembly of the Agreement between the Government of the Somali Democratic Republic and the International Development Assucio tion (IDA) signed on 24th October 1979.
Hereby promulgates the following law :

ARTICLE II

The Loan Agreement between the government of the Somali Democratic Republic and the Insternational Development Association, signad on 24th October, 1979 at Colombia, USA, concarning Loan for the financing of the Agricultural Extension and Farm Management Project of Somalia, is hareby ratified.

ARTICLE II

This Agreement shall have the force of law in the territory of the Somali Somali Democrstic Republic and shall enter into force upon signsture by the President of the Somali Democratic Republic, and shall be published in the Official Bullein.

Mogadishu, 5th Apriil, 1980

(MAJOR GENERAL MOHAMED SIAD BARRE)

PRESIDENT OF THE

SOMALI DEMOCRATIC REPUBLIC

SHARCI L. 17 ee 5 Abriil 1980 Meel Marin Heshiis

ISAGOO ARKAY : Qod 67aad xubintiisa 5aad iyo Qod. 82aad xubintiisa 4aad ee Dastuurka J. D.S.

ISAGOO ARKAY : Oggolaanshaha Golaha Shacbiga ee Heshiiska Dhexmaray Dawladda Jamhuuriyadda Demoqraadiga Soomaaliyeed iyo Hay'adda Caalamiga ah ee Horumarinta (IDA) ee 24kii Oktoobar 1979;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda :

QODOBKA 1AAD

Heshiiska dhexmaray Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Hey'adda Caalamiga ah ee Horumarinta (IDA) oo lagu kala saxiixday degmada Colombia (USA) taariikh 24. 10.79 oo ku saabsan amaah lacageed oo loogu tala galy in loo fidiyo Mashruuca Horumarinta Beeraha ee Wasaaradda Beeraha J.D.S. waa la meelmariyay.

QODOBKA 2AAD

Shuruudha iyo Xaaladaha ay qorayaan qodobbada Heshiisku waxay leeyihiin qiimo iyo astaan sharci la heer ah sharciyada iyo xeerarka Dalka, waxayna dhaqan gelayaan markuu Saxiixo Mdaxweynaha J. D. S. waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee dawladda.

Muqdisho, 5 Apriibl 1980

JAALLE MAXAMED SIYAAD BARRE

MADAXWEYNAHA J. D. S.

LAW N. 17 5th April 1980, Instrument of Rat-if-ication.

SOMALI DEMOCRATIC REPUBLIC

-THE PRESIDENT-

Instrument of Ratification :

HAVING SEEN : Article 67 paragraph 5 and Article 82 paragraph 4 of the Constitution of the Somali Democratic Reyublic.

TAKING NOTE : The approval of theAssembly of the Agreement between the Government of the Democratic Republic and the International Development Association (IDA) signed on 24th Octobr, 1979.

Hereby promulgates the following law :

ARTICLE I

The Special Action Credit Agreement for the Agricultural Extension and Farm Management Training Propect of Somali between the Government of the Somali Democratic Republic ad the International Development Association as ADMINISTRATOR of the Special Action Account established with funds contributed by the MEMBER STATES of the European Economic Community, is hereby ratified.

ARTICLE II

This Agreement shall have the force of law in the territory of the SomaliDemocratic Republic anad shall enter into force of upon signature by the President of the Somali Democratic Republic; and shall be published in the Official Bulletin of the Gofernment.

(MAJOR GENERAL MOHAMED SIAD BARRE)
SOMALI DEMOCRATIC REPUBLIC

SHARCI L. 18 ee 5 Abriil 1980 Meel marin Heshiis

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY: Qod. 67aad xubintiisa 5aad iyo 82aad xubintiisa 4aad ee Dastuurka J.D.S.

ISAGOO ARKAY: Oggolaashaha Golaha Shacbiga ee heshiiska dhexmaray Dowladda Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliyeed iyo Dowldda Mareykan oo adeegatay Wa kaaladda Horumarinta Dunida (AID);

wuxuu soo saarayaa

Sharciga soo socda :

QODOBKA 1AAD

Heshiiska dhexmaray Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Dawladda Maraykanka oo adeegatay Wakaaladda Horumarinta Dunida (AID) oo lagu kala saxiixday Magaalada Muqdisho taariikh 18.8.1979 oo ku saabsan amaah lacageed oo lagu tala galay in loo fidiyo Mashruuca Ballaarinta Beeraha JDS waa la meel mariyey.

Qod. 2aad

Heshiiska iyo lifaaqyadiisa waxay ku yeelan doonaa J.D.S astaan sharci ah, waxayna dhaqan gelayaan markuu saxiixo Mdaxaweynaha J.D.S. waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda.

Muqdisho 15 Maajo 1980

MADAXWEYNAHA J. D. S.
SAREEYE GAAS MAXAMED SIYAA DBARRE

LAW N. 18 5th April 1980, Instrument of Ratification :

SOMALI DEMOGRATIC

THE PRESIDENT

Instrument of Ratification :

HAVING SEEN : Article 67 paragraph 5 and Article 82 paragraph 4 of the Constitution of the Somali Democratic Republic.

TAKING NOTE : The aproval of the People's Assembly of the Agreement between the Government of the Somali Demacratic Republic and the Government of the Nnited States of America (US-AID).

Hereby promulgates the follwing law :

ARTICLE I

TheAgreement between the Government of the Somali Democratic Republic and the Government of the United States of America (US-AID), signed at Mogadishlu on 18th August 1979, concaring the Loan for the Agricultural delivery Systems of Somalia, is hereby ratified.

ARTICLE II

This Agreement and its annex shall have the force of Law in the tarritory of the Somali Democratic Republic and shall enter into force upun signature by the President of the Somali Democratic Republic, and shall be published in the Official Bulletin of the Somali Democratic Republic.

PRESIDENT OF THE
SOMALI DEMOCRATIC REPUBLIC
MOJOR GENERAL MOHAMED SIAD BARRE

SHARCI L. 19 ee 15 Abriil 1980 Meel marin heshiis

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY : Qod : 67aad xubintiisa 5aad Qod. 82aad xubintiisa 4aad iyo Qod. 72aad xubintiisa 1aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

ISAGOO ARKAY : Heshiiska Amaahda ee sum. tahay 906 So Mashruuca Daaqa Gobollada Dhexe ee Soomaaliyeed, dhexmarayna Jamhuuriyada Dimoqraadiga Soomaaliya iyo hayadda Caalamiga ah ee Horumarinta laguna kala saxiixday degmd Kolombiya ee dalka Maraykanka 24kii Oktoobar, 1979 iyo Heshiisyada la xiriira ee dhexmaray Hay'adda Caalamiga ah ee horumarinta iyo Wakaaladda Daaqa Qaranka Soomaaliyeed (Heshiiska Mashruuca); iyo Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Wakaaladda Daaqa (Heshiis-Hoosaadka Mashruuca).

ISAGOO TIXGELINAAYA : Oggolaashaha Golaha Shacbiga ee Heshiiska aan soo sheegnay taariikhdiisu ahayd 19kii Abriil 1980.

Wuxuu soo saarayaa sharcigan soo socda :

QODOBKA 1AAD

Heshiiska Amaahda ee Mashruuca Daaqa Gobollada Dhexe ee Soomaaliy dhexmarayna Dawladda Jamhuuriyadda Dimuoqraadiga Soomaaliy iyo Hey'adda Caalamiga ah ee Horumarinta laguna kala saxiixday degmada Kolombiya ee dalka Maraykanka 24kii Oktoobar, 1979, iyo Heshiisyada kala ee xiriira waa la meelmariyey.

QODOBKA 2AAD

Heshiiskan iyo kowa kale ee la xiriira waxay ku yeelanayaan Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliya astaan sharci ah, waxayna dhaqan gelayaan markuu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliya.

Sharcigan waxaa lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoquraadiga Soomaaliya.
Mogadishu 5 Abriil 1980

MADAXWEYNAHA J. D.S.
SAREEYE GAAS MAXAMED SIYAA DBARRE

LAW. N. 19 15th April 1980, Instrument of Ratif-icat-ion.-

SOMALI DEMOCRATIC REPUBLIC

-The President-

Instrument of Ratification :

HAVING SEEN : Article 67 parts 5, Article 82 para 4 and Article 72 pare 1 of the Constitution of the Somali Democratic Republic.

HAVING SEEN : The Loan Agreement No. 906 So for the Central Rangeland Project of Somalia between the Somali Democratic Republic and the International Develoyment Association signed at the district of Columia, USA, on 24th October, 1979, and other related agreements between the International Development Association and the National Renge of Somalia (Project Agreement) and the National Range Agency (Subsidiary Agreement).

TAKING NOTE : Of the approval of the people's Assembly of the said Agreement dated 19th April, 1980.

Hereby promulgates the following Law-:

ARTICLE *I*

The Loan for the Central Rangeland Project of Somalia between the Government of the Somali Democratic Republic and the International Development Association signed at the Distric of Columbia, USA, on 24th Ocober, 1979, and other related agreements, are hereby ratified.

ARTICLE II

This Agreement and the other releted agreements shall have the force of law in the territory of the Somali Democratic Republic and shall enter into force upon signature by the Presidente of the Somali DemocraticRepublic.

This law shall be published in the Official Sulletin of the Somali Democratic Republic.

MAJOR GENRAL *MAHAMED* SIAD BARRE

PRESIHENT OF THE
SO*MALI DEMOCRATIC* REPUBLIC

SHARCI L. 20 ee 15 Abriil 1980 Meel marin heshiis

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY : Qod. 67aad xubintiisa 5aad iyo qod. 82aad xubintiisa 4aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

ISAGOO ARKAY : Oggolaashaha Golaha Shacbiga ee Heshiiska dhexmaray Dawladda Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Dawladda Maraykanka oo adeegsatey Wakaaladda Horumrinta Dunida (AID).

Wuxuu soo saarayaa sharcigan soo socda :

QODOBKA 1AAD

Heshiiska dhexmaray Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Dawladda Maraykanka oo adeegatey Wakaaladda Horumrinta Dunida (AID) oo lagu kala saxiixday Muqdisho 18kii Ogosto, 1979 oo ku saabsan Amaah lacageed oo lagu talo galay in loo fidiyo Mashruuca Daaqa Gobollada Dhexe ee Soomaaliyeed, waa la meelmariyey.

QODOBKA 2AAD

Heshiiska iyo lifaaqyadiisa waxay ku yeelan doonaan Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya astaan sharci ah, waxayna dhaqan galayaan markuu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaan lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

MADAXWEYNAHA
SAREEYE GAAS MAXAMED SIYAA DBARRE

LAW N. 20 15th April 1980, Insturument of Ratification.

SOMALI DEMOCRATIC REPUBLIC

THE PRESIDENT

Instrument of Ratification

HAVING SEEN : Article 67 para 5 and Article 82 para 4 of of the Constition of the Somali Democratic Republic.

TAKING NOTE : The approcal of the People's Assembly of the Agreement between the Government of the Somali Democratic Republic and the Government of the United States of America (US-AID).

Hereby promulgates the following law :

Guddi Qorshaha ee Magaalada Xamar.

ARTICLE I

The Agreement between the Government of the Somali Democratic Republic and the Government of the United States of America (US-AID), signed at Mogadishu on 18th Agust, 1979, concerning the Loan for the Central Rangeland Project of Somalia, is hereby ratified.

ARTICLE II

This Agreement and its Annex shall have the force of law in the territory of the Somali Democratic Republic and shall enter into force upon signature by the President of the Somali Democratic Republic; and shall be published on the Official Bulletin of the Somali Democratic Republic.

MAJOR GENERAL MOHAMED SIAD BARRE
PRESIDENT OF THE
SOMALI DEMOCRATIC REPUBLIC

XE4R MADAXW4YNAHA JDS L. 56 ee 9 Jenaayo 1980, Xubnaha Guddiga

MARKUU ARKAY : Dastuurka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

MARKUU ARKAY: Qod. 113 ee Dastuurka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

MARKUU ARKAW: T. 121 ee soo baxay 17 Settembare 1972.

MARKUU: TIXGELIYEY Talo soo jeedinta Duqa Magaalada Xamar.

MARKUU: GAROWSADAY in Magaalada Xamar ay u baahan tahay in ay yeelato Qoshe Cilmiyeysan oo ku habboon

WUXUU GUDDOOMIYAY XEEEGO'AANKAAN

Qod. 1aad

DHISMAHA GUDDIGA QORSHAHA MAGAALADA XAMAR.

1. Waxaa la dhisay Guddi wax-aqoon ah oo qaabilsan Guddiga Qorshaha ee Magaalada Xamar.
2. Guddiga Qorshaha ee Magaalada Xamar waxaa Guddoomiye ka noqonaya Duqa Magaalada Xamar. Markuu maqanyahayna waxaa Guddoomiye ka noqonaya qofkuu wakiisho.

Qod. 2aad

XUBNAHA GUDDIGA QORSHAHA

1) Xubnaha Guddiga waxay noqonayaan dad aqoon wanaagsan iyo waaya aragnimo u leh cilmiyadda kala duwan ee bulshada, ee bulshada, ee si toos ah u taabananaya ama u soo gelaya hawlaha iyo waajibaadka ay leedahay Dawladda Xamar kuwaas oo ay ka mid yihiin:

b) Dhismaha t) Caafimaadka j) Bulshada x) sharciga Kh) Dhaqaalaha d) Handasada (Injenyeriya) r) tirakoobka s) Taariikhda iwm.

Qod. 3aad

MUDDADA AMA WAQTIGA GUDDIGA SHAQAYN DOONO.

Guddiga Qorshaynta ee Magaalada Xamar wuxuu noqonayaa mid hawshiisu tahay joogto oo mar kasta diyaar u ah isku dubaridida ama wax ka beddelidda Qorshayaashii horay loo sameeyay

QODOKA 4AAD

MAGACAABIDDA GUDDIGA

Guddiga Qorshaynta Magaalada Xamar, waxaa lagu magacaabayaa Dekereeto Madaxweyne, kaddib markii la helo soo jeedin talo ee Duqa Magaalada. Taasoo la xiriirta magacaabidda Guddiga.

QODOBKA 5AAD

GUDDI HOOSAADYO

Guddiga Qorshaha Magaalada Xamar, yeelan karaa Guddi Hoosaadyo kale oo isugu sii magacaabey, kuwaas oo loo wakiilan karo ka soo taljnta arrimaha u baahan in si gaar ah oo qoddadheer loo baaro.

QODOBKA 6AAD

KA SAARIDDA AMA KU DARIDDA XUBNO CUSUB

1) Guddiga Qorshaha ee Magaalada Xamar waxaa laga saari karaa qofkii ay muuqato in uusanu gudanayn waajibkiisa sjdii loo baahnaa. Islamarkaas waxaa lagu kordhin karaa xubnihii hadba loo baahdo, iyadoo la fiirinayo hawlaha uu Guddigu qabanayo.

2) Habka ka saarjdda iyo ku daridda Guddigu, wuxuu noqonayaa mid la mid ah ama waafaqsan habka ku xusan qodobka 4aad ee xeergo' aankaan.

QODOBKA 7AAD

XOGHAYNTA

Guddiga Qorshaynta ee magaalada Xamar wuxuu yeelan doonaa Xoghaye Guud iyo xafiis gaar ahaaneed oo ah Xoghaynta. Kaasoo qaabilsanaan doona isku dubaridka qorjdda iyo galaynta talooyinka iyo go'aanada Guddiga Qorshaynta.

QODOBKA 8aad

QARASHKA GUDDIGA QORSHAYNTA

1) Guddiga Qorshaynta ee Magaalada Xamar, oo loo xilsaaray jnuu si cilmiyeeysan u qorsheeyo hawlaha maamulka Dawladda Xamar, waxaa loo oggolaaday kha-

raj uu ku fuliyo hawlaha kala duwan oo looga baahan yahay.

2) Xubnaha Guddiga iyo Xoghaynta waxaa la siinayaa gunno joogta ah ama gunno dheeri ah, iyadoo hadba la fiiranayo dhumucda hawlahay soo qabteen xubnuhu.

3) Xadaynta kharajka iyo gunnada ay qaadanayaan xubnaha Guddiga Qoorshayntu waxaa awood u leh Duqa Magaalada Xamar, oo ah Guddoomiyaha Guddiga Qorshaynta, wuxuuna markasta fiirinayaa isxilqaanka iyo dadaalka uu qofku muujinayo.

QODOBKA 9aad

FADHIYADA GUDDIGA QORSHAYNTA

Guddiga Qorshaynta markuu qaadanayo fadhiyadiisa waa inay joogaan in ka badan nus dadka xubnihiisa ah.

Haddii la waayo tiradaas shirka waa la wadi karayaa haddii ay joogaan aqoonyahannadii qaabilsanaa mawduuca laga hadlayo, isla markaasna uu sidaas amar ku bixiyoo Guddoomiyaha Guddiga Qorshayntu.

QODOBKA 10aad

HAWLAHA IYO WAAJIBAADKA GUDDIGA QORSHAYNTA

1) Guddiga Qorshaynta ee Dawladda Xamar waxaa loo dhisay, inuu Duqa Magaalada Xamar ka siiyo talooyin wax ku ool ah oo cilmi ku salaysan hawlaha kala gaarka ah oo khuseeya horumarinta iyo daryeelka Magaalada Xamar.

2) Arrimaha uu Guddiga Qorshayntu ka dhiibanayoo talooyinka waxaa ka mid ah:-

b) Xallinta dhibaatooyinka Dhulka.

t) Midaynta Sharciyada khuseeya dhulka iyo dhulbixintaba.

j) Xadidaadda waddooyinka iyo Qorshaha loo maroyo harumarinta bulshada ku nool magaalada iyadoo la cayimayo waqtigii iyo habkii lagu gaari lahaa ujeed-

x) Horumarinta iyo mideynta hawlaha la xiriira adeegga Guud (servizi) iyo hoos-keeniddooda awoodda Dawladda Xamar, kuwaas oo ay ka mid yihiin:-

kh) Dejinta Qorshe magaaleed (town plan).

1) Qaybinta biyaha la cabbayo iyo nalka magaalada.
2) Nadaafadda iyo caafimaadka Guud iyo sidii magaalada loogu samayn lahaa biyo suur (fognature).
3) Daryeelka Dadka tabaalaysan.
4) Samaynta meelo cayaareed, nasasho iyo tamashle.
5) Samaynta Guryo dadweyne oo la dajiyo Shaqaalaha.
6) Khidad u samaynta, ganacsiga Dawladda Xamar si looga bdbaadiyo dadweynaha Suuqa Madow.
7) Jidadka magaalada iyo gaadiidka dadweynaha iyo sharci u sawayntiisa.
8) Samaynta mashaariic dhaqaale ama warshado ay maamusho Dawladda Xamar, habaynta iyo horumarinta kuwa haatan jira, iyo wixii kale ee la mid ah.
9) Duqa Magaalada Xamar wuxuu Guddiga Qorshaynta u wakiilan araa hawl kasta oo maamulka ah, oo uu is yiraahdo waxaa ku habboon in Guddigu ka taliyo.

QODOBKA 11aad

FULINTA TALOOYINKA GUDDIGA MAGAALADA XAMAR

Fulinta talooyinka Guddiga Qorshaynta Magaalada Xamar waxaa laga doonayaa Duqa Magaalada isagoo mar kasta la kaashanaya waddo sharci ah.

QODOBKA 12aad

DHAQAN GELIDDA XEERGO,AANKAN

Xeerga,aankan wuxuu dhaqan gelayaa isla marka la saxiixo.

MADAXWEYNAHA J. ,D.S.
SAREEYE GAAS MAXAMED SIYAA DBARRE

MAXKAMADDA GOBOLKA J. HOOSE KISMAAYO

HADDUU ARKAY :- dalabka Ruqiyo Cali Ciise;

MARKUU OGAADAY inay tahay Shaqa Xafiiskiisa wixii Ogeysiis Bankiga ku saabsan ee ku xusan Qod. 69 Xeer L. 2 ee soo baxay 9 Seteember 1959.

MARKUU OGAADAY : Jaalle Ruqiya Cali Ciise inay ka luntay Buug Kayd Lamb. 5373 ee Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Kismaayo ee ku qoran lacag dhan Sh. S. 1.319

WUXUU AMRAY*AA*

Bankiga Ganacsiga iyo Keydka laanta Kismaayo iney u ogolaato cusbooneysiinta Buugga Keydka L. 5373 muddo 15 beri gudaheeda, marka lagu qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah haddaan la helin cid sheegta Buugaasi.

Waxaana la amrayaa Bankiga inay guugaasi gacanta u saarto qofta Magaceeda kor ku qoran ama qof kale oo ka sita Wakaalad aan shaki ku jirin.

Kismaayo, 27. 4. 1980

MAXKAMADDA GOBOLKA J. HOOSE 27.4.1980,
Dr. **Xiis** **Cumar** **Maxamed**

L. 194

MAXKAMADDA GOBOLKA J. HOOSE KISMAAYO

HADUU ARKAY: ama akhriyey dalabka kor ku qoran;

MARKUU OGAADAY: waxay ku saabsan tahay dhumidda Buug kayd L. 5705 wuxuu ogaaday inay tahay shaqadiisa;

HADUU ARKAY; qodobka 6« Xeer L. 2 ee 9. 9. 1965;

Lumidda Buuga kaydka lamb. 5705 ku qoran lacag dhan 4.20 Sh. So. iskana laheyd Yuusuf Caynab Muuse.

Bangika Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Kismaayo in loo sameeyo Buug Kayd ee cusub badalkii lumay, 15 maalmood kaddib marka lagu qoro Faafinta Rasmiga ah ee dawladda, haddaan la helin in qof buugaas sheegta.

In Buugaas cusub oo la sameyn doono gacanta laga saaro qofka Magaciisa kor ku xusan ama cidda kale ee ka sita Wakaalad aan shaki ku jirin.

Kismaayo 1 Maajo 1980

GUDOOMIYAHA MAXKAMADDA G. J. HOOSE
Dr. Xiis Cumar Maxamed

L. 195

MAXKAMADDA GOBOLKA J. HOOSE KISMAAYO

HADUU ARKAY: Warqadda codsiga ee u soo qortay Cawad Aadam Maxamed 55 jir ah degan Kismaayo taariikh tahay 3.5.80 oo ku codsanayey in loo cosbooneysiiyo Buuga Kaydka ee lamb. 5805 aysa ku qoran tahay lacag dhas Sh. So 808 808;

HADDUUOGAADAY: In ay tahay Maxkamadda Shaqadeeda in ay soo saarto Go'aan (Amortamento).

HADDUU ARKAY : Qodobada 69 Xeerka lamb. yahay 9 ee soo baxay 9.9.1965,

Dhumidda Buugga Kaydka lamb 5805 ayna ku qoran tahay lacag dhan 808 Sh So oo uu lahaa Cawad Aadam Maxamed.

In loo cusooneysiiyo Buuggaasi ka dhumay Cawad Aadan Maxamed muddo 15 (maalmood) ah laga bilaabo marka lagu soo qoro Faa. Rasmiga ah, haddaan la helin nin kale oo soo sheegata isla markaasina gacanta laga saaro Ninka leh ee sare ku qoran ama ciddii kale ee ka sidata wakaalad gaarahaaneed ama guudahaaneed Ninka leh.

MAXKAMADDA GOBOLKA J. HOOSE KISMAAYO
Dr. Xiis Cumar Maxamed

L. 196

MOXKAMADDA GOBOLKA G. DHUUSA-MAREEB

HADDUU AKHRIYEY: Dacwaddg kor ku qoran;

HADDUU HUBSADAY: In Jeegga lamb. yahay 283112, lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Dh. mareeb, kuna qornayd lacag dhan Sh So 4.000 (afar kun), uu iska lahaa Cali Qaalib Samantar, sida cad warqada L. Dh. Mareeb, T. 4. 9. 1979,

HADDUU ARKAY : Qod. 69 Sharciga lamb. 2 ee 9.9.1979,

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo Jeegga wareega lamb 283112, oo ku qoran magaca Cali Qaalib Samatar ayna ku jirto Sh. So. 4000.

WUXUU FASAXAY

heddelo Cali Qaalib Samantar Jeegga war. ee kor ku qoraan una samayso mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood maalinta go'aanka lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadia Soomaaliyeed, haddii inta ka horeysa aan is hortaag laga keenin.

Dh. Mareeb, 25. 10.1979

GUDOOMIYAHA MAXKAMADDA G. G. DUUD Dh. Mareeb
Maxamuud Maxamed Ismaaciil

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYNTA
NAADDO *DHUL*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Axmed Maxamuud Cali uu u soo qortay waaxda Sahanka iyo Degaanka Magaaleynta ee W. H. Guud Xamar maalinta bishu ahayd 10.11.1979 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Madiina qaabkiisuna waa Retangolar Addimihiisuna waa 30X20 kuna fadhiya 600 Mdh.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS *KU QORAN*

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo

Koonfur waxaa ka xiga: Dhul lamb. 72 Biis.

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul Banaan

BARI waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii danaynaaya dhulka waxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal waaxda Sahanka Degaanka Magaalaynta naqshadda dhulka oo taal waaxda Sahanka Degaanka Magaalaynta ee W. H. Guud Xamar waxaana laga doodi karaa Muddo (30) Sodon Maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.

MUQDISHO 6. 5. 80

K/S. AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAG.
XAAJI MAXAMED *MAYE*

L. 197

FAAFINTA RASMIGA AH

الجريدة الرسمية

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

لجمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 8aad Muqdisho 18 Maajo 1980 L. 1 R 5

FAAFINTA BIL SOO BAXA جريدة شهرية

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J.D.S.

QIIMAHA : waa 5 shilin lnmbar walba **RUKUNKA** : Sanalkii waa Sh. 100 Soomaaliya gudaheeda — dibedana waa Sh. So, 300, Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo Qiimaha qorotaanka F. R, halkii sadar iyo wàxii ka yàr wàà 2 lgbà Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weeydiistaa Laanta Maamulkà Fàafintà Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuurahà ee **Wàsàaràddà Làcagta.**

KOOBNIIN

Q A Y B T A **K O O W A A D**

SHARCI

WASAARADDA H. GUUD 13. 1. 1980, Naado Dhul Jaalle Axmed Saalax Kulmiye L. 197 Bogga 606

WASAARADDA H. GUUD 13. 1. 1980, Naado Dhul Jaalle Sahra Sheekh Cali Munasar L. 198 » 607

WASAARADDA H. GUUD 13. 1. 1980, Naado Dhul Jaalle Axmed Jaamac Xersi L.199 » 608

WASAARADDA H. GUUD 13. 1. 1980, Naado Dhul Jaalle Beddel Xersi Faarax L. 200 » 609

WASAARADDA H. GUUD 13. 1. 1980, Naado Dhul Jaalle Xamiida Xaaji Cabdulle L. 201 » 610

WASAARADDA H. GUUD 13. 1. 1980, Naado Dhul Jaalle Cabdulaahi Cumar Maxamed L. 202 » 611

WASAARADDA H. GUUD 13. 1. 1980, Naado Dhul Jaalle Maxamed Cali Ciise L. 203 » 612

WASAARADDA H. GUUD 13. 1. 1980, Naado Dhul
Jaalle Munye Cabdalla Maxamed Caas L. 204 » 613

WASAARADDA H. GUUD 13. 1. 1980, Naado Dhul
Jaalle Makhbuul Dheere Maxamed L. 205 » 614

WASAARADDA H. GUUD 14. 1. 1980, Naado Dhul
Jaalle Maxamuud Xuseen Maxamed L. 206 » 615

WASAARADDA H. GUUD 13. 1. 1980, Naado Dhul
Jaalle Ibraahim Carte Cabdi L. 207 616

WASAARADDA H. GUUD 13. 1. 1980, Naado Dhul
Jaalle Shukri Nuur Cabdulle L. 208 » 618

WASAARADDA H. GUUD 13. 1. 1980, Naado Dhul
Jaalle Muuse Kaaji Jaamac Cali L. 209 619

WASAARADDA H. GUUD 13. 1. 1980, Naado Dhul
Jaalle Cali Maxamed Cabdulaahi L. 210 » 620

WASAARADDA H. GUUD 13. 1. 1980, Naado Dhul
Jaalle Dahaba Sheekh Saalax L. 211 621

WASAARADDA H. GUUD 13. 1. 1980, Naado Dhul
Jaalle Cabdulaahi Maxamed Cali L. 212 » 622

WASAARADDA H. GUUD 13. 1. 1980, Naado Dhul
Jaalle Axmed Ibraahim Jaamac L. 213 623

WASAARADDA H. GUUD 13. 1. 1980, Naado Dhul
Jaalle Xasan Aw Cali Cusmaan L. 214 624

WASAARADDA H. GUUD 13. 1. 1980, Naado Dhul
Jaalle Cabdi Salaad Cali L. 215 625

WASAARADDA H. GUUD 13. 1. 1980, Naado Dhul
Jaalle Cabdiraxmaan Maxamed Xersi L. 216 626

WASAARADDA H. GUUD 13. 1. 1980, Naado Dhul
Jaalle Axmed Caamir Cawad L. 217 627

WASAARADDA H. GUUD 13. 1. 1980, Naado Dhul
Jaalle Luul Baana Aftik L. 218 628

WASAARADDA H. GUUD 13. 1. 1980, Naado Dhul
Jaalle Cabdi Maxamed Siyaad L. 219 629

WASAARADDA H. GUUD 13. 1. 1980, Naado Dhul » 630
Jaalle Cabdullaahi Maxamed Jaamac L. 220

WASAARADDA H. GUUD 13. 1. 1980, Naado Dhul » 631
Jaalle Maxamed Cali Maxamed L. 221

WASAARADDA H. GUUD 13. 1. 1980, Naado Dhul
Jaalle Xaaji Xaashi Diiriye L. 222

WASAARADDA H. GUUD 13. 1. 1980, Naado Dhul » 633
Jaalle Faadumo Cumar Maxamuud L. 2223

WASAARADDA H. GUUD 13. 1. 1980, Naado Dhul » 634
Jaalle Muraayo Warsame Dhiblaawe L. 224

WASAARADDA H. GUUD 13. 1. 1980, Naado Dhul » 635
Jaalle Cabdulle Cadar Maxamed L. 225

WASAARADDA H. GUUD 13. 1. 1980, Naado Dhul » 636
Jaalle Warsame Cali Godane & Cabdi
Cigaal Xasan L. 226

WASAARADDA H. GUUD 13. 1. 1980. Naado Dhul » 637
Aamina Cabdi Aadan L. 227

WASAARADDA H. GUUD. 14. 1. 1980, Naado Dhul » 638
Maxamed Xaashi Faarax L. 228

WASAARADDA H. GUUD. 14. 1. 1980, Naado Dhul » 639
Jaalle Cumar Nuur Cabdi . 229

WASAARADDA H. GUUD. 14. 1. 1980, Naado Dhul » 640
Jaalle Xasan Barre Maxamed & Maxamed-

WASAARADDA H. GUUD. 14. 1. 1980, Naado Dhul » 641
Jaalle Jasan Mataan L. 230

WASAARADDA H. GUUD. 14. 1. 1980, Naado Dhul » 642
Jaalle Ayaan Daahir Warsame L. 231

WASAARADDA H. GUUD. 14. 1. 1980, Naado Dhul » 643
Jaalle Khadiija Faarax Odaway L. 232

WASAARADDA H. GUUD. 14. 1. 1980, Naado Dhul » 645
Jaalle Cabdiraxmaan Carte Qaabil L. 233

WASAARADDA H. GUUD. 14. 1. 1980, Naado Dhul » 646
Jaalle Cismaan Cumar Guure L. 234

WASAARADDA H. GUUD. 14. 1. 1980, Naado Dhul Jaalle Axmed Rashiid Maxamed Xasan L. 235

WASAARADDA H. GUUD. 14. 1. 1980, Naado Dhul Jaalle Axmed Ibraahim Aw Daahir L. 236 » 648

WASAARADDA H. GUUD. 14. 1. 1980, Naado Dhul Jaalle Xaawa Yuusuf Cali L. 237 » 649

WASAARADDA H. GUUD. 14. 1. 1980, Naado Dhul Jaalle Maryan Cali Jaamac L. 238 » 650

WASAARADDA H. GUUD. 14. 1. 1980, Naado Dhul Jaalle Muuse Xaashi Baraale L. 239 » 651

WASAARADDA H. GUUD. 14. 1. 1980, Naado Dhul Jaalle Axmed Cali Jicaale L. 240 » 652

WASAARADDA H. GUUD. 14. 1. 1980, Naado Dhul Jaalle Xasan Macaw Cosoble L. 341 » 653

WASAARADDA H. GUUD. 14. 1. 1980, Naado Dhul Jaalle Cadi shakuur Yuusuf Cali L. 242 » 654

WASAARADDA H. GUUD. 14. 1. 1980, Naado Dhul Jaalle Yuusuf Axmed Saalax L. 243 » 655

WASAARADDA H. GUUD. 14. 1. 1980, Naado Dhul Jaalle Cabdulqaadir Cabdulraxmaan-Muxidiin L. 244 » 656

WASAARADDA H. GUUD. 14. 1. 1980, Naado Dhul Jaalle Maxamed Ibraahim Cali L. 245 » 657

WASAARADDA H. GUUD. 14. 1. 1980, Naado Dhul Jaalle Aadan Kediye Faarax L. 246 » 658

WASAARADDA H. GUUD. 14. 1. 1980, Naado Dhul Jaalle Madiina Caamir Maxamed L. 247 » 659

WASAARADDA H. GUUD. 14. 1. 1980, Naado Dhul Jaalle Maxamed Muuse Xuseen L. 248 » 660

WASAARADDA H. GUUD. 14. 1. 1980, Naado Dhul Jaalle Shariif Axmed Sayid L. 249 » 661

WASAARADDA H. GUUD. 14. 1. 1980, Naado Dhul Jaalle Axmed Maxamed Yuusuf L. 250 » 662

WASAARADDA H. GUUD. 14. 1. 1980, Naado Dhul » 663
Jaalle Maxamed Cabdul/dir Maxamed L. 251

WASAARADDA H. GUUD. 14. 1. 1980, Naado Dhul » 664
Jaalle Xaaji Cabdi Sheekh Maxamed L. 252

WASAARADDA H. GUUD. 14. 1. 1980, Naado Dhul » 665
Jaalle Dr. Ismaaciil Maxamed Ab. L. 253

WASAARADDA H. GUUD. 14. 1. 1980, Naado Dhul » 666
Jaalle Xuseen Xaaji Yuusuf Xasan L. 254

WASAARADDA H. GUUD. 14. 1. 1980, Naado Dhul » 667
Jaalle Dr. Maxamed Yuusuf Xuseen L. 255

WASAARADDA H. GUUD. 14. 1. 1980, Naado Dhul » 668
Jaalle Maxamed Meygaag Miicaad L. 256

WASAARADDA H. GUUD, 9. 1. 80 Bed Naado Dhul » 670
Jaalle Sheekh Muxidiin Sheekh iyo
Maxamed Sheekh Abuukar L. 257

WASAARADDA H. GUUD, 13.1.80 Bed Naado Dhul » 669
Jaalle Cali Qaasim Jacfar L. 258

WASAARADDA H. GUUD, 14.1.80 Bed. Naado Dhul »671
Galbeed waxaa ka xiga: Dhul Lam. 190 M.

B a r i waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar waxaana laga doodi karaa muddo(30) soddon maalmood laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.-

MUQDISHO. 2 Apr. 1980

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA & DEG. MAG.
MAXAMED MAYE XAAJI

L. 636

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYNTA
NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Maxamed Sheekh Cabdi uu u soo qortay arji Waaxda Sasanka & Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar maalintii taariikhdu ahayd 15.12.79 ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Madiina Qaabkiisuna waa: RETANGOLAR Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya: 600 MDH.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo

Koonfur waxaa ka xiga: Dhul Lam. 382 M.

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul Lam. 379 M.

B a r i waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg. Magaalaynta ee W. H. Guud Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.-

MUQDISHO. 2 Apr. 1980

MAXAMED MAYE XAAJI

L. 637

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYNTA
NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Shariif Miftaax Mudhir uu u soo qortay arji Waaxda Sahanka & Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar maalintii taariikhdu ahayd 28.11.79 ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Madiina Qaabkiisuna waa: RETANGOLAR Addimihiisuna yihiin 30X40 kuna fadhiya 1200 MDH.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul Lam. 356 357 M.

Koonfur waxaa ka xiga: Dhul Lam. 360 361 M.

Galbeed waxaa ka xiga: Waddo

B a r i waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar waxaana laga doodikaraa muddo (30) soddon maalmood laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.-

MUQDISHO. 2 Apr. 1980

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA & DEG. MAG.
MAXAMED MAYE XAAJI

L. 638

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYNTA
NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cabdi Xuseen Yuusuf uu u soo qortay arji Waaxda Sahanka & Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar maalintii taariikhdu ahayd 14.7.79 ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Madiina Qaabkiisuna waa: RETAGOLAR Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya: 600 MDH.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul Lam. 15 M.

Galbeed waxaa ka xiga: Waddo

Koonfur waxaa ka xiga: Waddo

B a r i waxaa ka xiga: Dhul Lam. 17 M.

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.-

MUQDISHO. 2 Apr. 1980

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA & DEG. MAG.
MAXAMED MAYE XAAJI

L. 639

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYNTA NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Maxamed Caydiid Faarax uu u soo qortay arji Waaxda Sahanka & Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar maalintii taariikhdu ahayd 15.1.80 ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Madiina Qaabkiisuna waa: RETANGOLAR. Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya: 60 MDH.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN.

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul Lam. 306 M.

Koonfur waxaa ka xiga: Dhul Lam. 310 M.

Galbeed waxaa ka xiga: Daddo

B a r i waxaa ka xiga: Dhul Lam. 309 M.

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.-

MUQDISHO. 2 Apr. 1980

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA & DEG. MAG.
Maxamed Maye Xaaji

L. 640

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYNTA
NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Muuse Axmed Geelle uu u soo qortay arji Waaxda Sahanka & Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar maalintii taariikhdu ahayd 4.10.79 ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Madiina Qaabkiisuna waa: RETANGOLAR Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna Fadhiya: 600 MDH

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN.

Waqooyi waxaa ka xiga:	Waddo
Koonfur waxaa ka xiga:	Dhul Lam. 287 M.
Galbeed waxaa ka xiga:	Dhul Lam. 284 M.
B a r i waxaa ka xiga:	Waddo

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga ahki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Sharciga Rasmiga ahraa muddo (30) soddon maalmood laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.-

MUQDISHO. 2 Apr. 1980

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA & DEG. MAG.
Maxamed Maye Xaaji

L. 641

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYNTA
NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Axmed Ibraahim Fiidow uu u soo qortay arji Waaxda Sahanka & Deg. ee W. H. Guud Xamar maalintii taariikhdu ahayd 8.8.79 ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Madiina Qaabkiisuna waa: RETANGOLAR Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 MDH.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN.

Waqooyi waxaa ka xiga : Waddo

Koonfur waxaa ka xiga : Dhul lam. 57 M

Galbeed waxaa ka xiga: Waddo

B a r i waxaa ka xiga : Dhul lam. 56 M

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar waxaana laga doodi ka-

K/S. AGAASIMAHA WAAXDA SAH. IYO DEGAANGA
Maxamed Maye Xaaji

L. 643

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYNTA
NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cali Axmed Geelle uu u soo qortay arji Waaxda Sahanka & Deg Mag. ee W. H. Guud Xamar maalintii taariikhdu ahayd 20.10.79 ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo yaal Muqdisho Degmada Madiina Qaabkiisuna waa: RETANGOLAR Addimihiisuna yihiin 20X30 kuna fadhiya: 600 MDH.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN.

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo

Koonfur waxaa ka xiga: Dhul Lam. 57 M.

Galbeed waxaa ka xiga: Waddo

Bari waxaa ka xiga: Dhul Lam. 56 M.

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.-

MUQDISHO. 2 Apr. 1980

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA & DEG. MAG.
Maxamed Maye Xaaji

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAHANKA & DEGAANKA MAGAALAYNTA.

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Ismaaciil Xuseen Liibaan uu u soo qortay arji Waaxda Sahanka & Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar maalintii taariikhdu ahayd 10.10.78 ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Yaaqshiid Qaabkiisuna waa: RETANGOLAR Addimihiisuna yihiin 20X30 kuna fadhiya: 600 MDH.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN.

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo
Koonfur waxaa ka xiga: Dhul Lam. 0552 Y.
Galbeed waxaa ka xiga: Dhul Lam. 0549 Y.
B a r i waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.-

MUQDISHO. 2 Apr. 1980

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA & DEG. MAG.
Maxamed Maye Xaaji

L. 644

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYNTA
NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Maxamuud Maxamuud Cali uu u soo qortay arji Waaxda Sahanka & Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar maalintii taariikhdu ahayd 2.2.80 ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Yaaqshiid Qaabkiisu waa: RETANGOLAR Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna Fadhiya 600 MDH.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN.

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo
Koonfur waxaa ka xiga: Dhul Lam. 0526 Y.
Galbeed waxaa ka xiga: Dhul Lam. 0525 Y.
B a r i waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg Mag. ee W. H. Guud Xamar waxaana laga doodi karkk muddo (30) soddon maalmood laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Bugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.-

MUQDISHO. 2 Apr. 1980

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA & DEG. MAG.
Maxamed Maye Xaaji

L. 645

IIB MA GALO

FAAFINTA RASMIGA AH

الجريدة الرسمية

JAMHUURIYADDA DIMQQRAADIGA SOOMAALIYA

لجمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 8aad Muqdisho 6 Oktoobar 1980 L. 1 R 10

FAAFINTA BIL SOO BAXA

جريدة شهرية

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J.D.S.

QIIMAHA : waa 5 shilin Inmbar walba **RUKUNKA** : Sanalkii waa Sh. 100 Soomaaliya gudaheeda — dibedana waa Sh. So, 300, Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo Qiimaha qorotaanka F. R, halkii sadar iyo wàxii ka yàr wàà 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weeydiistaa Laanta Maamulkà Fàafintà Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuurahà ee Wàsàaràddà Làcagta.

KOOBNIIN

QAYBTA **KOOWAAD**

SHARCI

SHARCI L. 26 ee 15 Sebteember 1980, Heshiis dhexmaray Dawladda J.D.S. iyo Jamhuuriyadda Ciraaq

مرسوم جمهورى رقم ٩٥ الصادر فى ١٩ اغسطس ١٩٨٠

QAYBTA LABAAD

XEER

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 95 ee 19 Agoosto 1980, meel marin Heshiis.

TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH

MAXKAMADDA GOBOKA BANAAIR, 1.3.1978, Lumid Jeeg Wareega L. 049126 ku qoran Sh. So. 15.079 ay leedahay Iskaasha. Dhuxusha Cadceed L. 602

MAXKAMADDA GOBOLKA J. HOOSE, 16.9.1980, Lumid Jeeg Wareega L. 260171 ku qoran Sh. So. 8.500 uu leeyahay Yuusuf Axmed Xersi

MAXKAMADDA GOBOLKA J. HDEXE 11.6.1980, Lumid Jeeg Wareega L. 693658 ku qoran Sh. So. 5.000 uu leeyahay Axmed Suldaan Cali L. 604

MAXKAMADDA GOBOLKA, BANAADIR, 6.7.1980, Lumid Buug Kayd L. 16575 ku qoran Sh. So. 1347 uu leeyahay Maxamuud Siyaad Cabdi-kariin L. 605

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR 25.9.1980, Lumid Jeeg Wareega 120113 ku qoran Sh.So. 39.600 uu leeyahay Warsame Qoriyow Macallin L. 606

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR 25.9.1980, Lumid Jeeg Wareega L. 120112 ku qoran Sh. So 29.000 L. 607

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 23.8.1980 Lumid Buug Kayd L. 11307 ku qoran Sh. So. 600 uu leeyahay Cismaan Yuusuf Maxamuud L. 608

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR 1.10.1980 Lumid Jeega Wareega Lamb. 154976 L. 609

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR 1.10.1980 Lumid Jeeg Waree lamb. 226221 L. 610

MAXKAMADDA GOBOLKA BANADDIR 1.10.1980 Lumid Jeega Wareega Lamb. 153870 L. 611

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR 27.9.1980 Lumid Buuga Keydka Lamb. 16412 Lamb. 612

SAXID QALAD

Faafinta Rasmiga ah ee soo baxday 2 Maaji 1980, Bog 587
Go'aanka ku qoran waa in loo akhriyaa sida hoos ku qoran Shs. 4.020

QAYBTA *KOOWAAD*

SHARCI L. 26 ee 15 Sebt 1980 Heshps Dhexmaray Dawladda J.D.S. iyo Jamhuuriyadda Ciraaq

MADAXWEYNAHA *J. D. S.*

ISAGOO ARKAY: Dastuurka J.D.S. qodobadiisa 78 (1) iyo 82 (4) iyo 67 (5)

ISAGOO SALDHIG Looga dhigayo oggolaashaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

QODOBKA *1*AAD

1) Waxaa la oggolaaday Heshiiska dhexmaray Dawladda Jamhuuriyadda Demoqraadiga Soomaaliya iyo Dawladda Jamhuuriyadda Ciraaq oo ku saabsan Brotokol gaar ah oo lagu dhisayo Machadka tababarka Macalimiinta Soomaaliyeed.

2) Heshiiska waxaa lagu kala saxiixday Magaalada Muqdisho taariikhdu markay ahayd 23 Jennaayo 1980.

3) Heshiisku wuxuu ka mid noqonayaa sharcigan isagoo lifaaq u yahay.

QODOBKA *2*AAD

Shuruudaha iyo Xaaladaha ay qorayaan qodobbada Heshiiska lagu soo tilmaamay Sharcigan, waxay leeyihiin qiimo iyo astaan sharci oo la mida sharciyada Dalka, dhaqan gelintiisuna waxaa la waafijinayaa qod. 72 (1) ee Dastuurka J.D.S. iyo qod. 14aad ee heshiiska (Brotokolka).

QODOBKA 3AAD

Sharcigani wuxuu ka mid noqonayaa sharciyada Dalka, wuxuuna dhaqan gelayaa maalinta ku xigta oo lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho 15 Seteember 1980

مرسوم جمهورى رقم ٩٥ الصادر فى ١٩ اغسطس ١٩٨٠
وثيقـــة التصـــديق

جمهورية الصومال الديمقراطية
الرئيـــس

بعد الاطـــلاع على المادة ٦٧ الفقرة الخامسة والمادة الفقرة الرابعة والمادة ٧٢ الفقرة الاولى من دستـــور جمهـــورية الصومـــال الديمقراطية.

وبعد الاطـــلاع على موافقة مجلس الشعب بتاريخ ٢١ يونيو ١٩٨٠م على بروتوكول الخاص بانشاء معهد لاعداد المعلمين في الصومال بين حكومة جمهـــورية الصـــومال الديمقراطيـــة وحكومـــة الجمهورية العراقية الموقـــع عليـــه في مقديشـــو بتاريـــخ ١٩٨٠/١/٢٣م.

يصـــدر المرســـوم التـــالى

المـــادة الاولى

تم التصديق على البروتوكول الخاص بانشاء معهد لاعداد المعلمين فى الصومال المبرم بين حكومة جمهورية الصومال الديمقراطية وحكومة الجمهورية العراقية الموقع عليه في مقديشو بتاريخ ١٩٨٠/١/٢٣م.

المـــادة الثانية

للبروتوكول قوة القانون في جمهورية الصومال الديمقراطية ويعمل به اعتبارا من تاريخ تبادل وثائق التصديق وكتا للمـــادة الرابعـــة عشر مـــن البروتوكول .

المـــادة الثالثة

ينفذ هذا المرسوم حال توقيعـــه من قبل رئيس جمهـــورية الصومـــال الديمقراطية، وينشر فى الجريدة الرسمية للدولة .
مقديشوه ، فى ١٩٨٠/٨/١٩م .

اللواء محمد سياد برى

QAYBTA LABAAD

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 95 ee 19 Agoosto 1980, Meelmarin heshiis

MADAXWEYNAHA J. D. S.

ISAGOO ARKAY: Qodobka 67aad xubintiisa 5aad, Qodobka 82aad xuintiisa 4aad iyo Qodobka 72aad xubintiisa 1aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

ISAGOO TIXGELINAAYA Oggolaashaha Golaha Shacbiga ee taariikhdiisu tahay 21kii Juun 1980 ee Brotokoolka Gaar ahaaneed ee lagu abuurayo Machadka tababarka ee Macallimiinta, dhexmarayna Dawladda Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Dawladda Jamhuuriyada Ciraaq.

Wuxuu soo saarayaa **xeerka** *soo* **socda**:-

QODOBKA 1AAD

Brotokoolka Gaar ahaaneed ee lagu dhisayo Machadka Tababarka ee Macallimiinta dhexmarayna dawladda Jamhuuriyadda Soomaaliya iyo dawladda Jamhuuriyadda Ciraaq laguna saxiixday Muqdisho, 23kii Janaayo, 1980, WAA LA MEELMARIYEY.

QDOBKA 2AAD

Brotokoolku wuxuu ku yeelan doonaa Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya astaan sharci ah wuxuu dhaqan gelayaa marka la isudhaafsado waraaqaha meelmarinta sida waafaqsan Qodobka 14aad ee Brotokoolkan.

QODOBKA 3AAD

Xeerkanu wuxuu dhaqan gelayaa markuu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya;

Waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 19.8.1980

SAREEYE GAAS MAXAMED SIYAAD BARRE
MADAXWEYNAHA

MAXKAMADDA GOBOLKA BENAADIR

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

MARKUU ARKAY: waxey ku saabsan tahay iyo ogeysiiska bangiga;

HADDUU ARKAY: qod. 69 D. L. 9.9.1965 N 2; Lumid Jeeg Wareega Lamb. yahay 049126 kuna qoran tahay Sh. So. 15.079 Bangiga Ganacsiga iyo Keydka laanta Dhexe

WUXUU AMRAYAA

In loo cusbooneysiiyo Jeeg wareega ka dib markii ay ka soo wareegto 15 maalmood dekeretada lagu shaaciyo Faafinta ras miga ah ee dawladda.

WAXAA LA CODSANAYAA

In jeegaga cusub ee la sameyn doono gacanta laga saaro Iskaashatada Dhuxusha Cadceed ama qof isla asaga ka sita wakaalad shrci ah, ayadoo la sugaayo mudada 15 maalmood ah ee aan kor ku soo sheegnay.

Muqdish, 3. 7. 1978

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADA GOB. BANAADIR
CABDULLAHI MAXAMED MAAX

L. 602

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA G. J. HOOSE

HADDUU ARKAY: Akhriyey dalabka uu soo qortay Jaalle Yuusuf Axmed Xersi oo sheeganaaya in uu ka dhumay Jeega Wareega lamb. 260171, ee ku qoran tahay lacag dhan Sh.So. 8.500 (Sideedkun shanboqol) Shs.

HADUU ARKAY: Qodobka 69 Xeer L. 2 ee soo baxay 9.9.1965 wuxuu cadeeynayaa in uu ka dhumay Jeegaas lamb sare lagu sheegay Ninka la yiraahdo Yuusuf Axmed Xersi.

WUXUU AMRAYAA

In loo cusbooneysiiyo Jeegaa war. lamb sare ku xusan yahay kuna qoran lacagta aan kor ku soo sheegnay muddo dhan 15 (toban iyo shan) casho gudaheeda laga bilaabo marka lagu qoro Faafinta Rsmiga ah.

Waxaa kaloo la amrayaa in jeegaas gacanta laga saaro ninka la yiraahdo Yuusuf Axmed Xersi, ama cidii ka wadata wakaalad Rasmi ah hadaan la helin qof kale oo sharci u haysta.

Kismaayo, 16 Sebt. 1980.

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA G. J. HOOSE
Dr. Cumar Yuusuf Faarax

L. 603

MAXKAMADDA GOBOLKA J. DHEXE

HADDUU ARKAY; Dacwadda horay ku qoran

MARKUU OGAADAY; waxaay ku saabsantahay iyo ogeysiiska Bangiga W. 003 ee 8.1.1980 Laanta Jilib B. Ganacsiga iyo Kaydka S. Laanta Jilib.

wuxuu ogaaday in aay tahay shaqadiisa.
HADDUU ARKAY: Qod. 69 D. L. 9.9.1965 N 2

Wuxuu cadeynayaa in Jeegaas war. L. 693658 ee 3010.79 ku qoran Axmed Suldaan Cali Sh. So. 5.000 leeyahay.

Wuxuu amrayaa in loo sameeyo Jeeg wareega ee cusub Ninka kor ku Magacaaban 15 maalmood kaddib, markii amarkaan lagu Shaaciyo Faafin Rasmiga ah ee Dawladda.

CODSI

Waxaa la codsanayaa in Jeegga war. ee la sameeyn doono gacanta laga saaro Axmed Suldaan Calj ama qof asaga ka sita wakaalad sharci ah iyadoo la sugaayo 15 kor xusan.

Jilib; 11. 6. 1980

GUDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA J. DHEXE
Dr. Xuseen Cabdi Abiikar

L. 604

MAXKAMADDA GOBOLKA BENAADIR

HADDUU AKHRIYEY dacwadda kor ku qoran;

HADDUU HUBSADAY: in Buug Keyd dhumay oo lambarkiisu ahaa 16575 lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta kuna qorneyd lacag dhan Sh. So. 1.347 uu iska lahaa Maxamuud Siyid Cabdikariin sida ku cad warqadda lamb. 02256 Taariikh 6. 7. 1980 oo bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta.

HADDUU ARKAY: qod 69 sharciga lamb. 2 ee 9.9.1965.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo Buug keyd Lamb 16575. oo ku qoran Magaca Maxamuud Siyid Cabdikariin ayna ku jirto Sh. So. 1.347

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo keydka laanta Xarunta u beddelo Maxamuud Siyid Cabdikariin buugga keydka ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood maalinta go'aanka lagu daabaco faafinta rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Demoqraadiga Soomaaliyeed, haddii inta ka horeysa aan is hortaag laga keenin.

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BENAADIR
Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 605

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran:

HADDUU HUBIYEY: In Jeega wareega dhumay oo lambarkiisu ahaa 120113 Lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed, Laanta Badhaadhe kuna qornayd lacag dhan Sh. So. 39.600 uu iska lahaa Warsame Qoriyow Macalin sida ku cad warqadda lamb 009594 Taariikh 25.9.1980 oo Bangiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Laanta Badhaadhe

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo Jeeg Wareega lamb. 120113 oo ku qoran magaca Warsame Qoriyo Macallin ayna ku jirto Sh. So. 39.600

WUXUU FASAXAY

In Bangiga Ganacsiga iyo Keydka laanta Badhaadho u bedelo Warsame Qoriyow Macallin Jeegga Wareega ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka djb markay ka soo wareegato muddo aan ka yareyn 15 Maalmood Maalinta go' aanka lagu daabaco Faafinta rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliyeed, haddii inta ka horeysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 25. 9. 1980,

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 606

MAXKAMADDA GOBOLKA BENAADIR

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran:

HADUU HUBIYEY: in Jeegga wa. dhumay oo lambarkiisu ahaa 120112 lagana soo soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed; Laanta kuna qornayd lacag dhan Sh. So. 29.000 uu iska lahaa Warsame Qoriyow Ma callin sida ku cad warqadda lamb. 009594 Taariikh. 25.9.80 Baniga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Laanta Ba dhaadhe.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo Jeega Wareega Lamb. 120112 oo ku qoran magaca Warsame Qoriyow Macalin ayna ku jirto Sh. So. 29.000

WUXUU FASAXAY

In Bangiga Ganacsiga iyo Keydka laanta Badhaadhe u bedelo Warsame Qoriyow Macallin Jeega wareega ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegato muddo aan ka yareyn 15 Maalmood Maalinta Go' aanka lagu daabaco Faafinta rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadia Soomaaliyeed, haddii inta ka horeysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 25. 9. 1980

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 607

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU AKHRIYEY dacwadda kor ku qoran;

HADDUU HUBSADAY: In Buug Seyd dhumay oo lambarkii su ahaa 11307 lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta 1aad kuna qorneyd lacag dhan Sh. So. 600 uu iska lahaa Cismaan Yuusuf Maxamuud sida ku cad warqadda lamb. 5514 Taariikh 23.8.1980 oo bangiga Kanacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta 1aad.

HADDUU ARKAY: qod 69 sharciga lamb. 2 ee 9.9.1965.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo Buug Keydka Lamb. 11307 oo ku qoran Magaca Cismaan Yuusuf Maxamuud ayna ku jirto Sh. So. 600

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka laanta 1aad u beddelo Cismaan Yuusuf Maxamuud Buuga keydka ee kor ku tilmaan una sameeyso mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto mudo aan ka yarayn 30 maalmood maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Demoqraadiga Soomaaliyeed haddii inta ka horeysa aan is hortaag laga keenin.

Muqdisho 23.8.1980

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 608

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran:

HADDUU HUBIYEY: In Jeega Wareega dhumay oo lambarkiisu ahaa 154976 lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed, Laanta Berbera kuna qornayd lacag dhan Sh. So.10. 000 uu iska lahaa Yaasiin Cali Yuusuf sida ku cad warqadda lmb. 009837 Taariikh 1. 10.1980 oo Bangiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Laanta Berbera.

HADDUU ARKAY Qod: 69 Sharciga L. 2 ee 9.9.1065

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo Jeega Wareega Lamb. 154976 oo ku qoran Magaca Yaasiin Cali Yuusuf ayna ku jirto Sh. So. 10.000

WUXUU FASAXAY

In Bangiga Ganacsiga iyo Keydka laanta Berbera u bedelo Yaasiin CaliYuusuf Jeega Wareega ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegato muddo aan ka yareyn 15 Maalmood Maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ahee Jamhuuriydda Dimoqraadiga Soomaaliyeed, haddii inta ka horeysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho,1. 10. 1980

GUDD. MAX. GOBOL. BANAADIR

L. 609

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran:

HADDU HUBIYEY: In Jeega Wareega dhumay oo lambarkiisu ahaa 226211 Lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed, Laanta Berbera kuna qornayd lacag dhan Sh. So. 22.000 uu iska lahaa Cabdullaahi Cabduraxmaan Sida ku cad warqadda lamb. Taariikh 28. 9. 1980 oo Bangiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Laanta Berbera.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo Jeega Wareega Lamb. 226211 oo ku qoran Magaca Cabdulqaadir ayna ku jirto Sh. So. 22.000

WUXUU FASAXAY

In Bangiga Ganacsiga iyo Keydka laanta Berbera u bedelo Cabdullaahi Cabduraxmaan Yuusuf Jeeg Wreega ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegato muddo aan ka yareyn 15 maalmood Maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliyeed, haddii inta ka horeysa aan wax is hortaag ah laga keenin.

Muqdisho 1. 10. 1980

GUDD. MAX. GOBOL. BANAADIR
***Dr. Cabdullaahi* Maxamed Maax**

L. 610

MAX. GOBOL. BANAADIR

HADUU ARKAY: Qod 69 Sharciga L. 2 ee 9.9.1965

HADUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran:

HADDUU HUBIYEY: In Jeega Wareega dhumay oo lamabrkiisu ahaa 153870 lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed, Laanta Berbera kuna qornayd lacag dhan Sh. So. 7.500 uu iska lahaa Maxamed Xasan sida ku cad warqadda lamb. Taariikh 28. 9. 1980 oo Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Berbera.

HADUU ARKAY: Qod 69 Sharciga L. 2 ee 9.9.1965

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo Jeega Wareega Lamb. 153870 oo ku qoran Magaca Maxamed Xasan ayna ku jirto Sh. So. 7.5000

WUXUU FASAXAY

In Bangiga Ganacsiga iyo keydka laanta Berbera u bedelo Maxamed Xasan Jeega wareega ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka djb markay ka soo wareegato muddo aan ka yareyn 15 Maalmood Maaljnta Go'aanka daabaco Faafinta rasmiga ah ee Jamhuuriyada Dimoqraadiga Soomaaliyeed, haddii inta ka horeysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 1. 10. 1980

GUDD. MAX. GOBOL. BANAADIR
Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 611

GUDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOKA BANAADIR

HADUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran:

HADDUU HIBIYEY: In Buuga Keydka dhumay oo lamabrkiisu ahaa 16412 lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed, Laanta Xarunta kuna qornayd lacag dhan Sh. So. 307 uu iska lahaa Xasan Eybakar Maxamuud sida ku cad warqadda lambar 03269 taariikh 27.9.80 oo Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta.

HADUU ARKAY: Qod 69 Sharciga L. 2 ee 9.9.1965

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo Buuga Keydka Lamb 16.412 oo ku qoran Magaca Xasan Eybakar Maxamuud ayna ku jirto Sh. So. 307

WUXUU FASAXAY

In Bangiga Ganacsiga iyo Keydka laanta Xarunta u bedelo Xasan Eybakar Maxamuud Buuga Keydka ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegato muddo aan ka yareyn 30 Maalmood Maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliyeed, haddii in ka horeysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 27. 9. 1980

Dr. *CABDULLAAHI* MAXA*MED* MAAX
GUDOO*MIY*AHA *MAXKAMADDA* GOBO*KA* BA*NAADIR*

L. 612

GUDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOKA BANAADIR

HADUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran:

HADDUU HUBSADAY in Buuga Keydka dhumay lambarkiisu ahaa 14143 lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Keyd-Soomaaliyeed Laanta 1aad kuna qorneyd lacag dhan Sh. So. 12.050 uu iska lahaa Maka Xaaji Warsame sida ku ca warqadda lamb 4695 Taariikh oo bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta 1aad.

HADDUU ARKAY: qod 69 sharciga lamb 2 ee 9.9.1965.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo Buuga Keydka lamb. 14143 oo ku qoran Magaca Maka Xaaji Warsame ayna ku jirto Sh. So. 12.050

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka laanta 1aad u beddelo Maka Xaaji Warsame buugga keydka ee kor ku tilmaaman una sameeyso mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto mudo aan ka yarayn 15 maalmood maalinta go'aanka lagu daabaco faafinta rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Demoqraadiga Soomaaliyeed, haddii inta ka horeysa aan is hortaag laga keenin.

Muqdisho, 19. 7. 1980

GUDD. MAX. GOBOL. BANAADIR
K.S. *Dr. KHALIIF XIRSI CALI*

L. 613

MAXKAMADDA GOBOLKA HARGEYSA

CABDILLAAHI MAXAMED CIGAAL

DEK. LAMB. 7 1980

Cabdillaahi Maxamed Cigaal wuxuu yimid Maxkamadda asagoo oo ah qofka haystay Jeegga Lambarkiisu yahay 126094 oo ay ku taalay lacag dhan Sh. So. 5000/00 kuna qoran magiisa, wuxuuna keenay Maxkamadda Warqadda Lambarkeedu yahay 132 ee Taariikhdeedu tahay 17. 8. 1980 oo ka soo baxay Xafiiska Maamulaha Bankiga Ganacsiga iyo Ammaahda Hargeysa.

waxaan halkan ku bixinayaa Amarkan aniga oo cuskanaya Qodobka 27 Xeerka Lambarkiisu yahay 2 ee 29kii Sebtember 1965 in Jeegga Wareegga ee Lambarkiisu yahay 126094 la tiro Waxaanan amrayaa.

A) In lagu qoro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

B) [illegible]eagta ah So. Shs, 5000/00 [illegible] Baankigu u celiyo Cabdullaahi Maxamed Cigaal 30 casho gudahood marka lagu soo saaro faafinta rasmiga ah ee Dawladda

la qoray 23. 8. 1980.

(IBRAAHIM FAARAX MAXAMED)
GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA HARGEYSA

L. 614

IIB MA GALO

FAAFIN RASMI AH

الرسمية الجريدة

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

جمهورية الصومال الديمقراطية

1980 L. 2 R 10

Sannadka 8aad Muqdisho 29 Oktoobar 1980 L. 2 R 10

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J. D. S.

FAAHFAAHINTA BIL SOO BAXA

جريدة شهرية

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — RUKUNKA: Sannadii waa Sh. 100 Somaaliya gudaheeda — dibaddeedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilaabmaa 1 Jenayo Qiimaha qoritaanku F.R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoriitaanka waxaa la weydiistaa laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda lacagta

KOOBNIIN

AMAR MADAXWEYNAHA J. D. S.

AMAR Madaxweynaha J.D.S. Lamb. 1 ee 21 Oktoobar 1980, ku soo rogid Dalka J.D.S. Xukun deg deg ah .

AMARKA Madaxweynaha J.D.S. Lamb. 2 ee 21 Oktoobar 1980, laalid Qodobbada Dastuurka iyo Shuruucda aan la socon karin Xukun deg deg ah.

MARKA Madaxweynaha JDS, Lamb. 3 ee 23.10.1980 Guddiyada Golaha Sare ee Kacaanka.

AMAR Lamb. 4 ee 23.10.1980, Magacaabid Guddiyada Golaha Sare ee Kacaanka.

AMARKA Madaxweynaha JDS Lamb. 5 ee 23.10.1980 Dhismaha Guddiyada Kacaanka ee Gobollada iyo Degmooyinka JDS

AMARKA MADAXWEYNAHA JDS Lr. 6 taariikh 28.10.80
Isku bedilid Xubnaha Guddiyada Golaha Sare ee Kacaan.

QAYBTA 1aad

SHARCI

SHARCI L. 27 ee 23 Oktoobar 1980, Xeer Sharci Kordhin Mushaharka Shaqaalaha Joogtada ah Dawladda.

QAYBTA LABAAD

XEER Madaxweynaha JDS, L. 96 ee 26 Okt. 1980 u gacan Bannayn Xubnaha GSR Hawlaha Guddiyada.

AMARKA Madaxweynaha J.D.S. Lambar 1 ee 21ka Oktoobar 1980 ku soo rogid Dalka Xukun deg deg ah.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY : Qodobka 83 iyo 113/2 ee Dastuurka;

IYADOO LA TIXGELIYEY : weerarka joogtada ah oo Axmaarada iyo xulafadeedu ku hayaan Dalka Jammaalin walbana soo badanaya;

IYADOO LA TIXGELIYEY : Dhibaatooyin badan ee ka soo kordhey Qaxootiga faraha badan ee Dalka Jooga, maalin walbana soo badanaya;

IYADOO MUUQATAY : In la qalloociyey himiladii iyo ujeeddadii Kacaankii 21ka Oktoobar 1969, taasoo ah; musuqmaasuq, qaraabokiil, eex, cadaalad iyo sinnaan darro iyo shaqo curyaamin maamulka iyo Xisbiga dhexdiisa ku badatay muddadan dambe;

MARKII LA ARKAY In ay lagama maarmaan tahay in Dalka oo dhan lagu soo rogo laguna dhaqo ilaa iyo inta ay umuurtu caadigeedii ku soo noqoneyso, xukun deg deg ah oo kafaale qaadaya :

a) In duruufta adag ee Dalku marayo uruursanaan iyo midnimo looga gudboo;

b) In mabaadi'dii iyo himiladii Kacaanka 21ka Oktoobar 1969 lagu soo celiyo marinkeedii dhabta ahna ee laga weeciyey

ISAGOO KU ISTICMAALAYA : Awooddii aan caadiga ahayn oo lagu siiyey Qod. 83aad ee Dastuurka;

DHEGEESTYNA Guddiga Difaaca Qaranka;

WUXUU SOO SAARAYAA

AMARKA SOO SOCDA;

QODOBKA 1AAD

Waxaa Dalka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya dhammaantii lagu soo rogay Xukun deg deg ah marka laga bilaabo 3da aroornimo oo maalinta talaadada oo taariikhdu tahay kow iyo labaatan bisha Oktoobar

QODOBKA 2AAD

1) Si dhibaatooyinka kor ku sheegan degdeg iyo habsami wax looga qabto, waxaa dib loogu yeerayXubnihii hore ee Golihii Sare ee Kacaan oo ku shaqayn doona qaab Gole oo masuuliyad wadajir ah leh, waxaana Shirguddoomiye ka naqanaya madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimuqaraadiga Soomaaliya.

2) Golaha Sare ee Kacaanka wuxuu u kala baxayaa guddiyoo dhismahooda iyo xilalkooda lagu tilmaami doono Xeer gaar ah.

3) Hay'adaha dastuuriga ah ee Qaranka, sida Xisbiga, Golaha Shacbiga iyo Dawladda, sidoodii ayay u wadanayaan hawlaha caadiga ah ee aan ka hor imaanayn Xukunka degdegga ah.

QODOBKA 3AAD

Qof kasta oo Soomaali ah ama Dalka ku nool waa inuu dhowraa nidaamka Xukuka deg degga ah. Qofkii ku gefa waxaa lala tiigsanayaa Sharciga.

QODOBKA 4AAD

Amarkan wuxuu dhaqan gelayaa laga billaabo 3da aroornimo ee 21ka Oktoobar 1980, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya.

Muqdisho, 21 Oktoobar 1980

MADAXWEYNAHA J. D. S.
(Maxamed Siyaad Barre)

Amarka Madaxweynaha J.D.S. Lamb. 2 ee 23ka Okt. 1980 laalid Qod. Distuurka iyo Shuruudaha aan la socon karin Xukunka degdegga ah.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qodobka 83aad ee Dastuurka .

MARKUU ARKAY: Amarka Madaxweynaha J.D.S. lambar 1 ee 21kii Oktoobar 1980.

MARKUU TIXGELIYEY: In ay lagama maarmaan tahay in la laalo qodobbada Dastuurka iyo shuruucda kale ee dalka oo aan la socon karin Xaaladda Xukunka Deg Degga ah.

WUXUU SOO SAARAYAA

Amarka soo socda

QODOBKA 1aad

Tan iyo inta ay socoto xaaladda Xukunka Deg Degga ah ee ku tilmaaman Amarka Madaxweynaha JDS lambar 1 ee 21kii Oktoobar 1980, waxaa la laalay Qodobbada Dastuurka iyo Shuruucda kale ee Dalka oo ka horimaanaya ama aan la socon kareyn dabeecadda Xukunka Deg Degga ah.

QODOBKA 2aad

Amarkan wuxuu dhaqan gelayaa laga bilaabo 23ka Oktoobar 1980, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 23.10.1980

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Maxamed Siyaad Barre)

Amaraka Madaxweynaha J.D.S. L. 3 ee 23ka Oktoobar 1980, Guddiyada Golaha Sare ee Kacaanka.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qodobka 82aad iyo 83aad ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Amarka Madaxweynaha JDS lr. 1 ee 21ka Oktoobar 1980;

MARKUU TIXGELIYEY: Inay lagama maarmaan tahay in la qaabeeyo awoodaha iyo hawl gelinta Xubnaha Golaha Sare ee Kacaanka ee dib loogu yeeray si loo toosiyo qallooca galay majaraha Kacaanka 21ka Oktoobar 1969

WUXUU SOO SAARAYAA

Amarka soo socda:

QODOBKA 1aad

Waxaa la magacaabay Guddiyada soo socda:

1. Guddiga Difaaca iyo Nabadgelyada;

2. Guddiga Dhaqaalaha, Ganacsiga iyo Maaliyadda;

3. Guddiga Siyaasadda;

4. Guddiga Bulshada;

5. Guddiga Xisaab Xil Ma Leh.

Guddiyada oo dhan waxay hoos imanayaan Madaxweynnaha JDS.

QODOBKA 2aad

Guddiyada ku tilmaaman Qodobka 1aad ee Amarkan waxay ka koobnaanayaan xubno ka tirsan Golaha Sare ee Kacaanka oo lagu magacaabayo XEER gaar

QODOBKA 3aad

Guddiyadu waxay fulinayaan xilalka iyo howlaha soo socda:

1. Toosinta ujeeddooyinka iyo himilada Kacaanka ee la qalloociyey,
2. Dib u habeynta maamulka guud ee Hay'adaha,
3. La dagaallanka shaqo curyaaminta, xatooyada xoolaha dadweynaha, maamul xumada, qaraabakiilka caddaalad iyo sinnaan darrada;
4. Ciribtirka qabyaaladda, afmiinshaarnimada iyo fidinta wararka beenta ah;
5. Hubanti gelinta fulinta iyo ku dhaqanka shuruucad Dalka,
6. Ilaalinta nabadgelyada iyo badbaadada Ummadda iyo Daafaca Dalka;
7. Kormeerka, toosinta iyo talo ka bixinta tacab kordhinta iyo horumarinta dhaqaalaha Ganacsiga iyo Maaliyadda Qaranka.
8. Kormeerka iyo u hawl-galka fulinta siyaasadda gudaha iyo ta dibadda ee Dalka;
9. Wax alla wixii la xiriira taabbagelinta ujeeddada Xukunka Deg Degga ah.

QODOBKA 4aad

1. Guddi waliba wuxuu awood u leeyahay in uu qaado tallaabo kasta oo lagama maarmaan u ah gudashada hawsha loo xilsaaray.
2. Gaar ahaan Guddi kasta wuxuu baari karaa, xaqii-

daya ciddii maamul xumo ama gef kale ay ku caddaato tillaabada ku habboon ee Sharciga ah.

QODOBKA 5aad

Guddi kasta wuxuu yeelan karaa Guddi Hoosaadyo ka kooban dad aqoon xirfadeed iyo waayo aragnimo leh.

QODOBKA 6aad

Xilalka, waajibaadka, qorshaha iyo howl-galka Guddi kasta waxaa lagu soo saarayaa guddoon gaar ah.

QODOBKA 7aad

Si loo habeeyo waxqabadka iyo wargelinta Guddiyada, Madaxweynuhu wuxuu xubin ka mid ah Golaha Sare ee Kacaanka u magacaabayaa xilka Guddoomiyaha Xaghaynta Guddiyada Golaha Sare ee Kacaanka.

QODOBKA 8aad

Amarkan wuxuu dhaqan gelayaa 23ka Oktoobar 1980, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 23.10.1980

Jaalle Maxamed Siyaad Barre
MADAXWEYNAHA J.D.S.

AMAR Lr. 4 ee 23 Okt. 1980. Magacaabid Xubnaha Guddiyada Golaha Sare ee Kacaanka.

MADAXWEYNAHA JDS.

MARKUU ARKAY: Qodobka 83aad ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Amarka Madaxweynaha JDS lr. 1 ee 21 Oktoobar 1980, kuna saabsan Xukunka Deg Degga ah;

MARKUU ARKAY: Amarka lr. 3 ee 23ka Oktoobar 1980, kuna saabsan dhismaha Guddiyada Golaha Sare ee Kacaanka;

MARKUU ARKAY: Inay lagama maarmaan tahay in la magacaabo xubnaha Guddiyada Golaha Sare ee Kacaanka;

WUXUU SOO SAARAYAA

Amarka soo socda:

QODOBKA 1aad

Guddiyada Golaha Sare ee Kacaanka ee ku tilmaaman Amarka Madaxweynaha JDS lambar 3 ee 23ka Oktoobar 1980 waxay hoos imanayaan Madaxweynaha JDS, waxayna ka kooban yihiin Jaallayaasha soo socda:

I. GUDDIGA DIFAACA IYO NABADGELYADA

1. S/Guud Maxamed Cali Sámatar — Guddoomiye
2. S/Guuto Axmed Suleyman Cabdalla — Ku-Xigeen

II. GUDDIGA DHAQAALAHA, MAALIYADDA IYO GANACSIGA

1. S/Gaas Cabdalla Maxamed Faadil — Guddoomiye
2. G/Sare Axmed Maxamuud Faarax — Ku-Xigeen
3. G/Sare Faarax Waceys Duule — Xubin
4. G/Sare Muuse Rabiile Good — Xubin

III. GUDDIGA SIYAASADDA

1.	S/Guuto Ismaaciil Cali Abokor	Guddoomiye
2.	G/Sare Maxamed Cumar Jees	Ku-Xigeen
3.	G/Sare Cabdulqaadir X. Maxamed	Xubin

IV. GUDDIGA BULSHADA

1.	S/Gaas Xuseen Kulmiye Afrax	Guddoomiye
2.	S/Guuto Maxamed Cali Shire	Ku-Xigeen
3.	G/Sare Cabdirisaaq Maxamuud Abukar	Xubin
4.	G/Sare Cusmaan Maxamed Jeelle	Xubin
5.	G/Sare Cabdi Warsame Isaaq	Xubin

V. GUDDIGA XISAAB XIL MA LEH

1.	S/Guuto Maxamuud Geelle Yuusuf	Guddoomiye
2.	G/Sare Axmed Xasan Muuse	Ku-Xigeen

QODOBKA 2aad

Jaalle S/Guuto Maxamed Sheekh Cusmaan waxa loo magacaabay Guddoomiyaha Xoghaynta Guddiyada Golaha Sare ee Kacaanka.

QODOBKA 3aad.

Amarkan wuxuu dhaqan gelayaa laga bilaabo 23ka Oktoobar 1980, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

Muqdisho, 23.10.80

Jaalle Maxamed Siyaad Barre
MADAXWEYNAHA JDS

AMARKA Madaxweynaha JDS. L. 5 ee 23 Okt, 1980,

Dhismaha Guddiga Kacaanka ee Gobolada iyo Degmooyinka JDS.

MADAXWEYNAHA JDS.

MARKUU ARKAY: Qodobka 82aad ee Dastuurka,

MARKUU ARKAY: Qodobka 83aad ee Dastuurka,

MARKUU ARKAY: Amarka Madaxweynaha JDS Lr. 1 ee 2 Oktoobar 1980 oo ku saabsan ku soo rogidda dalka Xukun Deg Deg ah,

MARKUU ARKAY: Inay lagama maarmaan tahay in la qaado tallaabada ku habboon yoolka gaaridda iyo xaqiijinta himilada ka dambeysa Xukunka Deg Degga ah ee dalka lagu soo rogay,

MARKUU ARKAY: In loo baahan yahay in Gobolada iyo Degmooyinka Dalka laga dhiso Guddiyo si gaar ah uga mas'uul ah abaabulka iyo dhaqmadinta Dadweynaha Soomaaliyeed Daafacaya Qaranka, waxna ka qabadka dhibaatooyinka ka dhashay Qaxootiga iyo ku soo hagidda himiladii iyo ujeeddadii Kacaanka 21ka Oktoobar 1969kii waddadii laga weecsiyey,

ISAGOO LA TASHADAY: Guddiga Difaaca Qaranka

WUXUU SOO SAARAYAA

AMARKA SOO SOCDA:

QODOBKA 1aad

Waxaa Gobol iyo Degmo kasta laga dhisay Guddi Kacaan ee Gobol iyo mid Degmo.

QODOBKA 2aad

1. Guddiga Kacaanka ee Gobolku wuxuu ka kooban yahay:

Xoghayaha Guddiga Xisbiga ee Gobolka Gud.

Kaaliyaha 1aad ee Xoghayaha Gobolka Xubin

— Taliyaha Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed ee Xarunta Gobolka fadhiya »

— Taliyaha Qaybta Goliiska ee Gobolka »

— Taliyaha NSSka ee Gobolka »

— Taliyaha Ciidanka Asluubta ee Gobolka »

— Taliyaha Ciidanka Guulwadayaasha ee G. »

2. Guddiga Kacaanka ee Degmadu wuxuu ka kooban yahay;

— Xoghayaha Guddiga Xisbiga ee Degmada Gud.

— Kaaliyaha kowaad ee Xoghayaha Degmada Xubin

— Guddoomiyaha Golaha Shacbiga ee Deegaanka »

— Taliyaha Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed ee Xarunta Degmada fadhiya »

— Taliyaha Saldhigga Boliiska ee Degmada »

— Taliyaha NSSka ee Degmada »

— Taliyaha Ciidanka Asluubta ee Degmada »

— Taliyaha Ciidanka Guulwadayaasha ee Degmada »

QODOBKA 3aad

1. Guddi kasta oo kacaan wuxuu yeelan karaa Guddi Hoosaadyo qabanaya xilal gaar ah oo ka mid ah waajibaadka ku tilmaaman Qodobka 6aad ee Amarkan, waxaana magacaabaya Guddiga Kacaanka ee Gobolka ama kan Degmad.

2. Guddi Hoosaadyada waxaa madax u noqonaya xubin ka tirsan Guddiga Kacaanka ee Gobolka ama kan Degmada, wuxuuna ka koobnaanayaa Xubno aqoon u leh arrimaha Guddi Hoosaadku ka xil saaran yahay.

QODOBKA 4aad

Guddiga Kacaanka ee Degmada waxaa Tuulooyin-

food.oo uu madax u yahay Xoghayaha Unugga Xisbiga ee Tuulada.

QODOBKA 5aad

Fadhiyada Guddiyada Kacaanka ee Gobolka ama kan Degmadu waxay ku ansaxayaan marka ay ka soo qayb galaan saddex meelood laba Xubnaha Guddiga go'aannaduna waxay ku ansaxayaan cod hal dheeri ah.

QODOBKA 6aad

Guddiga Kacaanka'Gobolka iyo kan Degmadu waxay fulinayaan waajibaadka soo socda:

1. Inay Dadweynaha u gurmadiyaan Daafaca Qarannka, iyagoo qaadaya tallaabooyinka ku habboon, kana shidaal qaadanaya awaamiirta iyo siyaasadda guud ee Qaranka iyo ujeeddada Xukunka Deg Degga ah.
2. In ay taakuleeyaan, gacanna ka gaystaan daryeelka Qaxootiga Gobolka ama Degmada ku nool, lana xalliyaan mashaakilka jira Hay'adaha Qaranka iyo kuwa Caalamiga ah ee haya maamulka Qaxootiga,
3. In ay u hawl galaan ciribtirka qabyaaladda iyo goboleysiga,
4. In ay u hawl galaan baabi'inta maamul xumada, eexda, qaraabakiilka, xatooyada xoolaha dadweynaha, sinnaan la'aanta iyo caddaalad darrada, fududeysiga iyo fulin la'aanta shuruucda, xeerarka, go'aannada iyo tilmaamaha Hay'adaha Qaranka,
5. In ay u hawl galaan ciribtirka afmiinshaarnimada iyo fidinta wararka beenta ah;
6. In ay mintidnimo, kormeer iyo hubin ugu hawl galaan shaqo kordhinta, tacab kordhinta iyo xannaanada bantida Dadweynaha;

7. In ay u hawl galaan ka dhex abuuridda bulshada niyad gacaltooyo, wax wada qabad iyo is garabsi oo ku habeysan sare u qaadidda dareenka waddaninimo ee Dadweynaha.

QODOBKA 7aad

1. Guddoomiyaha Guddiga Kacaanka ee Gobolka iyo kan Degmadu, iyagoo ka wakiil ah Madaxweynaha JDS, la tashanaya Guddiga intiisa kale, waxaa la siiyey awood buuxda oo ay ku fuliyaan ujeeddada Xukunka Deg Degga ah ee ku xusan Amarka Madaxweynaha JDS lambar 1 ee 21ka Oktoobar 1980ka iyo xilalka ku cad qodobka 6aad ee Amarkan. Gaar ahaan waxay soo saari karaan go'aanno leh ku dhaqan ku meel gaar ah, iyagoo:

   a) xadeynaya dhaqdhaqaaqa iyo kulannada qofka si loo badbaadiyo nabadgelyada iyo xasiloonida guud, ama hoggaanka siyaasadeed ee Dowladda;

   b) amraya in la xiro muddo aan ka badnayn sagaashan (90) maalmood, ama la baaro qof ahaan ama hoy ahaan qof kasta oo lagu tuhmo fal ka mid ah falalka sababeeyey Xukunka Deg Degga ah;

   t) siinaya Hay'adaha rayidka ah iyo kuwa Ciidammada Qalabka Sida awood ka baxsan kuwooda caadiga ah.

2. Fulinta Go'aannada ku cad lambarka hore ee qodobkan waxaa ka xilsaaran Ciidammada Nabadgelyada.

QODOBKA 8aad

Xarigga ku xusan qodobka 7aad, xarafkiisa (b) ee Amarkan, waxaa qofka lala tiigsanayaa haddii fal-

ee 10ka Jannaayo 1970 (SHARCIGA AWOODDA HAYNTA) ama shuruucda kale ee ciqaabta. Xaaladahan dambe ecdeysanaha waxaa la horgeynayaa Maxkamadda Qaadista dembiga uu galay awoodda u leh ama Guddiga Kacaanka ee Gobolka ama kan Degmada iyadoo hadba la tixgelinayo sharciga uu ku xadgudbay.

2. Go'aan ka gaaridda ku xadgudubka sharciga awoodda Haynta (Sharci lambar 1 ee 10ka Jannaayo 1970) waxaa leh Guddiga Kacaanka ee Gobolka ama Degmada, waxaana xalaalaynta go'aannadaas loo soo gudbinayaa Madaxweynaha JDS.

QODOBKA 9aad

1. Haddii falku uusan keeneyn dembi ka weyn, qof kasta oo ku xadgudba go'aannada Guddoomiyaha Guddiga Kacaanka ee Gobolka ama Degmadu soo saaray isagoo cuskanaya Qodobka 9aad, ee amarkan waxaa lagu ciqaabayaa ilaa hal (1) sano oo xanig ah ama ilaa Shs. 10.000/= (toban kun) oo ganaax ah.

2. Qaadista dembiyada ku cad lambarka hore ee qodobkaan waxaa awood u leh Maxkamadda Badbaadada ee Degmada.

QODOBKA 10aad

Guddiga Kacaanka ee Degmadu wuxuu warbixin joogta ah u gudbinayaa Guddiga Kacaanka ee Gobolka isagoo tilmaamaya qorshaha hawlgalka, tayada wax qabadka iyo natiijada had walba la gaaro; nuqul warbixintaas ahna wuxuu siinayaa Madaxweynaha JDS, Hoggaanka Guud ee Abaabulka iyo Kicinta Bulshada ee Golaha Dhexe XHKS iyo Wasaaradda Dowladaha Hoose iyo Horumarinta Reer Miyiga.

Qodobka 11aad

Guddiga Kacaanka ee Golalku wuxuu warbixin ka soo gudbinayaa hawl-gabka Gobolka iyo Degmooyinkiisa ee la xiriira waajibaadka amarkan ku tilmaaman, wuxuuna u soo dirayaa Madaxweynaha JDS, isagoo ogeysiis siinaya Hoggaamada Guud ee Abaabulka iyo Kicinta Bulshada ee Golaha Dhexe XHKS, iyo Wasaaradda D/Hoose iyo Horumarinta Reer Miyiga.

QODOBKA 12aad

1. Guddoomiyayaasha Guddiyada Kacaanka ee Gobollada iyo kan Degmooyinku waxay xiriir toos ah kala yeelanayaan Madaxweynaha JDS arrimaha saameeya fulinta ujeeddooyinka Xukunka Deg Degga ah.

2. Arrimaha kale ee caadiga ah waxay kala xiriirayaan Hay'adaha ku shaqo leh.

QODOBKA 13aad

Amarkan wuxuu dhaqan gelayaa 23ka Oktoobar 1980, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

Muqdisho, 23.10.1980

Jaalle Maxamed Siyaad Barre
Madaxweynaha J.D.S.

QAYBTA KOOWAAD

Xeer SHARCI L. 27 ee 23 Oktoobar 1970, ee kordhin Mushaarka Shaqaalaha Joogtada ah ee Dawladda.

MADAXWEYNAHA JDS.

MARKUU ARKAY : Qodobka 69aad ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY : Sharciga Lambar 5 ee 2 Febraayo 1980 (Sharciga Shaqaalaha Dawladda);

MARKUU ARKAY : Sharciga lambar 36 ee 22 Abriil 1972 iyo Xeerka Madaxweynaha Lambar 74 ee 22 Abriil kuna saabsan Shaqaalaha Wakaaladaha Dawladda ee Madaxa Bannaan;

MARKUU TIXGELIYEY : Dhibaatada xagga dhaqaalaha ka haysata shaqaalaha Dawladda ee joogtada ah, dhibaatooyinkaas oo ka dhashay ascaarta adduunka oo sare u kacday, raadna ku yeelatay nolosha qofka Shaqaalaha;

MARKUU ARKAY : Inay lagama maarmaan tahay in la daryeelo, lana qaado tallaabo lagu dheellitirayo dhaqaalaha shaqaalaha joogtada ah ee Dawladda;

ISAGOO TIXGELINAYA : Baahida degdegga ah, dabeecadda iyo nuglaanta arrintan inay khasbayaan in Dawladdu ay ku isticmaasho awoodda ku tilmaaman Qodobka 69aad ee Dastuurka soona saarto Xeer Sharci;

AMARKA MADAXWEYNAHA JDS lambar 6, taariikh 28. 10. 1980: Isku beddelid Xubnaha Guddiyada Golaha Sare ee Kacaanka.

MADAXWEYNAHA J. D. S.

MARKUU ARKAY : Qodobbada 82 iyo 83 ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY : Amarka Madaxweynaha JDS. lambar 1 ee 21ka Oktoobar 1980, kuna saabsan ku dha waaqidda xaaladda Xukunka deg degga ah;

MARKUU ARKAY : Amarrada Madaxweynaha JDS. lambar 3 iyo lambar 4 oo ku saabsan dhismaha iyo Xubnaha Guddiyada Golaha Sare ee Kacaanka;

MARKUU TIXGELIYEY : aqoonsadayna in ay lagama maarmaan tahay in la isku beddelo xubno ka mid ah Xubnaha Guddiyada Golaha Sare ee Kacaanka;

WUXUU SOO SAARAYAA :

Amarka soo socda :

Qodobka 1aad

1. Jaalle G/Sare Axmed Xasan Muuse oo ka tirsan Guddiga Xisaabi xil ma leh ee Golaha Sare ee Kacaanka waxaa lagu wareejiyey Guddiga Dhaqaalaha, Ganacsiga iyo Maaliyadda ee Golaha Sare ee Kacaanka;

2. Jaalle G/Sare Faarax Waceys Duule oo ka tirsanaa Guddiga Dhaqaalaha GSK waxaa lagu wareejiyey Guddiga Xisaabi xil ma leh ee Golaha Sare ee Kacaanka.

Qodobka 2aad

Amarkani wuxuu dhaqan gelayaa laga bilaabo 28ka Oktoobar 1980, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

Muqdisho, 28.10.1980

Maxamed Siyaad Barre
MADAXWEYNAHA JDS

QODOBKA 2AAD

Kororsiimaha ku tilmaaman Qodobka hore ee xeerkan sharci lagama go'naayo Canshuurta Horumarinta.

QODOBKA 3AAD

Xeerkan sharci wuxuu dhaqan gelaysa 1da Jannaayo 1981, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda, isla markaana waxaa loo gudbinayaa Golaha Sahcibaga sida uu qabo Qodobka 69aad ee Dastuurka.

MAXAMED SIYAAD BARRE

MADAXWEYNAHA J. D. S.

AMARKA MADAXWEYNAHA JDS lambar 6, taariikh 28. 10. 1980: Isku beddelid Xubnaha Guddiyada Golaha Sare ee Kacaanka.

MADAXWEYNAHA J. D. S.

MARKUU ARKAY : Qodobbada 82 iyo 83 ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY : Amarka Madaxweynaha JDS. lambar 1 ee 21ka Oktoobar 1980, kuna saabsan ku dhawaaqidda xaaladda Xukunka deg degga ah;

MARKUU ARKAY : Amarrada Madaxweynaha JDS. lambar 3 iyo lambar 4 oo ku saabsan dhismaha iyo Xubnaha Guddiyada Golaha Sare ee Kacaanka;

MARKUU TIXGELIYEY : aqoonsadayna in ay lagama maarmaan tahay in la isku beddelo xubno ka mid ah Xubnaha Guddiyada Golaha Sare ee Kacaanka;

WUXUU SOO SAARAYAA :

Amarka soo socda :

Qodobka 1aad

1. Jaalle G/Sare Axmed Xasan Muuse oo ka tirsan Guddiga Xisaabi xil ma leh ee Golaha Sare ee Kacaanka waxaa lagu wareejiyey Guddiga Dhaqaalaha, Ganacsiga iyo Maaliyadda ee Golaha Sare ee Kacaanka;

2. Jaalle G/Sare Faarax Waceys Duule oo ka tirsanaa Guddiga Dhaqaalaha GSK waxaa lagu wareejiyey Guddiga Xisaabi xil ma leh ee Golaha Sare ee Kacaanka.

Qodobka 2aad

Amarkani wuxuu dhaqan gelayaa laga bilaabo 28ka Oktoobar 1980, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

Muqdisho, 28.10.1980

Maxamed Siyaad Barre
MADAXWEYNAHA JDS

QAYBTA LABAAD

XEERKA MADAXWEYNAHA J.D.S. lambar 96 ee 26. 10.80

U GACAN BANNAYN XUBNAHA G. S. K. HAWLAHA GUDDIYADA

MADAXWEYNAHA JDS.

MARKUU ARKAY : Qoddobka 82aad iyo 83aad ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY Amarka Madaxweynaha JDS lambar 1 ee 21ka Oktoobar 1980 iyo awaamiirta MJDS lambar 3 iyo 4 ee 23ka Oktoobar 1980;

MARKUU TIXGELIYEY : In ay lagama maarmaan tahay in xubnaha Golaha Sare ee Kacaanka ee haya xilal maamul ay u gacan bannaanadaan hawlaha Guddiyada lagu magacaabay;

WUXUU SOO SAARAY

QODOBKA 1AAD

Laga billaabo 26ka Oktoobar 1980:

— Jaalle S.Gaas Cabdalla Maxamed Faadil
Wasiirka Wasaaradda Caafimaadka

— Jaalle S.Guuto Maxamuud Geelle Yuusuf
Wasiirka W. Gaadiidka Badda iyo Dekedaha

— Jaalle G.Sare Axmed Xasan Muuse
Wasiirka Wasaaradda Beeraha

— Jaalle G.Sare Maxamed Cumar Jees
Wasiirka Wasaaradda Dalxiiska

— Jaalle G.Sare Cabdi Warsame Isaaq
Wasiirka W.Madaxtooyada X. Arrimaha Bulshada

— Jaalle S.Guuto Maxamed Cali Shire
Maamulha Sare ee Wak. Horumarinta Beeraha

— Jaalle G.Sare Faarax Wacays Duule
Maamulaha Sare ee Wak. Muuska Ummadda

Waxay u go'doomayaan hawlaha Guddiyada Golaha

FAAFIN RASMIGA AH

الجريدة الرسمية

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

لجمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 8aad Muqdisho, 1 Nofember 1980 L. 11

FAAFINTA BIL SOO BAXA جريدة شهرية

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J.D.S.

QIIMAHA : waa 5 shilin lnmbar walba **RUKUNKA** : Sanalkii waa Sh. 100 Soomaaliya gudaheeda — djbedana waa Sh. So, 300, Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo Qiimaha qorotaanka F. R, halkii sadar iyo wàxii ka yàr wàà 2 laba Sh. — Rukunka iyo qorjtaanku waxaa la weeydiistaa Laanta Maamulkà Fààfintà Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuurahà ee Wàsàràddà Làcagta.

KOOBNIIN

QAYBTA KOOWAAD

SHARCI

QAYBTA LABAAD

SHARCI L. 28 ee 19 Sebt. 1980, Qaybinta Filimada. Bogga 1096

SHARCI L. 29 ee 1 Okt. 1980, Mideynta Rugta Ganacsiga iyo Guddiga Iibka Qaranka. » 1103

QAYBTA LABAAD

XEER

XEER MADAXWEYNAHA JDS : L. 98 24 ee Sebt. 1980, Mideynta Wakaaladaha Hargaha iyo Saamaha, Warshadaha Hargaha » 1106

XEER MADAXWEYNAHA JDS : L. 99 ee 24 Sebt. 1980, Go'aan lagu gaaray magaalooyinka hoos ku qoran. » 1107

XEER MADAXWEYNAHA JDS : L. 100 » 1108

XEER MADAXWEYNAHA JDS : ee 6 Okt. 1980, Abuuris Xafiis. L. 101 » 1109

XEER MADAXWEYNAHA JDS : ee 1 Nof. 1980, Baabi'in Xafiis. Agaasinka Guud ee Danaha Soomaaliyeed L. 102 » 1110

WASAARADDA MAALIYADDA : ee Sebt. 1980, Taar/da ay ka bilaabmeyso dhaqangalka lacagta Xaashida 100, 20 iyo 10, ee cusub. L. 103 » 1112

XEER WASAARADDA H. G. : L. 104 ee 4 Maarso 1980, Cad dhul Dawladeed oo ku yaal Degmada Shibis oo loo oggolaaday dhismahiisa J.le Maxamuud Yuusuf Aadan (Muuro). » 1113

XEER WASAARADDA H. G. : L. 105 ee 10 Maarso 1980, Siismo dhul Dawladeed, la siiyey Mashruuca Gosha iyo Gendiga ee Was. X. Dhirta iyo Daaqa » 1116

XEER WASAARADDA H. G. : L. 106 ee 24 Juun 1980, Siismo dhul Dawladeed, la siiyey Taliska Ciidanka Asluubta Soomaaliyeed kuna yaal Muqdisho Degmada Kaaraan kuna fadhiya mq. 520.000. » 1118

XEER WASAARADDA H. G. : L. 107 ee 24 Juun 1980, Siismo dhul Dawladeed, la siiyey Xaruunta Taliska Ciidanka Asluubta Soomaaliyeed kuna yaal Muqdisho, Degmada Madiina kuna fadhiya mq. 1566.062,50 » 1120

XEER WASAARADDA H. G. : L. 108 ee 24 Juun 1980, Siismo dhul Dawladeed, la siiyey Isbitaalka Ciidanka Asluubta Soomaaliyeed, kuna yaal Muqdisho Degmada Madiina, kuna fadhiya mq. 115.593,50. » 1122

QAYBTA KOWAAD

SHARCI

SHARCI L. 28 ee 19 Sebtembar 1980, Qaybinta Filimada.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO ARKAY: Dastuurka Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya;

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qodobka 1aad

Filimada

1. Wakaaladda Filimada Soomaaliyeed waxay filimada u qaybinaysaa Shineemooyinka dalka JDS iyadoo hunaysa:

a) Daryeelka, Faafimaadka iyo Raaxada Dadweynaha gala Shineemooyinka;

b) Ilaalinta dhaqaalaha Wakaaladda iyo Xannaanada Filimada.

2. Hirgelinta ujeeddooyinka ku xusan qodobkan waxaa iska kaashanaaya Wakaaladda iyo dhammaan Hay'adaha Dawladda ee u qaybsan ururinta dakhliga Dawladda.

dakhliga u fududeeyo gudashada waajibaadkooda.

4. Kormeeruhu waa inuu ka sitaa Hay'addiisa idan qoraal ah.

Qodobka 2aad

Qaybinta Dakhliga Shineemada

1. Dakhliga guud ee Shineemada waxaa loo qaybinayaa sida soo socota:

— Canshuurta Dawladda Dhexe	25%
— Canshuurta Dawladda Hoose	5%
— Ijaarka Filimada iyo Khidmadda Wakaaladda	40%
— Qofka Shineemada leh	30%

2. Wasaaradda Maaliyaddu waxay canshuurta ka soo gashaa Filimada gebi ahaan ku wareejinaysaa Wakaaladda Filimada Soomaaliyeed si ay horumar ugu sameyso.

Qodobka 3aad

Ilaalinta Dakhliga

1. Si loo ilaaliyo dakhliga, wax aawaajib ku ah Shineemada inay sameyso tikidhyo leh lambrro taxan iyo midabbo kala duwan lana xiriira inta fadhi ee Shineemadu ay leedahay.

2. Tikidhyada lagu galo Shineemada waa inay hore looga soo dalooliyo Xafiiska Dawladda ee u xilsaaran arrintan.

3. Maamulka Shineemada waxaa waajib ku ah

4. Inta aan lacag qabashada la bilaabin, maamulka Shineemadu waa inuu ku qoro boldarooga iyo diiwaanka boldarooga lambarrada tikidhyadu ka bilaabmaan; marka iibinta tikidhyadu joogsatana waa inuu ku qoraa lambarrada ugu dambeeyey ee iibsamay.

5. Diiwaanka iyo boldarooga iyo warqadaha la xiriira lacag bixinta waa in Shineemadu hayso laba sano, laga bilaabo waqtigii isticmaalkooda joogsaday.

Qodobka 4aad

Tikidhyada Shineemada

1. Qofka Shineemada gelayaa waa inuu wato tikidh, ilaaliyaha irridda Shineemaduna waa inuu tikidhkaas labo gobol u kala jeexaa, gabal waa in la siiyo qofka daawadaha ah, gabalka kalena waa in lagu rido sanduuq quful leh.

2. Sanduuqa waa in la madhiyo mar kasta oo la bilaabayo iibinta tikhidhyada. Furaha qufulka waa inuu haysto maamulka Shineemadu, haddiise ay u baahdaan, Hay'adaha kormeerka dakhliga way haysan karaan furaha sanduuqa sabab baaris darteed.

Qodobka 5aad

Waajibka Daawadahá

1. Daawadaha waxaa waajib ku ah inuu haysto jeexa tikidhka uu ku galay Shineemada ilaa uu ka baxayo Shineemada.

2. Qofkii kormeerku ka waayo jeexa tikidhka wuxuu bixinayaa mar labaad qiimaha tikidhka.

3. Waajibaadka ku xusan qaybaha hore ee qodob-

Qodobka 6aad

K o r m e e r

1. Si loo ilaaliyo dakhliga Shineemooyinka, Wakaaladda waxay awood buuxda u leedahay inay baaris iyo kormeerba ku sameyso maamulka Shineemada.

2. Muddada baarista iyo kormeerka waxay ka qayb qaadan kartaa Wakaaladdu diiwaangelinta boldarooga lacag-qabashada iyo jeexidda tikidhyada.

Qodobka 7aad

X a d g u d u b

1. Iyadoo ay sidoodii u taagnaanayaan qodobada 20 iyo 21 ee Sharciga L. 23, soona baxay 21 Disember 1965, Shineemadii caaddeysata laguna caddeeyo maamul-xumo lagu dhaawacayo daryeelka dadweynaha, dhaqaalaha Wakaaladda iyo xannaanada Filimada, waxaa la ganaaxi karaa min Shs. 500 ilaa Shs. 10.000; gnaaxa ka sokow waxaa laga joojin karaa siinta Filinka muddo aan ka badneyn hal bil.

2. Xad-gudubyada keeni kara ganaaxa waxaa weeye:

a) haddii Shineemadu gacan buuxda siin weydo kormeerka ku xusan qod. 1aad ee Sharcigan:

b) haddii Shineemadu waqti habboon ku keeni weydo lacagta Wakaaladda, boldarooga, Filimada iyadoo aysan jirin sabab macquul ah;

t) haddii Shineemadu u hoggaansami weydo awaamiirta idaariga ah ee la xiriirta daryeelka (maqalka wacan, saxada, raaxada) dadweynaha daawada filimada iyo ilaalinta dakhliga;

x) haddii la xaqiijiyo in tirada tikidhyada la gaday ka yar yihiin tirada dadka ku jira Shineemada;

kh) haddii kormeerku qabto tikidh aan ninka iridda joogaa ogaal u jeexin ama dad aan tikidhyo iibsan ay Shineemada galeen sharci la'aan;

3. Ganaaxa ku xusan faqradda 1aad ee qodobkan, waxaa cabasho looga qaadan karaa Wasiirka Wasaaradda Warfaafinta iyo Hannuuninta Dadweynaha.

4. Xad-gudubka ku xusan qodobkan waxaa go'aan ka gaara guddi oo uu magacaabo Wasiirka Wasaaradda Warfaafinta iyo Hannuuninta Dadweynaha kana kooban Wakaaladda Filimada Soomaaliyeed, Dawladda Hoose iyo Xafiiska Canshuuraha.

Qodobka 8aad

Daryeelka

1. Wakaaladdu waxay awood u leedahay inay baaris farsamo ku sameyso qalabka filin-tusidda si ay u hubsato raaxada dadweynaha iyo badbaadada filimada.

2. Haddii ay caddaato in qalabka filin-tusidda ee Shineemadu uusan si wacan u shaqeynayn, Wakaaladdu waxay amri kartaa maamulka Shineemadu inuu qalabka xumaaday si deg-deg ah usameeyo ama uu u beddelo.

Qodobka 9aad

Lumidda iyo dhaawaca Filimada

1. Haddii ay caddaato in Shineemo lumiso ama dhaawacdo filinkii ama tusmaddii, waxaa xaq loogu leeyahay inay bixiso qaandhow;

2. Qiimaha qaandhowga waxaa lagu caddeyna-

yaa heshiis dhexmaraaya Wakaaladda iyo Shirkadda Filinka iska leh.

3. Haddii ay dhacdo in Shineemo lumiso ama jeexjeexdo warqadaha xayaysiiska filinka, waxay Wakaaladdu xaq ugu leedahay iny qaandhow ka qaadato Shineemadaas;

4. Qiimaha qaandhowga waxaa lagu caddeynayaa heshiis dhexmaraaya Wakaaladda iyo maamulka Shineemada.

Qodobka 10aad

Kireynta Shineemada

Shineemadii xiranta kaddib markii uu kireystuhu ama mulkiiluhu wadi waayo ama uu mulkiiluhu doonaayo inuu ka beddelo ujeeddadii awel loogu talogalay maaweelinta dadaweynaha, Wakaaladdu waxay kireysan kartaa, si ay u daryeesho danta dadweynaha, haddii Wakaaladda iyo Madaxda Degmadu u arkaan in bulshadu u baahan tahay maaweelada Shineemadaas.

Qodobka 11aad

Qiimaha tikidhka

1. Qiimaha gelidda Shineemooyinka waxaa lagu xaddidayaa dekreetada Wasiirka Wasaaradda Warfaafinta iyo Hannuuninta Dadweynha, isagoo la tashanaaya Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda.

2. Qiimaha tikidhyada Filinka waa in la tixgeliyaa qiimo u gaar ah carruurta.

3. Haddii loo baahdo in Wakaaladdu keento Filin heer caalami ah oo qiime badan lagu soo ijaaray, Wakaaladdu waxay u goyn kartaa sicir gaar ah.

Qodobka 12aad

Guddiga Baarista

1. Shineemada lacag la'aan waxaa ku geli kara xubno loo xulay oo ka tirsan Guddiga Baarista Filimada (Censura);

2. Waxaa kaloo geli kara Kormeerayaasha ku xusan Qod. 1aad ee sharcigan iyo saraakiisha lacag qabashada iyo xubnaha Booliiska canshuuraha ama cidda ka wakiil ah, waxayna ku galayaan sida iyo habka ku cad sharciga lambar 23 ee 21kii Disember 1965.

Qodobka 13aad

B u r i n

Waxaa la buriyey sharciga lambar 23 ee 21kii Disember 1965 qodobdiisa ka soo horjeeda shacigan, iyo sharci kasta oo lid ku ah ama aan la socon karin.

Sharcigan waxaa lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda, wuxuuna dhaqan galayaa marka uu Madaxweynuhu saxeexo.

Muqdisho, 19/9/1980.

Madaxweynaha J.D.S.

S/Gaas Maxamed Siyaad Barre

XEER SHARCI Lambar 29 ee 1 Oktoobar 1980.

Mideynta Rugta Ganacsiga iyo Guddiga Iibka Qaranka.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

MARKUU ARKAY: Qod. 69aad ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Sharciga lambar 19 ee 10ka Abriile 1978, kuna saabsan dhismaha Guddiga Iibka Qaranka iyo beddelaaddii ka dambeysay;

MARKUU ARKAY: Sharciga lambar 38 ee 30ka Luulyo 1970 oo ku saabsan dhismaha Rugta Ganacsiga;

MARKUU TIXGELIYEY: Xawliga ay ku socdaan hawlaha Qaranku, lana dareemay in ay lagama maarmaan tahay in la dejiyo hab fududeynaya dalabka badeecadda iyo qalabka Hay'adaha Qaranku u baahan yihiin;

MARKUU ARKAY: In fududeyntaasu ay ku iman karto mideynta hawlaha Guddiga Iibka Qaranka iyo Rugta Ganacsiga oo ka wada mas'uul ahaa suuq raadinta, hubinta sicirka, kormeerka qalabka iyo badeecadaha Hay'adaha Qaranku ay iibsadaan;

MARKUU TIXGELIYEY: Baahida culus ee deggegga ah ee loo qabo in lagu dhaqaaqo dib u habeyntaas, lana soo saaro Xeer-sharci si hawlaha Maamulka Guud ee Dalka ayan u hakan;

MARKUU DHEGEYSTAY: Soojeedinta Wasiirka Ganacsiga iyo Golaha Wasiirrada;

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka-sharci ee soo socda:

Qodobka 1aad

Waxaa la mideeyey Rugta Ganacsiga iyo Guddiga

Iibka Qaranka oo lagu dhisay Sharci lambar 19 ee 10ka Abriile 1978, waxayna qaadanayaan magaca Wakaaladda Rugta Ganacsiga.

Qodobka 2aad

Wakaaladda Rugta Ganacsigu waxay qandaraasyada iyo Iibka Qaranka ku yeelaneysaa awoodihii Guddiga Iibka Qaranka ee ku xusnaa Sharciga lambar 19 ee 10ka Abriile 1978 iyo Sharciga lambar 2 ee 14ka Jennaayo 1979, waxayna ku maamuleysaa hababka Sharciyadaas ku tilmaaman.

Qodobka 3aad

Wakaaladda Rugta Ganacsigu waxay la wareegeysaa xilalkii iyo ballanqaadyadii Guddiga Iibka Qaranku uu galay, waxayna yeelaneysa xuquuqdii Guddiga hore ugu bislaaday iyo kuwa dib ka bislaanaya.

Qodobka 4aad

Wasiirka Wasaaradda Ganacsigu wuxuu Wakaaladda Rugta Ganacsiga ku yeelanayaa awood hoggaamin, toosin, kormeer iyo ilaalin guud oo buuxda.

Qodobka 5aad

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraraadiga Soomaaliya, isagoo dhegeystay soojeedinta Wasiirka Wasaaradda Ganacsiga iyo la tashiga Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda, wuxuu soo saarayaa Xeer nidaaminaya qandaraasyada iyo iibka Qaranka.

Qodobka 7aad

Xeerkan-sharci wuxuu dhaqan gelayaa laga billaabo 1da Oktoobar 1980, waxaa lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda, isla markaana waxaa loo gudbinayaa Golaha Shacbiga sida uu qabo Qod. 69aad ee Dastuurka.

Muqdisho, 1 Oktoobar 1980.

MADAXWEYNAHA JDS

S/Gaas Maxamed Siyaad Barre

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 98 ee 24 Sebt. 1980.

Mideeynta Wakaaladaha Hargaha iyo Saamaha, Warshadaha Hargaha.

MADAWXEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY: Qod. 82aad xubintiisa 14aad ee Dastuurka JDS;

ISAGOO ARKAY: Go'aankii Golaha Wasiirrada ee 13.9.80 kuna saabsanaa Mideynta Wakaaladda Hargaha iyo Saamaha, Warshadda Hargaha ee Burco, Warshadda Hargaha ee Hargeysa, Warshadda Hargaha iyo Kabaha ee Kismaayo iyo Warshadda Hargaha iyo Kabaha ee Km. 7 ee Muqdisho.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

Qodobka 1aad

Waxaa la Mideeyey Wakaaladda Hargaha iyo Saamaha, Warshadda Hargaha ee Burco, Warshadda Hargaha ee Hargeysa, Warshadda Hargaha iyo Kabaha ee Kismaayo iyo Warshadda Hargaha iyo Kabaha Km. 7 ee Muqdisho, isla markaasna ay noqon doonaan Hay'ad hoos timaadda Wasaaradda Warshadaha.

Qodobka 2aad

Xeerkani wuxuu dhaqan geli doonaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 24 Setembre 1980.

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 99 ee 24 Sebt. 1980.

Waxaan go'aan lagu gaaray in magaalooyinka hoos ku qoran lagu wareejiyo W.X.K.U.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY: Qod. 82aad xubintiisa 14aad ee Dastuurka JDS;

ISAGOO ARKAY: Go'aankii Golaha Wasiirada ee 15.9.80 ahaana in korontada magaalooyinka Hargeysa, Kismaayo, Burco, Baydhabo, Berbera, iyo Merka, lagu wareejiyo W. Xoogga Korontada Ummadda.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

Qodobka 1aad

Waxaa go'aan lagu gaaray in magaalooyinka Hargeysa, Kismaayo, Burco, Baydhabo, Berbera iyo Marka, hadda iyo wixii ka dambeeya lagu wareejiyo Wakaaladda Xoogga Korontd Ummdda.

Qodobka 2aad

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa marka uu soo saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 24 Sebt. 1980.

MADAXWEYNAHA JDS

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 100 ee 26 Luul. 1980 Dallacaad.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY: Dastuurka JDS Qod. 82aad;

ISAGOO ARKAY: Sharciga lambar 2 ee 23.12.72 oo ku saabsan dhismaha Ciidanka Boliiska Soomaaliyeed;

ISAGOO TIXGELIYEY: Talada uu soo jeediyey Taliyaha Ciidanka Boliiska Soomaaliyeed ee ku qornayd xaashida lambar XOG/A/8/1 ee 26.7.1980;

ISAGOO TIXGELIYEY: Talada Wasiirka Gaashaandhigga ee ku qornayd xaashida lamb. WWG/Q26/1371 80 ee 11.7.1980.

WUXUU XEERAY

Qodobka 1aad

Sargaalka iyo Kormeeraha hoos ku qoran oo ka tirsan Ciidanka Boliiska Soomaaliyeed waxa- loo dal lacsiiyey derejada ninwalba magaciisa ku hor qoran laga bilaabo taariikhda ninkasta ku hor qoran:

1) L/Xiddigle Gaanni Maxamed X.Cabdi Dhamme 1.7.80.

2) K/S.5255 Xasan Sh. Cabdi Cumar Xi'le 16.7.80.

Qodobka 2aad

Xaarkan degdeg buu u dhaqan gelayaa, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda kaddib karka uu saxeexo Madaxweynaha JDS.

Muqdisho, 26.7.1980.

MADAXWEYNAHA JDS

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 101 ee 6 Okt. 1980 Abuuris Xafiis.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY: Qodobka 82aad xubintiisa 14 aad ee Dastuurka JDS.

ISAGOO ARKAY: Xeerka Lambarkiisu yahay 47 ee 15.7.79, kuna soobsan habka aqoonsiga Qoxootinimada.

ISAGOO ARKAY: Go'aankii Golaha Wasiirrada ee 18.9.80 kuna saabsan Abuuris Xafiis hoos imaanaya Guddiga sare ee Qaxootiga Qanarka.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

Qodobka 1aad

Waxaa la abuuray Xafiis hoos imaanaya Guddiga-sare ee Qaxootiga Qaranka. Xafiiskaas waxaa hawshiisu noqon doontaa abaabulka ururinta tirakoobka iyo iskuduwidda qoraalka arrimaha Qaxootiga Soomaaliyeed;

Waxaa kaloo Xafiisku qaban doonaa wixii hawl ah oo la xiriira arrimaha Qaxootiga Qaranka oo Guddiga sare u xilsaaro.

Qodobka 2aad

Xxrkani wuxuu dhaqan geli doonaa marka uu soo saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 6 Okt. 1980.

MADAXWEYNAHA JDS

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 102 ee 1 Nof. 1980. Baabi'in Xaf. Agaasinka Guud ee Danaha Soomaaliyeed:

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY: Qod. 82aad xubintiisa 14aad ee Dastuurka JDS.

ISAGOO ARKAY: Xeerarka lambarradoodu kala yihiin 14.6.1964 iyo 237 ee 31.8.64 kuna saabsan Xafiiska Danaha Soomaaliyeed.

ISAGOO ARKAY: Go'aankii Golaha Wasiirrada ee ku taariikhaysnaa 18.9.1980.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

Qodobka 1aad

1. Waxaa la baabi'iyey Xafiiskii Agaasinka Guud ee Danaha Soomaaliyeed.

Qodobka 2aad

Shaqaalaha ka tirsan Xafiiskaan la baabi'iyey waa inay Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshadu u kala bedesho Hay'adaha u baahan.

Qodobka 3aad

Waa in wax allaale iyo wixii qoraallo ah (Documenty) ee Xafiiska yaalla lagu wareejiyo Wasaarrada Arrimaha Dibedda, halkaas oo laga abuuri doono waax qaabilsan Arrimaha Dalalka Soomaaliyeed ee la gu-

Qodobka 4aad

Xeerkani wuxuu dhaqan geli doonaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 1 Nof. 1980.

MADAXWEYNAHA JDS
S/Gaas Maxamed Siyaad Barre

XEER W. MAALIYADDA L. 103 ee 30 Sebt. 1980. Taariikhda ay ka billaabmeyso dhaqangalka Lacagta Xaashida 100, 20, iyo 10 ee cusub.

WASIIRKA W. MAALIYADDA

MARKUU ARKAY: Qodobka 4 ee Xeerka 6da Maarso 1961 oo loo bedelay Sharciga 23ka Maarso 1961 Lr. 13 kuna saabsan nidaamka Lacagta Soomaaliyeed;

MARKUU ARKAY: Qodobka 4 ee Sharciga 5ta Juunyo 1962, Lr.2 kuna saabsan nidaamka samaynta soosaaridda iyo wareeg-gelinta xaashida iyo tan cadadiga ee Shilin Soomaaliga ah;

MARKUU ARKAY: Xeerka Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya Lr. 25 ee 5 Abriile 1980ka;

ISAGOO TIXGELIYEY: In lacagta kaydka ee 100, 20 iyo 10 ay aad u hoosayso;

ISAGOO GARTAY: Baahida loo qabo in la gooyo taariikhda ya dhaqan galayso lacagtaasi;

Ayada uu soo jeediyey Bankiga Dhexe ee Soomaaliyeed.

WUXUU SOO SAARAYAA

Qodobka 1aad

Lacagta xaashida cusub ee 100, 20 iyo 10 Shilin Soomaali oo tilmaamaheeda iyo summadaheeda Farsamo lagu carrifay Xeerka Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya Lr. 52 ee 5 Abriile 1980, waxay ka dhaqan gelaysaa kana soconaysaa dalka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga ee Soomaaliya oo dhan laga bilaabo 10.10.1980.

Xeerkani wuxuu Bankiga Dhexe ee Soomaaliya u oggolaanayaa inuu lacagta uu wareeg geliyo laga

XEER W. HAWLAHA GUUD L. 104 ee 4 Maarso 1980. Cad dhul Dawladeed oo ku yaal Degmada Shibis, oo loo oggolaaday dhismihiisa Jaalle Maxamuud Yuusuf Aaden (Muuro):

WASIIRKA WASAARADDA H. GUUD

Waaxda Sahanka iyo Degaanka Magaaleynta

ISAGOO ARKAY: Dastuurka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya;

ISAGOO ARKAY: Sharciyada lambarradoodu yihiin 17,18,19 ee 1da Luulyo 1976, kuna saabsanaayeen Xukunka Dalka oo la wareegay Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed;

ISAGOO ARKAY: Sharciga lambarkiisu yahay 41 soona baxay 13kii Settembre 1973 oo ku saabsan oggolaanshaha dhulka dhismaha ;

ISAGOO ARKAY: Xeer lamb. 115 soona baxday 13kii Sebtember 1973 oo ku saabsan oggolaanshaha dhulka dhismaha;

ISAGOO ARKAY: Arjigii codsiga ahaa uu keensaday Maxamuud Yuusuf Aaden (Muuro) taariikhdu markay ahayd 5 Oktoobar 1957 kuna weydiistay dhismo, cad dhul Dawladeed oo ku yaal Muqdisho — Degmada Shibis — jidka Benaadir;

ISAGOO AQOONSAN: Caddeynta dhulka, kuna saabsan cad dhul Dawladeed ah ee uu weydiistay Jaallahaas ogeysiis ahaana loogu Faafiyey Dawladda Hoose ee Xamar, laguna qoray Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda, iyadoo aan cidna hor istaagin;

aqoonsadeen Guddiga Dhismaha oo Dawladda Hoose ee Muqdisho — fadhigoodi 227aad taariikhdeeduna ahayd 22 Sebtember 1958;

ISAGOO ARKAY: Naqshadda lamb. 8126 taas oo beddeshay middii hore oo lambarkeedu ahaa 10810 laguna aqoonsaday fadhigii 271aad ee Guddiga dhismaha ee Dawladda Hoose ee Muqdisho — taariikhdeeduna markay ahayd 10 Juunyo 1961, kuna saabsan dhismo guri;

ISAGOO ARKAY: Bolleettada lamb. yahay 299 ee 24 Juunyo 1958, kuna soo baxday Xafiiska Canshuurta Dadban, taas oo caddeyneysa in Maxamuud Yusuuf Aaden (Muuro) uu bixiyey lacag dhan Sh. So. 500, kuna saabsan qiimaha dhulka oo dhismaha loo siiyey;

ISAGOO AQOONSAN: Dhulka la weydiistay oo ku fadhiya mq. 1.000, tilmaan cadna laga siiyey Maxamuud Yuusuf Aaden (Muuro) sida ku cad xaashida ay qortay Waaxda Farsamada Dhulka taariikhdeeduna ahayd 9.7.1958;

ISAGOO ARKAY: Xaqiijintii Farsamada Sah. Axmed Khaliif Xanaf, kana tirsan Waaxda Qorshaha iyo tabaabarrada ee W.H.G. taariikhdeeduna ahayd 20.1.1980 taas oo caddeyneysa in naqshadda dhismaha ee ay oggolaadeen Dawladda Hoose ee Xamar lamb. yahay 8126 taariikhdeeduna ahayd 10 Juunyo 1961, laguna xaqiijiyey sida ay naqshadda Guriga waafaqsan tahay — kuna fadhiya mq. 1.000;

ISAGOÓ ARKAY: Oggolaanshaha (Nulla Osta) degsiimada guriga oo ku yaal Degmada Shibis laguna siiyey xaashida lamb. 13506 taariikhdeeduna ahayd 20 Dic. 1962, oo ka soo baxday Dawladda Hoose ee Xamar (Xafiiska Farsamada dhulka);

ka Dawladda (Concessione e conseguente libera disponibilità) oo ay ujeeddadiisu ahayd dhis, cad dhul Dawladeed lagama maarmaan tahay in xuquuqda Sharciga ahaa loo aqoonsado Jaallaha magaciisa oo ku qoran:

WUXUU XEERAYAA

Waxaa cad dhul Dawladeed la siiyey, gacantana loo geliyey, loona aqoonsaday Maxamuud Yuusuf Aaden (Muuro), (Decreto di concessione e conseguente libera disponibilità) dhulkaasi oo ku fadhiya mq. 1.000 kuna yaal Muqdisho — Degmada Shibis.

Muqdisho, 4 Maarso 1980.

Wasiirka W. Hawlaha Guud

S/Guuto Maxamuud Nuur Galaal

Waan Aragnay oo Diiwaangelinay
Diiwanka lamb. 1 bogga lamb. 6
Muqdisho, 12 Maarso 1980.
Hantidhawraha Guud KMG
Yuusuf Cali Nuur

XEER W. HAWLAHA GUUD, L. 105 ee 10 Maarso 1980. Siismo dhul Dawladeed, la siiyey Mashruuca Gosha iyo Gendiga ee Wasaaradda Xoolaha Dhirta iyo Daaqa.

WASIIRKA WASAARADDA H. GUUD

Waaxda Sahanka iyo Degaanka Magaaleynta

WASIIRKA

ISAGOO ARKAY: Dastuurka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya;

ISAGOO ARKAY: Sharciyada lamb. yihiin 17, 18, 19 ee 1da Luuliyo 1976, kuna saabsanayeen Xukunka Dalka oo la wareegay Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed;

ISAGOO ARKAY: Sharciga lamb. 41 soona baxday 13kii Sebtember 1973 oo ku saabsan oggolaanshaha dhulka dhismaha;

ISAGOO ARKAY: Xeer lamb. 6 soona baxday 9 Jennaayo 1967 oo la xiriira qiimaha dhul bixinta;

ISAGOO ARKAY: Warqadda lamb. yahay WXD/9/24/617/80 taariikhdeeduna ahayd 9.2.1980 ee ay soo qortay Wasaaradda Xoolaha, Dhirta iyo Daaqa oo ay ku weydiisaneyso in la siiyo dhul laga dhiso Xarun weyn ee Mashruuca Gosha iyo Gendiga;

ISAGOO ARKAY: Warqadda Hubsimada dhulka soo sameeyeen Sah. Abuukar Maxamed Sheekh iyo Xaaji Maxamed Maye ka tirsan Waaxda Sahanka iyo Deg. Magaaleynta ee Wasaaradda Hawlaha Guud — taariikhdeeduna ahayd 19.2.1980;

WUXUU XEERAYAA

Waxaa la caddeynayaa in la siiyey Wasaaradda Xoolaha, Dhirta iyo Daaqa — Mashruuca Gosha iyo Gendiga — dhul Dawladeed ee cabbirkiisu yahay 600 × 900 kuna fadhiya mg. 540,000 kuna yaal Mus-

Soohdimihiisuna yihiin sidan hoos ku qoran:

WAQOOYI waxaa ka xiga: waddada Afgooye.

KOONFUR waxaa ka xiga: dhul Dawladeed.

GALBEED waxaa ka xiga: waddo.

BARI waxaa ka xiga: Nadiga Sbortiga ee Gaadiidka.

Muqdisho, 10 Maarso 1980.

Wasiirka Wasaaradda H. Guud

S/Guuto Maxamuud Nuur Galaal

Waan aragney ee Diiwaangelinnay

Diiwaanka lamb. 1 bogga lamb. 8

Muqdisho, 19 Maarso 1980

Hantidhawrka Guud KHG

Yuusuf Cali Nuur

XEER W. HAWLAHA GUUD, L. 106 ee 24 Juunyo 1980. Siismo dhul Dawladeed, la siiyey Taliska Ciidanka Asluubta Soomaaliyeed — kuna yaal Muqdisho Degmada Kaaraan — kuna fadhiya mq. 520.000.

WASIIRKA WASAARADDA H. GUUD

Waaxda Sahanka iyo Degaanka Magaaleynta

WASIIRKA

ISAGOO ARKAY: Dastuurka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya;

ISAGOO ARKAY: Sharciyada lamb. yihiin 17, 18, 19 ee 1da Luuliyo 1976, kuna saabsanayeen Xukunka Dalka oo la wareegay Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed;

ISAGOO ARKAY: Xeerka Sharciga dhulka lamb. 41 soona baxay 13kii Sebtember 1973;

ISAGOO ARKAY: Xeer lamb. 6 soona baxday 9 Jennaayo 1967 oo la xiriira qiimaha dhul bixinta;

ISAGOO ARKAY: Warqadda lamb. yahay AST/355/HDH/5/18/80 taariikhdeeuna ahayd 17.4.1980 ee ay soo qortay Taliska Ciidanka Asluubta Soomaaliyeed — Hoggaanka Dhismaha, oo ay weydiisaneyso in la siiyo dhul laga dhiso Xabsi Dhexe;

ISAGOO ARKAY: Warqadda Hubsimada dhulka soo sameeyeen Jeom. Abuukar Maxamed Sheekh iyo Maxamed Maye Xaaji kana tirsan Waaxda Sahanka iyo Degaanka Mag. ee W.H.G. taariikhdeeduna ahayd 20 Abriil 1980;

WUXUU XEERAYAA

Waxaa la caddeynayaa in la siiyey Taliska Ciidanka Asluubta Soomaaliyeed, Hoggaanka Dhismaha, dhul Dawladeed ee cabbirkiisuna yahay mt. 1300 × 400. wu-

ha, dhul Dawladeed ee cabbirkiisu yahay mt. 500; 325; 300; 482; 5 wuxuuna la mid yahay mq. 156.062,50 kuna yaal Muqdisho — Degmada Madiina.

Soohdimihiisuna yihiin sida hoos ku qoran:

WAQOOYI waxaa ka xiga: Waddo.

KOONFUR waxaa ka xiga: Sheybaarka.

GALBEED waxaa ka xiga: Waddo.

BARI waxaa ka xiga: Waddada Afgooye.

Muqdisho, 24 Juunyo 1980.

Wasiirka Wasaaradda H. Guud

S/Guuto Maxamuud Nuur Galaal

Waan Aragnay ee Diiwaangelinnay

Diiwaanka lamb. 1, Bogga lamb. 16.

Muqdisho, 7 Luuliyo 1980.

Hantidhawrka Guud KHG

Yuusuf Cali Nuur.

XEER W. HAWLAHA GUUD, L. 108 ee 24 Juunyo 1980. Siismo dhul Dawladeed, la siiyey Isbitaalka Ciidanka Asluubta Soomaaliyeed — kuna yaal Muqdisho, Degmada Madiina — kuna fadhiya mq. 115.593,50.

WASIIRKA WASAARADDA H. GUUD

Waaxda Sahanka iyo Degaanka Magaaleynta

WASIIRKA

ISAGOO ARKAY: Dastuurka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya;

ISAGOO ARKAY: Sharciyada lamb. yihiin 17, 18, 19 ee 1da Luuliyo 1976, kuna saabsanayeen Xukunka Dalka oo la wareegay Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed;

ISAGOO ARKAY: Xeerka Sharciga dhulka lamb. 41 soona baxay 13kii Sebtember 1973;

ISAGOO ARKAY: Xeer lamb. 6 soona baxay 9 Jennaayo 1967 oo la xiriira qiimaha dhul bixinta;

ISAGOO ARKAY: Warqadda lamb. yahay AST/203/HDH/2/3/80 taariikhdeeduna ahayd 24.5.1980 ee ay soo qortay Taliska Ciidanka Asluubta Soomaaliyeed — Hoggaanka Dhismaha, oo ay ku weydiisaneyso in la siiyo dhul laga dhiso Isbitaalka Ciidanka;

ISAGOO ARKAY: Warqadda Hubsimada dhulka soo sameeyeen Jeom. Abuukar Maxamed Sheekh iyo Maxamed Maye Xaaji kana tirsan Waaxda Sahanka iyo Degaanka Magaleynta ee W.H.G. taariikhdeeduna ahayd 24.5.1980;

WUXUU XEERAYAA

FAAFIN RASMI AH

الجريدة الرسمية

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

جمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 8aad Muqdisho, 5 Noofeenbar 1980 L. 1 R. 11

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J. D. S.

FAAHFAAHINTA BIL SOO BAXA

جريدة شهرية

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — RUKUNKA: Sannadii waa Sh. 100 Somaaliya gudaheeda — dibaddeedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilaabmaa 1 Jenayo Qiimaha qoritaanku F.R. halkii saddex iyo waxii ka yar waa 2 Jaba Sh. — Rukunka iyo qoritaanka waxaa la weydiistaa laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda lacagta

KOOBNIIN

QAYBTA KOOWAAD

W.M.

QAYBTA LABAAD

X E E R

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. Lr. 97 ee 18 Oktoo. 1980 Daflacaad.

QAYBTA SADDEXAAD

TALOOYIN ISGAARSIIN OGEY. IYO WIXII LA MID AH

WASAARADDA H. GUUD, 2. 10. 1980, Naado Dhul Jaalle Aadan Xaaji Axmed L.646

WASAARADDA H. GUUD, 2. 10. 1980, Naado Dhul Jaalle Faarax Rooble Maalin L. 647

WASAARADDA H. GUUD, 2. 10. 1980, Naado Dhul Jaalle Cumar Caamir Nidrik L. 648

Madbacadda Qaranka

WASAARADDA H. GUUD, 2. 10. 1980, Naado Dhul Jaalle Maxamed Cabdulaahi Saalax L. 649

WASAARADDA H. GUUD, 2. 10. 1980, Naado Dhul Jaalle Maasiti Cabduraxmaan Sheekhunaa; L. 650

WASAARADDA H. GUUD, 2. 10. 1980, Naado Dhul Jaalle Jeylaani Nuur Sheekh Maxamed L. 651

WASAARADDA H. GUUD, 2. 10. 1980, Naado Dhul Jaalle Maxamuud Xaaji Maxamuud L. 652

WASAARADDA H. GUUD, 2. 10. 1980, Naado Dhul Jaalle Suufi Xasan Muuddey L. 653

WASAARADDA H. GUUD, 2. 10. 1980, Naado Dhul Jaalle Suufi Xasan Muuddey L. 654

WASAARADDA H. GUUD, 2. 10. 1980, Naado Dhul Jaalle Maxamed Sheekh Xabiib L. 655

WASAARADDA H. GUUD, 2. 10. 1980, Naado Dhul Jaalle Xaaji Marqaani Xaaji L. 656

WASAARADDA H. GUUD, 2. 10. 1980, Naado Muuye Qaasim Abu Mado L. 657

MAXKAMADDA GOBOLKA MUDUG, 2. 9. 1980, Lumid Buug Kayd L. 2057 ku qran Sh. So. 1530 uu leeyahay Ciise Nuur Warsame L. 658

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 15. 10. 1980 Lumid Jeeg Wareega L. 030431 ku qoran Sh. So. 4000 ay leedahay Weris Ducaale Gurey L. 659

MAXKAMADDA G. BANAADIR 17. 7. 1978 Lumid Jeeg Wareega L. 056683 L. 660

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 28. 10. 1980, Lumid Jeeg Wareega L. 001483 L. 661

MAXKAMADDA G.BANAADIR, 28.7.80 Lumid Jeeg Wareeg L. 028568, L. 662

MAXKAMADDA G. J. Hoose, 14. 5. 80, Lumid Jeeg Wareega L. 502564 L. 664

MAXKAMADDA GOBOLKA SH. HOOSE MARKA, 5. 10. 1980, Lumid Buug Kayd L. 1218 k uqoran Sh So. 1.227 L. 665

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 20.10.1980, Lumid Buug Kayd L. 19062 ku koran Sh. So. L. 666

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, Lumid Buug Kayd L. 1474, ku qoran Sh. So. L.667

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 3. 11. 1980, Lumid Buug Kayd L. 15117 qoran Sh. So. 19200 L. 668

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 4 11. 1980, Lumid Buug Kayd L. 2662 L.669

SAXID QALAD

Go'aanka Maxkamadda Gobolka Mudug ee ku soo baxay Faafinta Rasmiga ah Lamb. 1 R 8 ee 28. Agoosto 1980 Bogga 443 Ninka ku qoran go'aankaas waa in loo akhriyaa sida hoos ku qoran Maxamed Xirsi Cali

QAYBTA LABAAD

XEER MADAXWEYNAHA JDS Lr. 97 ee 18 Oktoo 1980

MADAXWEYNAHA J. D. S.

MARKUU ARKAY : Dastuurka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya

MARKUU ARKAY : Sharciga Lamb. Yahay 5 ee 2.2. 1980 ee lagu dhaqo Sh. Dowladda

MARKUU ARKAY : Soo jeedintii Wasiir ku xigeenka Wasaaradda Dalxiiska

WUXUU XEERIYEY

QOD. 1AAD

Jaalle Dr. Muumin Ibraahim Isaaq, Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Dalxiiska, kaddib markii si buuxda loo xaqiiqsaday in Kacaankii Oktoobar 1969kii uu ugu shaqeeyey daacadnimo, Kacaannimo, Waddaninimo iyo hawl karnimo waxaan u dallacsiiyey Darajada A/2 laga bilaabo 1da Jannaayo 1980.

QOD. 2AAD

Kharajka waxaa laga bixinayaa Miisaaniyadda Dalxiiska

QOD. 3AAD

Xeerkani wuxuu dhaqan galayaa 1da Jannaayo 1980ka.

MADAXWEYNAHA J. D. S.
(S/GAAS MAXAMED SIYAAD BARRE)

Wasiirka Wasaaradda Dalxiiska

Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda

Muqdisho 18. 10. 80

Diiwaanka Lamb. 6 Bogga lamb. 248
Muqdisho 30 Oktoobar 1980
Hantidhawraha Guud KMG

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA
GOBOLKA SHABEELAHA HOOSE
N A A D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Aadan Xaaji Axmed uu ku soo weydiistay arji Taariikhdiisu ahayd 11. 5. 1980 gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Degmada Afgooye Qaabkiisu yahay Quadrato Addimihiisu yihiin 100; 100 100; 100 kuna fadhiya 10.000 MDH.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga : Dhul Banaan

Koonfur waxaa ka xiga : Waddada Xamar iyo Afgooye

Galbeed waxaa ka xiga : Axmed Qoslaaye

B a r i waxaa ka xiga: Dhul Bannaan

Qofkii deneeynayaa Dhulkaas waxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud Gobolkan Shabeeladda Hoose waxaanna laga doodi karaa muddo ku siman 30 (Sodon) Maalmood oo laga bilaabayo Maalinta la soo daabaco Buugga Faafinta Rasmiga ah : laguna soo dhejiyo Ogeysiisyada ee Dawladda Hoose Waaxda Farsamadda Dhulka.

Shalambood, 2. 10. 1980

AGAASIMA. WAAX. SAHAN. IYO DEG. MAGAALEYNTA
CABDI MAXAMED CUMAR

L. 646

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA
GOBOLKA SHABEELAHA HOOSE
NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Faarax Rooble Maalin uu ku soo weydiistay arji taariikhdiisu ahayd 21. 8. 79 gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Degmadda Afgooye Qaabkiisu yahay Retangolar Addimihiisu yahay 32; 32; 26; 26 kuna fadhiya 832 Mdh.

SOOHDIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga : WADDO

Koonfur waxaa ka xiga : WADDO

Galbeed waxaa ka xiga: Guriga Axmed Dubbe

BARI waxaa ka xiga : Waddo

Qofkii deneeynayaa Dhulkaas waxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud Gobolkan Shabeeladda Hoose waxaanna laga doodi karaa muddo ku siman 30 (Sodon) Maalmood oo laga bilaabayo Maalinta la soo daabaco Buugga Faafinta Rasmiga ah : laguna soo dhejiyo Ogeysiisyada ee Dawladda Hoose Waaxda Farsamadda Dhulka. I

Shalambood, 2. 10. 1980

AGAASIMA. WAAX. SAHAN. IYO DEG. MAGAALEYNTA
CABDI MAXAMED CUMAR

L. 647

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA
GOBOLKA SHABEELAHA HOOSE.

N A A D O D H U L

Waxaa la saddeynayaa in Jaalle Cumar Caamir Nidrik uu ku soo weydiistay arji taariikhdiisu ahayd 4. 8. 1980 gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Degmadda Marka Qaabkiisu yahay Retngolar Addimhiisu yihiin 15; 15; 20;3;20;3 kuna fadhiya 304,50 MDH.

SOOHDIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga : Waddo

Koonfur waxaa ka xiga : Waddo

Galbeed waxaa ka xiga: WADDO

BARI waxaa ka xiga: Guri ku dhagan

Qofkii deneeynayaa Dhulkaas waxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud Gobolkan Shabeeladda Hoose waxaanna laga doodi karaa muddo ku siman 30 (Sodon) Maalmood oo laga bilaabayo Maalinta la soo daabaco Buugga Faafinta Rasmiga ah : laguna soo dhejiyo Ogeysiisyada ee Dawladda Hoose Waaxda Farsamadda Dhulka.

halambood, 2. 10. 1980

AASIMA. WAAX. SAHAN. IYO DEG. MAGAALEYNTA
CABDI MAXAMED CUMAR

WASAARADDA HAWL...
WAAXDA DHIS...
GOBO...

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA
GOBOLKA SHABEELAHA HOOSE
N A A D O D H U L

Waxaa la caddeynay aain Jaalle Jeylaani Nuur Sheekh Maxamed uu ku soo weydiistay Arji Taar. ahayd 14.7.80 gabal Dhul Dawladeed ah oo ku yaal Deg. Baraawe Qaabkiisu yahay Rettangolo Adimihiisuna yihiin 15;15;16;5;16; 5 kuna fadhiya 247, 50 MDH.

SOOHDIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga Waddo
Koofur waxaa ka xiga Waddo
Galbeed waxaa ka xiga Waddo
Bari waxaa ka xiga Waddo

Qofkii deneeynayaa Dhulkaas waxuu si fiican u arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhisha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud Gokan Shabeeladda Hoose waxaanna laga doodi kmuddo ku siman 30 (Sodon) Maalmood oo laga biyo Maalinta la soo daabaco Buugga Faafinta Raah : laguna soo dhejiyo Ogeysiisyada ee Dawlado se Waaxda Farsamadda Dhulka.

Shalambood, 2.10.1980

...ASIMA. WAAX. SAHAN. IYO DEG. M...
CABDI MAXAMED CUMA...

651

...Shalam...

...AGAASIM...

L. 649

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA
GOBOLKA SHABEELAHA HOOSE.

N A A D O D H U L

Waxaa la saddeynayaa in Jaalle Cumar Caamir Nidrik uu ku soo weydiistay arji taariikhdiisu ahayd 4. 8. 1980 gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Degmadda Marka Qaabkiisu yahay Retngolar Addimhiisu yihiin 15; 15; 20;3;20;3 kuna fadhiya 304,50 MDH.

SOOHDIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga : Waddo

Koonfur waxaa ka xiga : Waddo

Galbeed waxaa ka xiga: WADDO

BARI waxaa ka xiga: Guri ku dhagan

Qofkii deneeynayaa Dhulkaas waxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud Gobolkan Shabeeladda Hoose waxaanna laga doodi karaa muddo ku siman 30 (Sodon) Maalmood oo laga bilaabayo Maalinta la soo daabaco Buugga Faafinta Rasmiga ah : laguna soo dhejiyo Ogeysiisyada ee Dawladda Hoose Waaxda Farsamadda Dhulka.

Shalambood, 2. 10. 1980

AGAASIMA. WAAX. SAHAN. IYO DEG. MAGAALEYNTA
CABDI MAXAMED CUMAR

L. 648

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA
GOBOLKA SHABEELAHA HOOSE
N A A D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Maxamed Cabdulaahi Saalax uu ku soo weydiistay arji taariikhdiisu ahayd 3. 8. 1980 Qaabkiisu yahay Tetangolar Addimihiisu yihiin 32;32;9,6,9,5 kuna fadhiya 304 MDH.

SOOHDIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: WADDO

Koonfur waxaa ka xiga: Dukaanada Suuqa soo xigaan

Galbeed waxaa ka xiga: WADDO

B A R I waxaa ka xiga: Guri Dhisan oo ku dheggan

Qofkii deneeynayaa Dhulkaas waxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud Gobolkan Shabeeladda Hoose waxaanna laga doodi karaa muddo ku siman 30 (Sodon) Maalmood oo laga bilaabayo Maalinta la soo daabaco Buugga Faafinta Rasmiga ah : laguna soo dhejiyo Ogeysiisyada ee Dawladda Hoose Waaxda Farsamadda Dhulka. I

Shalambood, 2. 10. 1980

AGAASIMA. WAAX. SAHAN. IYO DEG. MAGAALEYNTA
CABDI MAXAMED CUMAR

L. 649

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA
GOBOLKA SHABEELAHA HOOSE
N A A D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Maasiti Cabdiraxmaan Sheekh Hunaa uu ku soo weydiistay Arji Taariikh. ahayd 14.7.80 gabal Dhul Dawladeed ah oo ku yaal Deg. Baraawe Qaabkiisuna yahay Rettangolo Addimihiisuna yihiin 20;20;16;5;16,5 kuna fadhiya 330 MDH.

SOOHDIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga Waddo

Koofur waxaa ka xiga Waddo

Galbeed waxaa ka xiga Waddo

Bari waxaa ka xiga Waddo

Qofkii deneeynayaa Dhulkaas waxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud Gobolkan Shabeeladda Hoose waxaanna laga doodi karaa muddo ku siman 30 (Sodon) Maalmood oo laga bilaabayo Maalinta la soo daabaco Buugga Faafinta Rasmiga ah ; laguna soo dhejiyo Ogeysiisyada ee Dawladda Hoose Waaxda Farsamadda Dhulka. I

Shalambood, 2. 10. 1980

AGAASIMA. WAAX. SAHAN. IYO DXG. MAGAALEYNTA
CABDI MAXAMED CUMAR

L. 650

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA
GOBOLKA SHABEELAHA HOOSE
N A A D O D H U L

Waxaa la caddeynay aain Jaalle Jeylaani Nuur Sheekh Maxamed uu ku soo weydiistay Arji Taar. ahayd 14.7.80 gabal Dhul Dawladeed ah oo ku yaal Deg. Baraawe Qaabkiisu yahay Rettangolo Adimihiisuna yihiin 15;15;16;5;16; 5 kuna fadhiya 247, 50 MDH.

SOOHDIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga Waddo

Koofur waxaa ka xiga Waddo

Galbeed waxaa ka xiga Waddo

Bari waxaa ka xiga Waddo

Qofkii deneeynayaa Dhulkaas waxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud Gobolkan Shabeeladda Hoose waxaanna laga doodi karaa muddo ku siman 30 (Sodon) Maalmood oo laga bilaabayo Maalinta la soo daabaco Buugga Faafinta Rasmiga ah : laguna soo dhejiyo Ogeysiisyada ee Dawladda Hoose Waaxda Farsamadda Dhulka. I

Shalambood, 2. 10. 1980

AGAASIMA. WAAX. SAHAN. IYO DEG. MAGAALEYNTA
CABDI MAXAMED CUMAR

L. 651

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA
GOBOLKA SHABEELAHA HOOSE
N A A D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Maxamuud Xaaj Maxamuud Cabdulle uu ku soo weydiistay Arji Taar. 14.7.80 gabal Dhul Dawladeed ah oo ku yaal Degmada Baraawe Qaabkiisu yahay Rettanglo Addimihiisuna yihiin 18,2;18;-2;13;5;13;5 kuna fadhiya 245,70 MDH.

SOOHDIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga Waddo

Koofur waxaa ka xiga Waddo

Galbeed waxaa ka xiga Waddo

Bari waxaa ka xiga Waddo

Qofkii deneeynayaa Dhulkaas waxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud Gobolkan Shabeeladda Hoose waxaanna laga doodi karaa muddo ku siman 30 (Sodon) Maalmood oo laga bilaabayo Maalinta la soo daabaco Buugga Faafinta Rasmiga ah : laguna soo dhejiyo Ogeysiisyada ee Dawladda Hoose Waaxda Farsamadda Dhulka. I

Shalambood, 2. 10. 1980

AGAASIMA. WAAX. SAHAN. IYO DEG. MAGAALEYNTA
CABDI MAXAMED CUMAR

L. 652

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA
GOBOLKA SHABEELAHA HOOSE

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Suufi Xasan Muudey uu ku soo weydiistay Arji Taar. tahay 2.6.80 gabal Dhul Dawladeed ah oo ku yaal Degmada Baraawe Qaabkiisuna yahay Rettangolo Addimihiisuna yihiin 40;40;20;20 kuna fadhya 800 MDH.

SOOHDIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga Dhul bannaan

Koofur waxaa ka xiga Guriga D/Hoose ee hore u lahayd

Galbeed waxaa ka xiga Waddada Baraawe iyo Xamar

Bari waxaa ka xiga Guri dhisan

Qofkii deneeynayaa Dhulkaas waxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud Gobolkan Shabeeladda Hoose waxaanna laga doodi karaa muddo ku siman 30 (Sodon) Maalmood oo laga bilaabayo Maalinta la soo dabaco Buugga Faafinta Rasmiga ah : laguna soo dhejiyo Ogeysiisyada ee Dawladda Hoose Waaxda Farsamadda Dhulka. I

Shalambood, 2. 10. 1980

AGAASIMA. WAAX. SAHAN. IYO DEG. MAGAALEYNTA
CABDI MAXAMED CUMAR

L. 653

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA
GOBOLKA SHABEELAHA HOOSE
N A A D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Suufi Xasan Muudey uu ku soo weydiistay Arji Taariikh. ahayd 2.6.80 gabal Dhul Dawladeed ah oo ku yaal Demada Baraawe Qaabkiisu yahay Quadrato(Afar-Geesle) Addimihiisuna yihiin 20;20;20;20 kuna fadhiya 400 MDH.

SOOHDIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga Dhul bannaan

Koofur waxaa ka xiga Guri dhisan

Galbeed waxaa ka xiga Waddada laamiga Xamar iyo Baraawe

Bar waxaa ka xiga Guri dhisn

Qofkii deneeynayaa Dhulkaas waxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud Gobolkan Shabeeladda Hoose waxaanna laga doodi karaa muddo ku siman 30 (Sodon) Maalmood oo laga bilaabayo Maalinta la soo daabaco Buugga Faafinta Rasmiga ah : laguna soo dhejiyo Ogeysiisyada ee Dawladda Hoose Waaxda Farsamadda Dhulka. I

Shalambood, 2. 10. 1980

AGAASIMA. WAAX. SAHAN. IYO DEG. MAGAALEYNTA
CABDI MAXAMED CUMAR

L. 654

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA
GOBOLKA SHABEELAHA HOOSE
N A A D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Maxamed Sheekh Xa biibi Cab/dir uu ku soo weydiistay Arji Taariikh. ahayd 22.-5.76 gabal Dhul Dawladeed ah oo ku yaal Deg. Baraawe Qaabkiisuna yahay Tarapezio Addimihiisuna yihiin 30;16;-2;25;35;9,5 kuna fadhiya 729,30 MDH.

SOOHDIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga Waddo u dhaxayso Guriga iyo M.N. Xeebaha

Koofur waxaa ka xiga Jidka Acqua saalus

Galbeed waxaa ka xiga Dhul bannaan

Bari waxaa ka xiga Dhul bannaan

Qofkii deneeynayaa Dhulkaas waxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud Gobolkan Shabeeladda Hoose waxaanna laga doodi karaa muddo ku siman 30 (Sodon) Maalmood oo laga bilaabayo Maalinta la soo daabaco Buugga Faafinta Rasmiga ah : laguna soo dhejiyo Ogeysiisyada ee Dawladda Hoose Waaxda Farsamadda Dhulka. I

Shalambood, 2. 10. 1980

AGAASIMA. WAAX. SAHAN. IYO DEG. MAGAALEYNTA
CABDI MAXAMED CUMAR

L. 655

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA
GOBOLKA SHABEELAHA HOOSE
N A A D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Xaaji Marqaani Xaaji Cabdulle uu ku soo weydiistay Arji Taariikh. ahayd 18.6.68 gabal Dhul Dawladeed ah oo ku yaal Degmada Baraawe Qaabkiisuna yahay Rettangolo Addimihiisuna yihiin 42,-60X24,90 kuna fadhiya 1060,74 MDH.

SOOHDIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga Jid

Koofur waxaa ka xiga luuq la maro

Galbeed waxaa ka xiga Jid

Waqooyi waxaa ka xiga Waddo u dhaxayso iyo Guriga

Bari waxaa ka xiga Dhul bannaan oo Garoonka Kubbadda Cagta ka soo horjeeda

Qofkii deneeynayaa Dhulkaas waxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud Gobolkan Shabeeladda Hoose waxaanna laga doodi karaa muddo ku siman 30 (Sodon) Maalmood oo laga bilaabayo Maalinta la soo daabaco Buugga Faafinta Rasmiga ah : laguna soo dhejiyo Ogeysiisyada ee Dawladda Hoose Waaxda Farsamadda Dhulka. I

Shalambood, 2. 10. 1980

AGAASIMA. WAAX. SAHAN. IYO DEG. MAGAALEYNTA
CABDI MAXAMED CUMAR

L. 656

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA
GOBOLKA SHABEELAHA HOOSE
N A A D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Munye Qaasin Abu Mado uu ku soo weydiistay Taariikh. ahayd 1.3.80 gabal Dhul Dawladeed ah oo ku yaal Degmada Baraawe Qaabkiisuna yahay Tranpezio Addimihiisuna yihiin 52;37;39;3 kuna fadhiya 780 MDH.

SOOHDIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga Jidka Acqua salus

Koofur waxaa ka xiga Shariif Mudhir

Galbeed waxaa ka xiga Jidka Xamar/ Baraawe

Bari waxaa ka xiga Dhul bannaan

Qofkii deneeynayaa Dhulkaas waxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud Gobolkan Shabeeladda Hoose waxaanna laga doodi karaa muddo ku siman 30 (Sodon) Maalmood oo laga bilaabayo Maalinta la soo daabaco Buugga Faafinta Rasmiga ah : laguna soo dhejiyo Ogeysiisyada ee Dawladda Hoose Waaxda Farsamadda Dhulka. I

Shalambood, 2. 10. 1980

AGAASIMA. WAAX. SAHAN. IYO DEG. MAGAALEYNTA
CABDI MAXAMED CUMAR

L. 657

MAXKAMADDA GOBOLKA MUDUG

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran.

HADDUU EEGAY: Qodobka 82 iyo 69 D/L 2 Taar. tahay 9.9.65 ee Lumidda Buugga Kaydka Lam. yahay 2057 ku na qoran tahay lacag dhan Sh.So.1530.00 uuna lahaa Ciis Nuur Warsame, lagana sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Gaalkacyo kuna xusan dacwada sare ku magacaaban.

WUXUU AMRAYAA

In loo cusbooneysiiyo Buugga Keydka ka dib markii ay ka soo weegto 15 maalmood (Shan iyo Toban maalmood) maalinta dekereetada lagu sharciyeeyo faafinta rasmiga ee Dawladda.

WAXAANA

La codsanayaa in Buugga Keydka cusub ee la samayn doono gacanta laga saaro Ciise Nuur Warsawe iyadoo la sugaayo muddada 15ka maalmood ah ee aan kor ku soo sheegay.

Gaalkacyo: 2.9.80ka

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA MUDUG
Dr. Cumar Colaad Cabdi

L. 658

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDUDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran

HADDUU HUBIYEY In Jeega wareega dhumay oo lambarkiisu ahaa 030431 lagana soo saaray Bangiga Ganacsga iyo keydka Soomaaliyeed; Laanta Ceerigaabo kuna qornayd lacag dhan Sh. So. 4.300 ay iska lahayd Weris Ducaale Gurey sida ku cad warqadda lamb. 019307 taariikh 15.10.1980 oo Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Ceeri Gaabo.

HADDUU ARKAY : Qodobka 69 Sharciga N. 2, 9. 9. 1965

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo Jeega Lambarkiisu 030431 oo ku qoran Magaca Weris Ducaale Gurey ayna ku jirto Sh. So. 4.300

WUXUU FASAXAY

In Bangiga Ganacsiga iyo keydka laanta Ceerigaabo u bedelo Wers Ducaale Gurey Jeegga wareega ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegato muddo aan ka yareyn 15 Maalmood Maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliyeed, haddii inta ka horysa aan wax is hortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 15. 10. 1980

GUDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 659

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU AKHRIYEY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDU HUBSADAY: In Jeeg Wareeg. dhumay oo Lam. ahaa 056683. lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta 3aad kuna qorneyd lacag dhan Sh.So. 16.700. uu iska lahaa Cabdulqaadir Maxamed Sad sida ku cad Warqadda lam. 1111111 Taa. 7.7. 80 oo Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta 3aad.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lam. 2 ee 9.9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (ammortamento) Jeeg War. L.056683. oo ku qoran Magaca Cabdulqaadir Maxamed Sadiiq ayna ku jirto Sh. So. 16.700

WUXUU FASAXAY

In Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Laanta 3aad u beddelo Cabdulqaadir Maxamed Saadiq Buugga Keydka), ee kor ku tlmaaman una sameyn mid la mid ah ka dib markay ka s oowareegto mudo aan ka yarayn 15. maalmood maalinta go'aanka lagu daabaco faafinta rasmiga ah ee J.D.S, haddii inta ka horeysa aan is hortaag laga keenin.

Muqdisho, 17.7.80

GUDOOM. MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

W.s. — Dr. Cabdullaah Maxamed Maax —

— MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR —

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran:

HADDU HUBIYEY: In Jeeg War. dhumay oo lambar. ahaa 001483. lagana soo saaray Bangiga ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed, laanta Qey. Xis. G, kuna qornayd lacag dhan Sh.So. 10.000 iska lahaa Xaaji Cumar Yuusuf Maxamed sida ku cad warqadda l. 010618 taariikh. 28.10.80 oo Bangiga ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed laanta Hargeysa.

HADDUU ARKAY: Qod.69 sharciga lam. 2 ee 9,9,65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (ammortamento) Jeeg Ware. l. 0014-83. oo ku qora nMagaca Xaaji Cumar Yuusuf Max. ayna ku jirto Sh.So. 10.000

— WUXUU FASAXAY—

Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Laanta Hargeysa u bedelo Xaaji Cumar Yuusuf Maxamed Jeegga Wareega ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegato muddo aan ka yareyn 15. maalmood maalinta go'aanka lagu daabaco faafinta rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horeysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 28.10.80

GUDDOMIYAHA MAXKAMADDA G. BANAADIR
—Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax—

L. 661

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU AKHRIYEY: dacwadda kor qoran;

HADDUU HUBSADAY: in Jeeg Wareeg dhumay oo lambarkiisu ahaa 028568 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Ceeri-gaabo una qornayd lacag dhan Sh.So. 10.000/= uu iska lahaa Caydiid Jaamac Axmed sida ku cad warqadda lam. 007279 taa riikhda 24.7.80 oo Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Ceeri-Gaabo.

HADDUU ARKAY: qod. 69 Sharciga lam. 2 ee 9.9.65

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (ammortamento) Jeeg Wareega lam. 028568 oo ku qoran magaca Caydiid Jaamac Axmed ayna ku jirto Sh.So. 10.000/=

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka laanta Ceeri-Gaabo u beddelo Caydiid Jaamac Axmed Jeeg war. ee kor ku tilmaaman una samayn mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood maailnta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Demuqraadiga Soomaaliya, haddii inta ka horreysa aan is hortaag laga keenin.

Muqdisho, 28.7.80

GUDDOOM. MAXKAMADDA GOBOL. BENAADIR
-Dr.Cabdullaahi Maxamed Caax-

L. 662

LUNA D'AFRICA BOTTLING CO.

Ujeeddo: Digniin iyo Ogeysiin isugu yeerid

Waxaa la ogeysiinayaa Saamileyda Shirkadda ku jirta in qiimihii saamiga la kordhiyay laguna daray boqolkiiba labaatan (venti per cento ogni azione non pagata entro 20 Giugno 1980) laga billaabo 20 Juun 1980.

Qofkii aan taariikhdaas kor ku xusan ka hor bixin saamiga uu ballan qaaday, amase aan hagaajin habka bixinta waxaa ku kordhaaya boqolkiiba labaatan.

Qofkii aan ku bixin saamiga laga rabo ilaa iyo 12.11.80 ugu dambaystii, waxaa loo qaadanayaa in uu tanasulay ,qofkaasi haddii uusan horay wax u bixin, haddii uu horay wax u bixiyey waxaa loo tixgelinayaa intii uu bixiyey muddadaas kadib waxaa loo bandhigayaa saamilayda kale amase qof kasta oo iibsanayo, in ay buuxiyaan inta dhiman sida qodobada xeerka madaniga ee hore.
Waxaa laysugu yeerayaa Shirweynihii samileyda si ay uga wada hadlaan arrimaha hoos ku qoran:

1) Magacaabidda Guddiga Hantidhowrka
2) Magacaabidda Xubno Guddiga maamulka
3) Si looga hadlo arrimaha Shirkadda
4) Si looga hadlo haddii ay jiraan arrimo lagama maarmaan ah iyo wixii la mid ah.

Waxaa shirka laysugu yeeray maalinta bishu ay tahay 25.11.80 ee 16,30 Fadhiga hore kan dambe haddii loo baahdo waxaa laysugu imaanayaa taariikhda 9.12.80 saacaddu markay tahay 16,30 xafiiska shirkadda ee ku yaal Kowda Luulyo.

MAAMULKA IDMAN

L. 663

GUDOOMIYAHA MAXKAMADDA G. J. HOOSE

MAXKAMADDA GOBOLKA J/HOOSE KISMAAYO

HADDUU ARKAY Guddoomiyaha Maxkamadda G. J. Hoose, Arjiga kor ku xusan ee uu soo qortay Jaalle Cali Maxamed Odey, (Cali Eet)

HADDUU ARKAY Qod. 69 D. 9. 9. 1965 N. 2 iyo Lumidda Jeegga Wareega lamb. 502564, iskana Cali Maxamed Odey (Cali Eet)

WUXUU AMRAYAA

1) In uusan socon karin Jeegga wareega lambarkiisu kor ku qoran yahay laga bilaabo maanta

2) In lagu qoro Amarkaas Faafinta Rasmiga ah.

3) In Lacagtaas ah Sh. So. 10.000/ Bangiga Siiyo Arji lahaa Magaciisu kor ku qoran yahay, Muddo ku siman (30) Casho ka dib Markii lagu qoro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Kismaayo, 14. 5. 1980

(Dr. Xiis Cumar Maxamed)

L. 664

MAXKAMADDA GOBOLKA SH/HOOSE

MARKUU ARKAY : Dacwadda kor ku qoran;

MARKUU ARKAY : Waxay ku saabsan tahay, iyo Ogeysiiska Bangiga iyo keydka Soomaaliyeed laanta Afgooye ee T. 29/9/80;

HADUU ARKAY : Qod. 69 D. L ee 9. 9. 1965 N 2

WUXUU CADEEYEY

Lumista Buuga Keydka Lamb. 1218 kuna qoran tahay Sh. So. 1.227

WUXUU AMRAYAA

In loo sameeyo Buug cusub Ninka la yiraahdo Jaalle Cabdi Buule Macallin Xeydar oo ah ninka Buuga ku qoran ee Sheeganayo Lumista Buuga kor lambarkiisu ku xusan yahay 15 Maalmood ka dib markii ka soo wareegtoMaalinta Decretada lagu shaaciyo Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda.

WAXAA LA AMRAYAA

In Buug Cusub loo sameeyo weydiistaha kor ku xusan, Gacantana laga saaro asaga ama qof ka haysto wakaalo rasmi ah.

Marka, 5. 10. 1980

GARSOORAHA MAXKAMADDA GOBOLKA SH/HOOSE
Dr. Axmed Sheekh Cali Nuur

L. 665

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY : Dacwadda kor ku qoran:

HADDUU HUBIYEY : In Buug Keyd dhumay oo lambarkiisu ahaa 19062 lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo KeydkaSoomaaliyeed, Laanta Xarunta kuna qornayd lacag dhan Sh. So. 800 uu iska lahaa Jaamac Mooge Cusmaan Jaamac sida ku cad warqadda lamb. Taariikh 20. 10. 1980 oo Bangiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta.

HADDUU ARKAY : Qod. 69 Sharciga lamb. 2 ee 9. 9.65

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo Buugga Keydka Lamb. 19062 oo ku qoran Magaca Jaamac Mooge Cusmaan J. ayna jirto Sh. So. 800.00

WUXUU FASAXAY

In Bangiga Ganacsiga iyo Keyd Laanta Xarunta u bedelo Jaamac Mooge Cusmaan Jaamac Buugga Keydka ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegato muddo aan ka yareyn 30 maalmood Maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliyeed, haddii inta ka horeysa aan wax is hortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 20. 10. 1980

GUDOOMIYAHA MAXKAMADA GOBOLKA BANAADIR
Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 666

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY : Dacwadda kor ku qoran:

HADDUU HUBIYEY : In Buug Keyd dhumay oo lambarkiisu ahaa 1474 lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed, Laanta 4aad kuna qornayd lacag dhan Sh. So. 14.090 ay iska lahayd Cawrala Samatar Muuse sida ku cad warqadda lambar 0239 Taariikh 27. 10. 1980 oo Bangiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Laanta 4aad.

HADDUU ARKAY : Qod. 69 Sharciga lamb. 2 ee 9. 9.65

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo Buuga Keydka Lamb. 1474 oo ku qoran Magaca Cawrala Samatar Muuse ayna ku jirto Sh. So. 14.090

WUXUU FASAXAY

In Bangiga Ganacsiga iyo Keydka laanta 4aad u bedelo Cawrala Samantar Muuse Buug Keydka ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegato muddo aan ka yareyn 30 Maalmood Maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliyeed, haddii inta ka horeysa aan wax is hortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 27. 10. 1980

GUDOOMIYAHA MAXKAMADA GOBOLKA BANAADIR

L. 667

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY : Dacwadda kor ku qoran:

HADDUU HUBIYEY : In Buug Keyd dhumay oo lambarkiisu ahaa 15117, Lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed, Laanta Xaruunta kuna qornayd lacag dhan Sh.So. 19.200/=uu iska lahaa Raage Axmed Maxamuud sida ku cad warqadda lamb. 03645 Taariikh 3.11.80 oo Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Xaruunta.

HADDUU ARKAY : Qod. 69 Sharciga lamb. 2 ee 9. 9.65

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo Buug Keyd Lam. 15.117, ooku qoran Magaca Raage Axmed Maxamuud ayna ku jirto Sh.So. 19.200/=.

WUXUU FASAXAY

In Bangiga Ganacsiga iyo Keydka laanta u bedelo Raage Axmed Maxamuud Buug Keydka ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegato muddo aan ka yarayn 30 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliyeed, haddii inta ka horeysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 3.11.80

GUDOOMIYAHA MAXKAMADA GOBOLKA BANAADIR
Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 668

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY : Dacwadda kor ku qoran:

HADDUU HUBIYEY : In Buug Keyd dhumay oo lambarkiisu ahaa 2662, Lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed, Laanta 5naad kuna qornayd lacag dhan Sh. So. 3.400/=uu iska lahaa Daa'uud Qalinle Faahiye Sida ku cad warqadda lamb. 001204 Taariikh 4.11.80 oo Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 5naad.

HADDUU ARKAY : Qod. 69 Sharciga lamb. 2 ee 9. 9.65

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (ammortamento) Buug Keyd Lam. 4.11.80 oo ku qoran Magaca Daa'uud Qalinle Faahiye ayna ku jirto Sh. So 3.400/=

WUXUU FASAXAY

In Bangiga Ganacsiga iyo Keydka laanta 5naad u bedelo Daa'uud Qalinle Faahiye Buugga Keydka ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood maa linta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliyeed, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 4.11.80

GUDOOMIYAHA MAXKAMADA GOBOLKA BANAADIR
Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 669

MAXKAMADDA GOBOLKA MUDUG

Ujeedo : Go'aan Maxkamaddeed

GUDDOOMIYAHA Maxkamadda Gobolka ee Sare ku qoran :

HADDUU ARKAY : Dacwada kor ku qoran :

MARKUU EEGAY : Qodobka 82 iyo 69 D/L 2 taariikhdiisu tahay 9. 9. 1965 ee lumida Jeegga Wareega lambar 226392 ee 21. 6. 1980 ay ku qoran tahay Sh. So. 20.000.00 (Labaatan kun) ayna sameeysay Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka laanta Gaalkacyo; kuna xusan Dacwada sare ku magacaaban.

WUXUU AMRAYAA

In la cusboonaysiiyo Jeegga kaddib markii ay ka soo wareegto 30 (Soddon) maalmood maalinta dikreetada lagu sharciyeeyo Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

WAXAANA

La codsanayaa in Jeegga cusub ee la samayn doono gacanta laga saaro Maxamuud Yuusuf Jaamac iyadoo la sugaayo muddada 30ka maalmood ah ee aan kor ku soo sheegay.

Gaalkacyo 30. 9. 1980ka.
GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA MUDUG
Dr. Cumar Colaad Cabdi

L. 670

MAXKAMADDA GOBOLKA SH./HOOSE MARKA

HADDUU ARKAY: Dacwadda ku Thariikheysan 27.10.80.

MARKUU ARKAY: Waxay ku sabsan tahay iyo Ogeysiiska Bangiga Ganacsiga Ummadda Laanta Afgooye. Eeeg warqadda Lam. 000999 ee ka soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Laanta Afgooye;

WUXUU OGAADAY: Inay tahay shaqadiisa.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 D.L. 9/9/65, L. 2, Lumida Buugga Keydka Lam. 859 kuna qoran Jaalle Maxamuud Xirsi Aadan kuna jirto lacag dhan Sh. So. 40.550.

WUXUU AMRAYAA

In loo sameeyo Buug Keyd oo cusub ee ay ku qoran tahay lacagtaas kor ku xusan iyo Jaallaha magaciisa kor ku qoran yahay kadib markii 15 maalmood lagu shaaciyo Dekretada tan Faafinta Rasmiga ee Dowladda.

WAXAA LA CODSANAYAA

In Buugga cusub oo la sameyn doono gacanta laga saaro Jaalle Maxamuud Xirsi Aadan ama qof ka sito Wakaalad sharci ah. Iyadoo la sugayo 15ka maalmood oo aan kor ku soo xusnay.

Marka, 27.10.80

Garsooraha Maxkamadda G/Sh./Hoose
Dr. Ahmed Sheekh Cali Nuur

FAAFIN RASMIGA AH

الرسمية الجريدة

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

لجمهورية الصومال الديمقراطية

Sannaka 8aad Muqdisho 25 Nof. 1980 L. 2 R11

FAAFINTA BIL SOO BAXA جريدة شهرية

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J.D.S.

QIIMAHA : waa 5 shilin lnmbar walba **RUKUNKA** : Sanalkii waa Sh. 100 Soomaaliya gudaheeda — djbedana waa Sh. So, 300, Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo Qiimaha qorotaanka F. R, halkii sadar iyo wàxii ka yàı wàà 2 laba Sh. — Rukunka iyo qorjtaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulkà Fààfintà Rasmi ga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuurahà ee Wàsàràddà Làcagta

KOOBNIIN

QAYBTA KOWAAD

SHARCI

SHARCI L. 30 ee 13 Nofeember. 1980. Wax ka beddelid Sharciga Lamb. 9 ee 3 Febraayo 1977. Bogga 1126

SHARCI L.31 ee 13 Nofeembar 1980, Oggolaansho meelmarinta Axdiga 2aad ee Lome.

SHARCI L. 31 ee 13 Nofeember 1980, Oggolaasho Meelmar inta Heshiis ganacsi dhexmaray Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Jamhuuriyadda Dadka ee Shiinaha. » 1129

QAYBTA LABAAD

XEER

XEE RMADAXWEYNAHAJDS, L. 109 ee 18 Nofeember 1980, Canshuur ka dhaafid alàabta loo keeno Ururka Bisha Cas » 1131

XEER MADAXWEYNAHA JDS. 111 ee 15 Sebteember 1980, Dib ugu soo celin C. Booliska. » 1136

XEER MADAXWEYNAHA JDS. L. 112 ee 27 Sebteember 1980, Ruqsayn Sarkaal » 1137

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 113 ee 4 Oktoober 1980, Qorid Sarkaal » 1138

XEER MADAXWEYNAHA JDS, 114 ee 6 Nofeember 1980, Dallacaad Sarkaalnimo » 1139

XEER MADAXWEYNAHA JDS, 115 ee 25 Nofeember 1980, Billad Maar ah oo Waddanimo; Jaalle Saalim Axmed Saalim. » 1142

XEER MADAXWEYNAHA JDS, 116 ee 25 Nofeember 1980, Billado Maar ah oo Hawlkarnimo; Jaalle Abuukar Maxamed Shamcuun iyo Nuur Maxamed Cabdulle » 1143

XEER MADAXWEYNAHA JDS, 118 ee Nofeember 1980, Billado Maar ah oo Hawlkarnimo; Jaalle KIM JIN GWON, UN GI SUL iyo Jaalle LI DOK HO » 1144

XEER MADAXWEWNAHA JDS, 119 ee 16 Juun 1980, Gunnooyinka Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga Degaanka ee Magaalada Muqdisho » 1146

XEER MADAXWEYNAHA JDS. L. 120 ee 29 Juun 1980. Sare u qaadid heerka darajada iyo Mushaharka ee Shaqaalaha aan lahayn aqoon gaar ahaaneed; 1148

WASAARADDA GANACSIGA L. 121 ee 10 Nofeember 1980. Diwaangelinta Iskaashatada Milixda ee Tuulada Bohol, Degmada Ceel afweyn Gobolka Sanaag 1149

QAYBTA KOWAAD

SHARCI LAMBAR 30 taariikh 13 Nofeember 1980 Wax ka beddelid Sharciga Lambar 9 ee 3. 2. 1977

ISAGOO TIXGELINAAYA oggolaashaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

QODOBKA 1AAD

Qodobka 3aad ee Sharciga Lamb. 9, soona baxay 3. 2. 1977, erayga «kontrobaan» waxaa lagu beddelay erayada «suuqa xaaraanta».

QODOBKA 2AAD

Qodobka 9aad ee Sharciga Lamb. 9, soona baxay 3. 2. 1977, waxaa loo beddelay sida soo socota:

Qodobaka 9aad Bedeecadda iyo qalabka lagu galay dembiga ee lagu qabtay eedeysanaha ama wakiilkiisa waa lala wareegayaa, shatigana waa lagala noqon karaa.

QODOBKA 3AAD

Sharciga Lamb. 9 ee 3. 2. 1977 waxaa lagu kordhiyay qodobbada soo socda:

Qodobka 9 — A

Qiimaha ka soo baxa qalabka dembi ee ku xusan Qodobka 9aad ee Sharcigan, boqolkiiba konton waxaa lagu wareejinayaa Khasnadda Dhexe ee Dawladda, kontonka kalena khasnadda gaar ahaaneed ee Degmada dembiga lagu qabtay oo ugu isticmaaleysa mashaariicda horumarinta degmada.

QODOBKA. 9 — B

1. Lacagaha dhab ahaan ka soo xerooda ganaaxa dembiyada suuqa xaaraanta ah, boqolkiiba toddobaatan waxaa lagu shubayaa Khasnadda

2) Boqolkiiba soddonka hara waxaa yeelanaaya qofkii dembiga soo sheegay, kii qabtay, baarayaasha iyo Shaqaalaha ku tilmaaman Qodobbada 15 iyo 17 ee Amarka lambarkiisu yahay 15, soona baxay 30. 1. 1957 ee Maxkamadda dacwadda dhammeysay, waxayna u qaybsanayaan sida soo socota :

— Soo sheegaha dembiga 10%

— Qofka ama kooxda soo qabata iyo baarayaasha 7%

— Shaqaalaha Maxkamadda dacwadda dhameysay 13%

3) Abaalgudka qofka soo sheegay dembiga ama gacanta ku dhigay iyo baarayaasha kama badnaan karo Sh. So. 10.000 (Toban kun) markiiba.

4) Abaalgudka Shaqaalaha Maxkamadda dacwada dhameysay waxaa lagu dhaqayaa Amarka Lambar 15 ee 30. 1. 1957.

5) Lacagta ka soo harta qaybintaas waxaa lagu shubayaa Khasnadda Dhexe ee Dawladda.

QODOBKA 9—T

1) Maamulka iyo qaybinta hantida ka soo gasha qalabka dembi iyo ganaaxa ee Sharcigan ku xusan waxaa leh Kaaliyaha Maxkamadda dacwadda dhammeysay, waxaana ku kormeeraya Garsooraha Maxkamadda.

QODOBKA 4AAD

Sharci kasta oo ka soo horjeeda ama aan la socon

QODOBKA 5AAD

Sharcigan waxaa uu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinnta Rasmiga ah ee JDS.

Muqdisho, 13 Nofeember 1980

MADAXWEYNAHA J. D. S.
MAXAMED SIYAAD BARRE

SHARCI LAMB. 31 Taariikh. 13 Nof. 1980.
Oggolaasho meelmarinta Axdiga 2aad ee Lome.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaashaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

1) Waxaa la oggolaaday Axdiga 2aad iyo protokollada la xiriira oo dhexmaray Dalalka Afrika, Karaybi iyo Dalalka Badweynta degen (ACP) iyo Dalalka Suuqa dhaqaalaha Yurub (EEC).

2) Axdiga 2aad ee Lome ee ACP-EEC oo ay ka mid tahay Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliya waxaa lagu saxiixay magaalada Lome ee Dalka Togo taariikhdu markey ahayd 31 Oktoobar 1979.

3) Axdiga 2aad ee Lome ee sannadka 1979 iyo protokollada la xiriira oo ay tiradoodu tahay toddoba (7) waxay ka mid noqonayaan Sharcigan.

Qod. 2aad

Shuruucda iyo xaaladaha ay qorayaan qodobbada uu ka kooban yahay Axdiga iyo protokollada la xiriira kuna tilmaaman Qod. 1aad ee Sharcigan, waxay leeyihiin qiimo iyo astaan sharci la heer ah Sharciyada iyo Xeerarka Dalka, dhaqangelintoodana waxaa la waafajinay aa Dastuurka Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliya iyo qodobbada uu ka saameeyo ee Axdiga iyo protokolladiisa.

Qod. 3aad

Sharcigan waxaa lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S wuxuuna dhaqan gelayaa isla maalinta lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 13 Nov. 1980.

MADAXWEYNAHA J. D. S.
MAXAMED SIYAAD BARRE

SHARCI LAMB. 32 Taariikh. 13 Nof. 1980, ogolaasho meelmarin heshiis ganacsi dhexmaray Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Jamhuuriyadda Dadka ee Shiinaha

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA : Oggolaashaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda :

QODOBKA 1AAD

1) Waxaa la oggolaaday heshiiska dhexmaray Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Jamhuuriyadda Dadka ee Shiinaha, kuna saabsan xiriir ganacsi labada Dal.
2) Heshiiskaa waxaa lagu kala saxiixday magaalada PEKIN ee Dalka Jamhuuriyadda Dadka ee Shiinaha taariikhdu markey ahayd 23 Abriile 1980.
3) Heshiisku wuxuu ka mid noqonayaa Sharcigan isagoo lifaaq u yahay.

QODOBKA 2AAD

Shuruudaha iyo xaaladaha ay qorayaan qodobbada Heshiiska lagu soo tilmaamay Qodobka. 1aad ee Sharcigan, waxay leeyihiin qiimo iyo astaan sharci la heer ah Sharciyada iyo Xeerarka Dalka, dhaqangelintiisana waxaa la waafajinayaa Qodobka 72 (1) ee Dastuurka iyo Qodobka 11aad ee Heshiiska.

QODOBKA 3AAD

Sharcigan wuxuu ka mid noqonayaa Sharciyada iyo Xeerarka Dalka, wuxuuna dhaqan gelayaa maalinta ku xigta ee lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 13. Nofeember 1980

MADAXWEYNAHA J. D. S.
MAXAMED SIYAAD BARRE

QAYBTA LABAAD

XEERKA MADAXWEYNAHA JDS, Lambar 109 taariikh 18 Nofeember 1980 Canshuur ka dhaafid alaabta loo keeno Ururka Bisha Cas.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY : Qod. 82aad ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY : Xeerka tirsigiisu yahay 187 ee 17. 6. 1965

MARKUU ARKAY : Xeerka tirsigiisu yahay 5. 11.1966 qodobkiisa 15aad;

MARKUU TIXGELIYEY : In loo baahan yahay in la fududeeyo habka looga soo saaro furdooyinka Dalka qalabka iyo alaabta Hay'adaha Caalamiga ahi ay ugu deeqaan Ururka Bisha Cas ee Soomaaliya, loogana ahi ay ugu deeqaan Ururka Bisha Cas ee Soomaaliya, laguna tala galay daryeelka dadka ku tabaaleeyaan Dalkeenna;

MARKUU ARKAY : In fududeyntaasi ay ku iman karto iyadoo la soo saaro xeer looga dhaafayo qalabkaas iyo alaabtaas kaalmada ah wax alla wixii canshuur dawladeed ah;

ISAGOO DHEGEYSTAY : soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda;

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda :

QODOBKA 1AAD

Waxaa laga dhaafay wixii canshuur ah, mid toosan iyo mid dadbanba, iyo wixii Kharaj dawladeed ah ee ku saabsan qalabka, daawooyinka, cunnada iyo wixii la mid ah oo loo keeno Ururka Bisha Cas ee Saamaaliya.

QODOBKA 2AAD

Sidoo kale waxaa lagadhaafay alaabta ku cad qodobka 1aad ee Xeerkan ku lacagta laga qaado moorka iyo diiwaangelinta.

QODOBKA 3AAD

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa markuu saxiixo Madaxweynaha J. D. S. waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda

Muqdisho 8. Nofeember 1980

MADAXWEYNAHA J. D. S.

MAXAMED SIYAAD BARRE

WASIIRKA WASAARADDA MAALIYADDA

(Cabdullaahi Axmed Caddow)

XEERKA MADAXWEYNAHA J. D. S. Lambar 110 Taariikh 18. Nofeember 1980 Canshuur ka dhaafid alaabta loo keeno Qaxootiga.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY : Qodobka 82aad ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY : Xeerka tirsigiisu yahay 187 ee 17. 6. 1965;

MARKUU ARKAY : Xeerka tirsigiisu yahay 5 ee 5. 11. 1966, qodobkiisa 15aad;

MARKUU TIXGELIYEY : baahida loo qabo in la fududeeyo habka looga soo saarofurdooyinka Dalka qalabka iyo alaabta Dawladaha dibedda iyo Ururada Caalimiga ahi ay ugu keenaan daryeelka Qaxootiga Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya ay dhulkeeda ku martigalisay;

MARKUU ARKAY : In fududeyntaasi ay ku iman karto iyadoo la soo saaro xeer looga dhaafayo qalabkaas iyo alaabtaas kaalmada ahi wax alla wixii canshuur dawladeed ah;

ISAGOO DHEGEYSTAY : soojeedinta Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda;

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda :

QODOBKA 1AAD

Waxaa laga dhaafay wixii canshuur ah, mid toosan iyo mid dadbanba, iyo wixii kharaj dawladeed ah ee ku saabsan qalabka, daawooyinka, cunnada iyo wixii la mid ah ee loo keeno daryeelka Qaxootiga jooga Dalka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

QODOBKA 2AAD

Waxaa sidoo kale laga dhaafay alaabta ku cad Qodobka 1aad ee Xeerkan lacagta laga qaado moorka iyo diiwaangelinta.

QODOBKA 3AAD

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa markuu Saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 8 Nofeember 1980

MADAXWEYNAHA J. D. S.
MAXAMED SIYAAD BARRE

WASIIRKA WASAARADDA MAALIYADDA
Cabdullaahi Axmed Caddow

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 111 ee 15 Sebteember 1980 Dib ugu soo celin C. Booliiska

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY : Dastuurka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya Qodobka 82aad;

ISAGOO ARKAY : Sharciga lambar 2 ee 23. 12. 72kii oo ku saabsan dhismaha Ciidanka Booliiska Soomaaliyeed;

ISAGOO DHEGEYSTAY: Talada Hoggaammada XHKS ee qaabbilsan maamulka Hawlwadeenada Xisbiga;

ISAGOO LA TASHADAY : Taliyaha Ciidanka Boliiska Soomaaliyeed.

WUXUU XE RAY

QODOBKA 1AAD

b) Jaalle Salaad Yuusuf Samatar oo hore looga wareejiyey Ciidanka Booliiska Soomaaliyeed dib ayaa loogu celiyey Ciidankiisii laga bilaabo 9. 8. 1980ka.

t) Jaalle Salaad Yuusuf bacdamaa markii Boliiska laga wareejiyey uu sitay derejeda L/Xiddigle uuna hal derejo dallcay taariikhda 26. 5. 80 hadda derejeda uu ku wareegayaa waa Dhamme.

J) Shaqada Jaalle Salaad Yuusuf waxay ahaanaysaa xiriir.

Muqdisho, 15. 9. 1980

MADAXWEYNAHA J. D. S.

S/Gaas Maxamed Siyaad Barre

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 112 ee 27 Sebtember 1980 Ruqsayn Sarkaal.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY : Dastuurka J. D. S. Qodobka 82aad,

ISAGOO ARKAY : Sharciga L.2 ee 23.2.72 oo ku saabsan dhismaha Ciidanka Booliska Soomaaliyeed.

ISAGOO ARKAY : Talada uu soo jeediyey Taliyaha Ciidanka Boliiska Soomaaliyeed kuna qornayd Xaashida lambar XOG/GG/185 ee 27. 9. 1980ka, iyo Arjigii ku lifaaqnaa ee uu soo qortay Sarkaalku kuna saabsanaa shaqo ka tegid.

WUXUU XE RAY

QODOBKA 1AAD

L/Xidiggle Axmed Maxamed Cismaan waxaa laga Ruqseeyey Ciidanka Boliiska Soomaaliyeed laga bilaabo 30. 11. 1980ka, taariikhdaas oo ah tan uu ku dhammaanayo fasax laba bilood ah oo ka gilaabma 1.10.80

QODOBKA 2AAD

In Sarkaalka la siiyo wixii xaq ah ee uu siinayo Sharcigu.

QODOBKA 3AAD

Xeerkani degdeg buu u dhaqan geliyaa, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 27. 9. 1980ka

MADAXWEYNAHA J. D. S.

MAXAMED SIYAAD BARRE

Waan aragnay ee Diiwaangelinay
Diiwaan lambar 6 bogga lambar 141
Muqdisho 11 Oktoobar 1980,

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 113 ee 10 Oktoobar 1980 Qorid Sarkaal.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY : Dastuurka J. D. S. Qodobka 82aad
ISAGOO ARKAY : Sharciga lambar 2 ee 23. 12. 72kii oo ku saabsan dhismaha Ciidanka Boliiska Soomaaliyeed.

ISAGOO TIGLIYEY : Xaashida Wasiirka W. Shaqada iyo Arrimaha Bulshada Lambar 6/1/1-224386 ee 20. 9. 1980ka, taasoo Hay'adaha Dawladda lagu meeleeyey Ardadii ka soo qalin jabisay Jaamacadda Ummadda.

WUXUU XEERAY

QODOBKA 1AAD

Jaalle Cabdi Dubbad Ismaaciil oo ka qalin jebiyey Kulliyadda Beeraha 13. 7. 1980ka waxaa rasmi ahaan loogu meeleeyey Ciidanka Boliiska Soomaaliyeed isagoo lagu qaatay derejeda L/Xiddigle laga bilaabo 1.9.80

QODOBKA 2AAD

Xeerkani degdeg buu u dhaqan geleyaa, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 4. 10. 1980ka

MADAXWEYNAHA J. D. S.

MAXAMED SIYAAD BARRE

Waan aragnay ee Diiwaangelinay
Diiwaanka Lambar 6 bogga L. 227
Muqdisho, 28 Oktoobar 1980,
Hantidhowraha Guud KMG
Yuusuf Cali Nuur

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 114 ee 6 Nofeember1980 Dallacaad Sarkaalnimo.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY : Dastuurka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya Qodobka 82aad.

ISAGOO ARKAY : Sharciga lamb. 2 ee 23. 12. 1972kii oo ku saabsan dhismaha Ciidanka Boliiska Soomaaliyeed.

ISAGOO TIXGELIYEY : Tababar Layli Sarkaalnimo oo laba sano ah oo ay ku dhammaystaan Kulliyadda Ciidammada Qalabka Sida ee Jaalle Siyaad.

ISAGOO TIXGELIYEY : Talada Taliyaha Ciidanka Booliiska Soomaaliyeed;

WUXUU XEERAY

QODOBKA 1AAD

Layli Saraakiisha magacyadoodu hoos ku qoran yihiin oo ka tirsan Ciidanka Boliiska Soomaaliyeed waxa loo dallacsiiyey derejada Xiddigleyaal laga bilaabo 1. 10. 1980 xag derejo iyo lacageedba:

1) L/Sarkaal Maxamuud Axmed Maxamuud — Xiddigle

2) » Cabdisalaam Guuleed Diiriye — Xiddigle

3) » Cabdulqaadir Ibraahim Aadan — Xiddigle

4) » Aadan Cabdulle Axmed — Xiddigle

5) » Yuusuf Cali Raage — Xiddigle

6) » Axmed Maxamed Nuur — Xiddigle

7) » Cabdullaahi Xaashi Maxamed

8) » Cabdullaahi Maxamed Cali — Xiddigle

9) » Cumar Sh. Maxamed Cusmaan — Xiddigle

10) » Nuur X. Axmed Cabdi — Xiddigle

11) » Daahir Cali Wacays — Xiddigle

12) » Cabdulqaadir X. Maxamed Cabdi — Xiddigle

13) » Cabdullaahi Macallin Cumar Armed — Xiddigle

14) » Cabdulqaadir Mukhtaar Axmed — Xiddigle

15) » Maxamed Macallin Axmed Nuur — Xiddigle

16) » Maxamed Axmed Aadan — Xiddigle

17) » Cali Cabdi Ceelaabe — Xiddigle

18) » Cabdullaahi Axmed Maxamed — Xiddigle

19) » Cali Cabdulle Maxamed — Xiddigle

20) » Maxamed Sheekh Maxamed Xirsi — Xiddigle

21) » Cabdi Samantar Xuseen — Xiddigle

22) » Siciid Maxamed Xalane — Xiddigle

23) » Axmed Cusmaan Mire — Xiddigle

24) » Maxamuud Maxamed Cusmaan — Xiddigle

25) » Maxamed Sheekh Daahir Cabdisalan — Xiddigle

26) » Maxamed Axmed Yuusuf Cilmi — Xiddigle

QODOBKA 2AAD

Xeerkani degdeg buu u dhaqan gelayaa, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta rasmiga ee Dawladda.

Muqdisho, 6. 11. 1980

MADAXWEYNAHA J. D. S.

(S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)

Waan aragnay ee Diiwaangelinay
Diiwaanka Lambar 7 bogga L. 9
Muqdisho 17 Nofeembar 1980,
Hantidhowraha K M G
Yuusuf Cali Nuur

XEER MADAXWEYNAHA JDS. L. 115 ee 25 Sebteember 1980 Billad Maar ah oo Waddaninimo: Jaalle Saalim Axmed Saalim

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY : Qod. 82aad(15) ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY : Sharci Lamb. 65 ee 19 Oktoobar 1970;

MARKUU TIXGELIYEY : Geesinimada Waddaninimada ku dheehantahay ee Jaalle Saalim Axmed Saalim uu uga hortegay ulajeeddadii kooxdii burcadda ahayd ee hollisay in ay dhacdo hanti qaranku leeyahay; isagoo ku dhaqaaqay feker iyo ficil deg deg ah, sidaana ku samatabixiyey xoolihii Qaranka;

MARKUU TIXGELIYEY : In ay lagama maarmaan tahay in xusuus waarta laga reebo dadka dhiirranaanta iyo nafhuridda ku dayashada leh ku waajaha duruufaha adag, iyagoo gudanaya waajib waddani ah;

ISAGOO DHEGEYSTAY : Talada Guddiga Abaalmarinta;

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda :

QODOB KELIYA

Waxaa lagu maamuusay Billad Maar ah oo Waddaninimo Jaalle SAALIM AXMED SAALIM.

Muqdsho, 25. 9. 1980

MADAXWEYNAHA J. D. S.

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 116 ee 25 Sebteember 1980 Billadda Maarta ah ee Hawlkarnimo: Jaalle Xirsi Cabdi Saadaad.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY : Qod. 82aad(15) ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY : Sharciga Lambar 65 ee 19 Oktoobar 1970;

MARKUU TIXGELIYEY : Kartida, dadaalka, isxilqaanka iyo kaalinta wax ku oolka ah ee Jaalle Xirsi Cabdi Saadaad uu ka geystay xalinta biyo la'aanta ku dhacday Kismaayo, isagoo naftiisa u huray sidii dadweynaha Kismaayo ay biyo ku heli lahaayeen;

MARKUU TIXGELIYEY : In ay lagama maarmaan tahay xusuus in laga reebo wax qabadka iyo nafhuridda qaddarinta leh ee Jaalluhu muujiyey isagoo gudanaya waajib xilkasnimo;

ISAGOO DHEGEYSTAY : Talada Guddiga Abaalmarinta;

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda :

QODOB KELIYA

Waxaa lagu maamuusay Billad Maar ah oo Hawlkarnimo Jaalle XIRSI CABDI SAADAAD.

Muqdisho, 25 Sebteember 1980

MADAXWEYNAHA J. D. S.

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L· 117 ee 25 Sebteember 1980 Billado Maar ah oo Hawlkarnimo, Jaalle Abuukar Maxamed Shamcuun iyo Jaalle Nuur Maxamed Cabdulle.

MADAXWEYNAHA J ,D ,S,

MARKUU ARKAY : Qodobka 82aad ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY : Sharciga lambar 65 ee 19kii Oktoobar 1970, Habka Abaalmarinta;

MARKUU TIXGELIYEY : Kaalintii wacneyd ee Jaalle Abuukar Maxamed Shamcuun iyo Jaalle Nuur Maxamed Cabdulle ay ka geysteen duubiddii iyo isku duwiddii khudbooyinka Madaxweynaha Dalka ka akhriyi jirey tobankii sano ee Kacaanka jiray iyagoo habeen iyo maalinba Shaqada Qaranka u taagnaa, waqtiyada dadku nasashada ku jirana shaqeynaayey, sida Ciidaha Qaranka;

MARKUU TIXGELIYEY : Waqtiyadii adkaa ee fulinta xilalkaas kala soo gudboonaaday, mintidnimada iyo dareenka sare ee kacaannimo ay ku hawl galeen iyo hagar la'aanta ay goor kasta ugu adeegaayeen danaha Ummadda Soomaaliyeed;

MARKUU ARKAY : In ay lagama maarmaan tahay in qof kasta waxa uu mudan yahay lagu abaalmariyo;

MARKUU DHEGEYSTAY : Talada Guddiga Abaalmarinta;

WUXUU SOO SAARAY

Xeerka soo socda :

QODOB KELIYA

Waxaa lagu maamuusay Billad Maar ah oo Hawlkarnimo, Jaalle Abuukar Maxamed Shamcuun; Billad Maar ah oo Hawlkarnimo, Jaalle Nuur Maxamed Cabdulle.

Muqdisho, 25. 9. 1980

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 118 ee 8 Nof. 1980 Billado Maar ah oo Hawlkarnimo: Jaalle Kim Jin Gwon, Un Gi Sul iyo Jaalle Li Dok Ho.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY : Qod. 82aad(15) ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY : Sharciga tirsigiisu yahay 65 ee 19 Oktoobar 1970;

MARKUU TIXGELIYEY : Hirgelinta hawlaha Mashruuca Horumarinta Biyoxireenka Balcad ee isla kaashiga labada Dawladood Soomaaliya iyo Korea lagu fuliyey;

MARKUU TIXGELIYEY : Shaqada qaddarinta mudan ee Jaallayaasha Dalka Korea: Kim Jim Gwon, Un Gi Sul iyo Li Kok Ho, ay ka qabteen Mashruucaas, iyagoo si daacadnimo ah uga hawlgalay muddadii uu socday kuna guuleystay natiijooyinkii laga gaaray;

MARKUU TIXGELIYEY : In ay laga maarmaan tahay in la siiyo aqoonsiga ay mudan yihiin oo ku aaddan hirgelinta hawlaha adag ee Mashruuca;

MARKUU DHEGEYSTAY : Talada Guddiga Abaalmarinta 11 Guurada Kacaanka 21ka Oktoobar;

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

Waxaa lagu maamuusay Billad Maar ah oo Hawlkarnimo Jaalle Kim Jin Gwon, Billad Maar ah oo Hawlkarnimo Jaalle Un Gi Sul, Billad Maar ah oo Hawlkarnimo Jaalle Li Dok Ho.

Muqdisho, 8.11.80

MADAXWEYNAHA JDS
Maxamed Siyaad Barre

XEER MADAXWEYNAHA JDS, 119 ee 16 Juun 1980 Gunnooyinka Guddiga Joogttada ah ee Golaha Shacbiga Degaanka ee Magaalada Muqdisho,

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY : Qodobka 82aad ee DastuurkaJ.D.S

ISAGOO ARKAY : Xeerka Lamb. yahay 46 ee 16.9.79, eeuu ku dhaqan galay Dastuurka J. D. Soomaaliya

ISAGOO ARKAY : Sharciga Golayaasha Shacbiga ee Degaanka ee Lamb. yahay 6 ee 12. 2. 1980;

ISAGOO OGAADAY : In Gunnooyinka ku ttilmaaman Xeerka Lamb. yahay DHK/XQ/116—80 24.2.80 lana xiriiray Xoghayaha Guddiga Joogtada ah ee Degaanka Xamar, Guddoomiyaasha Guddi Hoosaadyada, Guddoomiye ku xigeenada Guddi Hoosaadyada iyo Xubnaha Guddiga Joogtada ah ay tahay mid aad u hooseysa oo aan u dhigmin Xilka Ballaaran oo ay u hayaan Maamulka D/Hoose ee Xamar,

ISAGOO TIXGELIYEY : Tala jeedinta Duqa Magaalada Muqdisho,

XEERKAN;

WUXUU SOO SAARAYAA

QODOBKA 1AAD

Waxaa Xeerkan lagu xaddiday tirada Gunnooyinka Xushmada ee bil walba lagu kala qaadanayo Jagooyinka : 1) Xoghaynta Guddiga Joogtada ah ee Degaanka Xamar,

2) Guddoomiye Guddi Hoosaad,

3) G/ku xigeen Guddi Hoosaad iyo Xubin Guddiga Joogtada ah waxayna noqonaysaa inta jago kasta ka hor qoran :

1) Xoghayaha Guddiga Joogtada ah iyo Guddoomiye Guddiga Hoosaad Sh. So. 3000/bil walba

2) Guddoomiye Ku xigeen Guddi Hoosaad iyo xubin Guddiga Joogtada as Sh. So. 2450 bil walba

QODOBKA 2AAD

Gunnadda bil walba la siinayo dadka ku Magacaaban Jagooyinka ku tilmaaman Qodobka 1aad, ee Xeerkan, waxay ka soo billaabnaysaa markaa Taariikhdu ahayd 24. 1. 1980 muddadaas oo ah maalintii Jagooyinka loo soo doortay,

QODOBKA 3AAD

Gunnooyinka la siin jiray Duqa Magaalada Muqdisho iyo Kuxigeennadiisa waxba iskama beddelin, waxaa laga hab raacayaa Xeerka lamb. yahay DHM/XQ /116/80 ee 24.2.80,;

QODOBKA 4AAD

Waxaa la baabi'iyo wax alaale wixii la socon karin Xeerkan, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya;

Muqdisho, 1.6.80

MADAXWEYNAHA J. D. S.

(S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)

Waan aragnay ee Diiwaangelinay
Diiwaanka lamb. 5 bogga L. 7
Muqdisho 4 Agoosto 1980
Hantidhowraha Guud KMG
Yuusuf Cali Nuur

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 120 ee 29 Juun 1980 Sare u qaadidda heerka darajada iyo Mushaarka ee Shaqaalaha aan lahayn aqoon gaar ahaaneed:-

ISAGOO ARKAY : Qod.82aad (Xubinta 14) ee Dastuurka JDS;

ISAGOO ARKAY : Xeerka lamb.yahay 46 ee 16.9.1979 ee uu ku dhaqan galay Dastuurka JDS;

ISAGOO ARKAY : Qod. 31aad (Xubinta D) ee Xeerka lamb.yahay 28Biis ee 21.2.1979 iyo wax ka beddeliddii ka dambeysay ee lagu maamulo Shaqaalaha D/Hoose ee Muqdisho;

ISAGOO GAREYSTAY : In sare u qaadidda heerka darajada iyo Mushaarka ee Shaqaalaha aan aqoonto gaarka lahayn sida Adeege, Ilaaliye, Xoogsade iyo Nadiifiye ee u qoran ama ay qoran doonto Dawladda Hoose ee Xamar ay tahay lagama maarmaan, taasoo looga dan leeyahay in la is waafajiyo ama la isku dheeli tiro Mushaarkooda iyo hawsha Muruq maalka ah oo ay u qabtaan D/Hoose ee Xamar.

ISAGOO TIXGELIYAY : Tala jeedinta Duqa Magaaladda Muqdisho ee ku xusneyd warq. Lamb. yahay

DH/MG/XO/119/80 ee 28. 2. 1980.

WUXUU SOO SAARAYAA

QODOBKA 1AAD

Laga Billaabo Maalinta Madaxweynuhu Xeerkan Saxiixo, waxaa kor loo qaaday Heerkii darajada ay ku mushaar qaadan jireen (ooahayn D4 lana mid ahayn Sh. So. 230/), Shaqaalaha Muruq maalka ah oo aan lahayn aqoon gaar ahaaneed sida Adeege, Ilaaliye, Xoogsade iyo Nadiifiye, waxayna u kala habaysnaandoonaan sida soo socota :

1) Adeege, Ilaaliye iyo Xoogsade, waxay ku Mushaar qaadan doonaan darajada D3 Steebka 4aad, lana mid ah Sh. So. 290 (Laba Boqol iyo Sagaashan, halkii ay awal ka ahayd 230/).

2) Nadiifiye, Wuxuu ku Mushaar qaadan doonaan darajada D2 Steebka 4aad, lana mid ah Sh. So. 330 (Saddex Boqol iyo Soddon), halkii ay awal kaahayd 230/.

QODOBKA 2AAD

Shaqaalaha ay arrintan Khusayso waa kuwa u qoran ama ay qoran doonto D/Hoose ee Xamar ee ay hawshoodu tahay Adeege, Ilaaliye, Xoogsade iyo Nadiifiye.

QODOBKA 3AAD

Xeerkan waxaa lagu soo baahin doonaa Faafinta Rasmiga ah ee J. D. S.

MADAXWEYNAHA J. D. S.

(S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)

XEER WASAARADDA GANACSIGA L. 121 ee 10 November 1980, Diiwaan gelinta Iskaashatada Milixda ee Tuulada Bohol, Degmada Ceel afweyn Gobol Sanaag.

WASIIRKA GANACSIGA

ASAGOO ARKAY : Qodobka 113aad ee Dastuurka JDS

ASAGOO ARKAY : Sharciga lamb. yahay 316 ee Maamulka Dhexe ee Dawladda soona baxay 17. 12. 1962;

ASAGOO ARKAY : Qodobka 41aad ee Dastuurka Qaybta Hantida Iskaashatooyinka;

ASAGOO ARKAY : Sharciga lamb. yahay 40 ee horumarinta Iskaashatooyinka Dalka J.D.S. ee dhaqan galay 4. 10. 1973;

ASAGOO ARKAY : Arjigii uu soo qortay Guddoomiyaha Iskaashatada Milixda Horseed, Degmada Ceel afweyn ee Gobolka Sanaag;

ISAGOO TIXGELINAAYA: Taladii Guddoomiyaha Guddiga Maamulka G. Sanaag

AMAR XEER
QODOBKA 1AAD

Iskaashatada Horseed ee saldhiggeedu yahay Tuulada Bohol, Degmada Ceel-afweyn ee Gobolka Sanaag, shaqadeeduna tahay Ganacsiga Milixda, waxaa laga Diiwaan geliyey Xafiiska Iskaashatooyinka ee Wasaaradda Ganacsiga taasoo waafaqsan Qodobka 15 cad ee Shardiga lamb. yahay 40 oo dhaqan galay 4. 10. 1973

QODOBKA 2AAD

Marka laga bilaabo maalinta xeerkani lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda Iskaashatada Horseed ee ganacsiga Milixda Tuulada Bohol, G/Sanaag waxay yeelaneysaa aqoonsi gaar ah oo Sharci ku dhisan, Xeer gaarkeeduna wuu dhaqan gelayaa.

WASIIRKA WASAARADDA GANACSIGA

IIB MA GALO

FAAFINTA RASMIGA AH

الجريدة الرسمية

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

لجمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 8aad Muqdisho 30 Nofeenber L. 3 r 11

FAAFINTA BIL SOO BAXA جريدة شهرية

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J.D.S.

QIIMAHA : waa 5 shilin lnmbar walba **RUKUNKA** : Sanalkii waa Sh. 100 Soomaaliya gudaheeda — dibedana waa Sh. So, 300, Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo Qiimaha qorotaanka F. R, halkii sadar iyo wàxii ka yàr wàà 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weeydiistaa Laanta Maamulkà Fààfintà Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafii ska Canshuurahà ee Wàsààràddà Làcagta.

KOOBNIIN

QAYBTA KOWAAD

AMARKA MADAXWEYNAHA J D S

AMARKA MADAXWEYNAHA JDS, L. 8ee 4 Nof. 1980, Beekhaaminta Kharajka iyo Xannaanaynta Hantida Qaranka.

QAYBTA LABAAD

XEER

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 122 ee 25 Okt. 1980, Dallacaad Saraakiil.

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 123 ee 28 Okt. 1980, Oggolaansho Ruqso Sarkaal.

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 124 ee 29Okt. 1980, Dalcaad.

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 125 ee 29 Okt. 1980, Dallacaad Sarkaal.

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 126 ee 4 Nof. 1980, Dib u celin iyo Dallacaad.

Madbaaddo Qaranka

QAYBTA SADDEXAAD

TALOOYIN ISGAARSIIN IYO WIXII LA MID AH.

MAXKAMADDA GO/LKA MUDUG,5.10.80
Lumid Jeeg War. L. 180669 L. 671

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 10.11.80,
Lumid Buug Kayd L.14875 L. 672

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 29.10.80,
Lumid Buug Kayd L. 15380 L.673

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 25.10.80,
Lumid Buug Kayd L. 12337 L. 674

MAXKAMADDA G. J. HOOSE, 8.11.80,
Lumid Buug Kayd L. 6073 L. 675

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 11.11.80,
Lumid Buug Kayd L. 13913 L. 676

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 11.11.80,
Lumid Buug Kayd L. 6062 L. 677

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 13.11.80,
Lumid Buug Kayd L. 17544 L. 678

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 15.11.80,
Lumid Buug Kayd L. 3752 L. 679

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 16.11.80,
Lumid Buug Kayd L. 10789 L. 680

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 17.11.80,
Lumid Buug Kayd L. 7146 L. 681

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 13.11.80,
Lumid Buug Kayd L. 240352 L. 682

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 22.11.80,
Lumid Buug Kayd L. 3961/4 L. 683

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 23.11.80,
Lumid Buug Kayd L. 18.883 L. 684

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 8.11.80,
Lumid Lix Saami L. 204 ah 209 L. 685

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 11.11.80,
Lumid Laba Saami L. 146 iyo 147 L.686

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 11.11.80,
Lumid Saamiyaasha L. 15 L. 687

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 25.11.80,
Lumid Buug Kayd L. 10951 L. 688

AMARKA MADAXWEYNAHA JDS, lamb· 8 ee 4ta Nofenber 1980 Beekhaaminta Kharajka Dawladda

Xeerka Madaxweynaha JDS lamb..... taariikh..... Beekhaaminta Kharajka iyo xan/neynta han. Qaranka

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY : Qodobka 82 iyo 83ee Dastuurka

MARKUU ARKAY : Xeerka Madaxweynaha JDS lamb. 1 ee 21ka Oktoobar 1980, (Ku dhawaaqidda xaaladda xukunka degdegga ah);

MARKUU ARKAY : In meelaha sida ba'an looga weeciyey hannaanka qumman ee habka qarannimo ay yihiin xilkasnimo iyo dareen la'aanta loo maamulo hantida Qaranka;

MARKUU TIXGELIYEY : dhibaatada ee Dalka ku jirta oo uu la wadaago Adduunweynaha oo dhan guud ahaan, gaar ahaan ay khasbeen duruufo gaar ah oo Ummadda Soomaaliyeed la baday;

MARKUU ARKAY : in ay lagama maarmaan tahay in la qaado tallaabada ku habboon beekhaaminta kharajka iyo xannaaneynta hantida Qaranka;

ISAGOO CUSKANAYA : awoodda lagu siiyey qodobka 83aad ee Dastuurka;

ISAGOO DHEGEYSTAY : Talada Golaha Sare ee Kacaanka;

WUXUU SOO SAARAYAAA

Xeerka soo socda:

Qodobka 1aad

1) Waxaa la go'aamiyey in la beekhaamiyo kharajka Dawladda.
2) Beekhaamintu waxay ku imaaneysaa:

a) in la joojiyo gebi ahaan kharajka micne la'aanta ah ee aan loo baahneyn;

b) in la yareeyo kuwa aan lagama maarmaanka ahayn;

t) Kharajka la galaayo inuu noqdo mid loo qabo baahi, macnanna leh;

j) in aragti dhaqaale oo adag lagu maamulo guud ahaan kharaj kasta oo Qaranka ama Hay'adihiisa gelayaan;

x) in xannaaneyn iyo gacan ku hayn masul ah loo yeesho qalabka wax soo saarka kuwa adeegga, kuwa xafiisyada iyo qalab kasta ee Hay'aduhu leeyihiin si loo dhimo kharajka dayactirka.

QODOBKA 2AAD

1) Laga billaabo maanta oo taariikhdu tahay 4ta Noofenbar 1980, waxaa laga mamnuucay Hay' adaha Qaranka oo idil in ay iibsadaan baabuur yaryar.

2) Wax alla wixii gorgortan ama wada hadallo ah, ama dhammaystirid beec tillaabooyinkiisii hore la qaaday oo aan weli guntamin lana xiriira iibsad baabuur yaryar, waa wax kama jiraan.

Qodobka 3aad

1) Baabuur yar waxaa shaqo awgeed loo siin karaa Wasiir, Wasiir ku xigeen, Agaasime guud, Maareeye Guud iyo jagooyinka u dhigma ee Hay'adaha kale ee Qaranka.

2) Madaxda ku cad qaybta hore ee Qodobkan waxay baabuurtaas ugu isticmaali karaan danta xilalka ay hayaan keliya, waxaana reebban in baabuurta ay wadaani cid ka baxsan shufeerada loo dhiibay.

3) Daadgureynta Shaqaalaha kale waxaa loo habeynayaa gaadiid wadajir loo raaco (basas, iwm).

QODOBKA 4AAD

1) Ku xadgudubka Qod.2aad qaybtiisa 1aad ee xeerkan, waxaa loo aqoonsanayaa Xatooyo

xoolo dadweyne oo ku dhacday u weecin hanti dawladeed weji aan loogu talo gelin, qofkii ay ku caddaatana waxaa lala tiigsanayaa sharciga

2) Ku xadgudubka qodobka kale ee xeerkan, iyadoo hadba la eegayo dabeecadda iyo culeyska falka, waxaa loo aqoonsanayaa dembi, qofkii u gefana waxaa laga qaadayaa tallaabo waafaqsan sharciga.

Qodobka 5aad

1) Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa 4ta Noofeenbar 1980, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

2) Qof kasta waxaa ku waajib ah inuu dhowro xeerkan.

3) Xaqiijinta si habsami u dhaqangelinta xeerkan waxaa si gaar ah loogu xilsaaray Guddiyada G.S.K., Boliiska, NSSTA, iyo dhammaan Ciidammada Nabadgelyada oo idil.

Muqdisho, 4 Nofenbar 1980.

MADAXWEYNAHA JDS,

Maxamed Siyaad Barre

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 122 ee
25 Oktoober 1980, Dallacaad Saraakiil

MADAXWEYNAHA

ISAGOO ARKAY : Dastuurka JDS Qodobka 82aad,
ISAGOO ARKAY : Sharciga lamb. 2 ee 23.12.72 ee ku saasan dhismaha Ciidanka Baliiska Soomaaliyeed,

ISAGOO TIXGELIYEY : Talada uu soo jeediyey Taliyaha Ciidanka Boliska Soomaaliyeed ee ku kala qorraa xaashiyaha XOG/A/8/1 ee 15.10.80ka iyo XOG/GG/239 ee 25.10.80ka.

WUXUU XEERAY:

Qodobka 1aad

Labada Sarkaal ee hoos ku qoran loo dalacsiiyo derejada mid kasta hortiisa ku qoran laga bilaabo 16.10.80ka.

1) L/Xiddigle Cabdi Kaahiye Faarax — Dhamme
2) Xididgle Maxamed Amiin X. Axmed L/Xid/le

Qodobka 2aad

Xeerkani degdeg buu u dhaqan gelayaa, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Daw/da.
Muqdisho, 25.10.80ka.

MADAXWEYNAHA JDS

S/Gaas Maxamed Siyaad Barre

Waan aragnay ee Diiwaangelinay
Diiwaanka lamb. 7 bogga lamb. 94
Muqdisho; 7 Nofen. 1980

Hantidhowraha Guud KMG
Yuusuf Cali Nuur

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 123 ee 28 Okt. 1980, Oggolaansho ruqso Sarkaal.

MADAXWEYNAHA

ISAGOO ARKAY : Dastuurka JDS Qodobka 82aad,

ISAGOO ARKAY : Sharciga lamb. 2 ee 23.12.1972kii oo ku saabsan dhismaha Ciidanka Boliska Soomaaliyeed,

ISAGOO TIXGELIYEY : Talada uu soo jeediyey Taliyaha Ciidanka Boliska Soomaaliyeed kuna qornayd xaashida lamb. CIID/A/12-11 ee 14.10.1980ka iyo arjigii uu soo qortay Sarkaalku kuna lifaaqnaa isla xaashida kor ku qoran ee uu ku codsanayey in shaqada laga sii daayo.

WUXUU XEERAY:

Qodobka 1aad

Xiddigle Maxamed Sheekh Maxamuud Yuusuf waxaa laga Ruqseeyey Ciidanka Boliska Soomaaliyeed laga bilaabo 31.12.1980ka, taariikhdaas oo ah tan uu ku dhammaanayo fasax laba bilood ah oo ka bilaabma 1.11.1980ka.

Qodobka 2aad

In Sarkaalka la siiyo wixii xaq ah ee uu siinayo sharciga.

Qodobka3aad

Xeerkani degdeg buu u dhaqan gelayaa, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Daw/da.

Muqdisho 29, Oktoober 1980

MAWAXWEYNAHA JDS
S/Gaas Maxamed Siyaad Barre

Waan aragnay ee Diiwaangelinay
Diiwaanka lamb. 7 bogga lamb. 93
Muqdisho, 7 Nof. 1980
Hantidhowraha Guud KMG
Yuusuf Cali Nuur

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 124 ee
29 Okt. 1980, Dallacaad.

MADAXWEYNAHA

ISAGOO ARKAY : Dastuurka JDS Qodobka 82aad,

ISAGOO ARKAY : Sharciga lamb. 2 ee23.12.72 oo ku saabsan dhismaha Ciidanka Boliska Soomaaliyeed,

ISAGOO TIXGELIYEY : Talada uu soo jeediyey Taliyaha Ciidanka Boliska Soomaaliyeed ee ku qorrayd xaashida XOG/A/8/1 ee 29.10.80ka,

ISAGOO TIXGELIYEY : Sharafnimada ay ku dhinteen iyo Agoonta badan ee ay ka tegeen.

WUXUU XEERAY:

Qodobka 1aad

Labada marxuun ee hoos ku qoran kana tirsanaan jirey Ciidanka Boliska Soomaaliyeed loo dallacsiiyo min hal derejo laga bilaabo taariikhda mid kasta hortiisa ku qoran:

1) Ex. Marxuun X/le Ismaaciil Jaamac Cali L/X/le 1.6.80

2) Ex. Marxuun K.S. 1678 Yuusuf Abokor Cali Xiddigle 1.11.80

Qodobka 2aad

Xeerkani degdeg buu u dhaqan gelayaa, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Daw/da.

Muqdisho, 29 Okt. 1980

MAWAXWEYNAHA JDS

S/Gaas Maxamed Siyaad Barre

Waan aragnay ee Diiwaangelinay
Diiwaan lamb. 7 bogga lamb. 92
Muqdisho, 7 Nof. 1980
Hantidhowraha Guud KMG

Yuusuf Cali Nuur

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 125 ee 29 Okt. 1980, Dallacaad Sarkaal.

MADAXWEYNAHA

ISAGOO ARKAY : Dastuurka JDS Qodobka 82aad,

ISAGOO ARKAY : Sharciga lamb. 2 ee 23.12.72 ee ku saabsan dhismaha Ciidanka Boliska Soomaaliyeed,

ISAGOO TIXGELIYEY : Talada uu soo jeediyey Taliyaha Ciidanka Boliska Soomaaliyeed ee ku qorrayd xaashida lambar XOG/GG/62 ee 29.10.80ka.

WUXUU XEERAY:

Qodobka 1aad

G/Sare Maxamed Dhaqane Iidle oo ka tirsan Ciidanka Boliska Soomaaliyeed waxaa loo dallacsiiyey derejeda Sarreeye Guuto laga bilaabo 1.11.1980ka.

Qodobka 2aad

Xeerkani degdeg buu u dhaqan geleyaa, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda

Muqdisho, 29.10.80ka.

MAWAXWEYNAHA JDS

S/Gaas Maxamed Siyaad Barre

Waan aragnay ee Diiwaangelinay
Diiwaanka lamb. 7 bogga lamb. 89

Muqdisho, 17 Nof. 1980

Hantidhowraha Guud KMG

Yuusuf Cali Nuur

XEER MADAXWEKNAHA JDS L. 126 ee
4 Nof. 1980 Dib u celin iyo Dal/aad.

MADAXWEYNAHA

ISAGOO ARKAY : Dastuurka JDS Qodobka 82aad;

ISAGOO ARKAY : Sharciga lamb. 2 ee 23.12.1972kii oo ku saabsan dhismaha Ciidanka Boliska Soomaaliyeed;

ISAGOO LA TASHADAY : Taliyaha Ciidanka Boliiska Soomaaliyeed.

WUXUU XEERAY:

Qodobka 1aad

b) Jaalle Cilmi Jaamac Xuseen oo hore looga wareejiyey Ciidanka Boliiska Soomaaliyeed dib ayaa loogu soo celiyey Ciidanka Boliska laga bilaabo 30.9.1980.

t) Jaalle Cilmi Jaamac Xuseen waxaa loo dallacsiiyey derejada Gaashaanle laga bilaabo 30.9.1980, shaqadiisuna waxay ahaanaysaa xiriir.

Qodobka 2aad

Xeerkani degdeg buu u dhan geleyaa, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta rasmiga ah ee Dawladda.
Muqdisho, 4.11.1980.

MAWAXWEYNAHA JDS

S/Gaas Maxamed Siyaad Barre

Waan aragnay ee Diiwaangelinay
Diiwaanka lamb. 7 bogga lamb. 91
Muqdisho, 17 Nof. 1980
Hantidhowraha Guud KMG
Yuusuf Cali Nuur

MAXKAMADDA GOBOLKA MUDUG

UJEEDDO : Go'aan Maxkamadeed TR.5.10.80ka Gud/miyaha Maxkamadda Gabolka Mudug ku Qoran;

HADDUU ARKAY : Dacwadda kor ku qoran,

MARKUU EEGAY : Qodobka 82,69 D/L 2 taariikhdeeduna tahay 9.9.65 ee lumidda Jeegga wareega lam. 180669 ee 2.7.80 ay ku qorantahay Sh.So.30,000.00 (Soddon kun) ayna samaysay Bankiga Ganacsiga iyo Keydka kuna xusan dacwadda Sare ku magacaaban.

WAXAA LA AMRAYAA

In la cusbooneysiiyo Jeegga —adib markii ay ka soo wareegto muddo 30 (soddon) maalmood maalinta Dekreetada lagu sharciyeeyo faafinta rasmiga ah ee Dawladda.

WAXAANA, la codsanayaa in jeegga cusub ee la sameyn doono gacanta laga saaro Taliska Horinta Gaaska 4aad, iyadoo la sugayo muddo 30ka maalmood ah ee aan kor ku soo sheegnay.

Gaalkacyo, 5.10.80ka

GUDDOOMIYA MAXKAMADDA GOBOLKA MUDUG

(Dr. Cumar Colaad Cabdi)

L. 671

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOMIYAHA MAXKAMADDA GO/KA BANAADIR

HADDUU ARKAY : Dacwadda kor ku qoran:

HADDUU HUBIYEY : In buugga dhumay oo lambarkiisu ahaa 14875 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed, Laanta 1aad kuna qornayd lacag dhan Sh.So. 10.841 ay iska lahayd Xadiya Warsame Raage sida ku cad warqadda lamb. 0952 taariikh 29.10.80 oo Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta 1aad.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (ammortamento) buugga Lam.148-75 oo ku qoran magaca Xaddiyo Warsame Raage ayna ku jirto Sh.So. 10.841/=

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka laanta1aad u bedesho Xadiyo Warsame Raage Buugga Keydka ee kor ku tilmaaman una sameyso mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco faafinta rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliyeed, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 10.11.80

GUDDOMIYAHA MAXKAMADDA GO/KA BANAADIR

W.S. Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 672

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

